
# TAARIIKH





## DUGSIGA SARE

***Fasalka Kowaad***

**Xafiiska Manaahijta**

F.A.

# *TAARIIKH*

## FASALKA KOOWAAD

## 1

## DUGSIGA SARE

**WASAARADDA WAXBARASHADA IYO BARBAARINTA**
**XAFIISKA MANAAHIJTA**

# TUSMADA BUUGGA KOWAAD

*Dhaqanka iyo ilbaxnimada Afrika* . . . . . . . 2
Hordhac — Ummadaha ama Bulshooyinka Afrika — Habka Nololraadcaysiga — Diimaha Afrikanka iyo Falsafadda — Farsugyada Bulshada — Shaxanka iyo Muyuusikada.

*Ilbaxnimadii Afrika iyo Dhaqan Iswaydaarsigii* . . . 16
Ilbaxnimadii Reer Suudaan — Boqortooyinkii Suudaanta Galbeed — Soo Bixitaankii Gaana — Boqortooyadii Maali — Boqortooyadii Songahay — Magaala Qarammadii Suudaanta Dhexe — Magaala Qaramadii Hawsa — Boqortooyadii Simbaabwi — Magaala Qarammadii Xeebaha Afrikada Bari — Gabo-Gabo.

*Dhalashadii Islaanka iyo Raadkii uu ku yeeshay adduunyada* . . . . . . . . . . . . . . 37
Nebi Maxamad — Risaaladii iyo Habkii Dhismaha Islaamka — Dagaaladii ugu Waaweynaa ee uu galay Nebi Maxamad — Khulafadii iyo Habkii Dhismada Islaamka — Dawladda Umawiyiinta — Burburkii Tailska Umawiyiinta — Taliskii Cabbaasiyiinta — Liiciddii Cabbaasiyiinta — Islaamka iyo Afrika — Woqooyi — Bari iyo Galbeed.

*Taariikhda Bariga Dhexe laga bilaabo asaaskii Imberaadoriyada Cusmaaniyiinta iyo wixii ka dambeeyey* 87
- Imberaadooriyadii Selyuukiyiinta — Soo Bixidii Cusmaaniyiinta — Iiicidii Imberaadooriyada Cusmaaniyiinta iyo Cidhib Reebka Reer Galbeedka — Ururkii Ummadaha — Dawladaha Carabta ee Madaxbanaanaaday.

*Sahyuuniyadda iyo Carabta* . . . . . . . . .
Arrinta Reer Falastiin — dhaqdhaqaaqii Sahyuuniyadda — Ballanqaadkii Balfoor — Carabta iyo Arrinta Falastiin — Dagaalladii Carabta iyo Yuhuudda.

*Taariikhda dalalka Jaarka la yahay* . . . . . . . 112
Dalka Suudaan — Imberaadooriyadda Itoobiya — Xeebta Badweynta Hindiya iyo Jasiiradaha, Kiiniya, Ugaandha iyo Tansaaniya.

*Buuggan lama daabacan karo lamana guurin karo iyadoo aan Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta laga helin oggolaansho*

*Waxaa lagu daabacay*
*Madbacaddu Qaranka*
*Xamar, 1976*

# HORDHAC

*Buuggan waxa loogu talagalay Fasalka Koowaad ee Dugsiyada Sare. Waxa uu ka kooban yahay afar qaybood. Tan hore waxay la xiriirtaa Dhaqanka iyo Ilbaxnimadii hore ee Afrika. Qaybta labaadna waxay ku aaddaa Dhalashadii Islaamka iyo Raadkii uu ku yeeshay adduunka. Tan saddexaad waxay iyana soo koobaysaa Taariikhda Bariga Dhexe laga bilaabo aasaaskii Taliska Cusmaaniyiinta. Qaybta ugu danbeysaa waxay la xiriirtaa taariikhda dalka jaarka la nahay.*

*Tusmada Buugga waxaad mooddaa inay badantahay, hase ahaatee, Qaybta Dhalashada Islaanka oo buuggan aad ugu tafaftiran waa duruus ardadu hore ugu soo martay Dugsiga Dhexe. Guudahaanse waxa macallinka laga filayaa in uu ku dadaalo sidii uu ugu taban lahaa ardada duruusta Tusmada Buuggan ka kooban tahay.*

*Buuggan waxa qoray Cabdiraxmaan Carte Qaalib, Caasha Xaaji Xaashi, Aamina Xaaji Qadar, Asli Maxamed Siciid, Cabdiqaadir X. Muumin, Axmed Faarax Ibraahim, Maxamed Cali Carraale, Maxamed Cumar Aadan, Cabduqani Maxamed, Caasha Xaaji Maxamed iyo Yuusuf Xaaji Cabdiraxmaan.*

*Waxa mahad gaar ah loo naqayaa kooxihii garaacay buugga, barayaashii masawirrada sameeyey iyo Madbacadda Qaranka.*

*Maamulaha Xafiiska Manaahijka*
*Bashiir Faarax Kaahiye*

## DHAQANKA IYO ILBAXNIMADA AFRIKA

*Hordhac:*

Wax badan ayaà gumeystayaasha reer Yurub ka qoreen Afrika iyo dadkeedaba, markase la fiirsho waxyaalaha ay ka sheegeen, ama se ku tilmaameen Afrikaanka waa uun hadal tiro, turxaan iyo horkanac itaalsatay. Haddiiba se aanu aqoon cilmi ifsano, Afrika jiralkeegii ahaaneed waa mid aad uga duwan kay isku dayeen inay gumeystayaashu ina tusaan inagan raaridaan. Afrika aqoonta aan u yeelan karnaa, waxay ku xidhantahay marka hore in la saxo lana tiro sheeko baralaydii ay wariyeen reer Yurub.

Taas waxaa lagu gaadhayaa in horta sheeko baralayda reer yurub siday u wariyeen aan u sheegno, dabadeedna jiraalkii ahaaneed ee Afrika aan dhinac dhigno.

Waxay reer Yurub ku andacoodeen Afrika inay ahayd «Qaarad» mugdi ah oo aan adduunka xidhiidh la lahayn.

Taasi waxay u sal ahayd Yurub, oo kaga danbaysay Afrika gaarahaan facii dhexe (Middle ages).

Afrikaanku waqtigaa, Carabta iyo Hindiya ayuu ganacsi la lahaa kaasoo uga tebi jirey badweynta Hindiya, lama dagaanka iyo Badda cadba.

Saanta reer Yurub ay ula baxeen «Moroco Leather» waxa lagu sameyn jirey Afrika galbeed, hase ahaatee waxay la ahayd in magaalada ay ka iibsadaan sameyskeeda leedahay.

Afrika isla waqtigaa waxay ku adeegsan jirtay «Currency» ama lacag, Cowery-Shells uga yimaadda «Maldive Islands» soona mara «Venice». Xoogtu waxay tahay Afriki markii ay adduunka xidhiidh la lahayd, Yurub waa ay huruday. Markii Afrikada Bari xidhiidh «Diplomacy» iyo dhaqan isweydaarsi la sameystay Shiinaha, Yurub indhaha may kala qaadin. Dan jire reer Malindi ah ayaa geri hadiyad ugu geeyey Shiinaha (1417). 1419-22 Malindi iyo Muqdisho waxa yimid



nin ka tirsanaa Ciidamada Badda ee Dalka Shiinaha oo la odhan jirey Admiral Ching Ho. Afrika waxay xidhiidh la wadaagaysay Yurubta Badda Cad ku taal. Taas waxaa u marag kacaaya masawirrada iyo naqshadaha Afrikaanka ee ku dhafan farshaxanka Roma iyo Giriigga. Yurub waxaa la gudboon inay aqoonsato, inay Yurub ahayd ta iyadu baraarugtay qarnigii shan iyo tobnaad (15).

Sheeko baralayda labaad ee reer Yurub waxay ina baraysaa in Afrikaanku ahaayeen «hamaj savage», ilbax iyo taariikhtoona aan lahayn. Jiraalka run ahaaneed ee Afrikaanku waa mid si cad u burinaaya hadal tirada reer Yurub ee been adeeg satada ah.


Sidaa darteed casharradaan soo socdaa waxay ku sugan yihiin, kuna unkan yihiin meerisyo cilmi ah oo u marag kacay, Afrikaanku in uu lahaa taariikh ku aroorta waayo hore, inuu dhaqan iyo ilbaxnimo u gaar ah lahaa; in Afrikaanku diino iyo falsafaduu ku dhaqmo haystay, isxukun, maamul, farsugyo bulsho «Social institution», farshaxan, muusig intabana dhaqan geliyey horena u mariyey.

## QABIILOOYINKA, UMMADAHA AMA BULSHOOYINKA AFRIKA

Dadka dhaladka ah ee Afrika boqolaal sano ayaabay ku noolaayeen ilaa haddana ku nool yihiin, Beelo iyo Bulsho lagu tilmaamo qabaa'il «Tribes». Way adag tahay sida loo sheegaa halka uu qabiil ka bilaabmo kuna dhammaado. Maxaa yeeley «reer Yuruba» ee Nnjeriya waxay tiro le'eg yihiin 12 Milyan, iyada oo «Hadsopi» Tansania ay ka yar yihiin kun qof. Inta qabiil ee Afrika ku nool tiradooda lama garan karo, hase ahaate waxa lagu qiyaasi karaa 1200 (kun iyo laba boqol). Micnaha qabiil waxaad mooddaa in tafsiir xumaato uu mutaystay, hase yeeshee, iyada oo aan ogsoonahay in Yurubba gaadho 12 Milyan (12 Milliones), ummad waa yihiin, sidaa darteed waxaannu door bidnay in aan adeegsano ummad ama dad halkii qabiilka. Waxaa kaloon ogsoon nahay in faraq u dhaxeeya «Tribes» iyo «Tribalism»; ama qolooyin iyo qabyaalad.

Afrika qabiilooyin way ku noolaayeen intaanu gumeystuhu iman, laakiin qabiilnimada micnaheeda cusubi markaa muusan jirin. Qabiilnimadu waxay la barbaartay gumeysigii iyadaana gacan u noqotay baabi'inta halganka gobanimadoonka. Jiraalka qabiilooyinku waa horumar taariikheed oo dabiica ah. Magaca qabiilo way jiraysaa sida «Irish, Scotish», oo kale, hase ahaatee siyaaso qabiilka weeye tan lala dagaallamayaa lana tirtirayaa. Haddaba sideen u kala sooci karnaa dadka faraha badan ee Afrika ku nool.

«Dad» wal oo Afrikaanihiba waxa uu leeyahay Af u gaar ah. Afaafka intooda badani waa isku xidhan yihiin, waana isu dhowyihiin. Sidaa darteed ayaa intii isku dhowba magac gaar ah loo baxshay. Markaa kooxaha: afeed (Linguistic groups) ee Afrikaanku waxay u kala baxayaan: 1. Congo-Kordofanian; I.A. - I.B., II. Nilo - Sahara, III. Afro-Asiatic IV. Khoisan.






Tan labaad oo gacan weyn ku leh kala soocidada dadka Afrikaanka ahi waa degaanka — «Geographic Area». Bulsho waliba si hidaysli ayay, degaan, dhul iyo dal gaar ah u leedahay. Dhibaato waxaa ku abaaray «Baarliin Conference» ama shirkii Bqrliiin 1885, markay reer Yurub ka la qoqobeen, dar isku mid ahaana kala daadsheen. Waxaad mooddaa in darbiga Berlin badhtankeeda maraa uu tilmaan u yahay sifihii ay la rabeen Afrika.

«Dad» wal oo Afrikaan ihi wuxuu leeyahay nidaam siyaaso iyo mid bulsho (Social and Politcal Organization) oo u gaar ah. Koox faced (Age groups), caadooyin guur, isxukun hidaysle, iwm. isku eekaan kara ama se kala duwanaan kara. Qaar waxay lahaayeen «Sama doon Gobol» oo xukunkiisu ayhay mid la kala dhaxlo, qaar kalena, Boqortooyo hadaysile oo Talis kama dambeys leh ah, oo ay u adeegaan Goleyaal iyo caaqillo (Chieves) ama Talis ku xidhan koox faceed rag iyo dumarba leh.

Yaqiinsinga iyo u tacab falka diineed, waa mid aad odhan karto wuxuu ku beeran yahay nolosha Afrikaanka. Yaqiinsiga diinta ee Afrikaanku maaha sida kan «Kiristaanka» mid ku ekaada «kulan» maalin axadeed. Ummad waliba Diin iyo Falsafad ayey haysataa. Hase ahaatee aqoonsiga «Ilaahay», Jiraalka, Arwaaxda, xidhiidhka nolosha ifka iyo kan aakhiro, sixir iwm. (etc) waa ka siman yihiin. Inta aan kor ku soo sheegnay waa sifaalaha qabiilka, «dadka», «bulshada», amam ummadda Afrikaanka ahi ay leedahay.

## HABKA NOLOL RAADCAYSIGA (Modes of Livehood)

Afrika iyo Jasiiradaheeda oo dhan 12 mayluun oo mayl ... areeg ah, iyo 500 oo malyan oo qof, waxay baaxaddeedu u dhigantaa Hindiya, Yurub, Jabaan, Ingiriiska, Iskandoneefiya, Niyuusiiland iyo dalka Maraykanka, marka laysu geeyo. Afrika waxay ka mid tahay, degaan ahaan qaaradda ugu hodansan dhinaca khayraadka.

Qaaradda Afrika hadiiba ay intaa bed le'eg tahay, horumar dhaqaale oo isku talaabo ahi muusan jirin. Inta lo ogsoon yahay shan hab oo wax loo soo saaro ayaa Aadamiga ku adeegsaday — Habkii is-adoonsiga, Habkii Dhulgoosiga, Habkii Hantigoosiga, Habkii wax wada tacabka iyo wax wada lahaanta iyo Habka Hantiwadaagga ah? Gumeystaha ka hor Afrika

dhaqaalaheedu wuxuu ahaa mid ku unkamay, dhulgoosi, ka d.b markay Afrikaanku dhulkii fasheen, raacdeen lo' geel iyo adhi, ku adeegsadeen qalab bir ah, barteen sida loo soo saaro, loo dhalaashado,loona tumo birta iwm; keensadeen biyo xidheenno, daaha ka qadeen dhirta qiimaha daweynta u leedahay, intaabana ay ku dhaqangasheen nidaamyo siyaaso iyo bulsho horumarsan.

Afrikaanku waxay markaas raad raacsi nololeed u galaan xoolo dhaqasho iyo falidda beeraha.

## 1. REER GUURAA — XOOLO DHAQASHO

Ugaadhsiga iyo arahsiga ilaa iminka bulshooyin ay ka mid yihiin «Pygmis Congo basin» reer damar (Bushman (S.A) ), Kindiga Tansaniya iyo Dorobo Keenya ayaa ku dhaqma; Ummadaha kale e Afrikaanka ahi waxay nolosha ka raacdaystaan xoolaha. Qaar dhaqashada xoolaha oo qudha ayay u go'aan waa na reer guuraa ku nool caanaha iyo wixii xoolah uga soo baxa. Dad kalena waxay isbarbar wadaan dhaqashada xoolaha iyo falida beeraha oy ka mid yihiin, Galla Nilotes iyo lo'layda Bantu. Labadaa noocba Soomaalidu way leedahay hase ahaatee bulshooyinka reer guuraaga ku dhaqmaa, waa Cafarta, Soomaalida, Carabta waqooyi Afrika Taurige sahara, Fulani, Hereero iyo Hotentot. ooXla dhaqashadu «Pastoralism» waxay sal ku leedahay raacidda iyo dhaqashada adhiga, geela iyo lo'da Geela waxa dhaqda Carabta, Berberis, Soomaalida iyo Beja lo'da waxaa dhaqda Galla, Baggara, Sudaan, Fulani, Hottentot iyo lo'leyda Bantuga.

Afirkaanku wuxuu u badan yahay beralay. 9/10 (Tobankiiba sagaal ka mid ah dhirta aadamigu yaqaan ayay beeraan bulshooyinka Afrika. Dhirta u ah cuntada joogtada ah bulshooyinka Afrikaanka waxaan guud ahaan isugu soo celin karnaa sidaan hoos ku qoran:

Sogorum ama hadhuudh
Millet
Maize
Wheat
Heed
Manioc
Yam ama Sonkorqandi



Toro
Bannanas ama muus
Bariis

(Madagaskar — Senegal to Ivory )Elensive — date Plam amase timir, «Ionio» «Ensete», «Fig» and Olive, legums amase digir. Falidda beeraha heer sare ayay Afrikaanku ka gaadheen, hase ahaatee waxaad mooddaa inay ka gudbiwaayeen habka soo saaridda ee loo yaqaan (Subsistance). Habkaas oo ka mid ahaa waxyaabihii hunguri geshay gumeystayaasha rerr Yurub, ka dib markay awoodsadeen kacaankii farsamada.

Taas waxaan uga jeednaa, habkaas «subsistance» ahi inuu Afrikaanka laf ahaantooda haqab tirayaya habka dhaqaala' hoodana la socday, lagana yaabo in haddiiba iskood ay u adeegsan lahaayeen aqoonta-farsamada sida Jabaan, ay horumari lahayd Afriki. Haes ahaatee, Afrika iyadoo habkaas ku jirta ayaa gumeystadii si dhaqaalahoodu iskugu tago ay u soo doolaalshay. Afrika iyada oo u wadata aaab farsamada-toman iyo yaa gumeysatadii si dhaqaalahoodu iskugu tago ay u soo doolaalshay Afrika iyada oo u wadata alaab farsamada-toman iyo aqoon farsamo oo cilmi leh. Taasi waxay noqotay in habkii subsitance ee dhaqaalaha Afrika ku dhismay uu ka baaba'o halkiisiina u galo hab kale oo ah baahnaanshaha Afrikaanku iyo hanti abuuradka gumeystaha. Halkii uu ninka Afrikaanku cunto ka beeran jiray, Buuri, Cudbi, Shaah,ama Canab ayay noqotay inuu ninka cad u beero una midiidin adeego lagana gado alaab farsamotuman oo qaaliya. Ilaa hadda dhibaatooyinka dhaqaalaha ee haysta ummaddaha Afrikaanka waxay ka soo unkameen habkaas isaga ah ee baahnaanta, oo Afrikaanka marnaba ka haqab tiri karayn baahida bulshada. Gumeysiga wuxuu isku deyey inuu ummadaha Afrikaanka ah iska hortaa go ka gudubka habkaas «subsitance», si dhaqaalaha dalkiisa hore ugu marshana wuxuu hirgashay beeridda (waxay ku tilmaamaan (Cash crops) midho dibadda loo dhoofiyo — Cacoco, Caffee, Cotton ama cudbi, falax, oil plam peonut, iyo sesame iwm.

## DIIMAHA AFRIKAANKA IYO FALSAFADA

Gumeystayaashu sidii ay wax wal oo Afrikaanka u gaar ahba u cambaaraynayeen, ayey diimaha Afrikaanka iyo Falsa-

faddiisana been uga sheegeen iyaga oo ku soo koobay eray bixin aan qoto lahayn - «Animism, Totenism» - Fetishims-Natulism. Hadda ka hor diimaha Afrikaanka si quudhsi, horkanac, iyc yasid leh ayaaba lagu tilmaamay wax dibudhacsan oo barbarbaar kadmay «baaderiyadu» waxay ku soo koobeen diimaha Afrikaanku inay ku dhisan yihiin khuraafad, sixir, shaydannimo iyo cadaab. Si kastoo oo loo cadaadshay diimaha Afrikaanku way ka soo doogteen, maantana way ku talaalan yihiin nolosha dadka ee Afrika.

Afriki waxay lahayd ciid hodan ah oo, biqlisay diin yio falcafad u gaar ah. Haddaba ka dib markii ifka cilmigu reer Yurub indhaha u furay, ayay aqoonsaden Afrikaanku in uu haystay diimo iyo nidaamyo «Metaphisic) waligood iyo haatanba la qiima ah diinta Kiristaanka iyo tan Islaamka. Casharka soo socda waxaan kaga faaloon doonnaa diimaha iyo falsafada Afrikaanka. Xusuusna aan u yeelanno in markaan ka hadlayno diimaha aanay ku jirin kuwa Muslinka ama Kiristaanka ah. Hase ahaatee Casharka soo socdaa waxa uu itaalsanayaa raadcayn cilmi oo laga soo axadhay 300 oo bulsho Afrikaan ah oon yaqiinsanayn Islaamka ama Kiristaankaba.

## DIIN (Religion)

Way adag tahay qeexidda erayga diin, iskumana dayeyno inaan halkan kaga doodno, hase ahaatee Afrikaanka waxay la tahay «Ontological Phenomenon» — waxaa loo jeeddaa ahaansho iyo jiraal (Existence and being). Qofka Afrikaanka ahi maaha baynu nidhi sida kan Kiristaanka ah ee ku tacab falka diintu kaga eegtahay kulanka maalinta axadda. Ninka Afrikaanka ah diintu, noloshiisa beri ka maalin bay ku unkan tahay. Waayo-aragnimada iyo camal falka guud ee bulshadu garasho diineed ayay ka soo maaxdaa. Magacyada dadku micne diiniya ayay leeyihiin, sida oo kale ayaa dhagaxa, iyo dhadhadhaabko qiimo diineed u leeyihiin, sida oo kale ayaa dhirta, dayaxa xidiguhu iwm. Jiraalka ahaansho ee qofu waa mid diiniya (Ontologiga) Afrikaanka hadaan soo koobo wuxuu isugu soo biyo shubmayaa: Ilaahay inuu Isiraha uunka yahay, Aadmigana ku barbaariyo, arwaaxdu inay gacan ku leedahay aayaha aadmiga, Aadmigu inuu badhtanka ontologiga ku jiro; xoolaha



dhirta iyo dabiicaduna yihiin degaanka (Enviroment) qofku ku nool yahay ee u nolosha ka raadcaysto, haddii loo baahdana ruu la yeelan kro xidhiidh (Mysticla) karaamo.

## ILAAHAY

Afrikaanku yaqiinsiga Ilaahay waxay ku muujiyaan Maah maaho, weedho, heeso, magacyo, sheegooyin, ducooyin iyo xusid. May jiraan qoraallo «Muqadaas ah». Hase ahaatee, Ilaahay shisheeye kuma aha dadka Afrikaanka, ala (Atheist) koodna maba laha Afrikaanka hidaha ku dhaqmaa.

Ummadaha Afrikaanku Ilaahay waxay u qabaan inuu wax walba ogyahay, isla markaana meel kasta joogo awoodena yahay (Omniscient Omnipresent-Almighty). Reer Zulugu iyo Bunyarwandigu waxay Ilaahay u yaqaaniin inuu murti leeyahay, «The wise one». Akaankum «inuu wax walba ogyahay, wax walbana arko» — He who knows or sees all». Reer Yurubna «inuu daalacdo qalbiyada, oo arko uurka iyo guudka qofka ba» — «The discerner of heart who sees both the inside and outside of man». Ashaantiga, Ngomba, iyo Akaanku waxay qabaan «inuu waxqabadku hawlyaryahay sida hadduu Ilaahay amro adag yahay hadduna amrin» — «Easy to do as that which god performs, difficult to do as that which He enables not». Akaankuna waxuu Ilaahay la yahay inuu hadda joogo siduu waligiiba u jirey «He who si there now, as from ancient time». Reer Zuluguna waxay qabeen Ilaahay inuu isagu is yahay, ahaanshahiiusna isaga ka yimi. «He is of himself» «He who came of himself into being». Reer Bambutii iyana waxay aqoonsan yihiin inuu Ilaahay yahay kii ugu horreeyay ee waligiiba jiray een waligii dhamanayn - «The first who had alweys been in existance and would never die».

Afrikaanku Ilaahay waxay u qabaan inuu yahay wax aan la taaban karin sida ruuxa. Inta lo ogsoon yahay Afrikaanku ma laha alaab farshaxan oo Ilaahay ay ku masilaan ama sanamo ay caabudaan. Uma haystaan Ilaahay inuu «Jidh leeyahay sida ay Ga, langi iyo Shilluktu ay u barbar dhigaan Ilaahyo in aan la arki karin sida uu ina dhacsiinayo gabaygan reer pygimi, ilaahay waxay u qabaan inaan la arki karin wax lagu masli karaana aanu jirin:

In the beginning was God, today is God
Blowgii Ilaahbaa jiray maantana waa jiraa;
**Tomorrow will be god, who can make an image of**
Barina waa jirayaa, yaa Ilaahay wax ku masli kara.
**God,, he has no body. He is aword which.**
Jidh ma leh, waa sida eray afkaaga ka soo baxa.
**Comes out of your mouth, That word it is no more,**
**it is past and still it lives, so is God.**
Eraygaasi waa mid soo baxay, waa wax tagay, misna
waa wax jira Ilaahayna waa sidaas oo kale.

Ilaahay siyaabo badan ayay u tilmaameen awooddiis iyo waaridda jiraalkiisa, ashaantii waxay yidhaahaan kii-aan qotadiisa la gaadhi karin. «The fathomless spirit», Bacongo iyana waxay sharaxi kari waayaan ayay yidhaahdaan waa shuqul Ilaahay «A thing of God». Tongo iyana waxay qaban inuu yahay Jannada aan waligeed damin rag ayuunba dhinta. «The Heaven that never dies, only men do». Reer Kataanga waxay qabaan inuu yahay Aabaha Abuurka, ee abuura misna dunsha.

«The father creator who creates and uncreates». Ummadaha Afrikaanka ahi intooda badani waxay qabaan inaan Ilaahay qaldamin, haaddiiba uu ka sarreeyo qof, hoobasho, «qalad iyo xaq darro». Qadariska Ilaahay waxaa lagu muujiaa shuruudo adag marka lagu camal falayo «Ritual», tuugmada iyo tukasho haddana waxaan hoos ku sheego doonaa habka Ilaahay loo caabudo. Siyaabo badan oo kala duwan ayaa dadka Afrika Ilaahey u caabudaan. Camal falka caabudaada habab kala duwan ayaa loo fushaa; si habaysan ama habaysla' (formal-informal.) Si joogta ah ama mar ah, wadareed ama gooni, caado fal ama xusla'aan intaas oo camal ama af lagu dhammeeyo. Tallaabooyin kala duwan ayaa bulshooyinka Afrikaanku Ilaahay caabudaadiisu ugu tacab galaan. Diinka iyo Nur intay soo jeedaan oo dhan caabudka Ilaahay ku fooggan yihiin, iyaga oo dar kalena caabudaadda Ilaahay kaga ektahay xusas dabbal deg ah. Goorta, sida, habka, iyo meesha ay Afrikaanku ku gutaan Ilaahay caabudkiisa ayaa isweydiin leh. Sidaan hoos ku qoran ayaa sheegaysa.

**(Scrifices and Offerings — Huridda iyo Qurbaanka)**

Sida badan «Huridda iyo Qurbaanka» Afrikaanku way ka siman yihiin. Huridda waa xoolaha gawrac ah ee Ilaahay loo huraayo, ama arwaaxda, amase dhinte-noolaha (Living-dead). «offeirngs» waa huridda waxyaalaha aan gawrac ahayn. Huridda iyo qurbaanka waxa lagu sharaxaa «Gift-theory» fiirada deeqda «Propitiation», fiirada raligalinta, communion theory, fiirada waxwada qabsiga Thanks giving theory, fiirada mahadcelinta, Hase ahaatee Afrikaanka waxay u tahay «dheelitir» «Ontological» ah oo ku aadda xidhiidhka qofka iyo Ilaahay, qofka iyo arwaxda, dadka intii dhimatay iyo inta nool.



Haddiiba xidhiidhku dheeliyo dhibaatooyin nasiib darro ah ayaa imaanaysa. Kolkaa, huriddu waa adeegsi « Psychological» ah oo ku aadan dheelitirka ahaansha iyo jiraalka bulshada.

Waxyaalaha Afrikaanku qurbaanka u baxshaan waxaa ka mid ahaa wax allaaliyo wixii qofku gacanta ku dhigi karo ee uu isticmaalo. Huridda waxaa had iyo jeer raaca Ilaah tuug iyo tukasho. Ilaah tuugga iyo tukashada inta badan Ilaahay baa loo jeedshaa, marmarna arwaaxda iyo awoowyaasha. Tuugmada iyo tukashadu maaha wax qoraal ah, hase ahaatee ummad waliba, eebe way tuugtaa waanay u tukataa; reer Abaluyi - Odayaasha ayaa salaadda kaca, jilbajoogsada, dhinaca barina u jeesta, kolkaas ayay ilaahay ka tuugaan inuu waasan u bariiyo, inuu bulshada dawo-caafimaad ugu maydho, inuu ka eryo shaydaanka. Sidaas oo kale ayaa «Gaala» aroortii iyo makhribka u tukataa Ilaahna u tuugtaa. Tukashada waxay Ilaahay kaga tuugaan caafimaad, nabad sugid, barwaaqo iyo bashbash. Qofku iskii ayuu u tukan karaa, hase ahaatee inta badan madaxa qoyska ayaa u qaybsan. Marka la tukanayo, dar way istaagaan, qaarna way jilba joogsadaan dar kalena dhulka ayay isjiifiyaan, qaarna waabay fadhiistaan; gacmahana waa isweydaariyaan, ama waa sacab tuntaan, qaarna gacmaha ayay saray u taagaan iyaga oo cirka eegaaya. Afrikaanku guud ahaan meeshay doonaan iyo goorta ay doonaan bay ilaahay caabudaan, iyada oo taasi ku xidhan tahay caadada bulshadaas. «Gaala» Abaabuyia, Asande, Nandi, iyo Yomba maalin walba mar ama laba mar ayay tukadaan. Aroortii iyo makhribka. Kikuyu, Gesii, Turkana waxay israacshaan horid iyo tukasho markuu ilmo dhasho, Guursi ama dhimasho timaado. Sidoo kale ayaabay Ahmaba, Shilluk, Shona» iyo Soyo ay sameeyaan.

## FARSUGYADA BULSHADA (Social Institution)

Basil Davidsan haddaan xigano waxa uu ku sheegay buuggiisa «Which way Africa», kuna tilmaamay heerka Afrikaanka ka gaadhay xeerka isxukunka maamulka iyo waxbarashada, isaga oo isbarbar dhigaya Afrika iyo Yurubna wuxuu yidhi «Law and order in the Western Sudan was probably superior under the eraly emperors of Mali than contemprary, France and England, while the scholarships of Timbuktu and Djenne could have given points to that of Oxford and Paris».

Sida la ogsoon yahay ummadaha Afrikaanku waxay ku dhaqmi jireen nidaam siyaaso oo suuragashay dhismo boqortooyo, qaran, iyo imberadooriyadaba. Ilbaxii ka hirgalay Mali iyo Songhai, Gaana, Magaalograndii Hausa, Kilwa, Zimbaabwe, Muqdisho, iyo Malindi ayaa ka mid ahaa. Intubana waxay ku dhaqmi jireen siyaasado sifo (Form) qaran leh. Qaran waa «Bureaucracy» u taagan inuu hirgeliyo tallaabooyin siyaaso.

«Bureaucracy» waa habab xafiis oo is ku xidhan shaqaalena ay maamulaan. Awoodo waxa yeesha habaka xafiisyada isku xidhan, oo (kolkaas) istaageera isna xukun dhawra (control).

Afrikaanku habkaas «Bureacracy» oo laakiin aan lahayn qalimaan, waraaqo, miisas iyo tilifoono ayuu si door ah ugu dhaqmi jiray.

Qaramada Afrikaanku waxay ahaayeen dar Boqortooyo oo iskaga mid ah awood dhexroorsan, maamul habaysan, iyo farsugyo garsoor iyo ku camal falka xoog sharci ah. Awoodda dhexroorsan waxaa looga jeedaa qaranku muu yeesho qof madax ah oo la aqoonsan yahay. Inta badan Goleyaal iyo Maxkamado ayaa hoos yimaada madaxa dalka is aanu ugu tagri falin awooddaas urursan. Awoodda Boqorku waxay u tebaysay maamulka taxaxafiisyada, madaxa degmooyinka iyo gobollad.

Boqorada Afrikaanku waxay ahaayeen dar ilaahay ka egman sida ay qabeen, «Divine» oo awood kama dambays ah leh. Dhulka, xoolaha iyo qaranka waxaa lahaa Boqorka. Boqorku wuxuu masilaayey xoogga iyo awoodda Qaranka. Sidaa darteed waxa laga rabay inuu ahaado mid xoog, itaal iyo caafimaad leh. Haddii uu gaboobo, taag darreeyo, ama xanuunsado waa la dili jirey. Boqorka inta uu xukunka hayo in yar ayaa arki kari jirtey haddii uu wax cunaayo. Aqoonsiga Boqortooyada waxa tilmaan u ahaa qalab gaar ah oo ay ka mid yihiin Ganbadh (stool) Durbaan iyo wixii la mid ah. Boqorka iyo Wasiiraddiisu waxay degi jireen xarun u gaar ah, waxaanu Boqorku lahaa Guri Boqortooyo oo leh Ilaaliyaal, maaweeliyayaal, khasnado iyo shaqaale qabta adeejin gaar ah. Si maamulka u hirgalo qaran waliba waxa uu u qaybsanaa gobollo iyo degmooyin. Shaqaale ka tirsan hababka xafiisyada isku xidhan (Bureaucracy) ayaa heer walba ku xil saaraa inay ilaashaan xasiloonida dalka, ururshana, tebiyana cashuuraha, shaqada iyo ciidammadana ay habeeyaan. Madaxa dalka ama boqorku waxa uu lahaa Gole la tails oo ka koobma Wasiirradiisa ka ugu madan. Taliyaha Ciidammada, Caddaaladda, Ilaaliyaha Xabaalaha Boqortooyada, Barbaariyaha carruurta Boqorka iyo deldelaha. Shaqaalaha sifaha loo doortaa ama loogu xil saaraa shaqada kumay xidhnaan jirin xigtaysi.

Maamulku wuxuu heegan u ahaa inuu sadooyin Boqortooyada u ururshо una tebiyo ganacsigana gacanta ugu hayo Boqortooyada.

Haddaan eegno dhinaca xeerka, Afrikaanku waxay lahaayeen xeer aad u hor maray. Maxkamadaha ay leeyihiin dadka ku hadla af baantuugu ayaan ku tilmaansan karnaa heerka garsoorka ay ummadaha Afrikaanku ka gaadheen. Odayga Degmada ama ka gobolka iyo dadka ka eegman kooxaha bulshada (Degmo beel ama fac) ayaa maderka maxkamaddu ka koobmaa. Garsoore waxa noqda Odayga Gobolka oo badhtamaha fadhiista, dhinaca midigtiisana ninka ugu da'weyn inta medarka joogta, dhinaca bidixdana ku da'xiga, dabadeedna dhinaca midigta ah ninka saddexaad ee ku da'xigga, dabadeedna ninka ku da'xiga ka hore, dabadeedna sidaas ayaa Goluhu ku buuxsami jirey. Kuwa isdacweynayaa iyo dadka la kala socla, markhaatiyaasha, mudanayaasha, iyo bulshada dhegaysadka u timid meel gaar ah ayaa la fadhiisin jirey. Hab tiro iyo hanaan shirku ku socdo ayaa la adeegsan jirey. Eedsadaha ayaa hadalka la siiya isaga oo raacaaya hannaan laga rabo, dabadeedna eedaysanaha ayaa isna dhinicisa muuja, mar-

khaatiyada ayaa markaas laga hadliyaa. Dabadadeedna ninka ugu da'yar ee guurtida maxkamadda ka tirsan ayaa sida ay la tahay garta ku naqa, dabadeedna ninka ka da'weyn ee dhinaca kale fadhiya yaa ra'yigiisa dhiibta, dabadeedna meertadaas ayaa socota ilaa badhtanka qofka fadhiya la soo gaadho. Markaas ayaa Odayga Gobolka oo had iyo jeer ah ninka dhexda fadhiya, isaga oo isu miisamay doodihii xaakimada ayuu go'aan gaadhaa sidaas ayaana lagu guddoomaa, loona hirgasha. Garsooreyaashu waxay ahaayeen odayaal aqoon waayo arag ler garasho ku dhisan qiimaha qofka iyo xeerka bulshada. Inta badan faylal (files) iyo karaaniyiin may lahayn, hase ahaatee, go'aanka uu gaadhaa Garsooruhu waxa suura gelinayey adeegsiga xusuusta uu u leeyahay intii qof ee bulshada ama beesha ka dhexdhacday. Aqoonta xeerka Afrikaanku waxay ku caddeeyaan maahmaaho. Qaar waxay tilmaamaan awoodda Garsooraha sida ay «Teswanuhu» u yidhaahdaan (Garsooraha kalmaddiisu waa xeer). Dar kale waxay tusaaleeyaan in xeerka loo sinnaado eex iyo xigtaysina la dhaafo. Sidaas darteed ayaa (Tswanuhu» ugu maahmaahaan «lama eegaayo qofka ee se waxaa la fiirinayaa gefka, maaha waxa la neceb yahay qofka ee waa gefka lagu soo dacweeyey». Tusaalooyin kale waxaan ka garan karnaa in ay farayaan madaxda, aqoon in lagu adeegsado oon xoog wax lagu meel marin, sidaa darteed waxay ku maahmaahaan «Magaalo waxa lag uurursha ul, budh, se lagama taabi karo». Siyaabo badan ayay Afrikaanku uga hadleen garsoorka iyo ilaalinta xeerka, maahmaahdan ugu dambaysa waxaan ka garan karnaa caddaalad ay raadin rabeen dadka Afrikaanka ahi maahmaahdaas waxay tahay «Xeerku inuusan indho lahayn, kii sameeyey ayuu liqaa».

## SHAXANKA IYO MUUSIKADA

Shaxanka iyo muusikada Afrikaanku si lifaadoon ayay u hirgaleen loogana yaqaannaa adduunka. Muusikada iyo shaxanka Afrikaanku wuxu yahay mare xidhiidhsha dareenka iyo isafgaradka bulshada. Muyuusiga waxay u ciyaaraan si ay isugu tabshaan isuna gaadhsiiyaan dareenka qofku ee ku aada farxa, dhimashada, dhalashada, shaqada, guurka, xuska iyo iwm. Bulshadu talaabaday qaaddaaba muyuusig u gaar ah ayay u leedahy. Muyuusiga iyo ciyaartu inta badan ma kala hadhi



karaan hase ahaatee waa kala gaar. Muyuusiga Afrikaanku wuxuu ku caan yahay «Polyrhythms» — taas oo micnaheedu yahay shan rhythem oo kala gaar ah oo la isu geeyey misna mar laga wada dhawaajiyey. Reer galbeedka muyuusikadoodu «Rythm» intaa ka yar ayay ku adeegsadaan. Qoobka ciyaarka Afrikaanku wuxuu raacaa «Polyrthimka» isaga oo «Rythem» wailba ku aadaayo qayb ka mid ah jidhka ciyaar toyga; Madaxu Rythem buu raacayaa garbuhuna mid kale, gacmuhuna mid saddexaad, luguhun mid kale, naasuhuna mid shanaad. Muyuusikada iyo ciyaaraha Afrikaanka waxaan ku soo koobi karnaa qaar ku aada 1 hees-e; hees dagaal 3 hees shaqo 4 hees ciyaareed; 5 hees xus-ku-aadan dhimasho, dhalasho, guur dabaaldeg iyo iwm. Ciyaaruhuna intaas oo kale ayay u qaybsamaan. Qalabka muyuusikada waxay Afrikaanku ka sameeyaan hadba degaanka wixii ku yaal. Qalabka ay garaacaana wuxuu tiro le'eg yahay kay «Orchestra» ay isticmaasho.


Qoobka ciyaaro fara badan oo lagu ciyaaro goleyaasha caweyska ee adduunka ayaa isirkoodu yahay Afrikaan. Haddaan magacawno in yar oo ka mid ah waxay yihiin: Tutsi, samba, Rhumba, Stamb. Muyuusikada «Jaas» «Blues» iyo «Soul music» intaba waxan odhan karnaa isiro Afrikaan ah ayay leeyihiin. Maxaa yeelay, dadka madow ee Maraykanka ah kuna caanka ah muusigga aan kor ku soo sheegnay waxay yihiin niman Afrikaan ah. Farshaxanka Afrikaanku waa mid aan qarsoomi karin in kasta oo ay gumeystayaashu canbaareeyeen misana si dhac ah u gurteen alaab farshaxankii kuna qurxisteen muyuusimyadooda. Farshaxanka Afrikaanku wuxuu u kala kacaa «Sculpture» ay ka qoraan qori ama ka dhalaashaan maar «Tin» iyo naxaas ay isku dhafaan, hase ahaatee qori qorka ayuu u badan yahay. Kaa waxa soo raaca «Masks» shaqal lo isticmaalo xusaska iyo maaweelada. Kan saddexaad waa xaradh lagu qurxiyo alaabta ay ka mid yihiin hubka, weelka iyo dharka. Kan lagu magacaabo «African bronze» isaga habka samayntiisa waxaa la yiraahdaa «lost wax method». Farshaxanka Afrikaanku gacan weyn ayuu ku leeyahay horumarka «Sculpture» iyo «painting» ama sawirka adduunka. Raadkiisuna wuxuu si aad ah uga muuqday sawirka «Picasso» oo ahaa farshaxankii qarniga labaatanaad. Farshaxanka Afrikaanku waa mid isaga iyo dhaqankiisaba u hadlaaya, guud ahaanu aadmiga oo dhan

# ILBAXNIMADII AFRIKA IYO DHAQANISWEYDAARSIGII

Heerkii ugaarsiga iyo arahsiga waxa ku xigay kacaan beerasho. Kacaankaa ugu horreyntii wuxuu ka hanaqaaday adduunkoo idil afar meelood, kuwaasoo ahq: Aasiyada Koonfur-galbeed, Aasiyada Koonfur-bari, Ameerika iyo Afriqa galbeei.

Waxa hore loo aqoonsanaan jiray saddexda kacaan ee ugu horeeyey oo qura, Afrikana waxaa loo haystay in kacaankeedu yahay mid ka soo farcamay kuwaas kale, waxaase cualumada barata cilmiga bootaniga ahi ay caddeysay in kacaanka beerashada ee ka taabbagalay Afrikada galbeed uu yahay mid dhalad ah oo aan wax xiriir ah la lahayn kuwa kale. Arrintaana waxay caddaatay markii la arkay abuurro badan u gaar ah Afrikada galbeed.

Kacaanka beerashada, Afrika gudaheeda wuxuu ka taabbagalay laba meelood, kuwaasoo ah: Aagagaarka wabiga Niil iyo agagaarka wabiyada Senegaal iyo Niijer. Labadaa meelood, oo dadkeedu bilaabay beerashada, waxa ka aasaasmay



*Haramka weyn oo ku yaal Qaahira agteeda. Waxa loo dhisay boqorkii Keope oo ka talin jiray 4000 oo san ka hor*



boqortooyin waaweyn, inkastoo dhalashadoodu kala horreysay, heerka uu gaaray horumarkooduna kala duwanaa. Dadkii beeralayda ahaa ee deggenaa degmooyinka ka dhashay wabiga Niil agagaarkiisa waxay u baahdeen dad biyaha iyo dhulka u qaybsha, nabaddana suga, cadawga dibedda ka daafaca oo maamula danahooda dhammaan, halkaana waxa ka dhashay qarankii ugu horreeyey ee ka abuurma Afrika, Masar. Qarankaasi wuxuu ahaa boqortooya ku dhisan talis dhaxaltooyo. Boqoradii masaarida awooddoodu kuma eyna ekeyn ka taliska arrimaha siyaasiga ah ee waxay maamuli jireen arrimaha diinta waxana loo haystay inay wakiil ka yihiin Ilaahay, taasina waxay aad u kordhin jirtay awooddooda oo ahayd mid buuxda. Inkasta oo uu boqorku lahaa la taliyayaal iyo kuwa go'aannadiisa fuliya, amarka uu bixiyo wuxuu ahaa kama dambays. Nolosha beeralayda ma ahayn mid aad u sarreysa,





*Sawirro muujinaya ilbaxnimadii reer Kuush oo ahayd 2000 oo sano ka hor : b) Waa sawir na tusaya fartii ay Kuush soo hindiseen qarnigii 3aad Nebi Ciise ka hor. (t) Xarar na tusaya boqorad reer Miroowe ah oo siinaysa qurbaan ilaahadda Isis.*





*Itoobiyadii hore : b) Madax qof oo dhagaxa oo ay sameeyeen dadkii aasaasay boqortooyadii Aksum 2000 oo sano k hor. t) Mambar uu ku yaal qoraal loo jeedinaya ilaahadda dayaxa ee Almaqah oo ku dhigan farta Carabta Koofureed oo reer Itoobiya qaateen.*



inkastoo ay tacbi jireen wax ayaga ku filan. Boqorka, wadaaddada iyo la taliyayaashiisa ayaa ka faa'idaysan jiray tacabka beeralayda kuna noolaa barwaaqo. Haybadda ay lahaayeen boqorradii hore ee Masaarida waxaa laga garan karaa ahraamta loo dhisa-y in lagu aaso. Boqorrada oo wakiil ka noqdo Ilaah gacantana ku haya maamulka arrimaha diinta waa mid ay ka siman yihiin boqortooyinkii ka dhashay dalka Afrika, taasina waxay caddeynaysaa dhaqan isweydaarsiga dhexmaray waddammada Afrika.

Xudduntii dhaqan isweydaarsiga waxa ay ahayd Nuubiya oo ay ka dhalatay boqortooyo la oran jiray boqortooyodii Kuush, oo ay Masaaridu qabsatay markii taariikhdu ahayd 1500 C.H. Masar waxay halkaa kula kulantay dhaqammada Afrikada madow, arrintaana waxa muujinaayey farshaxanka masaarida ee waqtiga la sameeyay oo ay ku sawiran yihiin dad madow.

Markuu sandku ahaa 700 N.C.H. Masaarida waxa ku dhacay dibu dhac u suurageliyey boqortooyoda Kuush in ay dib u soo ceshato madaxbannaanideedii, kolkeedana qabsato Masar. Waxa dalka Masar ka soo kiciyey boqortooyada Kuush Assiiriyiintii, oo kula dagaallamay hub cusub oo aan qoladani aqoon u lahayn, oo ay ka mid ahaayeen qalab bir ka samaysan. Waxa boqortooyada Masar dib u qabtay reer boqorkii hore ugu talin jiray, waxayna ku duuleen Kuush ayago kaashanaya Assiiriyiintii. Masaaridu waxay burburisay magaalomadaxdii Kuush, Nabata ayagoo ka cabsi qabay in ay Kuusha intay mar kale soo xoogeysato dib u soo weerarto. Reer Kuush markii laga burburiyey Nabata waxay u guureen dhanka koofure waxayna ka dhisteen magaalamadax la yiraahdo Miirow.

Nuubiya waxa dhinaca waqooyi ka xigay Masar, dhinaca galbeed suudaan, dhinaca koofureedna Itooboya, sida darteedna waxay ahayd bartamihii dhaqan isweydaarsiga, meeleynteeda joqraafiga ayaan awood siisay in ay noqoto caynkaas.

## ILBAXNIMADII REER SUUDAAN

Suudaan, oo macneheedu yahay dadka madow, waxa la oran jiray dhulka Saxara ka hooseeya ee ah dhul cawseedka tan iyo hawdka, xagga koofur iyo dhulalka sare ee Afrikada Bari. Dhulka inta u dhexeeya, oo ah mid aad u ballaaran, hodanna ah waxa ka dhalatay ilbaxnimo inkastoo ay xiriir la lahayd ilbaxnimooyinkii kale ee Afrika, waxay ahayd mid dhalad ah loona yaqaan ilbaxnimadii Suudaan. Ilbaxnimadaasi waxay lahayd dhaqan iyo hiddo, hab siyaasadeed, farshaxan ayada u gaar ah laguna aqoonsado.

Habkaas siyaasadeed iyo dhaqankaas waxa ku dhisnaa, kana wada sinnaa qarammadii filka weynaa oo ka dhashay Afrikada Galbeed iyo kuwii ay saameeyeen. Qarammadaa waxa loo yaqaan magaala-qarammo, magacaa ujeeddadiisu ma aha in qaranku ku koobnaa magaala qura, waxaase lagu tilmaamayaa qarammadaa oo bilowgoodii ka dhashay magaalooyin iskood u madax bannaanaaday, dabadeedna dhulballaarsaday oo mid waliba u talin jirtay kolba inta ay tabarteedu awood u siinaysay. Boqorku madaxda arrimaha siyaasiga ah iyo kuwa diintaba wuu wada ahaa, awoodoo idilna asaga ayay gacanta ugu jirtay. Boqorku kuma uusan tirsanayn qoys xoog leh ee waxa arrimaha u maamuli jiray xildhibaanno uu asagu magacaabo, markuu rabana jagada ka qaado. Maamulka qarammadaas waxaan oran karnaa wuxuu ku dhisnaa nidaam buroqraadi ah. Magaala-qarammadaa, oo kuwii ugu filweynaa ay ka dhasheen Afrikada Galbeed, halkaan laguma soo koobi karo, waxa laga soo qaadayaa : Magaala-qarammadii Suudaanta Galbeed, kuwii Suudaanta Dhexe iyo Zimbaabwe iyo Magaala-qarammadii Xeebta Afrikada Bari.

## BOQORTOOYINKII SUUDAANTA GALBEED

Magaala-qarammadii Afrikada Galbeed aad bay u filwaynaayeen haddii la eego nidaamka siyaasiga ah oo ay ku dhaqmi jireen iyo ballarka dhulka ay u tailn jireen. Waxa lala garabdhigi karaa boqortooyinka kale ee adduunka ka taabbagalay. Kacaanka barashada ee ka bilowday agagaarka Webiga Nijer iyo Senegal wuxuu dhaliyay degmooyin, kuwaasoo dadka deggan ay soo kordhayaan, tacab farabadanna soo saarayeen.



Kacaanka beerashada waxa weheliyey horumarna gaarsiiyey asaga laftigiisa dhalaalinta birta oo ayada la hubo in Afrikada galbeed laga yiqiin 220 N.C.H. ugu yaraan. Dhalaalinta birta waxay dhalisay horumar weyn, waqti dhan ayaana lagu magacaabaa kaasoo la yiraahdo «Faacihii Birta». Beerashada, xoolo dhaqashada iyo bir dhalaalinta waxay u sababahaayeen isbeddel isdaba jooga oo ka dhasha Afrikada galbeed.

Waxa kordhay waxaana soo baxay dad farsamo yaqaan ah, isla markaana waxaa bilowday hab nololeed oo ku dhisan beel, waxaana dabadeed dhashay qarammadii u horreeyey. Dhalaalinta birtu waxay siisay dadyowgii degganaa Afrika galbeed hub iyo alaabo cusub oo ka wanaagsan kuwii dhagaxa ka sameysnaa ee hore loo aqoon jiray. Waxay sameysteen waramo bir ah masaar, yambo, waxaana kordhay soo saariddii cunnada. Dadkii wey bulaaleen waxayna awood u yeesheen ayaga oo kaashanaya hubka iyo alaabta birta ah in ay ku fidaan Afrikada koofureed. Waxaa tabareystay qolooyinkii ayagu intaaba aqoonta u lahaa waxayna qabsadeen dadyowgii la jaarka ahaa, waxaana halkaa ka aasaasmay Boqortooyin waaweyn.

Kacaanka beerashada ee ka hanaqaaday Afrika galbeed waxa lagu wadaa in ay dhalisay Ummadda la yiraahdo Mande, Maladaasina waxay ku timid ummaddaas oo xagga beerashada gaarsiisneyd heer aad u sarreeyo, dhirta la beerana u lahayd cilmi wey iyo iyaga o oaad u bulaalay kana fara bata dadka kale, taasoo muujineysay iney barwaaqo ku noolaayeen.

Waxa inta raacsan ayadoo dhirta lagu beero Afrikada galbeed ay ku badan yihiin kuwa aan laga helin meelaha kale. Qoola ayaga ka mid ah oo loo yaqaan Soninke ayaana asaastay Boqortooyadii u horreysey ee ka dhalata dhinacaas: Boqortooyadii Gaana.

## SOO BIXITAANKII GAANA

Qarammadii ka dhashay Afrika galbeed waxaa ugu horreysay Wagedu oo reer Berberna oran jireen Awkar, haddana loo yaqaan Gaana, kaasoo ah magacii loo aqoon jirey Boqoraddooda. Wax soo saaridda oo korodhay waxay keentay in geddis lala yeesho dadyow kale. Dadka reer Soninke oo ayagu fadhiyey darafka koonfur ee Saxaraaga waxay xiriir geddis la yeesheen reer Barbar, si hab wanaagsan loogu maamulo geddiskoodana waxay door bideen in ay iska doortaan nin Madax ah oo u noqda Boqor.

Boqorradaas waxaa howlahooda ka mid ahaa isku dubbarridka geddiska, hagaajinta xiriirka lala lahaa geddisleyda reer Saxaraa, maamulka arrimaha diinta. Sidaas ayuu Boqorku awood ku yeeshay. Dhulkii ay u talin jireen reer Soninke wuu ballaartay oo waxa taliskooda ku hoos noolaa dadyow badan, bartamaha Boqortooyadooduna wuxuu ka xigay waqooyi hadda loo yaqaan Gaana ugu yaraan 800 oo Km.

Kolkii la joogay Qarnigii 8aad Boqorro fara badan iyo Madax kale ayaa Boqorka Gaana raacsanaa taliskiisa oo uu sado ka qaadan jirey. Markii ugu horreysey waxaa magaca Gaana laga helay buug uu qoray nin Carab ah oo la oran jiray Al-Fazari, waxaase in kastuusan tegin si wanaagsan uga warramy Al-Bakri oo aqoon dheer u lahaa Cilmiga joqoraafiga wareystana dad xogogaal ah. Gaana sannadku markuu ahaa 1065 waxaa u talin jirey boqor la yiraahdo Tunka Manin.

Gaana waxay ahayd dhul hodan ah hantida qarankuna waxay ka iman jirtay 3 meelood:

b) Cashuurta laga qaado geddisleyda.
t) Sedada laga qaado Boqorrada yaryarka ah ee ku hoos nool Gaana;
j) Dahabka laga qodo waddanka oo uu lahaa Boqorku; arrintaa ujeeddadeedu ma ahayn in lagu maamulo danaha waddanka oo qur ah ee danaha ugu weyn ee laga lahaa waxay ahayd in la xaddido dahabka waddanka ka baxayo si aan qiima dhac ugu dhicin.



Geddisleyda waddanka timaadda waxaa loo dhoweyn jirey si diirran, nabadgelyadoodana aad baa loo ilaalin jirey tan iyo inta ay ayagu dhowrayaan sharciga waddanka bixinayaanna cashuurta.

Tunka Manin wuxuu Madax u ahaa Boqortooyo weyn awoodna leh wuxuuna goob isugu keeni karay 200 oo kun oo Askar ah, hubkooduna yahay qaanso, fallaar iyo waramo caarad bir ah leh oo aad u fiqan. Hubkooda iyo nidaamka askartooda oo ka wanaagsan kuwa qolooyinka jaarka la ah ayaa awood u siiyey reer Soninke in ay dhistaan Boqortooyo sidaas u qaaya badan.

Diinta islaanku waxay Gaana soo gashy qarnigii 10aad boqorrada reer Gaanana inkastoo ayan rumayn diiinta Islaanka waxay u oggolaadeen dadkii Muslinka ahaa in ay dhulkooda magaalooyin ka dhistaan, kuwaasoo ay ka mid ahayd Kumbi Saalax, oo ahayd magaala weyn oo leh Masaajidyo iyo guryo dhagax ah. Magaala Madaxda Gaana in badan baa la raray tii ugu dambeyseyse waxaa lagu tilmaamaa in ay ku dhoweyd Kumbi Saalax, lahaydna daaro waaweyn oo uu ku heeraarsan yahay derbi aad u dheer oo aan cadowga soo dhaafi karin. Daarahaasi waxay ahaayeen aqalka Boqortooyada.

Gaana waqtiga saa loo tilmaamayaa oo ahaa 1066kii way sii liiceysay waxaana soo weeraray Almuraabiddintii qabsatay taliska Maroko. Reer Gaana waxay ciidammadaas kala hortageen dagaal kulul oo socday muddo 10 sano ah. Waxa magaala madaxda Gaana la qabtay 1076. Dadka reer Soninke waxay u qaxeen koofur, waxayna halkaa ka sameeyeen Boqortooyo cusub, taasoo jirtey muddo aan badneyn. 1205 waxaaba dhacday in ay dib u qabsadeen Gaana, wayse u soo celin kari waayeen bidhaanteedii hore.

## BOQRTOOYADII MAALIL

Markay Gaana jabtay waxa madaxa kor u soo qaaday wadammo yaryar oo isku deyey in ay kaalinteedii galaan. Waxaa ka mid ahaa dadkaas Fulaanidi Tokruur oo ayagu kaaliyay Almuraabidiintii markay Gaana jebinayeen. Fulaani-

ddu waxay ugu horeyntii qabsatay Boqortooyo yar oo la oran jiray Diyaara, kuna Xejisay Kumbi Saalax. Waxaa muddadaa u talinayey Takruur Boqor la yiraahdo Samanguuru. 1240kii waxay Samanguuru is qabteen dadka reer Mandinke oo ayagu intii ay Gaana talin jirtay gacanta ku hayey geddiska dahabka laga qodo dalka Wangaara, oo maanta ah Jumhuuriyadda Gini dhinaceeda waqooyi. Markuu Samanguuri qabsaday waddadii xiriirinaysey geddiska Afrikada galbeed iyo tan waqooyi, waxay arrintasi dhibaato u geystay dadka reer Mandinke.

Boqortooyada dadka Reer Mandinke oo la oran jiray Hangaba, waxa u talinayey Boqor la yiraahdo Sundiyaata. Samanguuru waxaa weerar ku soo qaaday sundiyaata, halkaana asagaana ku diley ciidankiisii ku jabshay. Sundiyaata, oo lahaa aasaaska Boqortooyada dabadeed la magac baxday Maali, wuxuu Boqortooyada qabtay 1230 wuxuuna hayay tan iyo 1255.

Muddadaa dheer ee uu u talinayey Maali, dhulkii Boqortooyadii yaryareyd ee Kangaba aad buu u ballaartay. Wuxuu gacanta ku dhigay oo soo hoos geliyey Maali Boqortooyo badan oo uu agasu kor ka xukumayay. Waxaa asaga ku xigay Mansa Uli (1255-70) oo waday dhul ballaarsigii. Boqorrada kale ee la garanayo waxaa ka mid ahaa Mansa Quu iyo Mansa Abuubakir. Mansa waa magaca loo yiqiin Boqorrada Maali. Manse Abuu-bakar waxaa ku xigay Mansa Sakuura, oo asagu ahaa xoryeel Boqortooyada qabsaday 1289. Boqorrada tan iyo intaa u taliyey Maali, siiba Sakuura, waxay ilaalin jireen dhulka Dahabka laga qodo ee Wangaara, waxay qabsadeen Diyaara.

Taliska Maalina wuxuu gaarsiisnaa tan iyo Nijer iyo harada Deeba.

Dhibaatooyinka soo food saaray Boqortooyada Maali waxaa ugu weynaa nidaaminta maamulka arrimaha Qaranka iyo sugidda nabadda dhulkaa ballaaran, waxaana dhibaatooyinkaas ka gun garay Boqorkii la oran jiray Mansa Muusa oo Boqortooyada qabtay 1312. Mansa Muusa wuxuu gaarsiiyey boqortooyada heerkii ugu sarreyey, magaca Maalina wuxuu ku faafiyey adduunka oo idil. Mansa Muusa, oo dhisay Boqortooyo ka weyn tii Gaana, wuxuu ugu horreyntii gacanta



ku dhigay waddooyinka uu marayey geddisku, oo ka kooban Awr isku xiriirsan oo iskaga gudubta saxaraaga. Magaalooyinkuu Boqortooyada ku daray waxaa ka mid ah Timbuku, Gaawo iyo Walata oo ku yaal saxarada koonfureed. Waxay Ciidammadiisu gaareen tan iyo meelaha cusbada laga qodo ee Tag Hasa, xagga barina tan iyo dhulka Hawsada. 25tii sano ee u hayey boqortooyada Maali xadkeedu wuxuu qabanayey Suudaanta galbeed iyo tan dhexe badankeeda. Mansa Muusa wuxuu soo xajiyey sanadku markuu ahaa 1324 asagoo ay la socdaan dad fara badan una raran yihiin awr tira badan, kuwaasoo lagu siday maal ka yaabiyey dadyowgii uu dhex maray. Safarkaa hadalheyntiisii waxay gaartay tan iyo Yurub, asagaana suura geliyey in lagu sawiro kolkii ugu horreysey, Maali Khariidadaha Adduunka.

Maali waxaa si wanaagsan uga warramay dal markii caanka ahaa oo la oran jiray Ibn Battuta oo dhulka Maali tegay 1353; magaalada Niyaani joogay muddo 3 bilood ah; waqtigaa waxaa Maali u talin jiray Mansa Suleymaan, oo la dhashay Mansa Muusa. Ibn Battuta oo aad ugu bogay nidaamka siyaasiga ah ay ku dhaqmayeen wuxuu yiri: «Waa dhif in aad ku argato caddaalad darro qolo kasta wey ka neceb yihiin daddaala darrida, Boqorkuna uma naxariitso qofkii ku xad gudba caddaaladа, dhulkoodu nabadgeliyadiisu waa sugan tahay, oo dalmareyaasha iyo dadka dhulka degganba midkoodna kama cabsi qabo tuugo iyo dil.

Tilmaamaha uu ka bixinayo Ibn Battuta waxay tusaale u yihiin maamulka wanaagsan ee dalkaas jiray. Caddaaladda iyo nabadgelyada waa tiirarka uu ku taagan yahay qaranka wanaagsan, oo meeshii ayan jirin kama dhici karo horumar. Dhulka caynkaa u ballaarraa waxaa isku hayn karayey nin isticmaalala awood buuxda, lehna karti uu ku socodsiiyo.

Boqorradii Mansa ka dambeeyey may wada lahayn kartidaas. 1360kii, markuu dhintay Mansa Suleymaan, waxaa bilowday liicitaankii Maali. Mansa Suleymaan waxaa ku xigay Mansa Baari Diyaatihi labaad oo lagu tilmaamo nin dadka cadaadin jiray hantida qarankana aan xijin jirin. Wuxuu dhintay 1373kii. In kastoo ay Boqorradii asaga ku xigay aysan waxba dhaamin, boqortooyada Maali lixaad bay lahayd tan iyo 1400.

Dhibaatooyin badan ayaa soo food saaray Maali kuwaasoo ay ka mid ahaayeen weerarro ay had iyo jeer ku soo qaadi jirtay Tuwaaregta reer guuraaga ah ee degganaa lamadegaanka koofur oo qabsaday Timbukutu iyo Walata, ayagoo ku tala jira iney gacanta ku dhigaan geddiska Suudaanta galbeed; Qarammadii yaryaraa oo ay u talin jirtay dhammaan oo ku kacay isna xoreeyey.

Boqortooyada Maali ee taliskeedu dib u sii dhacayey, waxay dhab ahaan u baaba'day 1550kii.

## BOQORTOOYADA SONGHAY

Waxaa markaa soo xoogeystay Boqortooyada Gaawo oo hore u jiri jirtay. Dadaka reer Songhay waxay Gaawo agagaarkeeda soo degeen qarnigii 7aad bilowgiisii oo waxay ka durugsadeen dadka reer Sooso. Marka magaala madaxdooda maysan ahayn Gaawo ee wax la orna jiray Kukiya, waxayna ka xigtay Gaawo bari. Songhay, sidii qarammadii aan hore u soo sheegay, oo sida dhabtaa ay dhaxashay, waxa dhaqaalaheedu ku dhisnaa geddis ay la lahayd reer Berber.

Qarnigii labaad bilowgiisii ayaa boqorkii Songhay ee la oran jiray Diya Kossay (Dia-boqor) muslimay 1010. Waqtigaa mar ku dhow ayaana magaala madaxda laga raray Kukiya oo la geeyey Gaawo. Diya Kossay iyo boqorradii ka dambeyey mayasan cadaadin dadkooda si ay ku soo galaan diinta Islaamka, mana ayan beddelin habkii lagu maamuli jirey aqalka boqortooyada, diinta Islaamka horteed. Wuxuuba isku dayey in uu israaciyo diinta iyo caadooyinkii.

Saddex qarni boqortooyadii Diya Kossay ka dib, Songhay waxay gaarsiisneyd horumar iyo hodannimo hunguri gelsay Mansa Muusa oo u soo diray ciidan qabta.

Markii sannadku ahaa 1335kii ayaa waxa dhammaday boqorradii isku magacaabi jiray Diya oo waxaa bilowday boqorro lagu magacaabo Sunni: Sunnigii labaad oo la oran jiray Soleymaan mar ayaa dib u soo ceshay madax bannaanidii Songhay. Boqolkii sano ee muddadaa ku xigtay dadka reer Songhay waxay cawadoodu noqotay in ay maraan heerar kala duwan; oo marna aad sare ugu kacaan marna dib u dhacaan.



Tan iyo intii laga gaaro boqortooyadii Sunni Caligii Ilaad oo madaxtinimada qabtay 1464, hayeyna tan iyo 1492kii. Nin kasta oo maanta taga degaanka reer Songhay wuxuu ogaanayaa in weli la hadal hayo magaca Sunni Cali, loona aqoonsan yahay nin geesi ah, karti weyn leh, indheer garatana ha. Songhay kolkuu boqortooyada qabtay wey sii tabar darreyneysey, waddankoo idil dhibaatooyin baa ka tagnaa. Xagga waqooyi waxaa ka soo weeraray Tuwaarag xagga koonfurna Moossi.

Sunni Cali wuxuu ahaa abbaanduulle weyn asagoo ay u muuqato in sida keliya oo Suudaanta galbeed leysagu keeni karo ay tahay dagaal, ayuu weerarro kulkulul ku qaaday dadka reer Mossi; wuxuu dabadeed u jeestay dadyowga reer Dogoon iyo Fulaanida oo ayaguna dhibaato u geysanayay Boqortooyada dhulkooda. 1468 markuu dhulka badankiisa xasiliyey, ayuu dagaal ku qaaday Tuwaarag oo heystay Timbuktuu tan iyo 1433kii kuna soo ceshay soohdinta Boqortooyada soona raacshay Jenne. Cali kolkuu dhintay 1492 waxaa ku xigay wiilkiisii Sunni Baari.

Sunni Baari, oo diiday inuu rumeeyo diinta Islaamka, yeelanna waayey kartidii aabihii, waxaa taliska kala wareegay abbaanduullihii ciidammada, Maxamed Askiya oo la magac baxay Askiyihii weynaa. Intii uu boqortooyada hayay Songhay waxay yeelatay magac weyn oo la qaddariyo, horumarkeeduna wuxuu gaaray heerkii ugu sarreeyey. Maxamed Askiya dhulka Boqortooyada aad buu u ballaarshay wuxuuna dhammaan gacanta ku dhigtay waddooyinka uu maro geddisku. Waxyaabaha lagu xasuusto laguna qaddariyo waxa u weynaa aqoonta uu u lahaa arrimaha gaashaandhigga ee waxaaba si weyn loola yaabay qota dheerida garaadkiisa siyaasadeed. Askiya wuxuu dhaqan geliyey hab qaran lagu maamulo oo aad u wanaagsan waxbana aan ka duwaneyn kan maanta jira. Si uu u mideeyo boqortooyadaas ballaaran wuxuu kaashaday culummada diinta iyo geddislayda. Gobol kasta wuxuu u yeelay guddoomiye wuxuuna magacaabay dhowr wasiir oo maamula danaha guud, kuwaasoo ay ka mid ahaayeen wasiirrada lacagta, caddaaladda, arrimaha gudah, beeraha iyo dhirta iwm. Intuu Askiya madaxtinimada hayey waddanka aad buu horay

uga maray xagga dhaqanka iyo dhaqaalaha. Magaalada Timbuktu waxay lahayd jaamacad culumma ka timid meel kasta. Songhay waxay xiriir siyaasadeed la lahayd Isbayn iyo Marooko.

Askiya wuxuu dhintay 1531dii waxaana ku xigay Askiya Ismaaciil (1537-38); Isxaaq Iaad (1539-49) iyo Daa'uud (1449-82). Intuu Boqortooyada hayey Daa'uud Songhay dib ey u soo bilanty, dadkeeduna wuxuu ku dhaqnaa barwaaqo. Boqorradii ku xigay Daa'uud waxa ka yimid dhibaatooyin ay ka sal gaari waayeen.

Songhay waxa baabi'yay ciidan hub rasaas ah sita oo uu leeyahay Boqorka Marooko. Inkastoo ay burburiyeen qaran waddanka u taliya ma aayan aasaasin Dawlad, Dawlad la'aantaasina waxay dhibaato u geysatay dadkii waddankaa deggana oo waayay xasilloonidii iyo barwaaqadii. Qarammo yaryar ayaa isku dayey in ay kaalintii Songhay galaan, kuwaasoo ay ka mid ahaayeen Boqortooyada Seguu iyo Kaarto, wayse u suura geli weydey, sidaa darteed Songhay waxay noqotay Boqortooyinkii waaweynaa ee ka dhashay Afrikada galbeed ta ugu dambeysey.

## MAGAALA QARAMMADII SUUDAANTA DHEXE

Magaala garammadii Suudaanta Dhexe waxaa loola jeedaa kuwii ka dhashay bariga Boqortooyada Songhay oo ahaa magaala qarammadii Hawse iyo Kaanem-Bornuu. In kastoo haddii xagga meeleynta joqoraafiga la eego ay habboonaan lahayd in Songhay lagu xijiyo Hawse, waxaa la soo hormarinayaa kaanem-Bornuu ayadoo la tixgelinaayo laxaadka ay lahaan jirtay, iyo dhulka ay xukumi jirtay.

## BOQORTOOYADA KAANEM-BORNUU

Qarnigii 7aad ayaa dhulka ku yaalla agagaarka harada Jaad waxaa ka dhashay dhowr boqortooyo, kuwaasoo ay ka mid ahayd Kaanem oo kaddib isku fuuqsatay kuwii kale. Halkaa waxaa ku yiil suuq xiriiriya geddiska isaga dhoofa Liibiya, Tuunis xagga waqooyi, Liibiya iyo Masar xagga waqooyi bari.



Waxaa kale oo alaaba looga keeni jirey dhulka maanta ah Nijeeriyada koofureed. Dhalashada Boqortooyada Kaanem-Bornuu waxba kama duwana kuwii aan hore u soo aragnay oo dhaqaalaheedu wuxuu ku dhisanaa geddis. Reer Boqorkii ugu horreeyey oo taliska qabta waxaa la oran jirey Sayfuwa.

Kolkay reer Sayfuwa xukunka hayeen laba qarni, ayaa boqorkii taliska haystay, markuu sannadku ahaa 1086, oo la oran jiray Hume, dabadeedna la baxay Cabdi Al-Jaliil, oo muslimay halkaasna waxaa ka bilaawday isbeddel weyn. Diinta Islaamku waxay suura gelisay inuu xoogoobo xiriirka ay la lahaayeen waddammada Muslinka. ah. Waxyaabaha ugu weynaa ee diintu keentay waxaa ka mid ah qoirdda far Carabiga iyo waxbarashada, kuwaasoo u suura geliya dadyowga reer Afrika in ay si dhab ah ula socdaan isbeddellada adduunka ka dhacay. Kuwaasi waa waxyaabihii ay u faa'iideysay dadka islaamka ah laakiin waxaase ka mid ahaa dhibaatooyinkii ay u soo jiidday ayadoo dadkii rumeeyey diinta Islaamka iyo kuwii ku adkaystay diinahoodii hore ay iska horyimaadeen oo islaayeen.

Dhulka Boqortooyada Kaanem-Bornuu ballaarkiisu wuu isbeddeli jiray oo wuxuu la socon jiray hadba heerka ay marayso Boqortooyadu. Dadka ugu badan Boqortooyada, taliskana, heystay waxaa la oran jiray Kanuuri. Dadka reer Kanuuri waxay ku noolaayeen agagaarka harada jaad, mase ayan lahayn wax soohdin ah oo kala sooca ayaga iyo dadka kale. Boqorradoodu waxay heshiis isbahaysi ah la samaysan jireen madaxda ay jaarka yihiin, markay awood u yeeshaanna waxay ku qasbi jireen madaxdaa in ay sado siiyaan amarkoodana oggolaadaan. Boqorrada reer Kaanen ma ayan ahayn keli tashadeyaal, mana haysan awood buuxda. Waxay maqli jireen inta ayan go'aan gaarin talada Boqorrada yaryar, madaxda kale iyo la taliyayaasha; wixii ku saabsan Kaanem arrimaheeduna waxay kala tashan jireen gole ka kooban hoggaamiyeyaasha qoyska Sayfuwa.

Inkastoo taliskoodu ku xasilay Bornuu iyo agagaarka harada Jaad waxay marna dagaal marna heshiis kula noolaan jireen Boqortooyinkii Hawsa xagga waqooyi, dhibaatooyinka

ugu waaweynaase waxay kala kulmeen xagga bari. Waxaa dhankaa ka xigay dad firfircoon oo la yiraahdo bulaala, oo kasoo horjeeday taliskooda.

Haddaannu eegno muddada dheer ooy jirtay Kaanem Bornuu waxaan garab dhigi karnaa Gaana oo qura. Dadka reer Kanuuri iyo dadyowgay isbahaysteen waxyaabaha ay kareen waxaa ka mid ah in ay ku wada maamulaan dadyow kala duwan sharci iyo nidaam qur ah. Kaanem-Bornuu qarnigii 16aad waxay bilowday dhul ballaarsi. May Idiris Katakarambe (1507-29) markuu qabtay boqortooyada Kaanem waxay ahayd qaran yar kuse nool xasillooni iyo nabad. Boqorku wuxuu goostay inuu qabsado dhulka kaanemka xiga xagga bari oo ay deggan tahay bulaaladu horana ay ugu talin jirtey Boqortooyadan. Boqorkii asaga ku xigay; May Maxamed ayaa Bulaaladu ku soo duushay waxaase halkaa Bulaalada ka raacday guul darro. May Maxamed wuxuu kaloo qabsaday Ayr oo waqtigaa ku hoos jirey taliska Songhay. May Cali (1544-48) wuxuu la dagaallamay Boqortooyada Kebi (Hawsa) oo doonaysay in ay ka qayb qaadato geddiska mara Ayr. Waxaa asaga ku xigay Maye Dunaama iyo Maye Daala. Waxaa Boqortooyada ku kacay Bulaaladii inkastoose laga adkaaday; Boqortooyadu way tabardarraysey waxaa Dunaama dantu ku kalliftay inuu magaala madaxda Ngsaramuu u darbi ku wareejiyay taasoo la sameeyey markii ugu horreysey waxay na tuaaleeynaysaa jilicsanaanta boqortooyada.

Ayadoo ceynkaas ah ayaa waxaa Madaxtinimada Boqortooyadii qabtay May Idiris Aluuma, oo ah Boqorka uga magac weyn boqorrada Kaanem Bornuu. Idiris, oo ah ina May Cali, wuxuu aabihii dhintay asagoo yar, intuu ka barbaarayna waxaa soo hayay reer abtigii oo ahaa reer Boqorka Bulaala. May Dunaama iyo May Dalaaba waxay isku dayeen inay dilaan hase yeeshee waxaa arrintaas ka horjoogsatay hooyadii Amsa.

Markuu May dhintay waxaa taliska boobtay walaashiis Boqorrada Caasha oo ahayd naag siyaasadda u bisil karti weynnaa leh. Idiris waxay madaxbannaanidu u soo gacan gashay kolkuu 7 sano la dagaallamayey Caasha, wuxuuno hayay Boqortooyada 1580kii tan iyo 1617dii. May Idiris wuxuu noqday



boqorkii ugu karti weynaa guulo badnaa. Boqorradii Kaanem. Boqorkaas oo ahaa nin geesi ah wuxuu had iyo jeer hor kici jiray ciidamadiisa, dhulka kaanem-Bornuuna aad buu u ballaarshay. Hawlihii uu qabtay waxaa ka mid ah isbedel weyn oo ka dhacay dhanka siyaasadda waddanka lagu socodsiinayey. Intuu madaxtinimada hayey wuxuu xoojiyey Boqortooyadii oo uu gaarsiiyey heerkii ugu sarreeyey; wuxuu adkeeyey diinta Islaamka; Maamuusna u yeelay dadka garsoorka haya.

Diinta wuxuu ka dhigay xariggii isku xirayey mideyneyna dadyowga kala duwan ee ku hoos nool Boqortooyada. May Idiris wuxuu xiriir la lahaa Turkiga qabsatay Masar.

May Idiris wuxuu dib u qabsaday kaanem oo ahayd meeshii ay ka aasaasantay Boqortooyadu ee dabadeed la magacbaxday kaanem-Bornuu. Boqortooyada kaanem-Bornuu oo soo gaartay tan iyo qarnigii 18aad; inkastoo taliskeedu ku dhisnaa weerar iyo qabsasho, haddaannu fiiro gaar ah u yeel lanno muddadii dheerayd oo ay Taliska haysay horumarkii iyo xasilloonidii la gaaray, waxaa muuqanysa inay kaalin weyn kaga jirto qarammadii dhisay ilbaxnimadii Afrika Galbeed.

*Magaalo Qarammadii Hawsa*

Songhay iyo Keenen-Bornuu dhexdooda, dhulka uu maro Niijerka Sare, waxaa ku yaal dhul hodan ah oo ay deggan yihiin dad la yiraahdo Hawsa. Dhulka Hawsa waxaa ku oolli jirey magaalo qarammo fara badan, kuwaasoo ay ka mid ahaayeen Goobir, Kaano, Kadsiino iwm. Dadka reer Hawsa ma ahayn qola qur ah ee waxay ahaayeen qoloyin ka dhashay dad kala duwan oo isbahaystay islana noolaa qarniyo badan; dadkaasi inkstaoo ay isku af iyo isku dhaqan ahaayeen; haddana waa la garanayey in ayan ummad qur ah ahayn. Faracoodaas kala duwan wuxuu ka hor istaagay in ay isku tagaan si ay xoog ku yeeshaan ay cadawgooda kaga hortagaan. Taa sina waxay u soo jiidday in ay Boqortooyada Songhay iyo tan Kaanem-Bornuu xukunkooda hadba mid dhinaceeda u liicaan. Qarnigii 11aad ayaa beelihii reer Hawsa waxay billaabeen in ay aasaasaan magaalo qarammo ay u taliyaan boqorro. Magaala qaran walba waxay lahayd dawlad iyo xoog Beeraa-

leyda deggan Magaalada agagaarkeeda halkaasey u carari jireen haddii la soo weeraro, waxayna bixin jireen cashuur si ay u helaan nabadgelintaas. Magaala qaran walba waxay ahayd suuq ay alaabada keensadaan dadyowga deggan magaaladaa agagaarkeeda.

Magaala qarammada Hawsa hodan bay ahaayeen oo waxay lahayeen warshado. Inkastoo dadka badankiisu uu ahaa beeraley, reer magaalku waxay ahaayeen farsamo yaqaanno. Kaanu iyo Raano agagaarkooda waxa ku yiil meelo birta laga qodo, oo aad baa birta looga shaqeyn jirey, dhar midabyo kala duwan leh baana lagu samayn jirey. Waxaa kaloo laga shaqeyn jiray hargaha, oo dadka reer Hawsa magac weyn bey ku lahaayeen harag samaynta.


Magaala qarammada Hawsa ee iyagu gacanta ku dhigay geddiska Afrikad waqooyi galbeed, markii ay Songhay baa'baday, waxay soo gaareen tan iyo qarnigii 18aad, markii ay daba yaaqadiisii Fulanidu ku soo qaadday jihaad halkaana ay xukunka qabsadeen Dawlado muslin ah.

## BOQORTOOYADA SIMBAABWI

Koofurta Zambeesi, dhulka hadda loo yaqaan Rhodeesiya waxaa ka dhalatay Boqortooyinkii Afrika tii ugu dhul ballaarneyd. Boqortooyadaas, oo qiimo weyn la siiyo waxaa la oran jiray Mwanamutapa, oo ah magacii loo yiqiin Boqorradooda. Magaalamadaxdeeda waxaa la yiraahdaa Zimbaabwi weyn si looga duwo dhawrka Zimbaabwe ee kale oo waddanka ku yaal. Zimbaabwe macnaheeda waa hoygii Boqorka.

Zimbaabwe waa magaalo weyn, waxaa ku yaal dhismooyin dhagax ah oo hadda burburay kuwaasoo la dhisay waqtiyo kala duwan una marag kacay ilbaxnimo weyn oo ka dhalatay koofurta Zambesi. Sahmiyayaashii reer Yurub ee horreeyey oo yimid Afrika, markay arkeen dhismooyinkaas waxay is yiraahdeen waxaa dhisay Finiiqiyiintii, ayagoo aan u quuri karin dadka reer Afrika kartidaas, waxaase caddaatay in boqortooyadaas ay ahayd mid ay dhiseen dad dhalad ah, inkastoo aqoonta loo leeyahay yar tahay, siiba qolada reebtay dhismooyinka hore.





*Zimbabwida Weyn oo laga sawiray dayuurad*

Boqortooyadaas oo ay dhiseen dad reer Shoona ah oo loo yaqaan Karanga, inkastoo aan la hubin waqtigii ay aasaasantay waxaa la ogsoon yahay in markii dalmarkii caanka ahaa ee la oran jiray Al-Mascuudi uu booqday dhulkaas, sannadkuna ahaa 950 C. D. In ay Manamutaaba ay ku fadhiday dhul ballaaran oo ka bilaawday agagaarka Buulowaayo gaarsiisanaa badweynta Hindiya, lahayd Boqor weyn oo u taliya boqorro iyo madax yar oo isaga siiya sado. Manamutaaba qayb weyn bay ka qaadan jiratay geddiska xeebta bari, taasoo ay muujinayaan lacag iyo alaabo ka yimid dalalka carabta iyo Shiinaha oo laga helay Zimbaabwe. Dhulka waxaa laga qodi jiray dahab oo laga iibin jirey geddisleyda Carabta ee ka timaadaa Sofaala iyo Kilwa.

Boortaqiisku kolkuu kala wareegay geddisleyda carabta ganacsigii Badweynta Hindiya. qarnigii 17aad wuxuu la yeeshay xiriir ganacsi Mwanamutaba. Boortuqiisku khilaaf ayuu ka dhex abuuray reer boqorkii waddanka u talinayey si uu uga faa'iideysto. Boqortooyadii Mwanamutaaba; waxay bilawday in ay liicdo. Waxaa madaxa kor u soo qaaday Boqortooyo yar oo Mwanamutaabi ay sado ka qaadan jirtey. Boqortooyadaas oo loo yaqaan Roswi waxaa u talinaya in la

yiraahdo Jaanga, Boqoradooduna waxaa lagu magacaabi jiray Jangamires.

Roswi waxay dagaal ay kaga guuleysatay mar ay ku qaadday Boortooqiiskii oo dantoodu ahayd dhul balaalrsi waxaana lagu go'doomiyey Xeebta. Boqortooyada Roswi waxay dib u dhistay magaalada Zimbaabwe oo ay gaarsiisay ballaca ay leedahay oo maanta ka muuqda burburkeeda.

## MAGAALA QARAMMADII XEEBTA AFRIKADA BARI

Dhinaca Afrika ugu horreeyey ee xiriir la yeesha adduunka, haddii laga saaro Afrikada waqooyi wuxuu ahaa Afrikada Bari. Waayihii hore waxaa iman jirey xeebta Afrikada Bari Maraakiib tiradoodu yar tahay oo ka yimaada waddamada Carabta iyo Masar. Markii ay farsamada maraakiibta iyo shiraacyadu horey u martay lana soo saaray qalab tusaaleynaya jihada; ayaa waxaa badatay maraakiibtii imaneysey Afrikada Bari. Maraakiibtaa waxaa u suuragelin jirey inay isaga socdaan dalalka kala fogfog, oo ay ka mid ahaayeen Hindiya iyo Shiina, dabaylaha loo yaqaan Mansuunka oo marna waqooyi bari u socda marna koonfurta galbeed.

Geddiska Afrikada Bari ay la lahayd waddamada Masaarida Carabta iyo Hindiya waa mid bilowday muddo fog. Tan iyo talis dhaxaltooyihii llaad, iyo kii 12aad, waxay Masaaridu la lahayd xiriir geddis dhul gaarsiisan xeebta gobolka bari ee Soomaaliya, waxaase ayagu gaari jirayn tan iyo Asaaniya Carabta, Xeebta Keenya, Tansaaniya Soomaaliya inta u dhexeysa Kismaayo iyo Kilwa ayaa dadkii hore ee u ku dhaqnaa badda cad waxay u yiqiineen Asaaniya. Waqtiga Afrikada bari lala yeeshay xiriirka geddis kama uu yara shan boqol C.H.

Waxaa u marag kacay arrintaa lacago ay lahaayeen Romaaniyiintii iyo Masaaridii hore ee waqtigaa ka hor la daabacay laga helay Afrika Bari.

Waxaa qarnigii 1aad buug ka qoray nin Giriig ah oo aad uga hadlay magaalooyinka ku yaal xeebta Afrikada Bari iyo waxyaabihii la keeni jirey iyo wixii laga dhoofin jirey. Magaalooyinka waqtigaa jirey ee ku yiil xeebta Soomaaliyeed waxaa ka mid ahaa:

a) Zeylac oo lo yiqiin Avaliite, waxay ahayd magaalo leh suuq aan aad u weyneyn oo wax lagu geddisto. Waxaa suuqeeda lagu gadi jirey amaba ay Soomaalidu dhoofin jireen ayagoo saaraya doonyo gudbaya xeebta dhinaceeda kale: Xawaaji, Caag, qolof, qubo, malmal, waxaana la keeni jirey dhar, muraayad, sarreen iwm.

t) Berbera oo looyiqiin Malao-Seylac ayadu weyna ka suuq weyneyd oo alaabo fara badan ayaa lagu kala iibsan jirey.

Waxaa la soo gaarayaa xeebta gobolka bari kuwaasoo dhawr meel laga magacaabayo: Mundi oo loo maleynayo Bandar Xays iyo Opoone oo loo maleynayo Raas Xafafuun.

Gobolkaa waxaa laga dhoofin jirey beeyo fara badan oo laga iibin jirey dadyowga agagaarka badda cad oo u shidi jirey guryaha ay ilaahey ku caabudaan. Beeyada darteed waxaa Roomaniyiintii ku magacaabi jireen Gobolkaa (Regio Amomatitera) Gobolkii udugga.

Xeebta Afrikada Bari magaalooyinkii ku yiil laguma iibin jirin waxyaabaha waddankooda ka baxa oo qur ah ee waxay ahaayeen xuduntii geddiska ka dhexeeye bari iyo galbeed. Waxaa laga dhoofin jiray alaabo laga keeno Hindiya iyo Shiina iyo alaabo laga keeno waddanka Yurub.

## GEBAGEBO.

Tan iyo muddo aan yareyn dadka reer Yurub waxay u heystaan inayan Afrika taariikh lahayn, taasoo ulajeedadeedu tahay in aan dadka Afrikaanka ah ayan lahayn garaad iyo karti ay ku dhaliyaan ilbaxnimo. Fikradaasi waxay beenowday markii la arkay in Afrika ay dhalisay boqortooyin haddii la eego xagga dhaqanka farshaxanka, nidaamka siyaasiga ah la garab dhigi karo kuwii adduunka kala ka hana qaaday.

Inkstoo aan halkaan lagu soo koobi karin qaranimamdii

ka dhashay Afrika dhammaanteed ee laga soo qaaday in yar, waxaa culumadii isku raacsan tahay in ay Afrika xagga taariikh dihintahay, oo aan weli fari ka qodneyn. Waxaa la oran karaa lahaa Afrika taariikh hore malaha, haddii inta la baaro dhammaanteed wax marag ah laga soo waayo tan iyo haddase baarista Arkiyo-loojiga ah ee Afrika lagu sameeyey waa mid aad u yar.

Meel kastoo la tago dhaqanka orahda ah'ee reer Afrika wuxuu ka hadlayaa dadyow magaalooyin ilbaxnimo sare gaarsiinaa oo baaba'ay oo Haddaannu waxaas oo dhan quraafaad u qaadanno, waxaannu ka mid noqoneynaa dadkii ku qoslay ninkii la oran jirey Scheleimann, markii uu ku dhaqaaqay inuu dhulka hoostiisa ka baro magaalo looga hadlay sheekooin tan iyo marka quraafaad loo heystay ee uu qoray nin Giriig ah oo la oran jirey Omeero. Magaaladaas waxaa la oran jiray Troya. Ninkaas oo loo heystay nin waalan, wuxuu ifka u soo saaray magaalo markii hoos loo sii qoday noqotay sagaal magaalo oo isdul saaran oo midda filweyni ay jirtay kumaanyaal sano.

Arrintaas oo ka dhacday Yurub qarnigii aynu soo dhaafnay dabayaaqadiisii, waxay na tusaaleyneysaa in shaki la'aan haddii Afrika loogu soo jeesto baaris Arkeolooji ah in jawaab loo heli lahaa su'aalo badan ama la sugi lahaa waxyaaba hadda shaki ku jiro, ama daahaba laga rogi lahaa taariikh aan maanta aqoonba loo lahayn.

Magaalooyinka ku yaal Xeebta Soomaaliya oo ayagu jiri jiray sidaan soo aragnay qarnigii 1aad hortii aadbay ugu baahan yihiin baaris caynkaas ah si aan ku ogaanno dadkii degganaan jirey iyo dhaqankooda oo waxaan ka ognahay ay yihiin war dad kale laga wariyey. Magaalada Xamar, kol kastoo roob ku da'o waxaa dhacda inuu dhulku dumo, siiba Xaafadaha filka weyn, oo ay ifka u soo baxaan dhismooyin iyo qalab ay ka tegeen dadyow hore.



## DHALASHADII ISLAANKA IYO RAADIKII UU KU YEESHAY ADDUUNKA

Inta aynaan dhexgalin dhalashadii Islaamka horta bal aan si kooban u tilmaamnno sidii ay ku sugnayd jasiiradda Carabtu.

Islaamka ka hor ma jirin wax la yiraahdo Dowladda Carbeed ee waxaa degganaa jasiiradda Carabta qabilooyin ku nool halkaas. Saas darteed ayey tilmaanteennu noqoneysaa, haddii aynnu doonno in aynnu wax qa qorno meeshii ay ku noolaan jireen iyo habkii ay ku dhaqmi jireen Islaamka ka hor, mid ku kooban sidaas hoos ku qoran.

Dhinaca Bari waxaa ka xigay gacanka Carbeed, dhinaca koonfureedna Badda Hindiya iyo gacanka Cadmeed, dhinaca galbeedna Badda Cas, dhinaca waqooyina dalkii loo aqoon jirey Shaam. Guud ahaan waxay ku dhacda koonfurta galbeed ee Qaaradda Aasiya waxaa lagu qiyaasay dhulka ay ku fadhido (1.700.000Km$^2$), sababta loogu bixiyeyna Jasiiradda: waxa ay tahay iyada oo biyo kaga wareegsan yihiin saddex jaho oo kala ah bari, galbeed iyo koonfur. Dhulkaas aan tilmaameynaa waa oomane lama deggaan ah.

**Bulshadii Jasiiradda Carabta Islaamka ka hor:** Intii aan Islaamku ku fidin Jasiiradda Carabta waxay ku noolaayeen dadka halkaas deggani nolol aad iyo aad u dambeysa, kuna dhisan bulsha qabiil ah isuna dila koox iyo reer reer, isla markaasna dakanadu xoog ku leedahay dhexdooda. Waxyaalaha ugu waaweyn oo ay is ku leyn jireen waxaa ka mid ah biyaha, geela, fardaha. Dagaalladaasu waxay socon jireen muddo dheer oo qaarkood gaaraan afartan sannadood ama ka badan. Intaas waxaa u dheeraa bulshadaas Carabta aftahanno, iyo deeqsinimo iyo geesinimo. Bulshada Carabtu wax yaalahay ku dhaqmi jirtey waxaa ugu darnaa iyaga oo gabdhaha nolosha ku aasi jirey, sababta ugu weynina ahayd in aanay dumarku qayb weyn ka qaadan jirin dagaalladii dhici jirey, hase yeeshee caadadaa foosha xun waxaa ka reebay Islaamka oo kuna cambaareeyey dadkii fikraddaas dibu socodka ah ku kici jirey. Xagga Diintana waagaas dadkii Jasiiradda Carabta degganaa waxay haysteen diinta (Wataniyada),

taasoo loola jeedo diin la'aan. Waxayna caabudi jireen sanamyo kala duwan oo ya ka dhaxleen awowyaashoodii, taasuna waxa u sabab ahaa aqoontooda oo aad u koobneyd, wax tacliin la yiraahdaana ayan jirin, xiriirkooda shisheeyaha oo ahaa mid kooban. Waxyaalahaas dibu dhaca ah waxaa ka baaba'shay dhalashadii Islaamka. Libta weynina waxay u noqoneysaa kaalintii u ka qaatay **Nebi Maxamed** iyo dadaalkii weynaa oo u la yimid gaarsiinta risaaladaas loo soo dhiibay iyo ku **fidintii uu ku** faafiyey diinta Islaamka dayowga adduunweynaha ku nool.

## NEBI MAXAMED DHALASHADIISII IYO KORMADIISII

Nebi Maxamed wuxuu dhashay sannadku marku ahaa 571 C.D. wuxuuna ku dhashay magaalada Maka, sidii caadada Qureyshtu ay ahayd hooyadiis waxay u dirtay miyi, halkaas oo ay Xaliima Sacdiya ku nuujin jirtey. Nebiga aabihiis wuxuu dhintay intuusan dhalan oo u caloosha hooyadiis ku jirey. Hooyadiisna waxay dhimatay isaga oo lix jir ah. Ilaa intii uu lix jirsaday Nebigu wuxuu ku noolaa magaalada Maka iyo hareeraheeda. Awoowahiis Cabdulmudalib oo korinaayey wuxuu isna dhintay Nebiga oo siddeed jir ah, markaas intii ka dambeysay Nabiga waxa garab siiyay oo koriyay adeerkiis Abuu Daalib. Inkasta oo uu sabool ahaa misna wuxuu u muujiyey inuu kaalmeeyo. Nebigu wuxuu ariga la raaci jirey ilma adeertiis. Laba iyo toban jirkiisii adeerkii ayuu u raacay Shaam; markuu qaan gaareyna iskiis ayuu u shaqaystay taasoo u keentay in lagu aaminay ganacsigii ka dhex dhici jirey magaalada Maka iyo Shaam. Markii uu shan iyo labaatan jiray na isaga oo lagu bartay run iyo aamin nimo ayaa Khadiija Binta Khuweyla oo ahayd Qureesh waxay Nebiga weydiisatay inuu xoola ugu dhigo Shaam oo u soo iibiyo. Markuu faa'iidooyin badan u keenay, ayey Nebiga u soo jeedisay iney is guursadaan, Nebiga wuxuu guursaday Khadiija iyada oo afartan jir ah, ka dibna waxay u dhashay lix carruur ah laba wiil iyo afar gabdhood. Nebiga Maka aad baa looga jeclaa yar iyo weynba, waxaana lagu jeclaa aaminnimadiisa, saas darteed, isaga ayaa dhigay kacbada dhagaxa madow. Nebiga wuxuu ahaa nin deggan oo naxariis badan, oo deeqsi ah kartina



leh iyo aftahannimo, inta badanna waa aamusnaan jirey inkastoo uu aad uwaji furnaa uuna kaftami jirey marmar.

## RISAALADDII NEBIGA IYO HABKII DHISMAHA ISLAAMKA

Nebi Maxamed markuu sannadku ahaa 610 C. D. ee uu afartan jir ahaa ayaa asagoo Hogga Al Xira ku jira waxaa u yimid Malak Jibriil, Nebiguna markaas waxna ma akhriyi jirin waxna ma qori jirin. Markaas ayuu Jibriil ku yiri: akhri Nebigu intuu argagaxy ayuu wuxuu yiri: Anigu wax ma akhriyo. Jibriil mar labaad ayuu ku celiyey oo wuxuu ku yiri «akhri». Markaasu nebigu asagoo aad u yaabsan wuxuu ku yiri «anigu wax ma akhriyo». Mar saddexaadkii ayuu Jibriil ku yiri «akhri, oo ku dhawaaq magaca Ilaahigaaga wax abuuray. Taasuna waa suuraddii Quraanka ugu horreysey. Maalintaas intii ka dambeysey nebigu wuxuu noqday Erga Eeebbahay ummadda u soo diray inuu xumaan uga digo samaantana faro, asagoo amarka Eebbe ka qaadanaya. Nebiga dadkii rumeeyey waxaa ka mid ahaa uguna horreeyey Xaaskiisii Khadiija Bintu Khuweylad iyo jaallihiis Abuubakar Sadiiq, Cali Bin Abudhaalib iyo Cismaan Bin Cafaan. Nebigu wuxuu ku dadaalay inuu dadka diinta ka dhaadhiciyo dhulkana ku faafiyo. Wuxuuna dadka u sheegay in islaamka barwaaqo lagu gaari karo dadkuna siman yihiin oo isku mid yihiin. Nebigu dhibaato badan ayuu kala kulmay sidii uu u dhisi lahaa Dawlad Islaam ah taasoo ugu wacnayd Qurayshtii gaalada ahayd oo asaga iyo asaxaabtiisii hortaagnaa. Dhibaatadaas iyo xumaan taas ay gaaladu muslimiinta kula kacaysey darteed ayuu Nebigu isku deyey in uu meel kale oo uu diintu ku faafiyo doonto. Markaa ayuu Nebigu galay magaalada Madiina sannadku markuu ahaa 622 C.D., maalintaa ayeyna taariikh Islaamku kowsatay. Halkaas waxaa ka dhisantay Dawlad Islaam ah, oo uu u kala baxday Muhaajiriin oo ahaa dadkii la qaxay Nebiga iyo ansaar oo ahaa dadkii nebiga ku soo dhaweyey magaalada Madiina. Nebigu goortuu dhammeeyey habeyntii dhismaha dowladda Islaamka ee Madiina gudaheeda, wuxuu bilaabay isla markaas inuu Islaamka ku fidiyo dadka carabta ah oo idil. Saas darteed isaga iyo gaaladii qureyshta ahayd waxaa dhexmaray dagaallo badan.

## DAGAALLLADII UGU WAAWEYNAA EE UU GALAY NEBI MAXAMED

Waxaa ka mid ahaa 1) Dagaalkii Badar

Kolkii Muhaajiriintii Maka lagaga dhacay waxay xoolo lahaayeen oo dhan, ayuu Nebigu amar ku bixiyey in la dhaco gaadiid ka yimid Siiriya oo reer Maka u rarnaa. Abu' Sufyaan, oo safarka madax u ahaa, markuu maqlay in muslimiintii waddada u fadhiyaan, ayuu iska soo hor mariyey dhambaal qayla roor wada, si ay Qurayshtu u gaashaaman lahaayeen xoolahooda. Isla markaasna Abu' Sufyaan gaadiidkii oo dhan buu ka duwey meeshii ay muslimiintu u fadhiday. Gaaladii soo duushay aad ayey uga badnaayeen Muslimiinta, labada ciidan waxay iskaga horyimaadeen ceelka Badar oo ku yaal Maka iyo Madiina dhexdooda. Dagaalkaas libtii waxay raacday Muslimiinta gaaladiina waa lagu jabshay. Isla goobtaas waxaa lagu dilay Abu Jahal oo ahaa abbaanduulihii ciidanka gaalada, iyo rag kale oo madax ahaa. Dadkii dagaalkaas lagu qabtay waxaa loo oggolaaday iney xoola isku furtaan, kooda aqoon dheer lihina in uu wax baro dadka aan wax qaoon. Taasina waxay ku caddeyneysaa in Nabiga iyo Asxaabtisa aaminsanaayeen dhowr arrimood oo ay ka mid ahaayeen:

1. Dhowridda xeerka dagaalka.
2. Ilaalinta nafta Bani-aadamiga.
3. Kalsoonida iyo fidinta diinta Islaamka.

Muslimiintii xaqa ku dagaalameysey guushii ay gaareen waxay noqotay mid meel weyn ka gashay taariikhda Islaamka. Waxeyna ahayd bilowgii guula badan oo isdabajoogay haddii laga reebo dagaalkii Uxud. Iska hor imaadkaas wuxuu ahaa kii ugu horreeyey ee dhabta ahaa oo dhex maray gaalada iyo Muslimiinta. Waxyeellooyin la gaarsiiyey gaalada waxay noqdeen kuwo ay ilaawi wayeen, goobtaasina waxay ku caan baxday goobtii Muslimiinta libtu ka raacday Dagaalkaasi wuxuu dhacay sanadkii labaad ee hijirada.

## DAGAALKII UXUD

Dagaalkii wuxuu dhacay, sannadkii saddexaad ee hijriyada, 625 C.D. Sababtu u dhacayna waxay ahayd Qureysh oo



dooneysey inay ka aargudato dhabar jabkii ku raacay goobtii Badar. Waxayna u tabaabushaysteen duulimaadkaa, ay Muslimiinta ku qaadayeen muddo aan sannad ka yareen. Qureyshi waxay aruursatay ciidan laxaad leh oo lagu qiyaasayq 3000 oo qof, ciidankaas waxaa madax u ahaa Abu Sufyaan. Waxayna goosteen inay weeraraan magaalada Madiina, hase yeeshee, waxa ka war helay wardoonkii Muslimiinta, oo Madiina ugu digay Nebiga iyo colkiisa wax yaalaha ay gaaladu damacsan tahay, markaas ayey muslimiinti si degdeg ah isku diyaariyeen; ciidankooda tiradiisuna waxay ahayd kun ruux, Nebigu markuu maqlay in lagu soo duulayo ayuu ciidankiisa kala dooransiiyay in dibedda lagaga hor tago gaalada iyo in magaalada lagu sugo, Nebiga iyo in yar mooye dadkii badankoodii waxay doorteen in laga hortago. Labada ciidan waxay ku kulmeen buurta Uxud oo ku taal waqooyiga Madiina. Nebigu ciidankiisii buu nidaamiyey, buurta korkeeda wuxuu saaray kooxihii ku dagaallameysey, fallaaraha si aan gadaal looga weerarin. Wuxuuna amar ku siiyey in aanay ka soo degin halkaas wax kastoo dhaca. Hase, yeeshee jaangooyadii oo ka xumaatay darteed ayaa lagaga adkaaday muslimiintii, waxaana goobtaas ku geeriyoodey Xamsa oo ahaa Nebiga adeerkiis. Isla goobtaasna waxaa lagu dhaawacey Nabiga, waxaana lagu dilay Muslimiin tiradoodu dhan tahay 70 ruux hase yeeshee, Muslimiinta inkastoo laga badanaa guuldarroyin adag ayey u geysteen Qureyshtii. Sababta lagaga adkaaday waxay ahayd:-

1. Taladii Nabigu soo jeediyey oo la diday, siiba kooxihii fallaaaraha ku dagaallamayey oo ka soo degey buurtii ay ka daafacayeen ciidanka Muslimiinta, taasina waxay kansho siisay fardooleydii Qureysh oo madax u ahaa khaalid Bin Waalid in uu soo dhabar jebiyo Muslimiinta si uu u kala dhantaalo habkii dagaalka ay ku gelayeen.
2. Tirada ciidanka Muslimiinta iyo kuwa gaalada oo aan isle'ekayn oo kala ahaa 1000 iyo 3000.
3. Istiratijayadii dagaalka iyo tabtii oo ka xumaatay. Dagaalkaas lagu jebshay muslimiinta wuxuu noqday mid wax u taray aayahoodii dambe casharna u noqday gal daloollooyinkoodii oo ay ka faa'iidaysteen. Wuxuu ahaa kaasi dagaalkii ugu horreeyey oo lagu jebiyey muslimiinta iyo kii ugu dambeye. Gaaladii

reer Maka markii ay ka aargoosteen muslimiintii a-yey iska noqdeen iyaga oo guul wata.

Markii dagaalkii laga soo noqday ,Yuhuuddi degganeyd Madiina oo xiriir siyaasadeed oo qarsoodi ah la lahayd qu-rayshta Maka ayaa khiyaamadii lagu ogaaday oo dagaal lagu kiciyey kaasna waa lagaga adkaaday; misana inta loo naxarii-tay ayaa loo oggolaaday inay qaataan wixii awrtoodu u qaadi kartey oo ay u qaxaan Khaybar.

## DAGAALKII KHANDAQ (Alaxsaab)

Dagaalkaasi wuxuu kula magac baxay Khandag micni-hiisuna yahay (dagaal-dhufays) oo uu ku gaashnaatay Nebi Ma-xamed markii ugu horreysey taariikhda inta la xasuusan yah-hay. Waxaana lagu tilmaamay in uu ahaa dheereerkiisu 13 kun oo dhudhun: halkaas oo tobankii ninba lagu qaybiyey in-ay qodaan god dhererkiisu yahay 40 dhudhun. Ciidanka Is-laamka uu dhufaysyada qodanayey waxaa lagu qiyaasay tira-dooda 3000 askari. Wuxuu Nebigu sidaas u yeelay markii uu ogaaday inay soo weerarayaan dhowr qabiilo oo iskugaashaan buurastay. Nebigu iyo muslimiinta waxay ku magacaabeen dagaalkaas (Al-axsaab), maxaa yeelay xisbiyo badan baa is u-rursaday si ay ula dagaallamaan Nebiga iyo ciidankiisa iyaga oo wata askar gaareysa toban kun. Hase yeeshee umay suuragelin inay wax lib ah gaaraan ee waxay la noqdeen guul-darro. Maxaa yeelay, dhinacii kaliyahaa ee Madiina laga soo weerari karaayey ayaa Nabigu ka qoday dhufaysyadasi aan soo sheegnay. Halkaasna waxaa gaaladii lagu hortaagnaa muddo bil ah, ka dibna waxaa ku kacay duufaanno dabaylo badan wata. Taambuugtii u dhisnaana dhunshay oo dumiyey.

Gaaladii kol kaas ayey dib u carareen iyagoon far taagin. Nebigu wuxuu ka muujiyey goobtaas dhowr arrimood oo taariikh leh, kuwaas oo ay ka mid yihiin:-

1. Sida dhufaysyada loogu dagaal galo.
2. Taaktikada ama tabta dagaalka uu isticmaalay.
3. Sida uu uga fakaday shirqoolladii badna ee isaga loogu talagalay.

## FURITAANKII MAKA

Qureyshtii Maka waxay jabisay heshiiskii dhexmaray iyaga iyo Nebiga, sidaas daraadeed Nabigu isaga oo wata ciidan lagu qiyaasay 10 kun ayuu ku soo duulay gaaladii reer Maka. Sannadku marku ahaa 630 (C.D.) waxaa gacanta lagu dhigay Abuu Sufyaan oo ilaala ahaa wuxuuna doonaayey in uu ogaado xaalada muslimiinta iyo ciidankooda xooggiisu in-ta uu yahay. Markii la qabtayna, Nebiga ayaa loo geeyey. Isla markiiba Abuu Sufyaan wuu islaamay, si loo xurmeeyo Abuu Sufyaan; ayaa Nebigu wuxuu yiri : «Ninkii gala guriga Abuu Sufyaan waa la nabadgelinaaya, ninkii gala kacbadaa waa la nabad gelinayaa,ninkii irriddiisa xirtana waa la nabad gelinayaa». Qureyshtii reer Maka dagaal iskuma deyin waana isdhiibeen. Halkaas waxaa laga taagay calanka waxaana lagu dhaqaaqay in la burburiyo sanamyadii ay reer Maka caabudi jireen, Qureyshtiina badideed waa islaameen. Maka waxaa la furay sannadkii 630 (C.D.) ama kii siddeedaad (H.J.).

## WARQADIHII NEBIGU U DIRAY MADAXDII DALALKA KALE

Nebigu wuxuu waraaqo u diray niman madax ahaa oo ay ka mid ahaayeen kii xiira, kii Baxreyn iyo kii Yaman. Ma-daxdii Masar iyo Imbaradooriyadii Bersiya, imbaradooriyadii Kisra iyo boqortooyadii Xabashida. Hadafkii ama dantii u ka-lahaa waraaqahaasna waxay ahayd fidinta diinta Islaamka; wuxuuna ka codsaday madaxdaas inay ku soo biiriyaan xoog-gooda diinta Islaamka. Sannadkii 10aad Nebigu wuxuu aaday magaalada Maka isagoo oo rabay inuu soo xajiyo. Halkaas wuxuu ka jeediyey khudbada qaaya leh taaso uu ku sagoo-tinayey ummaddiisa, kuna hanuuninayey in la wada shaqays-to oo la isku kalsoonaado. Wuxuu muslimiintii ka dhaadhi-ciyey in diinta islaamka ummad kasta oo rumaysata ay ho-lay ugu marayso: taas oo ku shaqaynaysay sinnaan iyo eexa-sho la'aan. Isla markaasna adkaynaysa garsoorka iyo midni-mo, xaq. Islaanka Nebigu wuxuu ku fidiyey jasiiradda Carab-ta oo dhan. Markii Nebigu muslimiinta khudbooyin sagootis ah u sheegay, ayuu xanuunsaday, markii xanuunkii ku soo kordhay wuxuu iimaannimadii u wakiishay Abuubakar oo u faray inuu dadka tujiyo. Nebigu wuxuu dhintay sannadku marku ahaa (632) C.D. Sannadkii 11aad ee hijiriyada wu-xuu ku dhintay magaalada Madiina. Kaddib marku dhisay bulsho muslin ah uu u sugay garsoor, cilmi, sinnaan, iyo talis wadaag.

## KHULUFAADI IYO HABKII DHISMAHA ISLAAMKA

**Abuubakar Al-Sadiiq.**

Kaddib geeridii Nebiga, ayey ka hortimid Muslimiintii dhibaato weyn sidii ay u dooran lahaayeen qof madax u noqda khulafada. Taasoo ugu wacnayd Nebigii oo aan qofna ka dardaarmin in uu madax noqdo, asagoo Muslimiintii awood u siinayey in ay doortaan qofkii iyo habkii (talis) oo ay rabaan. Haddaba doorashadaasi waxay noqotay mid ay isaga hor yimaadeen Muhaajiriintii oo ah kuwii Nebiga ka raacay Maka, iyo Ansaartii, oo ahaa kuwii Nabiga ku soo dhoweeyey magaaladoodii Madiina. Kuwaasoo markaas wada joogay Madiina. Waxay Muhaajiriintii ku doodeen in ay xaq u leeyihiin in laga doorto qofkii noqon lahaa «Khalifka» ayagoo isku tilmaamaya in ay ahaayeen kuwii dadka ugu horreeyey oo rumeeyey Nebiga, dhibaatadaana la soo qaybsaday. Ansaartii dhinacooda ayey xaqaas u sheegteen, ayagoo markooda isku tilmaamay in ay ahaayeen kuwii Nebiga soo dhoweeyey: Risaaladiisna rumeeyey cadowgiiisna ka gaashaamay, taasoo isla marka keentay guushii iyo faa'iidadi Islaamka. Hase yeeshee, Ansaartii waxay ka koobnaayeen labadii qabiilo oo la oran jiray «Aws» iyo «Khasraj» oo waligood khilaaf ka dhexeyn jirey tan iyo waagey deggeen magaalada Madiina. Sidaa daraddeed waa ay ku heshiin waayeen qofkii ay u magacaabi lahaayeen in uu khaliifa noqdo. Gaar ahaan iyada oo ey «Khasraj» wateen in la doorto «Sacad Bin Cabbaadah» oo ka mid ahaa madaxdooda.

Hase yeeshee, Bashiir Bin Sacad, oo ka mid ahaa madaxdii Khasraj, ayaa ka codsaday qabiilkiisii inay taageeraan Muhaajiriintii oo qof ka mid ah u doortaan Khaliifnimada. Halkaasi wuxuu wax ku kordhiyey Muhaajiriintii iyo Anaartiiba. Markaas ayey Cumar Bin Al-Khattaab iyo Abuu Cubeyda Bin Al-Jarraax, oo ka mid ahaa muhaajiriintii, ay ku dhawaaqeen iney Abuubakar u magacaabaan khaliifnimada. Reer Aws, haddii ay ka fiirsadeen hadalkii Bashiir Bin Sacad, iyo arrintii ay soo jeediyeen Muhaajiriintii oo ayagu ahaa reer qureysh iyo tan ay wataan reer Khasraj ayey ka baqeen haddii ay taageeraan Khasraj in taasi ay keento taliskii oo ay la wareegaan. Sidaa darteed ayey u raaceen Muhaajiriintii, oo ay magacaabeen Abuubakar .



Taasi waxay keentay in reer Khasarj ay waayeen wax garab siiya. Markaas ayey ayaguna magacaabeen Abuubakar.

Taliskii Abuubakar wuxuu ahaa mid ku yimi wada tashi iyo doorasho? Hase yeeshee, doorashadaasi ma ayna ahayn mid dadkoo dhan u furan ee waxay ahayd, sida yannu soo aragnay, mid ku kooban Muhaajiriintii.

Markii ay Muhaajiriintaa ka baxeen is afgarasha waagii weynaa ee ku saabsanaa qofkii qaban lahaa taliskooda ayey ka hor timid Muslimiinta qulqulatooyin waaweyn. Maxaa yeelay,qabiilooyin badan ayey la noqon weydey goortii uu Abuubakar taliskii qabtay, in ay ku hoos noolaadaan taliska qureyshta. Waxay qabeen in qureyshtu ay ka qaadday gobanimadoodii oo ay hoostooda soo gelisey iyada oo gaashaan ka dhiganaysa Diinta. Waxay qabiilooyinkaas markaa bilaabeen in ay isku dayaan inay soo ceshadaan madaxbannaanidoodii hore. Taasi waxaa keentay iyagu inay qabeen in islaamku uusan u imaan in uu dawlad dhiso ee uu yahay diin keliya. Sidaa darteed, goortii uu Abuubakar qabtay taliska Muslimiinta, ayey ogaadeen in ay hoggaansan yihiin, awood ilaalinaysa sekadana ka qaadda. Taasina ma eeyan ahayn mid ay ku dhaqmi jireen Carabtu waqtigii «Jaahliyadda». Sidaa awgeed ayey u qaateen in sekedu ay tahay baad.

Dhibaatadaas oo ka hor timid Abuubakar iyo madaxdii Muslimiinta, waxaa u dheereyd tii ay kala kulmeen dhaqdhaqaaqii loo yiqiin ka noqoshada, ama dagaalladii ka noqoshada.

**Dhaqdhaqaaqii ka Noqoshada.**

Dhaqdhaqaaqyadii ka noqoshada Diinta Islaamka, sida loo yaqaan, ama dagaalladii ka noqoshada. Waxay bilowdeen waagii Nebiga, waxay sii xoogoobeen geeridii Nebiga ka dib. Waxaase hubaal ah in qabiilku raad weyn ku lahaa dhaqdhaqaaqaasi, maxaa yeelay, madaxdii qabiilada Carabta, oo Nebinimada sheegatay, waxay muujinayeen wixii ay qabeen qabiilladoodii. Taasoo ahayd inay ahaadaan dad madax bannaan oo gaar loo aqoonsan yahay. Madaxdii qabiilladaase waxaa ku qabtay in ay nabinimo sheegtaan goortii ay arkeen guushii weyneyd oo uu Nebigu gaaray tobankii sannadood ee Madiina joogay.

Kuwii Nebi nimada sheegtay waxaa ugu magac dheeraa (1) Al Aswad Al-Caanasi.

Wuxuu ahaa nin reer Yaman ah markiisii hore wuxuu ka shaqeeyey in reer Yaman ay dalkooda ka saasraan Muslimiintii asalkoodu uusan ahayn Yaman. Kaddibse wuxuuba sheegtay in uu Nebi yahay markaas ayuu rasuulkii fariin fa-ray Madaxdii Muslimiinta ee joogtay Yaman in ay ka hor ta-gaan Al-Canasi waxaa shirqoolay oo dilay Abbaanduulliyihiisii iyo laba ka mid ah wasiiradiisii.

(2) Duleyxa Bin Khweylad.

Wuxuu Nebi nimo sheegtay wakhtigii rasulka. Wuxuuna isku deyey in uu diinta Islaamka wax ka bedelo, asagoo fari dadka in ay salaadda tukadaan ayagoo taagan oo aan rukuuucin ama sujuudan. Ciidan uu Abuubakar diray oo Khaalid Bin Al-waalid madax u yahay, ayaa jabiyey Duleyxa iyo qabiilladii la jirtay. Markaas ayuu duleyxa «Shaam» u cararay? kaddibse Madiina ayuu u soo noqday, halkaasoo ay isku arkeen Abuubakar, Islaamkana uu ku soo biiray, wakhtigii Cumar Bin Alkhadaab, qeyb libaax ayuu Duleyxa ka qaatay dagaalladii ay Muslimiinta ku fureen dalal badan, gaar ahaan Ciraaq.

(3) Museylamantu Al-kaddaab «Beenlow»

Aasaguna wuxuu Nebi Nimada sheegtay wakhtigii Rasuulka. Bani Xaniifa oo ahaa qabiil xoog leh ayuu ka dhashay. Wuxuu gaarey in uu isku duwado ciidan weyn oo gaara afartan kun oo nin. Abuubakar ayaa u diray ciidan oo uu madax u yahay «khaalid Bin Alwaalid» Museylama dagaalkaas ayaa lagu dilay qabiilkiisiina lagu jabshay. Markaas ayey «Bani Xaniif» ku soo noqdeen xaradii Islaamka.

Marka ay bilowdeen dhaqdhaqaaqyadii ay wateen Madaxdii Carabta oo ka soo horjeesatay Taliska Dawladda Islaamka, ayey Madaxdii muslimiinta qaarkood kula taliyeen Abuubakar in wanaag kuwaas wax looga raadsho ayaga oo qaba in xoog aan lagu jabin karin.

Abuubakarse taladaasi waa uu diiday; oo wuxuu goostay in uu dagaal ku kacsho wax kastoo dhaca si uu u caddeeyana in uu dardaarankii Nebiga si weyn uu u tixgelinaayo, ayuu koonfurta «Shaam» u diray ciidan weyn uu madax u yahay Usaama Bin Seyd. Ciidankaas oo Nebigu uu isku dubbariday intuusan geeriyoon.



Isla markaa, wuxuu Abuubakar ugu degdegay in uu ciidankaasi diro ni uu carabta ugu baaqo in uusan ka walwalsanayn dhaqdhaqaaqyadii Taliska Islaamka ka soo horjeeday iyo in uu ku maaweeliyo «Ansaartii oo weli ka murugsanayd Taliska oo ay Muhaajiriintii la wareegeen.

Intiise uu Abuubakar Abaabulayey ciidankii «Usaama Bin Seyd ayuu isla markaana qabanqaabinahayey ciidama kale oo uu ku weeraro qabiiladii Carabta ahayd oo ka noqotay Diinta Islaamka. Sannadkii kow iyo tobanaad oo hijriya ayuu kow iyo toban ciidan u kala diray gees walba oo ay carab deggan tahay. Kuwii uu u diray in ay Xerada Islaamka ku soo celshaan qabiiladii raacsanaa «Duleyxa iyo museylamo» waxaa dheeraad ku ahaa ciidama kale oo badan oo uu u kala diray dalalka Baxreyn, Cumaan iyo Yaman iyo dalal kale oo badan oo Carab ah. Kwaasoo ka wada noqday Diinta Islaamka, isla markaana diiday inay «Sekada» baxshaan.

Madaxdii iyo dagaalyahannadii Muslimiinta guul ayey dagaalladaas ka soo hoyeen, ayagoo ku soo ceshay Islaamka qabiiladaas ka noqday, kuna khasbay qabiiladaas in ay aqoonsadaan awoodda Islaamka.

Abuubakar wuxuu ciidamma kale u diray in ay furaan Ciraaq iyo Shaam. Taariikhdu markay ahayd 633-634 Khaalid iyo Mutaan Ibno Harit, ciidammadii ay hoggaamanayeen way ku guuleysteen Degmadaas, waxayna qabsadeen Xera oo ahayd magaala madaxda (Lakhid). Ciidankii Roomanka waxay ku jebiyeen goobtii loo yiqiin «aynadiin» Abuubakar wuxuu isu soo ururiyey quraanka oo uu ka baqayey in uu kala lumo. Abuubakar wuxuu geeriyooday 13kii H. 634 C.D.

**Cumar Bin Khadaab.**

Cumar Bin Khadaab wuxuu ku dhashay magaalada Madiina sannadkii 558kii C. D. Yaraantiisii aabbihii ayuu ariga u raaci jirey, kadib waxuu noqday ganacsato. Cumar waxaa lagu yiqiin aftahannimo, geesinimo, karti eexasho la'aan iyo xaqa oo uu sugo. Cumar wuxuu islaamay sannadkii

Shannaad ee (Dacwada) taasina wax weyn ayey u ahayd soo-bixitaankii Diinta Islaamka. Maxaa yeelay, Cumar wuxuu ahaa nin aan la biqin Islaannimadiisa kuna dhiirran mabda'iisa.

Asaga oo aaminsan in qof is hortaagi karaa uusan jirin, ayuu soo galay diinta Islaamka. Kaddib Cumar wuxuu ka mid noqday kuwii had iyo jeer Nebiga garabtaagnaa. Noloshiisana wuxuu u huray in uu Diinta Islaamka garab iyo gaashan u noqodo. Wuxuu nebiga kala qayb galay, dagaallo badan oo ay ka mid ahaayeen; Badár, Uxur, Khandaq, Khaybar, iyo Fatax. Nebigu waxyaalo badan ayuu Cumar kala tashan jiray, Marar badan waxaa dhacday in Nebiga Aayada quraan ah lagu faray sidii uu Cumar kula taliyey in uu ku socdo.

**Doorashadiisii.**

Markii uu Abuubakar bukooday ayuu waxaa uu ka baqay haddii uusan qof ku magaabin khaliifnimada in ay Muslimiintu qaybsamaan oo isku afgaranwaayaan ninkii madax u noqon lahaa. Markaas ayey fiiradiisii dheerayd tustay in uu qof xilkaas qaadi kara uu magaçaabo. Kolkaas ayuu Abuubakar indha indheeyey saaxiibbadiis, isaga oo ka dhex dooraayey nin leh adadayg oo aan cadaadis ku jirin iyo jileec aan lıidnimo la socon. Markaas ayey la noqotay in Cumar uu yahay ninka tilmaantaas lth. Haddii uu Abuubakar la tashaday saaxiibbadiis dhammaantood waxay isku raaceen in Cumar ku habboon yahay hoggaaminta muslimiinta.
Taliskiisii iyo waxyaalihii uu qabtay

*Taliskiisii iyo waxyaalihii uu qabtay*

Almusama Bin Xaarasa oo ka mid ahaa ciidanku Abuubakar u diray Ciraaq, ayaa warqad waxuu u soo qoray Khaliif Cumar, asagoo ku dhiirrigelinayey furidda Ciraaq. Markaas ayaa Cumar bin khadaab amar ku bixiyey in uu ciidan kaas ayaa Cumar bin khadaab amar ku bixiyey in uu ciidan lixaad leh u diro Ciraaq. Kaddib dagaalkii Yarnuuk markay ku guuleysteen Ciidanka Islaanku sannadku 636kii C.D. ayaa wuxuu amar ku siiyey ciidanka Islaamka inay u wareegaan dhanka Beershiya. Ciidanka Islaamka waxaa madax u ahaa Sacad Bin Abi Waqaas. Ciidanka Beershiyana waxaa madax u ahaa nin la oran jirey Rustum. Labadaa ciidan waxay iskaga horyimaadeen goobta Qaadisiya sannadkii 637dii, libtii waxay raacday Ciidankii Muslimaanta. markii la dilay Rustum oo ahaa Abbaanduulihii Ciidanka Beershiya.

Ciidanka Islaamku waxay qabsadeen magaala madaxdii beershiya oo la oran jiey Arl Madaa'in. Sannadku markuu ahaa 642, ayaa mar labaad ciidanka Beershiya iyo kan Islaamka waxay iskaga horyimaadeen goobta «Nahaawadi», halkaasna waxay guushii ku raacday Islaamka. Markaas ayey dad badan oo reer Ciraaq ahi ku soo biireen Diinta Islaamka. Sacad Bin Abi Waqaas wuxuu dhisay Kuufa iyo Basra oo xaruma u noqtoay ciidanka Islaamka.

**Furiddii Shaam iyo Masar.**

Taariikhdu mrakay ahayd 635 ayaa khaalid Bin Waalid wuxuu furay Dimishiq. Markaa dad badan ayaa qaatay Diinta Islaamka. Intii aanay qaadan waxaa lagu khasbay inay bixiyaan sannadkiiba hal diinaar iyo kiish sarreen ah. Ciidankii uu Cumra Bin Al Caas abbaanduulaha ka ahaa, wuxuu soo hooiyey guul, markuu jebiyey Ciidankii Roomanka oo degganaa Siiriya. Waxayna qabsadeen Baytmaqdis marku ahaa 636 - 638 ayaa furihii Baytamaqdisna waxaa loo dhiibay khallıf Cumar.

**Furiddii Masar.**

Cumar Bin Caas oo ciidan lixaad leh watay ayaa furay Masar sannadkii 642. Kaddib markii uu ciidanka Roomanka kala jebshay ayaa dad badan oo ahaa Masaari qaateen diinta Islaamka. Sannadku markuu ahaa 643dii waxaa la furay Liibiya, Tuunis iyo Marooko. Kaddib markii ciidammo Islaam ahi fureen dalal badan, ayuu Cumar dalalkaas gobollo u qaybıyey, madaxna uga dhigay rag uu asagu magacaabay. Cumar wuxuu unkay diiwaan lagu qoro xoolaha dawladda. Ninkii habeeyey qaadidda cashuurta wuxuu ahaa Khaliif Cumar Wuxuuna ahaa ninkii ugu horreeyey ee ku isticmaala taariikhda Islaamka ee loo yaqaan hadda Hijiriyada. Wuxuuna isku xiray Gobollada dawladdaha Islaamka markii uu isku dubbariday boostada iyo war isgaarsiinta. Cumar Bin Kha-

daab waxaa la dilay asagoo ku tukunahaya masaajid. 644 C.D., waxaa dilay nin la oran jirey Abuu Lu'lu al Majuusi.

**Cusmaan Bin Cafaan.**

Cismaan Bin Cafaan wuxuu ahaa dadkii ugu horreeyey ee risaaladii Nebiga rumeyey Islaamkaasna; isu keenidda quraanka qayb weyn ka qaatay. Waxaa uu ahaa nin firfircoon, aadna loo maqlo hadalkiisa loona jecelaa, saas darteed wuxuu ahaa ninkii ergada Islaamka ah ka socday heshiiskii Xudeyba. Wuxuu ahaa maalqabeen deeqsiah diintana aad u jecel.

**Doorashddiisii.**

Intuuna dhiman Sayid Cumar, wuxuu magacaabay guddi ka kooban lix ruux inay dhexdooda ka doortaan ninkii dawladda Islaamka madax ka noqon lahaa markuu dhinto; guddigaasu waxay ahaayeen:

a) Cismaan Bin Cafaan
b) Cali Bin Abuu Daalib,
t) Subayr Abuu al Caram
j) Sacad Ibnu Abii Waqaas.
x) Dulxa Bin Cubeyd
kh) Cabdiraxmaan Bin Goo

Guddigii waxay isku raaceen Cismaan Bin Cafaan in madax looga dhigo, markaa ka-ddib isaga iyo Cali waxaad dhexmaray isafgaranwaa weyn oo socday intii muddo ah, markii danbena waxay noqdeen laba kooxood oo u dagaallaamaya Xukun Ummadda Islaamka ah. Wuxuu Cusmaan Bin Cafaan qabtay taliskii Islaamka 23dii II ama 644tii (M). IIIda 656 sannadkii ugu horreeyey taliskiisa ayuu adkeeyey tiirarkii Dawladda Islaamka; wuxuuna damiyey fidmooyinkii ka kacay dalalka Iiraan iyo Masar; isla markaana wuxuu is-hortaagay Roomanka oo iku sdayey in ay ka noqdaan Masar iyo Shaam: Dagaalladii uu Cusmaan madaxda ka ahaa waxay gaartay ilaa badda «Madow» oo ku taal qaaradda Aasiya, dhanka kalena waxay ka gaartay Tuunis, Liibiya, Marooko oo ku yaal Waqooyi Afrika.



Cusmaan Bin Cafaan wuxuu dhisay maraakiib dagaal oo mara Badda Cad, wuxuuna ciidankiisii ku jebiyey, jasiiradda Qubrus, Ciidankii Roomanka, isuu u faafiyo diinta Islaamka, ayuu Cusmaan amar ku baxshay in gacanta lagu qoro (Quraanka) oo loo qaybiyo dalalkii ay muslimiintu fureen. Cismaan waqtigiisii wuxuu bilaabay in uu u liico xukunkiisu xagga reer Umawi isaga oo jagooyinkii iyaga u xilsaaray, ayuu maamulkiina wuxuu u dhiibay xigtadiisii. Taasina waxay dhalisay is-afgaranwaa dhexmaray Ciraaq iyo Masar. Taasu waxay keentay in Sayid Cismaan aqalkiisii lagu dilo isagoo kitaab quraan akhrinaya, taariikhdu waxay ahayd 656 (C.D.).

**Cali Bin Abuu Daalib.**

Cali Bin Abuu Daalib wuxuu ahaa Nebiga ina adeerkiis kuna barbaaray aqalka Nebiga. Cali waxaa lagu tilmaami jiray nin aad iyo aad u adag, geesina ah, isla markaana cilmi leh oo caaqilna ah. Wuxuu ku muslimay yaraan, qayb weynna wuxuu ka qaatay dagaalladii Nebiga iyo qurayshta dhexmaray. Khaliifnimada wuxuu qabtay geeridii Cismaan kadiib. Markay taariikhdu ahayd 656.

**Dorashadiisii.**

Dorashadiisii Cali waxaa ka dhacay qulqulado badn, maxaa ylay dad madaxda muslimiinta ka mid ah ayaa is-hortaagey oo diiday taliska Cali. Dagaallo baa dhexmaray Cali iyo dadakaas guulihiina waxay raaceen Ciidanka Cali, dagaalkaas waxaa lagu magacaabay goobtii (Owrka). Maxaa yeelay Caasha oo Nebiga Xaaskiisa ahayd ayaa rati fuushanayd iyadoo qabanqaabinaysa in Cali la dilo. Taasi se uma suura gelin Caasha ee Cali wuu guuleystey. Taliskiisii kaddib aad ayuu Caasha u xushmeyn jirey. Cali goortuu taliskii la wareegay ayuu jagooyinkii ka qaaday kuwii waqtigii Cusmaan madaxda ka haaa gobollada, taasna waxaa ugu wacnayd dadkii oo ka qayliyey maamul xumadoodii. Isla markaasna wuxuu ku soo celiyey «Beytulmalaaki» xoolihii ay reer Umaya xaq darrida ku qaateen. «Kuufa» Mucaawiya Bin Abi Sufyaan, oo u dhashay reer Umaya, isaga oo rabey madaxnimada, ayaa markaa bilaabay in uu faafiyo fidmooyin. Mucaawiya goortuu aqoon-

san waayey taliskii Cali, ayuu Cali ka casiley jagadii maamulaha gobolka Shaam oo uu heystey muddo dheer. Mucaawiya amarkaas waa uu diiday taasina waxay keentay in dagaal dhexmaro Cali iyo Mucaawiya, oo ay gilgisho dawladda Islaamka. Ciidanka Cali wuxuu jebshey ciidankii Mucaawiya.

Hase yeeshee, Mucaawiya markii la jabshay waxa uu amar ku siiyey ciidankiisii in ay warmahoodii Quraanka kor ugu qaadaan, ayaga oo leh waxa naga dhexeeya waa Kitaabkii Ilaahay. Taasina waxay dhalisay libtii oo uu janjersaday Mucaawiya, Cali in kasta oo uu go'aankaa diiday haddana weerarkii wuu joojiyey, sababtuna waxay ahayd in Cali ciidanka taageerayey uu qaybsamay, oo dabadeedna Cali laga guuleysto. Isla markaasna Mucaawiya goostay Shaan oo uu isku magacaabay(Khaliifa). Cali Bin Abuu Daalib sannadkii 661 C.D. waxaa dilay nin ka mid ahaa khawaarijiintii oo la oran jirey Maxamed Ibn «Muljan»

## DAWLADDA UMAWIYIINTA

## IS-AFGARAWAAGII REER BINI HAASHIM IYO REER BINN UMAYA

Sidii aynnu soo aragnay waagii hore Carabtu waxay isu layn jireen qabiil qabiil, iyo qoyis qoyis, sidaad darteed reer Bini Haashim iyo reer Bini Umaya heshiis ma lahayn Islaamka ka hor. I bi Maxamed oo reer Bini Haashim ahaa ayaa diinta lagu soo dejiyey; sidaas darteed Bini Haashim way ka saramareen, kana sharafbateen walaalahood Bini Umaya, waliba naceybkii waa sii siyaasadey markii uu Nebigu amar ku bixiyey in qureesh oo dhan iyo wixii raacsan ay rumeeyaan risaaladan. Hase yeeshee, qureyshtii reer Binu Umaya uma hoggaansamin amarkii Nebiga ee waa is-hortaageen. Taasu waxay dhalisay in Bini Haashim iyo dadkii raacsanaa iyo reer Bini Umaya iskaga horyimaadaan dagaalkii Badar. Waxaase uu xalkii sii kululaaday sannadkii saddexaad ee Hijiirayada, markii qureyshtii reer Bini Umaya u duushay Madiina si ay u muujiso sarraynteeda iyo aargudashadoodaba. Snanadku markuu ahaa 63 kii furitaankii Maka ka dib, ayaa reer



Bini Umaya Islaameen. Rasuulkiina si fiican ayuu ula dhaqmay Madaxdoodii taasina waxay caddeyneysaa in Rasuulku siiyey Abuu Sufyaan **100 halaad** oo geel ah, isla markaasna Mucaawiya oo ah wiilkii Abu Sufyaan ka dhigtay qore quraanka qora markii waxyigu ku soo degtay. Nebigu wuxuu goostay in kor loo qaado lana sara mariyo reer Bini Umaya, madaxdoodiina wuxuu xukaam uga dhigay magaalooyinka waaweyn ee Islaamku haystay, kaddib geeridii Nebiga waxaa madax noqday Abuubakar oo reer Binu Haashim ahaa. Si wanaagsan ayuu u waday maamulka dowladda Islaamka.

Waxaa ku xigay Cumar Binu Khadaab oo sii adkeyey taariikhda dowladda Islaamka. Cismaan Binu Cafaan oo asagu Khaliifkii seddexaad ahaa waxaa dhacday inaanu isagu uga soo bixin taliskiisii sidii Cmuar. Taasi waxay keentay is afgaranwaa cusub bilowdo goortuu Cusmaan u liicay in uu soo dhaweysto reer Bini Umaya, halkaas waxaa lagu dilay Cismaan.

Geeridii Cismaan ka dib waxaa taliskii la wareegay Cali Bin Abii Daalib oo isna dhibaatooyin badan kala kulmay maamulkii, sababtuna ahayd inay is hortaageen taliskiisii dad madax ah qaarkood, gaar ahaan Mucaawiya Ibnu Sufyaan oo aanba aqoonsanayn taliskii Cali. Is afgaranwaagaasu wuxuu dhalıyay in lagu dilo Cali. Kaddibna uu suura gelisay Mucaawiy ın uu madax u noqdo Dowladda Islaamko oo idil.

**Talis Dhaxaltooyo.**

Dowladdii Umawiyiintii waxaa madax ka noqday rag badan. Waxaase ugu qiima weynaa kuwa soo socda oo ay ka mid ahaayeen:

Mucaawiye Ibnu Abu Sufyaan, Yaasiid Ibnu Mucaawiye, Cabdi Maalik Binu Murwaan, Alwaalid Bin Cabdil Malik iyo Cumar Binu Cabdil Caasiis.

## 1. MUCAAWIYE IBNU ABU SUFYAAN

Mucaayie wuxuu ku dhashay magaalada Maka shan sano ka hor (Bicsadii) Nebiga (soo diriddii Nebiga). Ma ahayn

doorashadii Mucaawiye mid muslimiintu u wada dhammaayeen, hase yeeshee, waxaa doortay dadkii Shaam; gobolkaas oo uu u talin jirey waqtiyadii Cumar iyo Cismaan ay dowladda Islaamka madaxa ka ahaayeen. Mucaawiye wuxuu ka mid ahaa qurayshtii Nebiga waxyiga ka qori jirey, kaddibna wuxuu noqday raggii ka warin jirey axaadiista. Wuxuu ahaa dowladdii Umawiyiinta ninkii unkay, magacaana ay ka qaadatay. Intuusan Mucaawiye madaxda ka noqon dawladda Islaamka mudda dheer ayey isaga iyo Cali u halgamayeen madaxtooyada Dawladda Islaamka, iyada oo ay u dhowdahy in Mucaawiye laga adkaado ayaa Cali dhintay waxaa loo maleynayey in Xasan Cali uu jagadii aabbahiis dhintay qabsanayo, dagaalkiina meeshii ka wadayo. Hase yeeshee taasi ma dhicin ee asagaa iskiisa uga degay madaxnimadii una oggolaaday in Mucaawiye madax u noqdo Dowladda Islaamka oo dhan.

Xasan Cali arrintaas wuxuu u oggolaaday isaga oo aaminsan mabda'a doorashada ku dhisan, isla markaasna diidsan taliska dhaxaltooyada. Markii uu sannadku ahaa 661kii ayaa Mucaawiye taliskii si dhab ah u qaatay isga oo markaas ciidan ka soo horjeeda usan jirin ayuu qabsaday madaxtooyadii. Sannadkaas waxay Muslimiintu u bixiyeen sannadkii leysu tegay, sababtuna ahayd muslimiintii isafgaranwaayay oo dhexdoodii ka dagaallameysey ayuu mideeyey taliskii Mucaawiye. Mucaawiye markuu madaxtooyada qabsaday isla markiiba wuxuu beddelay magaalamadaxdii oo wuxuu u beddeley Dimashaq. Waxyaalaha uu u beddeley magaalamadaxda waxaa ka mid ahaa : Dimashaq iyo hareeraheeda waxaa ku noolaa dadkii asaga raacsanaa. Tan kale Dimishiq waxay ka fogeyd gobolka Xijaas oo ay ku noolaayeen dadkii Cali raacsanaa.

**Siyaasaddii Mucaawiye.**

**Mucaawiye:** wuxuu qabtay madaxnimada iyada oo dadka Islaamka ahi is-afgaranwaa uu ku kala dhexiiro isla markiiba wuxuu ku dhaqaaqay sidii uu wax uga qaban lahaa is-afgaranwaagaas. Si uu taas u suuragesho xoog ayuu ku muquunyey kooxahii ka soo horjeedey. Kooxhaasna waxaa ka mid ahaa dadkii la oran jirey Khawaarij.



Mucaawiye wuxuu kaloo beddelay nidaamkii ahaa in khilaafadu noqdaan niman madaxtooyada Dawladda keliya haya, isla markaas dadka la mid ah, lana siman. Taas wuxxuu ku beddelay nadaam la mid ah kii ay ku dhaqmi jireen Boqortooyodii reer Bisantiya dad ilaaliya aqalkiisa, misaajidkii uu ku tukan jirayna wuxuu ka sameystay meel asaga keliya u gaar ah, wuxuu kaloo beddelay nidaamkii ahaa in la doorto ninkii madaxda Dawladda Islaamka ka noqon lahaa. wuxuuna beddelay in madaxtooyada la iska dhaxalado, saas darteed wiilkiisii Yaasiin ayuu u magacaabay inuu uga dambeeyo madaxtooyada Dawladda Islaamka.


## DALALKII AY DIINTA ISLAAMKU KU FIDDAY

## WAQTIGII MUCAAWIYE.

Waqtigii Mucaawiye u madaxda Islaamka ka ahaa aad iyo aad ayey u fidday Dawladda Islaamkku. Xagga bariga waxay gaartey Badda Beershiya oo ka mid aha dhulkii loo yiqiin Bukhaara iyo Samaraqanda; xagga koonfureedna waxay gaartey waqooyiga Afrika oo ay ka mid yihiin: Liibiya Marooko, iyo Tunis. Markii u sannadku ahaa 680kii ayuu dhintay Mucaawiye. Waxaana madaxtooyadii Dawladda Islaamka ah ka dhaxalay wiilkiisii Yaasiin markuu xukunkii qabsaday ayaa halkaa waxaa ka cusboonaaday is-afgaranwaa hor leh sidii waagii Cali iyo Mucaawiye Ummadda Islaamku u qabsantay. Qalaanqalkaas waxaa kiciyey Xasan Cali oo asaga Aabahiis markuu dhintay Mucaawiye uga haray madaxtooyada. Xasan wuxuu ururiyey dadkii reer Xijaas oo markii horeba raacsanaa. Waxayna ku tashadeen Xasan iyo dadkii shicada ahaa inay Xijaas ka tagaan oo aadaan Ciraaq dabadeedna halkaas kaga soo duulaan Yaasiin. Hase yeeshee, uma suura gelin arrintaasi Xasan Cali iyo dadkii raacsanaa, maxaa yeelay nin la oran jiray Cabdulaahi Bin Siyaad oo markaa ahaa guddoomiyaha Gobolka kuufa oo ka mid ahaa Ciraaq, ayaa laayey ciidankaas Xasan watey.

Dadkii muslimiinta ahaa arrintaas aad iyo aad ayey uga xumaadeen siiba dadkii Xijaas ku noolaa. Yaasiin markuu arrintaas maqlay ayuu ciidan u diray xijaas, ciidankaasna

waxay isaga hor yimaadeen kuna jebiyeen dadkii reer Xijaas goobta la yiraahdo Al Xiraa. Markii ay ciidankaasi reer Xijaas jabsheen, waxay qaateen Maka si ay ula soo dagaallamaan Cabdulaahi Bin Subeer oo isagu damacsanaa madaxtooyada Dawladda Islaamka ka dib markii uu Xasan Cali dhinty, hase yeeshee, nasiib wanaag ciidankii ayagoo aan Maka soo gaarin ayey dib ugu laabteen xagga Shaam. Cabdulaahi Bini Subeerna wuxuu xiriir la yeeshay dadkii Muslimiinta ahaa oo ku kala filiqsanaa Gobollada Dawladda Islaamka, Gobolka Shaam mooyee.








Cabuldmalik wuxuu ku dhashay magaalada Madiina 26kii Hijriyada waagii taliska Cusmaan Bin Cafaan, Cadulmalik wuxuu ahaa nin karti leh oo aftahanima badan, xaqana aan ka leexan. Waxaa la'isku raacay in uu Cabudlmalik ahaa ninkii ku laba ahaa Mucaawiye ee aad isugu degey inuu sii xoojiyo dhismihii Dowladda Umowiyiinta. Cabdulmalik wuxaa taliska ka dhaxalay aabihiis markay taariikhdu ahayd 686dii wuxuu ahaa nin aqoon fiican leh, una bisil habka maamulka iyo siyaasadda dhulkaas.

Taliskiisii wuxuu la kulmay dhibaatooyin aad u badan.

Sidaas darteed, Umawiyiintii waa u suurageli weydey in ay qabtaan Cabdulaahi Bin Subeer, waqtigii Cabdul Maalik Binu Murwaan ka hor.

Dhibaatooyinkaas waxaa ka mid ah: DadkaMuslimiinta ah oo aad u kala tafaaruqsanaa, isla markaasna qalalaaso ayaa ka socday Gobollada Shaam, Ciraaq; Xijaas iyo waqooyiga Afrika. Cabdulmaalik wuxuu markiiba ku dhaqaaqay in uu is-afgaranwaagii ka socday Gobollada kala duwan baabi'iyo arrintaasna waa uu ku guuleystay taasina markay suuragashayayuu wuxuu u soo jeestay sidii uu dadka horuumarintiisa wax uga qaban lahaa.

Isla markiiba wuxuu ku dhaqaaqay in uu cusboonaysiiyo Masaajidkii la odhan jirey Al-Aqsaa oo uu markiisii horeba Cumar Bini Khadaab ka dhisay magaalada Beytu Qudus.

Wuxuu kaloo hirgeliyey amarna ku bixiyey in Madaxda Gobollada Dawladda Islaamku Xafiisyadoodu ku maamulaan Afka Carabiga. Wxaase ugu qiima weynaa waxyaalihii uu sameeyey Cabdulmaalik lacag ay iska leedahay Dawladda Islaamku.

Dalalka Carabtu ka hor waxay ku sticmaali jireen lacagta Romaaniyiinta iyo tii Bershiyanka. Cabdulmaalik wuxuu dhintay asaga oo heer sare gaarsiiyey Dawladda Islaamka.

Geeridii Cabdulmaalik ka dib sannadku markuu ahaa 686dii (H), taliskii waxaa uga dambeeyey wiilkiisii Alwaalid Bin Cabdulmalik. Alwaalid wuxuu dowladda Islaamka u talinayey muddo toban sannadood ah, wax dhibaato ah oo uu kala kulmay dadkii taliskiisii ku hoos noolaa ma jirin, waayo aabihiis ayaa baabi'iyey khalaafkii ku dhex jiray Muslimiinta. Waalid wuxuu ahaa nin aad iyo aad u naxariis badan, wuxuu kaalmayn jirey dadka saboolka ah iyo kuwa tabarta daran; wuxuu kaloo gacan siin jiray ardada iyo Culumada diinta raacata. Waalid wuxuu ku dadaalay waqtigii taliskiisii in uu diinta Islaamka fiddiyo, sidaas darteed, wuxuu ciidan u diray bartamaha Aasiya colkaas waxaa madax u ahaa nin la oran jirey Qoteyb Bin Muslim. Ciidammadaasi markey gaareen waddanka Shiinaha waxay ku khasbeen Boqortooyadii markaas dhisnayd in ay cashuur siiso Dawladda Islaamka. Waalid wuxuu kaloo isku dubba riday laba ciidan oo kale, oo uu u kala diray Hindiya iyo waqooyiga Afrika. Kan hore waxaa madax ka ahaa nin la oran jiray Maxamed Bin Qaasim, colkaasu wuxuu qabsaday waddanka Hindiya. Sidaas darteed aad ayey ugu fidday diinta Islaamka Hindiya. Colka kalena waxaa laxaadkiisu gaarey ilaa Badweynta Atlaantik, waxaan abbaanduule ka ah: nin la oran jirey Muuse Binu Museer. Ciidammadii Muslimiinta ahaa ee waddammada galay aad ayey ugu fidiyeen Daanta Islaamka iyo afka Carabigaba, dadkii halkaas degganaa ee loo yiqiinney Barbariyiinta. Kaddib markuu Islaamku ku fiday waddammada Maqrib ayaa guuto Muslimiin ah oo uu madax u ahaa Daariq Bin Siyaad ku duuleen oo qabsandeen waddanka Ibsaaniya. Waxyaalihii Waalid waddanka ka qabtay waxaa ka mid ahaa: Dhismaha waddanka oo uu ka sameeyey waddooyin; ceelal iyo isbitaallo, guud ahaan markii la eego waqtigaa, Waalid haystay Taliska Dalka waxay ka mid ahayd waqtiyaashii ugu wanaagsanaa Umuwiyiinta taliskooda oo ay heerkii ugu sarreeyey gaareen.

## TALISKII CUMAR BIN CABDULCASIIS

Waxaa la isku Sraacay in uu Cumar ahaa ninkii ugu talis



wanaagsanaa uguna caadilsanaa marka loo eego nimaankii badnaa ee iska daba dhaxlay taliska Umuwiyiinta. Cumaar Wuxuu taliska Dawladda Umuwiyiinta uga dambeeyey Soleymaan Bin Cabdilmaalik. Waxyaalaha aad loogu ammaanay waxaa ka mid ahaa in uu waqtigiisii dadyowgii Carabta uu kula dhaqmi jirey garsoor farsugan iyo cadaalad uu asagu xeer habaysan u dejiyey. Inkasta uu maamulka hayey muddo gaaban, hadana waqtigiisii Dowladda Carbta waxa ka muuqatay in uu waxyaalo badan ka beddeley xagga maamulka, siyaasadda xeerka iyo dhaqaalahaba. Cumar wuxuu abuuray siyaasada cusub oo uu ugu talagalay in uu ku hirgeliyo faafinta Diinta Islaamka. Xubnaha siyaasadda waxaa ka mid ahaa: In uu xiriir fiican uga dhex dhaliyo iyaga iyo dadyowga Islaamka ah. Dadkii xukunkiisa ku hoos noolaa ee aan Islaamka ahayn aad ayuu ugu naxariisan jiray, wuxuuna ku dadaali jirey in si xaq ah lagula dhaqmo dadyowgaas. Guud ahaan Cumar wuxuu ku dadaalay in ummadaha xukunkiisa hoos joogtaa ku noolaadaan barwaaqo iyo horukac taasna uu asagu u horseedo. Xagga maamulka wuxuu ku dadaalay in uu ka dhigo mid hufan, nin walibana uu shaqadiisa uga soo baxo si xilkasnimo ah. Haddii ay dhacdo in nin maamulka dawladda wax ka hayaa uu xilkiisa ka soo bixiwaayo, Cumar wuxuu ka joojin jirey shaqada sidaas darteedna waxa uu shaqada ka fariisiyey niman badan oo ay ka mid ahaayeen madaxdii Gobollada iyo kuwa kale oo la mid ah. Cumar wuxuu dhintay 722kii Ciise Masiixi dabadii ama 101dii Hijiriyadii.

**Waxyaalihii ay qabteen Umuwiyiintu guud ahaan:**

1. Waxyaalihii ugu waaweynaa ee ay Dowladdii Umuwiyiintu ka beddeshey nidaamkii Dowladda Carabta waxaa ka mid ahaa: Iyada oo doorashadii ay Muslimiinta dhexdooda ka dooran jireen madaxda ay ku beddeleen talis dhaxaltooyo.
2. Waxay ahayd tan labaad in ay aad isugu dayeen xoojintii iyo faafintii Diinta Islaamka sida darteedna ay abuureen ciidammao fara badan una kala direen dalal kala duwan oo ka baxsan soohdimaha Carabta.
3. Tan saddexaad waxay ahayd iney hirgeliyeen dhaqanka Carabta iyaga oo afafkii Giriigga, Roomanka,

Faarisiyiinta iyo kuwa kale oo badan ay ku beddelen afka Carabiga kuna hirgeliyeen xafiisyadoodii.

4. Umawiyiintii waxay sameeyeen lacag u gaar ah dallaka Carabta taasoo beddeshey lacagtii Roomanka ee horey lagaga isticmaali jirey dalalka Carabta.

5. Umawiyiintii waxay qayb weyn ka qaateen dhismahii magaalooyinka oo ay ka sameeyeen waddooyin, cisbitaallo iyo ceelal, intaas waxaa u dheeraa inay dhiseen meela lagu nasto oo loogu tala galay dadka dalxiiska ah.

## BURBURIDII DOWLADDA UMAWIYIINTA

Dowladdii Umawiyiinta waxaa ugu dambeyntii taliska kala wareegay Cbbaasiyiintii. Waxay ahaayeen niman ku abtirsada ninkii la oran jiery Abu al Cabbaas oo Nebiga adeerkiis ahaa. Markii Dowladda Islaamku Umawiyiinta uu madax u ahaa Murwaan Bin Maxamed. Cabbaasiyiintu waxay abaabuleen dhaqdhaqaaqyo ku ild ah. Markaas ayaa Umawiyiintii waxay ku kaceen in ay laayaan dadkii ka soo horjeedey gaar ahaan Madaxdii Calawiyiinta. Leyntii la laayey Calawiyiintaa waxay ahayd arrin ay Muslimiintii ka xumaadeen, halkaasna ka dhasheen kooxo ka soo horjeeday taliska Umawiyiinta. Markii la dilay ninkii la oran jirey Ibraahim oo ka mid ahaa madaxdii Cabbaasiyiinta ayey baxsadeen niman Cabbaasiyiin ah oo ay ka mid ahaayeen Abuu Al Cabbaas iyo Abuu Al Jacfar. Waxayna u baxsadeen Kuufa oo ahayd Gobolka Ciraaq, nimankaas baxsaday waxay ka sameeyeen halkaas halgan xoog leh iiaa dadkii reer kuufa Abu Al Cabbaas u doorteen Khaliifnimo. Muddo markey ka dambeysey waqtigaa Abuu Al Cabbaas loo doortay khaliifnimada, ayaa ciidammadii Umawiyiinta iyo ciidammadii Cabbaasiyiintu isaga hor yimaadeen goobta loo yaqaan «Saaq». Halkaasna waxa lagu jebeyey ciidankii Umawiyiinta markey taariikhdu ahayd 750kii C.D. Markii taasu dhacday Murwaan oo watay ciidammadii Umawiyiinta isla markaasna ahaa Khaliifkii Dowladda Islaamka ayaa Dimishiq u baxsaday. Cabbaasiyiintiise kama harin Murwaan ee waa daba galeen, markuu isna ogaaday in la dabajoogo wuxuu u baxsaday dalka Masar, dabadeedna wuxuu ku geeriyoodey jidka. Inkastoo Dowladdii Umawiyiintu hayeen sagaashan san-



sadood in ku dhow taliska Dowladda Islaamka, nasiib darro dowladdaasu sidey u badneyd ma helin rag karti leh oo taliskii qabtay sababtuna waxay ahayd taliska oo ahaa mid dhaxaltooyo ah.

Sababihii ugu waaweynaa oo ay la burburtay Dowladdii Umawiyiintii waxaa ka mid ahaa :-

1. Intii Dowladda Umawiyiinta ka horreysey Muslimiinta khalaafada waa soo dooran jireen, sidaa darteed had iyo jeer waxaa dowladda Islaamka u talin jirey rag karti leh, markiise Umawiyiintii taliska ka dhigeen tailsyo dhaxaltooyo, waxay keentay in ragga qaarkood ayan u qalmin, Sidaas darteed muslimiintii ma ayan jeclayn nidamka dhaxltooyada ahaa. Muslimiintu arrintaas dhaxaltooyada way diidanaayeen taasina waxay dhalisay in dad badani Dowladda Umawiyiinta ka soo horjeestaan.

2. Sidii ay Umawiyiintu taliska ku heleen waxay ahayd mid ayan isku raacin Muslimiinta oo dahmmi, saas darteed dadkii markii horeba ka soo horjeeday dawladdaas ma baabi'in, kuwaas oo weligoodba col la ahaa Umawiyiinta waxaa ka mid ahaa dadkii la oran jiray Khawaarji, iyo axasaabtii kale oo siyaasiga ahayd ee la mid ahaa.

3. Umawiyiintu intey Dowladda Islaamka ka madaxa ahaayeen aad ayey u fidiyeen Dowladda Islaamka, waxayna qabsadeen dalal badan oo ay ka mid ahaayeen Bersiyiintii, markii ay Muslimiintu Bersiyiinta qabsadeen waxay ku khasbeen in ay u hoggaansamaan dhaqanka iyo caadooyinka Carabta, oo ay ka mid ahaayeen hirgelinta Afka Carabiga iyo waxyaalo kale oo la mid ah, taasi waxay keentay in ay Bersiyiintii ay gacan siiso wax alla wixii ka soo horjeeday taliska Umawiyiinta, gaar ahaan Cabbaasiyiinta.

4. Tartan ayaa ka dhexdhashay qooyskii talada haystey, taaso dhalisay in ay laba walaalo ahi, ama wiil iyo aabihiis ama adeerkiis, isku laayeen maamulka dalka. Arrintaasna waxaa ka dhashay tabar darri aad

uga muuqatay xukunkii iyo tartankii ka dhex abuur-may qoyskii iska dhaxli jirey taliska, midaasina waxay khatar gelisay jiritaankii Dowladda Umawiyiinta.

5. Casabiyad ku fidday qabiilooyin dhexdooda: Taasina waxay dhalisay in ay isu laayeen qoys qoyis, qabiil qabiil iyo reer reer, oo hadba tii taliska qabsataa ay kuwa kale baabi'iso, waxaana ku dhex fidday colaad, fidmooyin iyo dagaal ay arrintiiba ka bixi weydo, waxayna tahay midaasi waxyaalihii dedejiyey dhicitaankii Dowladda Umawiyiinta, qabiillooyinka Carbeed ee iska dhaxli jirey madaxtooyada u gelisey taliska Cabbaasiyiinta.

6. Khaliifyadii oo qaarkood aad u dhexgaleen tumasho iyo raaxo: taasina waxay keentay in ay madaxdii ka jeedsadaan talidii guud ee dalka, kuna simbiriirixdeen arimaha siyaasadda taladiina si sahlan ayay uga wareegtay.

7. Umawiyiintii oo u eexday Carabta: Dowladdii Umawiyiinta oo ahayd dowlad Carbeed oo sugan waxay aad ugu tacasubtay una eexan jirtay Carabta, waxayna ciriiri gelin jirtey dadkii kale ee taliskooda ku hoos noolaa, taasoo keentay in ay fadmo ka oogan-to.

Umayiintii waxay ku kala saari jireen dadyowgaas aan tilmaamnay xagga dhaqanka, dhaqaalaha iyo siyaasaddaba. Taasuna waxay ku kicisay dadkii raacsanq oo dhan haddii laga reebo Carabta, kuwaas oo ka soo horjeestey Umawiyiinta lana saftay dadkii ka soo horjeeday oo ahaa Cabbaasiyiinta.

## CABBAASIYIINTII

Cabbaasiyiintu waxay taliska kala wareegeen Umawiyiinta sannadku markuu ahaa 750kii. Khaliifkii ugu horreeyey ee Dowladdii Cabbaasiyiintu, wuxuu ahaa ninkii la oran jirey Abuu Al Cabbaas, oo ku magac dheer Al Shufaax. Wuxuu ahaa nabiga adeerkiis wuxuuna taliska dawladda Cabbaasiyiinta hayey muddo aan dheerayn. Muddadaas oo ahayd intii u



dhexeysey 750kii ilaa 754, wuxuu ku dhammaystay tirtiridii wixii ka noolaa Umawiyiinta. Al Cabbaasi wuxuu ku guuleystey, mudda yar kaddib, waxba kama harin madaxdii Umawiyiinta, haddii lag reebo ninkii la oran jirey Cabdiraxmaan Bini Macaawiye oo isugu u baxsaday dalka Isbaaniya. Abuu Al Cabbaas markuu kooxihii ka soo horjeedey ciribtiray ayaa wuxuu dhintay 754kii.

Inksta oo Dawladdii Cabbaasiyiintu ay ahayd middii ugu magac dheereyd, ugna dheereyd muddada ay taliska hayeen, muddadaas oo lagu qiyaasi karo, haddii laga bilaabo 750 ilaa 1258 (M) misna dowladdaasi ma noqon dawlad adag oo isku kalsoon intii ka horreeysey Al Munsuuri Abuu Al Jacfar.

Al Mansuur wuxuu taliska ugu dambeeyey walaalkii Abuu Al Cabbaas. Marka Almansuuri taliska lagala wareegey waxay ahayd taariikhdu 754kii ilaa 775. Sida runta ah Mansuuri wuxuu ahaa ninkii hirgeliyey, tiirarkeedana adkeeyey dawladda Cabbaasiyiinta, maxaa yeelay Al Mansuuri wuxuu baabi'iyey kooxihii ka soo horjeedey Cabbaasiyiinta oo dhan.

Ha ahaadeen Calawiyiintii ama Khaawaarjiyiintii iyo kuwa kale ee la mid ahaa. Abuu Al Mansuur wuxuu ku shaqayn jirey caadilnimo. Saas darteed, wuxuu la xisaabtami jirey nimankii madaxdwa ahaa ee Gobollada fadhiyey. Isla markaana wuxuu isku hawli jirey sidii uu u ilaalin lahaa xoolaha dawladda. Markii dawladdii ugu horreeysey ee Cabbaasiyiintu dhisantay, ayey ka rareen magaalamadaxdii dawladda Islaamka Dimishiq, waxyn magaalamadax cusub ka dhiseen koonfurta wabiga Furfaat. Hase yeeshee, magaalamadaxdaasi lama uu dhicin Abuu al Jacfar Al Mansuur, ee wuxuu magaalamadax ka dhisay dhinaca qorrax ka soobaxa webiga la yiraahdo Tigres. Meesshaas oo ay horey uga dhisnaan jirtey magaalo la oran jirey Baqdaad, saas darteed magaalamadaxdii cusbayd Cabbaasiyiintu waxay u la baxeen Baqdaad. Sababta ugu weyn ay u beddeleen Cabbaasiyiintii magaalamadaxdii hore, waxay ahayd:

1. Marka hore waxay ka soo fogaanayeen dimishiq, halkaas oo ay ku noolaayeen dadkii raacsanaa Umawiyiinta.

2. Tan labaad Baqdaad wxay u dhowayd bershiyiinta oo iyana raacsanaa Cabbaasiyiinta. Kaddib markuu Al Mansuuri dhintay taliskii waxaa ugu dambeeyey 35 khaliif oo durriyaddiisii ahaa. Dadkii Al Mansuuri taliska ku la looltami jirey waxaa ka mid ahaa adeerkiis Cabdullahi Bin Cali oo isna qayb weyn ka qaatay dagaalladii dhexmaray Cabbaasiyiintii iyo Umawiyiinta, gaar ahaan goobtii (Alsaab) halkaas oo ay ku guuleysteen Cabbaasiyiintii taliskiina kala wareegeen Umawiyiinta sannadkii 750kii (M).

## TALISKII HAARUUN AL RASHIID

Haaruun Al Rashiid wuxuu ka mid ahaa khulafadii ugu magac weyneyd ee Cabbaasiyiinta. Haaruun wuxuu ka dhaxlay madaxtooyada dowladda Islaamka walaalkii oo la oran jirey Haadi, sannadkii 799 (H). Haaruun markuu taliska qabtay qas ayaa ka dhacay gobollada oo dhan; taas oo ay kiciyeen dadkii Baraamikad ahaa oo markoodii hore, Cabbaasiyiintu taliska ay qaybsadeen. Hase yeeshee, kaddib goortay awooddii si xun ugu isticmaaleen ayaa Haaruun al Rashiid awooddii ay taliska ku la hayeen ka qaaday. Haaruun al Rashiid wuxuu ku guulaystey in uu qaskaas damiyo. Haaruun wuxuu jeclaa climiga iyo fanka, saas darteed wuxuu soo dhoweyn jirey culimaada, waagiisiina kutubo badan oo af Shisheeye ku qoran ayaa lagu beddeley Aka Carabiga. Baqdaadna waagii Haaruun waxay noqotay magaalo loo soo doonto cilmi, waxyna xiriir ganacsi la lahayd dalal badan. Intii ay Cabaaaasiyiintu taliska dwldda Islaamka hayeen uma ayan fidin dawladda Islaamku sidii waagii Umawiyiinta, hase yeeshee, dawladda Islaamku way fidday markii ciidammadii Haaruun iyo ciidammo ay lahayd dawladdii Rooma iskaga hor yimaadeen dhulkii la oran jirey Aasiyada yar.

Taliskii Cabbaasiyiinta waaga ugu heer sareeyay waxa uu ahaa waqtigii ay isaga dambeyeen Al Cabbaasi Al Safaa, Mansuur Al Mahdi, Rashiid, Al Muqtasin, Al Watiiq, Al Mutwakil, waxayna ahayd taariikhdu 750 iyo 857 intii u dhexeysey. Haddii aynnu is garb dhigno dawladihii Islaamka ahaa ee aynnu soo aragny iyo middatan Cabbaasiyiinta, tan Cabbaasiyiintu waxay gaartay heer sare, xagga dhaqaalaha, siyaasadda, nolosha, iyo qoontaba. Baqdaad waxay gaartey horumar weyn, taas oo uu gaarsiiyey khaliifkii saddxaad Al Mahdi, intii kalena horay u sii marisay ilaa taliskii khaliifkii sagaalaad oo la oran jirey All Watiiq. Waxaase sii sare mariyey oo caan ka dhigay magaaladaas Haaruun Al Rashiid iyo wiilkaasaa Al Ma'muun oo taliska dawladda Islaamka isaga dambeyey.



## BAQDAAD HAYBADDEEDII

Baqdaad haybaddeedii iyo quruxdeedii waxay soo baxday 809kii, taariikh sugayaashu waxay sheegeen sharafta iyo horumarka magaalada Baqdaad waxay ku gaartay muddo ku sinayd qarni barkiis; siiba waqtigii Haaruun Al Rashiid 786—809 (H). Baqdaad waxyaalaha ay ku hormartay waxaa ka mid ahaa: Cilmiga, maxaa yeelay kutibtii afafka qalaad ku qornaa waxaa lagu beddeley afka Carabiga, isla markaana magaalada waxaa laga dhisay jaamacado iyo makaatib kala duwan , kuwaas oo aad caan u ahaa, dadyowga adduunyaduna u soo raadsan jireen aqoon. Magaaladaasi waxay noqotay mid ganacsi oo ay ku kulmaan alaabooyin badan oo isaga yimaadaan adduunka oo dhna, taasi waxay dhalisay inay magaaladu cammiranto. Baqdaad dhismaheeda waxaa sii qurxiyey masaajido farabadan oo dhismahoodu kala duwan yihiin fooqaaq aad u fara badan, iyo daro qurux badan.

## BAQDAAD IYO XIRIIRKII
### AY LA LAHAYD FARANSIISKA

Bilowgii qarnigii sagaalaad waxaa baratan ka dhexeeyey labadaa xoog ee kala ahaa galbeed iyo bari. Dhinaca galbeed waxaa hoggaamiye u ahaa Sharlamaan, dhinaca kalena waxaa hoggaanka u hayey Haaruun Al Rashiid. Haddii labada dhinac la isu eego ka bari ayaa ka xoogganaa ciidanka galbeed. Sharlamaan wuxuu rabay inay is garabsadaan labada xoog. Sababtuna waxay ahayd iyada oo Sharlamaan cadow u ahayd Imbaradooriyadii Bisantan oo deris la ahayd Haaruun. Haaruun sidoo kale ayuu isna u rabay waayo, asagana waxaa cadowgiisa ahayd xukumadii Umawiyiinta ee Isbaaniya fadhiday. Taas ayaa dhalisay in ay is dhaafsadaan Danjireyaal iyo

hadiyado Hadiyadahaasna waxaa ka mid ahaa sacaad si wanaagsan loo farsamatumay, oo markaas la dhigay gurigii Barlamaanku u ahaa Sharlamaan.

Markii saacaddii ku garaacday waqtigii ayaa dadkii aqalka Sharlamaan joogay kala yaaceen iyaga oo yaabban ayey waxay yiraahdeen dhowaaqaannu waa mid yaab leh wuxuuna noola eg yahay kan (jiniga) oo kale, ee Islaamku waaba na sixrayaa. Taasina waxay muujineysaa in Musilmiintu kaga hor reyesey reer galbeed, xagga teknoloojiyada.

## Xiriirkii Cabbaasiyiinta iyo Roomaniyiinta

Markay taariikhdu ahayd 760kii ayaa Boqortooyada Rooma ku soo duushay Gobolka Shaam. Muslimiintii intay ciidankaas jebiyeen, ayey iyana markoodii ku duul Boqortooyadii Bari ee Rooma. Duulimaadkaasi wuxuu Muslimiintii u keenay guul weyn, taaso u suura gelisey Muslimiinta markay taariikhdu ahayd 768dii in ay ku khasbaan Boqortooyadii Bari in ay cashuur siiso dowladda Islaamka. Boqortooyada aasna waxaa u talin jirey nin la oran jirey (Iyreyn). Cashuurta uu Haaruun ka qaadi jirey boqortooyada Rooma waxaa lagu qiyaasay (90.000) oo diinaar, hase yeeshee markuu taliska la wareegay Boqorkii la oran jirey Nikfor, si degdeg ah ayuu arrintaas wax uga beddeley isagoo ku dhawaaqaya nu uu ka baxay heshiiskii dhexmaray labada ciidan, oo ahaa in Boqortooyada Rooma siiso Dowladda Islaamka cashuur.

Nagfar wuxuu caddeeyey inuusan cashuur dambe siin doonin dowladda Islaamka, dagaalna ku kicin doono haddii ayaan soo magdhabin cashuurtii ay ka qaadi jireen Boqortooyada Rooma. Arrintaasi aad ayey uga careysiisay Haaruun Al Rashiid, waxayna ku kalliftay in uu dagaal ku kiciyo kuna duubo Boqortooyada Bari ee Rooma. Haaruun wuxuu ka gaarey arrintaas guul weyn, markii uu ka adkaaday boqortooyadaas wuxuu oggoleysiiyey in ay sidii hore cashuurta Dowladda Islaamka u siiyaan. Taasina waxay noqotay mid suuragal ah sannadku markuu ahaa 806dii.



## HEERKA AY TACLIINTA IYA FANKA KA GAAREEN CABBAASIYIINTA

Waxaynnu soo aragnay sidii Umawiyiintu qayb weyn uga qaateen fidinta diinta Islaamka, hase yeeshee, haddaan is **garab dhigno iyada iyo dowladda** Cabbaasiyiinta; tan Cabbaasiyiintu waxay caan ku ahayd waqtigeedii xagga cilmiga iyo fanka, oo ay horumar sare ka gaareen, intii ay madaxtooyada hayeen.

Khalufadu Cabbaasiyiintu aad ayey u dhiirri jireen dadka wax yaqaanka ah iyo kuwa wax barta. Cabbaasiyiintu niman culuma ah ayey u diri jireen inay ku beddelaan afka Carabiga kutubta wanaagsan ee ku qoran afafka shisheeyaha, kuwaasoo ay ka mid ahaayeen Giriigga, Roomanka, Hindiga iyo kuwa kale oo la mid ah.

Xagga Hindiga waxay markii hore ka turjumeen kutub badan oo ku saabsan cilmiga astroomiyada gaar ahaan daraasada xiddigaha. Al mansuuri oo ka mid ahaa culummadii Carabta ayaa kutub Hindi ah oo ka hadlaya xiddigaha iyo barashadooda ku beddelay afka Carabiga. Khowaariism oo isna ahaa ragga ku xeel dheer cilmiga astronoomiga wuxuu qoray kitaab caan ah oo ku saabsan cilmigaas, waxaana saldhig u ahaa tarjumadii u sameeyey Al Mansuuri.

1126kii ayaa buuggaas af Laatiin waxaa ku beddelay nin la oran jiray Edeelaad waxaana kitaabkaasu noqday mid kaalin weyn ka qaatay horumarinta cilmiga astronoomiyada ee maanta. Al khowaariism wuxuu misna qoray Cilmiga Xisaabta Aljabriga ah oo uu kitaabkii cilmiga astronoomiyaha ku saabsanaa wax kaga daray. Kutub badan Cabbaasiyiintu waxay ka beddeleen Faarisiyiinta kuwaasoo ay ka barteen waxyaalo kale oo ay ka mid tahay Dubnada iyagaana ka dib u gudbiyey Yurub iyo dalal kale oo la mid ah. Waxaa isna door weyn ka qaatay tarjimudaas Al Mumum oo ahaa ninkii ugu horreeyey oo ku beddeley kutub griig ah of Carabi, ninkaas wax badan ayuu u dhoofay dalalka girriiga, Roomanka, iyo Faaris. Wuxuuna ka ururin jirey kutub badan oo qiima leh kuwaas oo uu u beddeley af Carabi. Taariikhdu markay

ahayd 830kii (H) Al Mu'muum wuxuu sameeyey meel wax lagu barto kutubtana lagu ururiyo, wuxuuna u magac baxshay Guriga Murtida. Gurigaas waxaa lagu baran jirey aqoonta sare ee Islaamka, Laamaha Dugsiga waxaa ka mid ahaa barashada suugaanta Griigga oo ay ka mid ahaayeen sheekooyinkii Hoomer, iyo afaf kale sida Bershiga iyo Hindiga. Nin la oran jirey Xuneyn Ibnu Isxaaq (809 - 873) oo maamule ka ahaa guriga murtida ayaa isna tarjumadii iyo soo ururintii kutubta cilmiga ah sii kordhiyey. Xuneyn wuxuu aad u jeclaa cilmiga dawooyinka iyo falsafada. Waxaanu muddo dheer baranayay cilmiga fiisikada, wuxuu beddeley kutub badan oo Giriig ah oo ay ka mid ahaayeen : Kutub ay qoreen niman la kala odhan jirey Gleen iyo Hiboretis oo ku saabsanaa dawada. Wuxuu kaloo beddeley kitaabkii Diyoos oo ku saabsanaa cilmiga Bootaaniga, iyo buugag ay qoreen Balaltoon iyo Arriston oo ahaa falsafada iyo fiisikada.

Taabid Ibnu oo dhashay 830 dhintayna 901, ayaa isna kutub badan oo Giriig ah oo ahaa: Fiisikada Falsafadda iyo dawooyinka ku beddeley af Carabi. Markii ay carabtu muddo 100 sannadood ku dhow ama ka bdan ay tarjamadii wadeen ayey bilaabeen in ay cilmiga wax ku kor-dhiyaan.

Waxyaalo badan oo ay dunidu ilaa maantay ka faa'iideystaaan ayey soo saareen. Markii ugu horeysey waxay heer sare ka gaareenCabbaasiyiintu waagaas, xagga daawada sababtuna ahayd waqtigii khaliif Al Mansuur, ayaa waxa xanuunsaday nin la oran jirey Jundi Shabuur, ninkaas cudurkii, waxaa ka daweeyey nin takhtar ah oo la iran jirey Bakhtiisho. Wixii markaa ka dambeeyey khaliifyadii Cabbaasiyiintu waxay isku hawleen daraasada dawooyinka gaar ahaan indhaha iyo qallinkooda.

Waxaa kale oo isna horumar weyn ka gaaray cilmiga dawooyinka nin la oran jireyAl Raasi oo dhashay 835 dhintayna 925. AlRaasi wuxuu dhisay Cisbitaal weyn iyo meelo lagu raadiyo cudurrada iyo dawooyinka. Ninkaasi wuxuu ahaa ninkii ugu horreeyey ee ogaaday in cudurrada jadeecada iyo furuqa kale duwan yihiin. Kitaab uu qoray oo ku saabsanaa dawooyinka waxaa la oran jirey kitaabkaas «Alhaawi» waxaa aflaatiinka lagu beddeley 1279kii (M).



Markaas kaddib waxaa lagu beddeley magaalada Hinees, kitaabkaas saldhig weyn buu u noqday horumarka cilmiga dawooyinka. Al Majuusi wuxuu qoray kitaab caan ahaa oo la oran jirey Al Maalik wuxuuna ka sheekeynayaa cilmiga dawada iyo sidii horey loogu marin lahaa. Wuxuu caddeeyey inaan ilmuhu iskood isaga dhalan karin sidii beryihii hore loo qabay ee ay muruqyo minka ama ilma sidka ku yaal ay soo riixaan.

Nin kale oo la oran jirey Ibnu Siina oo dhashay 980 dhintayna 1037 oo isna horumar weyn ka qaatay cilmiga Ibnu Siina wuxuu aqoon dheer u lahaa cilmiyada Fiisikada, Filooloojiyada, cilmiga Dabiiciga ah wuxuun aisla markaa ahaa gabyaa. Gaar ahaan wuxuu aad ugu wanaagsanaa falsafadda iyo fiisikada.

Carabtu waxay kaloo aad ugu horey martay cilmiga kiimikada iyo Botaanikada cilmiga kiimikada waxaa soo saaray nin Carab ah oo la oran jirey Jabiir Ibnu Xaxyaan. Niman kale oo bdan oo ay ka mid ahaayeen: Ibnu Al Baydar iyo Al Jahaasi, ay aaiyana cilmiyada kiimikada iyo Botaanikada aad ugu xeel dheeraa.

Cilmiga Astronoomiyada iyo Xisaabta iyaana carabtu heer sare ayey ka gaareen taariikhdu markay ahayd 1056 ayaa Al Ma'muum magaalada Baqdaad wuxuu ka sameeyey jaamacad lagu barto cilmiyada astronoomiyada iyo culuum kale oo badan jaamacaddaas waxaa lagu aqoonsaday wareegga dhulka iyo xiriijimaha toosan iyo kuwa ballaaran ee cirka qeybiya iyo waxyaale kale. Nin isna la oran jirey Afarqaan ayaa buug ka qoray cilmiga astronoomiyaha buuggaasna 1135tii ayaa laatiin lagu beddeley magaalada Madariid.

Abuu Al Mashaan ayaa afar buug ku qoray, cilmiyadaas af laatiin ayaa lagu beddeley.

Cilmiyada Bulshada oo ay ka mid ahaayeen taariikhda, juqraafiga, biyogaraafiyada iyana horumar weyn bay ka gaareen carabtu. Waxaa buug qiima leh ka qoray nin la oran jiray Altabaar (839-923). Buuggaasi wuxuu ka koobnaa taariikhda adduunyada waxaana lagu beddelay afaf badan oo

ilaa maanta taariikh ahaan loogu isticmaalo. Taariikhda waxaa aad caan uga ahaa Al Ruumi. Al Ruumi wuxuu wax ka qoray Juqraafiyada dalalka Aasiya iyo Yurub.

Xagga falsafadda Cabbaasiyiinta horumar weyn bay ka gaareen. Nimankii kucaan ahaa waxaa ka mid ahaa Al kindi oo abuuray falsafadda carabtu leedahay oo u dhiganta tii Aristo iyo Blatoon ee Giriigga. Ninkaase xagga falsafadda ugu xeeldheeraa waxaa magacaasa la oran jiray Abuu Rashdi (1126-1198).

Xagga sharciga Cabbaasiyiinta guud ahaan waxaa saldhig u ahaa Quraanka iyo xaddiiska Nabiga. Haddii aan sharciga diinta Islaamka saldhiggiisa ugu weyn aragnay waxay u qaybsamaan afar dariiqood oo waawayn:

1. Tan ugu horreya waxaa abuuray nin la oran jiray Al maaliki Magacana dariiqadaasi waxay ka qaadatay ninkaas, waxaana hadda lagu magacaabaa Al Maalikiya, waxaa ku dhaqma dadyow badan oo ay ka mid yihiin dadka ku nool waqooyiga Afrika.

2. Waxaa abuuray Al Xanafi, dariiqadaas waxay ka magac baxday Al xanafiya iyadana waxaa ku dhaqma dalal badan oo Islaam ah.

3. Waxaa abuuray nin la oran jiray shaafici dariiqadaasina waxay la magac baxday shaaficiya taasoo ay ku dhaqmaan dadyow badan oo ay ka mid yihiin Soomaalidu.

4. Waxaa abuuray Axmed Al Xambali oo ahaa ardaygii Shaafici, dariiqadaasina waxay la magac baxday Xambaliya.

Waxay caddeeyeen taariikh-sugayaashu sida ay Cabbaasiyiinta uga hormareen xagga cilmiga in casriyadii dhexe jaamacadaha reer galbeed ka soo qaadan jireen manaahijta aqoonta jaamacaddii Islaamka ee ku tiillay magaalada baqdaad.

Cabbaasiyiinta sida ay ugu hormareen tacliinta oo kale,



misna waxay heer sare ka gaarnee xagga fanka iyo farshaxanka. Waxyaalaha ay heerka weyn ka gaareen waxaa ka mid ahaa : dhismaha sawirka iyo farshaxanka, farshaxanimada waxay gaartay meel sare taasina waxay ku tusaysaa sidii ay u qurxin jireen guryaha boqorrada iyo kuwa dowladda iyo masaajidyada, gaar ahaan misaajidkii Beytal Quddus.

Masaajid uu dhisay al Mutawakil oo laga dhisay samaara oo Cabbaasiyiinta xarun uu ahayd sannadkuu markuu ahaa 836-889 waxaa qiimahiisa lagu qiyaasay ilaa 70000 kun oo diinaar. Misaajidkaasi dhismahiisa iyo quruxdiisuba waxay caddeeynaysaa heerka sare ee ay Cabbaasiyiintu xagga dhismaha ka gaarnee. Farshaxannimadaas iyada ah waa mid ay ka yaaban yihiin dadka ku xeel dheer dhismaha ee casrigeenaan, intaa waxa u dheeraa sida ay ugu hore mareen sawirka iyo Muusikada siiba waagii taliskii khalif Al Mansur iyo Al muqtasim. Khalif A lMuqtasim oo dhisay magaalada samaara oo ahaa inankii Haruun Al Rashiid gurigiisa waxaa laga helay sawirro badan oo aad u qurux badan oo ay ka mid ahaayeen: Xoolo, Rag Haween, iwm sawirradaasi waxaa badankooda ku dhafnaa dahab iyo qalin iyo waxyaale kakle oo la mid ahaa, taasi waxay ku tuseysaa meesha ay ka gaareen fanka iyo farshaxanka.

## IS-AFGARANWAAGII HAASHIMIINTA

sidii aynnu horeyba u soo aragnay, hashamiyiintu waxay ahaayeen laba qolo oo ku kala abtirsan jiray Cabdulmudhalib oo nabiga adeerkiis ahaa, iyo calawiyiintii oo iyana ku abtirsan jiray Cali Bin Dhaaalib. Labada qolo ayaa waxaa la isku oran jiray Hashimiyiin. Intii aanay Cabbaasiyiintu madaxtooyada la wareegin labada qolo waxay ahaayeen heshiis, waxayna wada doonayeen inay Umawiyiintii taliska dowladda kala wareegaan. Hase yeeshee, markii Cabbaasiyiintii la wareegeen, ayaa calawiyiintii oo iyagu isku waday kuwii u lahaa madaxtooyada Dowladda Islaamka, sababtuna ahayd inay iyagu ahaayeen kuwii Cali ku abtirsan jiray qalanqalkiina iyagu kiciyeen, dabadeedna Cabbaasiyiintii ka qaadeen taliskii iyagiina ciribtireen gaar ahaan waagii taliskii Al Manuuri. Taasi waxay keentay in Calawiyiintii uga soo horjeesadaan dow-

laddii Cabbaasiyiinta isdii ay uga soo; horjeesadeen Umawiyiinta. Arrintaasi waxay dhalisay in Cabbaasiyiintii laayaan Calawiyiintii iyo madaxtooyadii, dilkaa dabadeedna Calawiyiintii waxay u baxsadeen meela ku hoose jiray taliska Cabbaasiyiinta. Kaddib waxay dowladda ka sameysteen dhinaca Bariga iyo Galbeedka dhulka ay xukumayeen Cabbaasiyiintu.

## ISAF-GARANWAAGII CABBAASIYIINTA DHEXDOODA

Is-afgaranwaagii ka dhex dhacay Muslimiinta kale iyo Cabbaasiyiinta kuma koobnayn kan haashimiyiinta keliya, ee muddo markay Cabbaasiyiintu taliska hayeen ayay Beersiyiintii is qabteen. Sababtuna waxay ahayd sidii aynu horeyba u soo sheegnay, Beershiyiintii aad iyo aad garab u siin jireen si ay taliska ugala wareegaan Umawiyiinta, markii ay Cabaasiyiintii taliskii la wareegeen, waxay Beersiyiintii ugu abaal gudeen jagooyin waaweyn oo ay dowladda Islaamka ugu dhiibeen. Hase yeeshee, Beersiyiintii jagooyinkaas kuma qancin ee waxay damceen in ay kala hoos baxaan taliska dowladda Islaamka, oo ay iskood u madaxbannaadaan. Taasina waxay keentay in is-afgaranwaa ka dhex dhacay Cabbaasiyiintii iyo Beersiyiintii.

Ummuurtaasi waxay dhalisay in rag badan oo ahaa madaxdii Beeshiyiinta la laayay, raggaasina waxaa ka mid ahaa Abu Salma oo la dilay waagii taliskii al Cabbaasi iyo nin la oran jiray Abu Muslim oo isna la dilay waagii taliska Mansuuri, kaasoo ahaa nin door weyn ka ciyaaray dhalashadii dowladda CabbaasiyiintaDhibaatooyinkaas ka dhex dhacay Cabbaasiyiinta iyo dadkii ay u tailn jireen kuma koobnayn is afgaranwaagii Haashimiyiintii iyo iska hor imaankii Bershiyiintii iyo Cabbaasiyiinta, ee waagii dambe Cabbaasiyiintii ayaa dhexdooda iska laayey iyaga oo isku haya madaxtooyadii dowladda. Haaruun Al Rashiid waxa taliska uga dambeeyey wiilkiisii Aamin. Markii uu Aamin xukumay dowladda Islaamiiya, waxaa jiray Ma'muum oo walaalkii ahaa, oo isna damacsanaa madaxtooyada dowladda Islaamka, in uu uga dambeeyo walaalkiis Aamin.

Hase yeeshee, Aamin wuxuu damcay in uu seejiyo walaalkiis madaxtooyada taasina waxy dhalisay sannadku markuu ahaa 819kii in labadii walaalaha ahaa dagaal dhex maro, oo markaas Aamin lagu dilo dagaalkaas, Ma'muumna madaxtooyadii Dowladda Islaamka qabsaday.



*Burburiddii Dawladda Cabbaasiyiinta*

Markii ay soo baaba'aysay dawladdii Cabbaasiyiinta, markii hore dowladda xoogeedii ayaa hoos u dhacay. Waxyaalihii hoos u ridaya waxaa ka mid ahaa: Is-afgaranwaagii Haashimiyiinta dhexdooda iyo tartankii Cabbaasiyiintu ay u tartamayeen madaxtooyada dowladda Islaamka, iyo khilaafkii ka dhex dhacay madaxdii Cabbaasiyiinta iyo dadkii xukunkooda ku hoos noolaa. Taasoo keentay in dad badani ka soo horjeedsadaan. Markaas ayaa kooxaha lidka ku ahaa taliska dowladda Cabbaasiyiintu, qaarba mar in yar goosteen dhulkii dowladda xukumeysey, ugu dambeyntiina waxay ka sameysteen dowlado yar yar oo ku wareegsan taliska Cabbaasiyiinta. Inkastoo taasi dhacday haddan dowladahaas yar yari iskood ayey isu maamuli jireen iyagoo ku xiran tailska guud ee dowladda Cabbaasiyiinta. Isbeddelkaas dhacay wuxuu markii ay dowladihii yar yaraa xoogeysteen inay xoogoodii saareen in ay kula tartamaan dowaldahaas yar yar waxaa ka mid ahaa dowladdii Safardayiinta oo laga smaeeyey suuriya iyo Ciraaq. Gobolka kharasaan aad ayey ugu fidday xagga bariga Hindiya iyo waddammada ugu dhowba isla markaas niman turki ah oo la oran jirey Saljuuk waxay bilaabeen inay xukunkii Turkiga xagga Bariga u fadhiyaan.

Waqtigaas wixii ka dambeeyeyna ,waxaa u suuragalay inay qabsadaan dhulkii dowladda cabbaasiyiinta ay heysan jireen oo dhan.

## SABABIHII UGU WAAWEYNAA EE AY LA BURBURTAY DOWLADDII CABBAASIYIINTU

Sababahay la burburtay waxaa ka mid ahaa:

1. Qaybsankii Imbaradhoriyada Islaamka ay u kala qaybsantay dowladda yar yar oo iskood isu maamula taasoo dabadeedna waddada u xaartay kala jabkii imbaradhooriyadii cabbaasiyiinta sannadku markii uu ahaa 1258 (M).

2. Dagaallo iyo fidmooyin ka oogmay dadyowga Carabta dhaxdooda gaar ahaan Carabtii reer Waqooyi iyo kuwii koofureed, iyada oo isla markaas dagaallo ka dhexsocdeen Carabta Beershiyiinta, iyo faarisiyiinta iyo dad badan oo taliska Cbbaasiyiinta ku hoos noolaa kuwaas oo sii baabi'in jirey jirıtaankii Dawladda Cabbaasiyiinta.

3. Dhaqaalihii waddanka oo burburay sababatuna ahayd in dad yar mooyee dadkii kale dhaqaalahoodii hoos u dhacay gaar ahaanna markii canshuurtii kor u kacday isla markaasna noloshii aad u qaaliyowday taasoo kentay in dadkii xukunkaas ku hoos noolaa ay ka soo horjeestaan Dowladdii Cabbaasiyiinta.

3. Khaliifyadii oo qaarkood u go'doomeen tumasho taasoo hilmaansiisay weerarkii gaalada ay soo weerareen magaaladda Baqdaad. Haddii ay wax badan salaajaqdii turkiga ahayd ay ku adeegn jirtey Imbaradooriyadii Islaamka laga biıaabo sannadkii 1055 waqtigii khilaafadii Nuseyri ilaa 1194, isaguna haba yaraatee wax awood ah oo uu lahaa ma jirin. Isla markaas Saleybiyiintii reer Galbeed waxay qabsadeen Cixiiri xooglehna geliyeen Falastiiniyiintii iyo Suuriya. Sannadku markuu ahaa 1099 gaaladii waxay qabsadeen Beytal Maqdis. Markay magaalooyinkii dhammaan burburiyeen magaalooyinkii waaweynaa ee xagga bariga ku yiil, ayey isla mrakaasna masaajidyadii quxurda badnaa masaxeen iyaga oo isla waqtigaas magaalooyinka islaamka dhiig qulqulay laguna dilay lixdan kun oo ruux.

Boqortooyadii manggooliyiintu ee Jangis Khaan oo ka bilaabantey Shiina ilaa Bariga Yurub, halkaas ayey ku burburiyeen Imbaradhooiyadii Islaamka markey taariikhdu ahayd 1258. Waqtigaas waxay ku soo duuleen Mongooliyiintu magaalada Baqdaad oo markaas ahayd Xudduntii dhaqanka iyo hiddaha Islaamka. Mongooliyiintu waxay gubeen kutubtii cilmiga diinta ee qiimaha weyn lahaa qaarna waxay ku daadsheen webiga ugu dambayntiina waxay ciribtiireen ilbaxnimadii Islaamka.

## SIDUU ISLAANKU UGU FAAFAY AFRIKA

Faafintii Diinta Islaamka waxaa qayb weyn ka qaatay ciidammadii Carabta ee Muslinka ahaa oo galay dalal badan oo



ka baxsan soohdinta Carabta. Halkaas oo ay ugu suuragashay iney ku abuuraan diinta Islaamka, taasi waxay keentay in Islaamku ku faafo dalal badan oo addunka ah. Dalalkaas ay ku faaftay diintu waxy u keentay ilbaxnimo iyo xeerar cusub oo ku xiran diinta Islaamka, dalalka ay dawladdii Islaamka ee Carabtu qabsatay kumana ay khasbin inay diinta Islaamka xoog ku qaataan, iyagoo tixgelinaaya xeerarka diinta Islaamka, hase yeeshee, dalalkaas badankoodu waxay oggolaadeen inay noqdaan dalal Muslim ah, sababtuna waxay ahayd iyagoo u qushuucay diinta Islaamka.

**Islaanku siduu ugu faafay Afrikada waqooyi.**



Islaamku waxaa Afrikada waqooyi gaarsiiyey ciidammadii Carabta ahaa oo u madax u ahaa Cumar Bin Caas. Ciidankaas oo galay Masar sannadku markuu ahaa 20kii Hijriyada ama 640 C.D., waxaa u suuro gashay in uu jebiyo ciidankii Bisantiga ahaa guusha degdegga ah oo ay carabtu gaareen waxyaalo bdan ayaa ugu wacnaa, kuwaas oo ay ka mid tahay soo-dhoweeyntii ay ka heleen dadkii qobtiga ahaa dadkaas oo nacay xukunkii Bisnatiga ahaa.

Islaamku wuxuu dadkii Masaarida ahaa siiyey nolol deggan oo uu qof kastaba haysan karo diintii uu doono, taasoo eyan helin wakhti dheer oo boqol sannadood ku dhow. Cumar Bin Al Caas oo ciidankii Islaamka madax u ahaana wuxuu kala dooran siiyey in ay Canshuurta baxshaan iyo in eyan bixin, wuxuu kaloo u oggolaaday in ay gudaan wax walba oo ku lug leh diintooda, taasna waxaa u dheer in Cumar uusan faraha saarin wixii ay kaniisadohoodu lahaayeen.

Haddii la baaray ma jirto waxa kaliya oo caddeynaya ka bixiddii ay ka bexeen diintoodii hore, iyo geliddii ay soo galeen Diinta Islaamka uu ahaa mid cadaadis iyo ciriiri lagaga keenay, waxaa jirtey in Masaari badan ay diintii «qobtiga»ka baxeen oo tan Islaamka galeen, inta aan weliba la furin dalkooda wakhtigaas oo magaalada Iskendariya oo markaas ahayd magaala madaxda dalka welina dagaal kula jirtey Ciidammaadii Islaamka oo Carabta ahayd. Qobti badan ayaa markaas raacay tallaabadii walaalohood oo galay diinta Islaamka. wakhti dheer iyada oo ayan taasi ka soo wareegin, ayuu Islaamku ku fiday Masar, Tuunis, Jasaa'ir, Marooko, isla markaas waxaa dhacday in «Cuqba binu Naafac» uu furay dalka Tuunis, Ciidankiisuna uu gaaray Xeebta Atlaantig.

Mudda yar kaddib ayaa dalkaas oo dhan ay ka dhasheen Xarumo kala duwan oo Diinta Islaamka gaarsiiyey bartamaha Afrika. Waxaa dhaqdhaqaaqaas ka qayb galay ladyowga Afrika badankooda oo ay ka mid yihiin dalka Masar iyo dadka deggan lama degaanka weyn, iyo dadka Morooko wakhtigii dawladda «Muraabidiinta». Markaas ayuu billaabay Islaamku in uu dhaafo lama degaanka weyn oo gaaro koonfurteeda, tan iyo Webiga Sinigaal, iyo Nayjar, iyo galbeedka dooxaha Nayjar. Islaamka faafiddiisa waxa is hor



taagey ma jirin, aan ahayn meelaha lama gudbaanka noqotay, sida kaymaha dhul-bareenka iyo Hawdka Webiga Niil.

Kaddib goortii la furay waqooyiga Afrika, ayey Muslimintii Carabta ahayd u dhaqaaqeen xagga iyo Afrikada waqooyi dhinaca galbeed. Dagaalladii ay isku halleeyeen iyaga iyo ciidanka Bisantiga iyo dadkii taageerahayey, gooni ahaan dadka barbarka ah, guul ayey k agaareen, hase ahaatee, ciidammadii Bisantiga iyo kuwii la jiray wakhti dheer ayey is hor taageen weerarkii ciidammada Islaamka, sannadku markuu ahaa 710 (C.D) ayaa naagtii madaxda u ahayd taasoo isla markaas ahayd wadaad, waxay kula talisay inay dagaalka joojiyaan oo isdhiibaan, iyaduse waxay dooratay geeri, iyada oo dagaalka kulajirta dadkeedii, markaas ayuu heshiis dhex maray carabtii Muslimiinta ahayd iyo Barbarkii. Iyada oo barbarkii lagu xiray in ay ku soo biiriyaan ciidankii Islaamka labo iyo toban kun oo dagaal yahan ah. Markii ay ku-waasi ku soo biireen ciidankii Islaamka, ayaa kuwa badan oo iyaga ka mid ah ka qaybgaleen ciidankii badda gooyey oo furay «Isbaaniya» 711 (C.D) ciidankaas oo uu madax u ahaa Daariq Bin Siyaad, oo dhalashadiisu ahayd Barbar kaddib markii ay galeen dalalkii Afrikada Waqooyi Galbeed ayey halkaas dadkii degganaa kala doorransiiyeen saddax arrimood.

1) In ay Islaamka soo galaan.
2) In ay canshuur baxshaan.
3) Ama in ay dagaal doortaan.

Dadwoygii dalalkaas badankoodu waxay doorteen inay soo galaan diinta Islaamka. Waxaanafaafinta diinta Islaamka ee dalalkaas hoggaanka u qabtay Muusa Museer. Wuxuuna ku dadaalay in Barbriyiinta laga dhaadhiciyo waxyaalaha ay diintu farayso, hase yeeshee, Islaamku xididdo adag dhexdooda kuma yeelan jeer ay si fiican uga dhaadhiciyee.n Diinta Islaamka, isla markaasna hoggaanka waddanka wax ka qabteen Sida darteed ayey halkaas ka soo baxday dawladdii la oran jiray Muraabidiinta Qarnigii 11aad taasoo ay la socdeen dhaqdhaqaaqyo «wadaninimo» ah oo ay ku soo biireen dad badan oo barbar ah Ummadda Islaamka. Taasuna waxay dhacday bilowgii Qarnigii 11aad markii uu Yaxye Bin Ibraahim oo madax u ahaa qabiiladii la oran jiray «Sanhaaja» oo

ka mid ahayd qabiilooyinkii lamadeggaanka weyn, uu doortay in uu qabiilkiisii ka dhaadhiciyo tiirarka diinta Islaamka, sidaa daraadeed in loo baahday nin diinta Islaamka aqoon dheer u leh. Ninkaas howshaas u qalmay wuxuu noqday Cabdala Bin Yaasiin oo ka oggolaaday arrintaas, islamarkaasna u go'doomay hanuuninta diinta ee dadkaas, Cabdalla goortuu ku isticmaalay xoog ayaa dadkii wax ka qaadan waayeen kana kala yaaceen saas darteed wax go'aan ah kama gaarin faafinta diinta Islaamka ee dadyowgaas markaas ayuu Cabdalla Bini Yaasiin wuxuu go'aan ku gaaray inuu siyaasaddii hanuuninta ee Islaamka xoogeeda saaro dadyowga (Suudaanta) ah, hanuunintaas wuxuu ka bilaabay Gaana. Halkaas ayaa asaga iyo kuwii soo raacay oo ardadiisii ahayd degeen jasiirad ku taal webiga Sinigaal, waxayna ka dhisteen Masaajid una go'doomeen cibaadada Ilaahay. Waxaase dhacday in barbarkii markii hore diiday hanuunintiisii ay ka xumaadeen tegidisii, halkaas oo ay kaga daba yimaadeen iyaga ka codsanaya Cafi, Islamarkaasna u muujiyey in ay rabaan barashada diinta. Waxaana markaas ku soo heermay Shiikh Cabdalla kun arday, oo mid kastaba uu ballan qaaday in uu ku faafiyo qabiilkiisa iyo qaraabadiisaba diin Islaamka. Markii uu sannadku ahaa 1042 (C.D) ayuu Shiikh Cabdalla oo hoggaaminaaya ciidammo ka kooban wadaado uu ku magacaabay (Muraabidiin), weeraray qabiiladii u dhoweyd isagoo ku khasbaaya in ay oggolaadaan Diinta Islaamka, taana waa ku guuleystey.

Cabdalla Bini Yaasiin wuxuu geeriyoodey (1059) (C.D) hase yeeshee, dhadhaqaaqii uu horseeday hoggaaminaayeyna ma baabi'in waxaana raacay qabiilooyin badan oo barbariyiin ah iyaga oo ka yimid lama degaanka weyn iyaga oo ku socda Afrikada Waqooyi Galbeed kaddibna u tallaabsadeen Isbaaniya, una taliyeen.

## SOO GELIDII DIINTA ISLAAMKA AFRIKADA BARI

Waxaynu soo aragnay sidii diinta Islaamku ay ugu faaftay Afrikada waqooyi, Afrikada waqooyi galbeed iyo Afrikada galbeed. Dalalkaas aynnu soo sheegnay mid waliba wuxuu leeyahay waxyaalo u gaar ah oo ku saabsan ku faafiddii-



sii Diinta Islaamka. Guud ahaan, waxaa ka dhacaysa in aanay Diinta Isaalmka mid koodna ku oo gelin dagaal la'aan.

Afrikada Bari, iyana waxay leedahay waxyaalo u gaar ah oo ku saabsan faafiddeedii Diinta Islaamka. Waxaa ugu muhiimsan ee Afrikada Bari ay kaga duwan tahay dalalka aynu kor ku soo sheegnay, waxaa lagu sheegi karaa inay Diinta Islaamka dalaka Afrikada Bari si nabad ah ku soo gashay.

Iyada oo ay ugu wacantahay xiriirka weyn ee ka dhexeeya Carabta iyo dalalka Afrika Bari awgeed, ayey Diinta Islaamku si degdeg ah u soo gashay Afrikada Bari siyaabaha ay Diinta Islaamku ku soo gashay Afrikada Bari waxay u kala baxaan saddex:

1. Ta u horreysa waxay tahay in ay dad ganacsatooyin oo muslin ah si isdabajoog ah ay u imanayeen dalalka Afrikada Bari,

2. Waxay tahay in cuilmo u gaar ahaa Diinta faafinteeda ay yimaadeen dalaka Afrikada bari kuna dadaaleen sidii ay diinta u bari lahaayeen dadyowgii dalalkaas ku noolaa;

3. Waxay tahay in dadyow badan oo ka soo qaxay dagaalladii dawladdaha Carabta ay u soo cararen dalalka Afrikada Bari.

Ku faafidda Diinta Islaamka ee Afrikada Bari waxaa lagu wadaa inay ka bilaabatay xeebaha Soomaalida ka dibna uu qalba dal u gudbiyey. Taariikhlayaasha Carabta qaarkood, waxay sheegayaan in uu qarnigii toddobaad C.D. uu Cismaan Bin Cafaan oo ay la socoto haweneydiisii uu yimid magaalooyinka Saylac iyo Harar ka dibna uga gudbay gobollada Wallo, Gaalla, Guraage iyo kuwo kale oo badan. Gobolladaas waxaa ku faafay culimmo badan, sidaa awgeedna dadyowgaas badankoodii waxay noqdeen kuwo ku soo biira Diinta Islaamka.

Imaatinka Cumsaan Bin Cafaan oo ka mid ah Khaliifyadii ka dambeeyey Nebiga waxay caddaynaysaa in uu dalka Soomaalida ka mid ahaa dalalkay ku faafidda diinta Islaamku ugu horeysey gacanka Carabta. Taariikhlayaasha qaarkood

waxayba sheegayaan inay dadyowgu Afrikada waqooyi bari gaar ahaan dalka Soomaalida Diinta Islaamka kaga soo horreysey dadyow badan oo Gacanka Carabta ku nool. Taas waxaaba caddayn kara in taariikhda uu Cusmaan Bin Cafaan yimid dalka Soomaalida ka horreysey soo haajiriddii Nebiga.

Waxaa lagu wadaa inay Diintu dalka Somaalida ku fidday siddeed sannadood ka hor intaanay soo gaarin Madiina.

Soomaaliya geesteeda koonfureed iyana waxa lagu wadaa inay Diinta Islaamku soo gaartay qarnigii siddeedaad. Ku faafinta Diinta Islaamku ee koofurta Soomaaliya waxaa kalin weyn ka ċayaaray culummo ka baxsatay dagaalladii carbata ee dariiqadaha kala duwan. Sidaa taariikhlayaal Carab ahi ay qoreen, dhismaha magaalada Muqdisho waxa qayb weyn ka qaatay toddoba nin oo walaal ah oo dooni kaga yimid Gobolka lagu magacaabo «Isxa» ee dalka Cummaan. Toddobadaa nin waxa lagu wadaa inay Muqdisho yimaadeen qarnigii 9aad bilowgiisii 739kii waxaa iyana Soomaaliya geesteeda koonfureed yimid dad ka soo qaxay dagaalladii Carabta ee dariiqada Shiiciyiinta. Nimankaasi waxay ka yimaadeen dalka Cummaan, waxayna ka qiyb galeen dhismaha magaalooyinka Marka iyo Baraawe, iyo magaalooyinka xeebaha geesta waqooyi ee dalka Soomaalida. Culummadaasi reer Cummaan waxay hore ugu sii mareen dalalka Afrikada bari, waxaanay ka qayb qaateen faafintii Diinta Islaamka ee degmooyinka Sinjibaar, Kilwa, Iaamo iyo meelo kale oo badan. Culimada Afrikada Bari u imanaysay faafinta Diinta Islaamka marnaba ma u kala go'ın ilaa waqtiyo dambe, mar walbana way si xoogeysanayeen.

Qarnigii 15aad qaybtiisii hore, gaar ahaan waqtiyadii dagaalladii Cabbaasiyiinta iyo Umawiyiinta, ayey wadaaddo badani yimiideen Afrikada bari, kuwaas oo xil weyn iska saaray fidinta diinta Islaamka, 44 nin oo culimadaas ka mid ahi, oo ka yimid Xacramut waxay soo galeen magaalada Berbera, waxayna door weyn ka cayaareen xoogaynta diinta Islaamka ee Gobollada Soomaalida. Nin culummadaas ka mid ah oo magaciisa la oran jirey Sheekh Ibraahim Abu Sarbay, wuxuu 1430kii qabtay Harar, waxaanu xooggiisii oo dhan isugu geeyey in uu xoojiyo awoodda diinta Islaamka. Sheekh Ibraahim



wuxuu isku deyey in uu ku wareego tuulooyinka baadiyaha iyo dadka reer guuraaga dhexdooda, si uu wax u baro dadka aan aqoonta fiican diinta u lahayn.

In kasta oo sida innoo muuqata aad mooddo inay culimada diinta faafinteeda u imaanaysay ay ku koobnaayeen xeebaha, haddana si deg deg ah baa la isugu gudbiyey Afrikada Barina dad badan baa kaga soo biiray. Dadyowga diinta Muslimiintu soo gaadhay gaar ahaan dadka Soomaalidu waxay dhammaantood noqdeen dad Muslimiin ah aadna ugu xididaystay diinta Islaamka. Taas waxaa si fiican u muujinaya inay Ummadda Soomaalida maanta ay ka wada kooban tahay dad wada Muslim ah.

Markii dadka Soomaaliyeed ay Diintu wada gaartey, waxaa iyana dhexdooda ka soo baxay wadaaddo u gaar noqday faafinta iyo baridda diinta Islaamka. Culimada Soomaaliyeed ee xerta la magac baxday hawlahoodu diinta, ku may koobnayn Ummadda Soomaaliyeed dhexdooda oo keliya. Sida runta ah xertu waxay qayb ka qaadatay ku faafinta diinta ee dalalka Itoobiya, Kiiniya, Yugaandha iyo dalal kale oo badan.

Qarnigii 9aad iyo wixii ka dambeeyey, waxa Afrikada bari aad ugu soo batay, ganacsatooyin ka imaanayey gacanka iyo dalka Hindiya ganacsatooyinkaasi waxay alaab ka keeni jireen dalalkooda, Afrikada bari waxay ka qaadi jireen alaab ay ka mid ahaayeen Dahab, Foolal Maroodi,, qolof diin iyo waxyaalo kale oo la mid ah. Dadyowgaas ganacsatooyinka ahaa oo dad Islaam ah u badnaa waxay door weyn ka cayaareen xoogayntii iyo faafintii diinta Islaamka iyo hore u marintii magaalooyinka. Magaalooyinka ay ganacsatooyinkaasi dhismahooda qaybta weyn ka qaateen waxaa ka mid ahaa Bemba, Malindi, Sanjibaar iyo xeebaha Banaadir.

Ganacsatooyinkii ka imaanayey gacanka carabta iyo dalka Hindiya, waxay badankoodu tallaabo, tallaabo u degeen dalalka Afrikada bari, waxayna ugu dambeystii noqdeen dadyow ka tirsan degmooyinkaa. Taasi waxay dhalisay inay is dhex galaan iyaga oo dadyowgii afrikaanka ahaa ee dalalka hore u degganaa, waxaana, halkaas ka abuurmay afaf iyo dha-

qanka loo yaqaanno Sawaaxili. Sawaaxiligu wuxuu yahay dhaqanka ka dhex dhashay dadkii Afrikaanka ahaa ee halkaa degganaa iyo dadkii kale ee Muslimiinta ahaa ee ganacsiga u imaanayey dalalka Afrikada bari, ka dibna degayey.

Taariikhlayaasha qarkood waxay sheegayaan in ganacsatooyinka carabta ee ka abuurmay dhaqanka Sawaaxiligu imaantinkoodu uu ka horreeyey qarnigii 9aad. Waxa lagu wadaa in kooxihii ugu horreeyey yimaadeen 650kii iyo wixii ka dambeeyey, nimankaasi waxa la filayaa in ay ahaayeen kuwo lagu magacaabo «**Daybuli**» daybuli waxa lagu magacaabi jirey magaalo xeebta Waqooyi-galbeed ee Hindiya ku taal, oo lahayd dekad weyn oo Ganacsiga carabta waqti dheer ku caan ahayd, sannadku markuu 711kii ayey carabtu qabsatay Magaalada Daybul, waxaana halkaas ka soo baxay degmooyin waaweyn oo Carab ah, laguna magacaabo Daybuuliyiin.

Daybuliyiintu, waxay markiiba xiriir Ganacsi ah la yeesheen dalalka Afrikada Bari, kaasoo lug weyn ku yeeshay faafinta diinta Islaamka iyo soo bixidda dhaqanka Sawaaxiliga. Daybuliyiintu degmooyin waaweyn bay ku yeesheen Afrikada Bari waxaana imaatinkoodii la samaysmay magaalo qarano waaweyn. Waqtigaas ay Daybuliyiintu soo galeen Afrikada Bari ayey magaalooyinka xeebaha Banaadir, kilwa, Beet, Laamuu, Xaruumo laga faafiyo diinta Islaamka ka sameeyeen.

Daybuliyiintu, waxay keeneen fikrado cusub oo ku saabsan Horuumarinta; waxaa gacan weyn ku siiyey dadyowgii Afrikaanka ahaa ee halkaas degganaa, sidaa awgeedna, waxa halkaa ka muuqata in imaatinkoodii aad loo soo dhaweeyey. Muddo aan dheereeyn kaddib dadyowgii Afrikaanka ahaa ee halkaa degganaa waxay badankoodii noydeen dadyow Islaam ah, oo isku wada inay ka tirsan yihiin umadda Carabta ah ee Islaamka ah, in kasta oo dhaqanka daybuliyiintu iyo kuwa Carabta ah guud ahaanba ay u dhex galeen dalalka Afrikada Bari, haddana may dhicin inay dadyowga Afrikaanka ahaa dhaqammadoodii iyo noloshoodii Afrikaanka ahayd ka taagan, waxaanay ka qaateen dhaqammadii shisheeyaha ee dibedda kaga imaanayey waxyaalihii horumarka u lahaa, waxaanay ku sii xoojiyeen kuwoodii.



## FAAFIDDII ISLAANKA EE AFRIKADA GALBEED.

Dawladihii Suudaanta waxay aad u xageysteen markii ay diinta Islaamku ku faaftay. Boqorro badan oo dalalka ka ka talin jirey ayaa nidaamydoodii ku dhisy diinta Islaamka. Guud ahaan, diinta Islaamku waxay Afrika iyo qaaradaha kale adduunka badankoodaba aad ugu faaftay markii ay dawladdii Carabtu kala daadatay ka dib.

Waxa lagu wadaa inay dalalka Afrikada waqooyi iyo dalalka Afrikada Galbeed ee Suudaantu xiriir weyn lahaayeen dawladaha Yurub ee badda dhexe diinta Islaamka ka hor, iyada oo taas ay muujinayaan shaxannada iyo fanka Giriigga iyo Roomaanka ee ku dhalan sawirrada Suudaanta. Xiriirkaas oo sida lagu wado xubintiisa ugu weyni ay ahayd geddis, iyo ganacsi, wuxuu aad u sii xoogeystay waqtiyadii dhalashada diinta Islaamka. Carab ganacsatooyin ahayd ayaa si daba joog ah u imaaneysay dalalka Suudaanta, kuwaas oo isla markaas ku dadaalay inay dadyowgaas ka dhaadhiciyaan Diinta Islaamka. Taasi waxay keentay in tallaabo-tallaabo dad badan oo islaam ahi ay ka abuurmaan dalalka Suudaanta.

Waxaa kale oo jirtey in carabta ganacsatooyinka ahaa ee imaanayey dalalka suudaanta aanay ka wada noqon dalka ee ay qaar badan oo iyaga ka mid ahi ay degi jireen. Magaalooyin badan oo ay ka mid ahayd Kumbi Saalax oo ahaan jirtay xaruunta Boqortooyadii Qaana, dhismahooda Carabtaas ayaa qayb weyn ka qaadatay. Taasina waxay door weyn ka cayaartay ciribta ay diinta Islaamka ku yeelatay dalalka Afrikada Galbeed.

Diinta Islaamku waxay si rasmi ahaana dalalka Afrikada galbeed ugu faaftay qarnigii 11aad, kaas oo urur ka mid ah urradii diinta Islaamka faafinteeda u soo ban baxay uu dagaal ku qaaday Boqortooyadii Suudaanta ugu horreysay ee Gaana. Dad Barbbaariyiin ah oo degganaa lamadegaanka Murutaaniya xaggiisa waqooyi galbeed, ayuu nin wadaad ahaa oo la odhan jiray Cabdalla Ibin Yaasir isu ururiyay, waxaana ay u soo ambabaxeen dallaka Suudaanta. Ibin Yaasiin iyo kuwii soo raacay waxay xaruun ka samaysteen jasiirad ku

taala webiga Nayjar, waxaana ay halkaas ka dhigteen meel laga faafiyo diinta Islaamka.

Ibin Yaasiin wuxuu halkaas isugu keenay ciidan xoog leh iyo wadaado badan oo u badnaa Barbaariyiin oo isku deyey inay diinta Islaamka xoog ku faafiyaan. Ururkaas oo la baxay Muraabidiinta wuxuu markii hore isku deyey in uu si nabad geliya ah u faafiyo diinta Islaamka wax badanna way kaga guuleysteen. Madax dhowr ah oo ka talinaayey dawladihii Suudaanta ee Afrikada galbeed ayaa si hawl yari ah isaga qaatay diintii Islaamka. Madaxdaas waxaa ka mid aha boqorradii dadyowga lagu magacaabi jiray Futa Tooro. Markaa ka dib, Muraabidiintu dagaal bay ku qaadeen dawladihii Suudaanta kuwo badan oo ka mid ahaa way qabsadeen. 1056 dii, Muraabidiintu waxay qabsadeen magaalada la oran jirey Sijilmaasa oo ahayd xaruun ka mid ah xaruumaha ganacsiga dahabka ee u dhexesey dalalka Suudaanta iyo Afrikada Waqooyi. Muddo yar ka dib waxay qabsadeen Marooko oo dhan dabadeedna waxay u tallaabeen Yurub.

Isla waqtigaas ayey qayb ka mid ah ciidammada muraabidiinta oo uu hoggaaminayey nin la orain jirey Abuu bakar uu weerar ku qaaday Qaana. 1054kii, Abuu Bakar, wuxuu qabsaday magaalo ka mid ah magaalooyinkii waaweynaa ee Qaana oo la oran jiray Awdagost. 1076kii Abuu Bakar iyo ciidammadiisii waxay qabsadeen magaalomadaxdii Qaana.

Dalka Suudaanta waxay diinta Islaamku aad ugu xogeystay markii Boqorro dawladaha Suudaanta ka mid ahi muslin noqdeen Boqorkii ugu horreeyay boqorradii Suudaanta wuxuu ahaa Boqorka la oron jirey Sundiyaata Cali (1230 - 1255). Suundiyaata wuxuu xukunka ka xoogey nin la oran jirey Sumunguuru oo ay dagaal isaka hor yimaadeen. Markii uu dagaalkaa ku guuleystey ka dib, ayuu Suundiyaata dhisay Boqortooyada Maali ee waqtigeedii ugu xoogga weynayd dawladdihii Suudaanta.

Xoogeynta diinta Islaamka ee dalalka Suudaanta waxa door weyn ka qaatay Boqorka la oran jirey Mansa Muusa (1312 - 1337). 1324kii ayuu Mansa Muusa qabtay xajka isaga oo Masar sii maraaya. Safarka Mansa Muusa ee Masar iyo Gacanka Carabta waxa uu reebay xasuus dheer. Markii uu dalkiisa ka tegeyey waxa uu sii qaatay dahab aad u badan iyo waxyaalo kale oo qiimo leh oo uu hadiyad ugu sii qaaday Boqorrada dalalka uu u safraayey.

Dahabka uu sii qaaday fara badnaantiisii awgeed, waxaa la sheegay in uu qiimo-jab ku dhacay dahabkii iyo lacagtii dalka Masar.

Markii uu Mansa Muusa soo noqday, waxa uu dalka Masar ka soo kaxaytsay qoonyahanno badan oo aqoon dheer u lahaa diinta Islaamka, dhismaha iyo waxyaalo kale oo bdan. Aqoonyahannadaas waxa ka mid ahaa nin la oran jirey Asaaxili. Asaaxili waxa uu dhismahooda iyo qorshayntoodo lahaa Masaajiddada waaweyn ee laga dhisay Gaw iyo Timbuktu iyo qalcad weyn oo loo dhisay Boqor Mansa Muusa.

Boqortooyinkii xoogga weyn lahaa ee Maali ka danbeeyey iyana waxaa ka soo baxay Boqorro badan oo xoogeynta diinta Islaamka ee dalalka Suudaanta qayb ka qaatay. Gaar ahaan Boqorrada ku dadaalay xoogaynta diinta Islaamka waxay ka soo bexeen boqortooyadii Songhay. Waxa xoogeynta diinta Islaamka heerka ugu weynaa ka cayaaray Boqorka la oran jirey Askiya Maxamed (1493-1538) oo waqtiyadii danbe ku magac dheeraaday Askiyihii weynaa.

Intii Askiya Maxamed ka horreysey Boqorrada Songhay oo intii Boqortooyadu ay xoogeysatay dhammaantood muslin ahaa, badanaaba way isku wadi jireen dadyowga diinta Islaamka haysta iyo kuwa diinihii hore ee dadyowga Suudaanta ay lahaan jireen haystaba. Dadyowga Suudaanta ee diinaha kala-duwan haystay marnaba la may kulmin ciriiri kaga yimaada xagga diinta Islaamka. Askiya Maxamed wuu ka leexday taas, waxaana uu xukunkiisii saldhig uga dhigay falsafadda diinta Islaamka.

Askiya Maxamed waxaa uu u safray Maka 1494, si uu u soo xajiyo, waxaa halkaas uu ku maqnaa muddo laba sannadood ah 1494-1497kii. Halkaas wuxuu kula kulmay Shariifkii

Maka ee diinta Islaamka u madaxa ahaa waxaana ay ka wada xaajoodeen xoogeynta diinta Islaamka iyo horumarinteeda Afrikada galbeed. Markii Askiya uu noqonaayey waxaa uu Shariifka Maka ku magacaabay khaliif waxaana uu wakiil uga dhigtay xoogeynta iyo faafinta diinta Islaamka ee Afrikada galbeed.

Markii uu dalkiisii ku soo laabtay 1497kii, waxa uu aad u sii xoogeeyey xeerka diinta Islaamka ee Boqortooyada Songhay.

Boqortooyadii Kaynem-Boornu ee Soonghay ka danbeyscy, iyana sidii Boqortooyadii ka horreysey oo kale, waxa soo baxay Boqoro badan oo xukunkooda saldhig uga dhigay xeer ka diinta Islaamka. Boqorradaas waxaa ka mid ahaa May Idiris oo xukunka haystay (1507-1529); May Maxamed oo xukunka haystay 1529-1544; May Cabdalla oo xukunka haystay 1566-1573, May Idiris Alooma oo xukuka haystay 1580-1617; iyo kuwo kale oo badan.

Xoogeynta diinta Islaamku waxa heerka ugu weynaa ka cayaaray Boqorka la oran jirey May Idiris Alooma. Dorka Idiris Alooma uu ka cayaaray hirgelinta xeerka diinta Islaamka wuxuu ku dhowaa kii Askiyihii Soongahay.

Xawsuhu, sida lagu wado waqti danbe ayey qaateen diinta Islaamka. In kasta oo dhulkood iyo magaalo qarannadoodaba ay muddo dheer xidhiidh la lahaayeen dalalka Islaamka haddana muddo badan cirib weyn diinta Islaamka kumay yeelan. Hase yeeshee, ugu danbeystii magaalo qarannadii Xawsuhu, waxay noqdeen kuwo ka siman xoogeynta diinta Islaamka ee Afrikada galbeed.


Ku faafidda diinta Islaamka ee dalalka Suudaanta waxay keentay horumar weyn marka laga eego xagga xukunka dawladnimada iyo midnimada xeerka. Intii diinta Islaamka ka horreysey, dadyowga Suudaantu waxay u kala baxeen diino badan. In kasta oo ay diino badan kala haysteen, haddana badankoodu Ilaahay ayey wada aaminsanaayeen, jiristiisana iyo awooddiisana way aqoonsanaayeen. Hase yeeshee, taasi u may suuro gelinayn inay diin qura isugu yimaadaan. Markii dadyow-



gaSuudaanta badankoodii ay diinta Islaamka qaateen, waxa ka dhex dhashay midnimo, waxaana taasi ay awood u siisay in ay yeeshaan dawlado waaweyn oo xoog leh.

Inkasta oo Gaana ay ahayd dawladda weyn talis Muslin ahna aanay ku lug yeelan, haddana u may dhigmayn Boqortooyinkii Muslinka ahaa ee Songhay iyo Kaynem-Buurnu. Diintii Islaamka ee ku faaftay Afrikada Galbeed waxaa ay aad u sii wanaajisay xiriirkii dalalkaasi ay Afrikada Waqooyi la lahaayeen. Sidaa awgeed, waxa aad u sii ballaadhay xidhiidh ganacsiga iyo dhaqanka ee labadooda ka dhexeeyey. Taasina waxay wax weyn ka tartay horumarka dhaqaalaha ee labada dhinacba.

## TAARIIKHDA BARIGA DHEXE LAGA BILLAABO AASAASKII IMBERADOORIYADA CUSMAANIYIINTA IYO WIXII KA DAMBEEYEY IMBERADOORIYADII SELJUUKIYIINTA



Muddo dheer buu taliska dawladda Carabtu ku socoonaayey midnimo ay ka dhaxleen Diinta Islaamka mudadaas dalalka Carabta iyo kuwo kale oo badn oo Diinta Islaamka qaatayba, waxa ka dhexeeyey xiriir weyn oo xoojinayey awoodda Diinta Islaamka iyo midnimada dawladaha Carabta. Waxyaalaha ka dhexeeyay waxa ugu muhiimsanaa dawladnimada xukunka iyo Faafinta Diinta Islaamka.

Nasiib darro, waxa dhacday, in midnimadii dawladda Carabta iyo iskaashiga dadyowga Muslimiintu ay kala furfurmeen; kaddib, markii ay iska hor-imaadyo ka dhex dhaceen dadkii Carabta. Iska hor-imaadkaa waxa saldhig u ahaa, is-afgaranwaayo ka yimid xagga xukunka iyo madaxtooyada dawladda Islaamka ee ay Carabtu hoggaaminaysay. H l-kaas, waxa ku baaba'ay midnimadii iyo isku xidhnaantii Siyaasadda ee dalalka Carabta.

Taasi waxay keentay in ay Bariga Dhexe ka soo baxday dawlad kale oo weyn oo la wareegta xooggii Bariga.

Waxayna dawladdaasi caan ku noqotay Imberadoori yadii Turkiga.

Markii hore, Turkiyiintu waxay ahaayeen dad kala filiqsan oo ku noolaa dalalka Aasiya una badnaa Turkistaan iyo Mongooliya. Turkiyiintu, muddo dheer, waxay daldool ku imaanayeen Aasiyada hoose, muddo kaddibna, waxay noqdeen dad halkaas aad ugu soo batay.

Dadyowga Carabtu, waxay qabeen in Turkiyiintu daldoorsiga ku imaanaysay dalalka Islaamka ay yihiin dad Calooshooda u shaqaystayaalah, sidaa awgeedna wey soo dhoweyn jireen, si ay ugu dagaallamaan Carabta iyo diinta Islaamka. Isla markaa laga billaabo qarnigii 10aad Imberadooriyada ay lahaayeen dadka lagu magacaabo Mangooliyiinta, ayaa cadaadis xoog le' ila kacay Turkiyiinta, gaar ahaan Turkiyiinta loo yaqaa keer Saljuuk, waxayna badankoodii u soo qaxeen Bariga Dhexe. Sidaa awgeedna Turkiyiintu aad bay ugu soo bateen Bariga Dhexe.

In kasta oo Turkiyiintu aanay Carab ahayn, haddana, markii ay muddo dheer dhex joogeen dadka Carabta iyo Is-



laamka, waxay noqdeen dad ay ku tallaalmeen caadooyinkii iyo dhaqammadii iyo Islaamkuba, sidaa awgeedna, waxa baaba'day fikraddii ahayd inay Turkiyiintu yihiin dad calooshoodo u shaqaystayaal ah, waxaana billaabatay in loola dhaqmo sidii dadyowga kale ee muslimiinta ahaa ee ay Dawladda Carabtu xukumaysey. Markii ay Turkiyiintu halkaas aad ugu soo bateen, gaar ahaanna, Turkiyiinta lagu ma gacaabo Saljuukiyiinta ayaa waxay billaabeen inay is bahaystaan, waxaana u suuro gashay inay noqdaan xoog weyn oo siyaasi ah. Ugu dambeyntii, Seljuukiyiintu waxay samaysteen dawlad, taas oo ay awood ugu yeelatay inay gacanta ku dhigto xoogga Bariga Dhexe, Taliskii Diinta Islaamka iyo faafinteediina la wareegto.

Soo-bixidda Taliska Seljuukiyiinta waxaa hawl yareeyey kala daadsanaantii dawladaha iyo dadka Carabta, markii ugu horreysayba Seljuukiyiintu waxay ku dhaqaaqeen inaanay xikundooda hoos keeneen dadyowga Carabta. 1055kii ayey Seljuukiyiintu weerar ku soo qaadeen, Baqdaad, oo ka mid ahyad dawladaha iyo xarumaha Islaamka ee waaweyn, waaney qabsadeen. Marka waqtigaa laga billaabo, dawladdii Seljuukiyiinau waxay noqotay Imberaadooriyad weyn. xooggii iyo faafintii diinta Islaamkana iyagaa la wareegay.

Xukunka Imberadooriyada Seljuukiyiintu aad buu u ballaartay, wuxuuna ku baahay dalalka Aasiya badankooda iyo dawladiihii Badda Dhexe.

Imberadooriyada Seljuukiyiinta oo waqtigeedii ahayd Hoggaamiyaha Diinta Islaamka waxay jihaadyo iskaga horyimaadeen hoggaamiyayaashii diinta Masiixiga, siiba Imberadooriyadii Roomanka iyo Giriigga. Sababta ugu weynayd ee jihaadyadaa keentay waxay ahayd, iyada oo dawladaha diinta Masiixiga ku dhaqaamaayey doonayeen inay Imberadooriyada Seljuukiyiinta ka dhacaan Jerusalem (Beytal Quddus) oo ahyd xarunta Macatabka Diinta masiixiga ah iyo inay burburiyaan xoogga diinta Islaamka. Jihaadyadaas oo soconayey muddo 126 sannadood ah (1095-1221), dawladaha Yurubna, badankoodu ay isu gaashaanbuuraysteen, waxa ku guulaystay Imberadooriyadii Seljuukiyiinta, taasina

waxay caddayneysaa xoogga iyo nidaamka ay lahayd Imberadooriyadaas Ssljuukiyiinta.

In kasta oo Imberadooriyadii Seljuukiyiinta ay xoog weyn yeelatay, aadna u ballaaratay, haddana u may suuro gelin inay waarto, waayo, waxa iyana ka dhex dhashay iska horimaadyo la mid ah kuwii Carabta. Imberadooriyadii Seljuukiyiintu way kala daadatay waxayna Qarnigii 13aad bartamihiisii u kala baxday dhowr dawladood oo madax-bannaan.

## SOO BIXIDDII IMBERADOORIYADA CUSMAANIYIINTA

kala baxa Imberadooriyadii Seljuukiyiinta, wuxuu suuro geliyey in uu xoog saddexaad oo Islaam ahi ka dhasho Bariga Dhexe, Markii ay caddaatay, in ay awooddii Seljuukiyiintu aad u yaraatay, ayey niman kale oo iyana Turkiyiin ahaa Hunguryeeyeen inay Afgembiyaan taliska Seljuukiyiinta, halkaasna kula wareegaan taliska Bariga Dhexe, iyo Xukunka iyo faafinta Diinta Islaamka. Dadkaas Turkiyiinta ahaa, taasi wey u suuro gashay, waxaana ay sameeyeen Imberadooriyad aad u weyn oo la magac baxday Imberadooriyadii Cusmaaniyiinta.

Turkiyiintaasi Imberadooriyada Cusmaaniyiinta abuuray, waxay ahaayeen dad reer Guuraa ah, oo iyana ka soo baxay Cadaadiskii Imberadooriyadii Mongooliyiinta, waxaanay isugu soo uruureen Beershiya iyo Gobolka Anatooliya oo ka mid ahaa Imberadooriyada Seljuukiyiinta. koox ka mid ah Turkiyiinta halkaa imaanaysay uu hoggaaminayey nin la oran jirey Ertoghorul, ayaa Gobolkaa Anatooliya ka aasaasay dawlad yar oo ay leeyihiin. Ertoghorul, wuxuu ku dadaalay in uu dawladdii aad u ballaariyo oo marka ugu horreysaba Turkiyiinta oo dhan xukunkiisa hoos keeno. Taasi wey u hawl yaraatay, dawladdiisiina si degdeg ah bay u xoogeysatay.

Dawladda Turkuyiinta ee uu aasaasay Ertoghorul, waxaa aad u sii ballaadhiyey Wiil uu dhalay oo la oran jirey Cusmaan. Iyada oo lagu maamuusayo heerka sare ee uu Cusmaan gaadhsiiyey dawladdii uu aabihii aasaasay awgeed,



ayey Turkiyiintii Imberadooriyadii u bixiyeen «Imberadooriyadii Cusmaan.»

Cismaan, wuxuu abuuray dawlad urur nidaamsan leh dhidibo xoog waaweynna wuu u qotomiyey. Turkiyiintii iyo dadyowgii kale ee Muslimiinta ahaa, wuxuu ku guubaabiyey inay meel uga soo wada jeestaan cadowga diinta Islaamka oo uu ku tilmaamay diinta Masiixiga iyo dadyowga rumeysan.

Si ay Imbaradooriyadoodda u ballaadhiyaan, Cusmaaniyiintu, waxay markii hore isku dayeen inay dalalka Aasiyada yar oo dhan Imberadooriyadooda hoos keenaan. 1129kii, oo ahayd waqtiyadii uu Cusmaan xukunka la wareegay, Cusmaaniyiintii waxay qabsadeen Dawladdii Seljuukiyiinta. 1340kii dalalka Aasiyada yar oo dhammi waxay hoos yimaadeen Suldaantooyada Cusmaaniyiinta.

Markii ay Cusmaaniynta u gacan galeen dalalka Aasiyada yar oo dhammi, waxa muuqatay in uu ka soo baxay xoogkii Carabta iyo Seljuukiyiintaba ka weyn. Cusmaaniyiinta waxaa iyana u muuqatay in ay abuurai karaan imberadoohiyad dunida gees walba ugu fidda.

Qorshaynta cusub ee Imbaradooriyadii Cusmaaniyiinta waxay noqotay inay weerar ku qaaddo dalal qaaraddda Yurub ka mid ah, waaney ku liibaaneen. 1354kii, ayey markii u horreysey u tallaabeen dalalka Yurub, waqtigaas oo ay qabsadeen Jaaliboli, waxaanay halkaa ka dhisteen qalcad aad u caan ah oo lagu magacaabo «Qalcadda Jaalibooli». Toddobaatan dadkii iyo siddeetanaadkii qarnigii 14aad Cusmaaniyiintu waxay qaybsadeen Bulgaariya iyo Seerbiya.

Markii Cusmaaniyiintu ay ay qabsadeen labadaa dal ee reer urub ka dib, in muddo ah bay ka yar hakadeen weerarradii qaaradda Yurub. Sababtuna waxay ahayd, iyada oo Imberadooriyada ay lahaayeen dadka lagu magacaabo Mongooliyiintu oo uu hoggaaminaayey ninka la oran jirey Timuur. 1402kii weerar ku soo qaaday magaalada Ankara oo ka mid ahayd magaalooyinka Imberadooriyada Cusmaaniyiinta. Hase yeeshee, Cusmaaniyiintu si dhakhso ah bay uga soo kabteen khasaarihii Mongooliyiinta, waxaanay hor ka wadeen

weerarradii qaaradda Yurub. 29 May, 1453kii, ayey Ciidamada Cusmaanniyiintu oo uu hoggaaminaayey Suldaan Maxamed kii 1aad, qabsadeen magaalo madaxdii Imberadooriyadda lagu magacaabi jirey Bisnatiin (ama Imberadooriyadda Roomanka ee Bari) (Koonstantinaboli). Halkaasna, waxaa ugu gacan gashay jaratada Balkaa, oo dhan. 1481kiina waxay u tallaabeen Rumaaniya iyo Kiriimiya.

Marka laga bilaabo 1512kii, oo ahayd waqtigii Sudaan Saalimkii 1aad u la wareegay xukunkii Imbaradooriyada Cusmaaniyiinta, waxay xukunkeela hoos keentay dalal ka mid ah dalalka Carabta ee Aasiya iyo Afrika. 1514kii, Cusmaaniintu waxay qabsadeen Siiriya, 1516 kiina Baqdaad; 1517na waxay u soo tallaabeen Afrika, waxaanay qabsadeen Masar. Saalimka 1aad, markii dalalkaas Carabta uu qabsaday, wuxuu isku magacaabaq, khaliif, waxaanu la wareegay xilkii ilaalinta Maka iyo Madiina.

Dagaalladii iyo weerarradii Cusmaaniyiinta ee Yurub waxaa soo cusbooneysiiyey qabsashadii Aasiya iyo Afrikana waxaa sii ballaariyey Suldaan Suleemaankii 1aad, oo xukunka hayey 1520 - 1566. Waqtigaas, waxay Cusmaaniyiintu dagaallo waaweyn dhexmareen Talis dhaxaltooyinka Jarmalka iyo Faransiiska. ee lagu kala magacaabi jirey Haabsbuurg iyo Faloysiiyiinta Faransiiska. Dagaalladaas, waxaa ku guuleystey Imbaradooriyadii Cusmaaniyiinta waxaanay qabsatay dhulal badan oo ay Talis dhaxaltooyinkaasi lahaayeen. 1521kii usmaaniyiinta waxay qabsadeen Belgaraad, 1522na, dhulbadeedka Roodis, 1526kiina waxay qabsadeen Hangeeriya oo ay ku jirto caasimaddoodii la oran jirey Budda. 29kii Sibtember 1529kii, ciidammada Turkigu waxay hareeHreeyeen, Fiyeenna, Magaalomadaxda Usteeriya. Hase yeeshee, gaadiidkii iyo isgaarsiintii oo ka xumaaday awgeed laba toddobaad ka dib ayey ka noqdeen.

Waqtiyadaas Cismaaniyiintu waxay Imbaradooriyadaad ugu ballaadhiyeen dhinacyada Afrika iyo Aasiya, qarnigii 16aad dhammaadkiisiina waxaa gacanta ugu jirey Ciraaq, Suuriya, Falastiin, Gacanka Carabta geestiisa galbeed oo dhan, Masar, Liibiya Tuunis, iyo Aljeer. Ibmaradooriyadii Cusmaaniyiintu, sidaas waxay ku noqotay Imbaradoodiyad aad dunida ugu ballaaran, xukunkeediina hoos keentay dalal badan oo ka tirsan qaaradaha Aasiya, Yurub iyo Afrika.



## LIICIDDII IMBAR DOORIYADII CUSMAANIYIINTA IYO CIRIB REEBKA GALBEEDKA

In kasta oo Ibmaradooriyaddii Cusmaaniyiintu ay noqotay mid aad u ballaaran una xoog weyn, haddana qarnigii 16aad dhammaadkiisii iyo wixii ka dambeeyey, awooddii ay dunida ku lahayd hoos ayey si isdabajoog ah ugu soo dhacaysey aayaheediina wuxuu noqday inay ugu dambayntii baa-'a'do.

Qarnigii 17aad dhammaandkiisii Imbaradooriyada Cusmaaniyiintu waxa dagaallo ay iskaga hor yimaadeen Usteriya, Ruushka, Boloshka iyo Feneesiya. Dagaaladaasi waxay ku dhamaadeen heshiis lagu gaadhay magaalada la yiraahdo varaloofiskii (Dalka Boolishka) 1699kii [illegible]aas, go'aannadiisii waxay noqdeen in dalal ka mid ah [illegible]adooriyadii Cusmaaniyiinta ay la wareegeen dowladahaas yurub. 1718kii, laba gobol oo ka mid ahaa gobollada imberadooriyada Cusmaaniyiinta ee yurub Banaat (Hangeeriyaa) iyo Seerbiya ayey 1774kii oo uu dhammaaday dagaal dhex maray Ruushka iyo Turkiga, afar gobol oo dalalka Aasiya ee usmaaniyiinta ka mid ahaa [illegible]yaa Ruushka la wareegay, laba gobolna (kubaan iyo karin) way ka madax bannaanaadeen. 1792kii wuxuu Ruushka Cusmaaniyiinta kala wareegay Badda madaw, geesteeda waqooyi oo hodan, 1821kii Dawladda Giriigga oo ka mid ahayd dalalka Cusmaaniyiinta ayaa ku dhawaaqday inay ka madax bannaanaatay Imberadooriyada Cusmaaniyiinta.

Ingariiska iyo Faransiiska, iyagana waxay qarnigii 18aad iyo wixii ka dambeyey bilaabeen inay ka faa'iideystaan taagdarreenta Cusmaaniyiinta.

Danaha dawladdaha Yurub ee Imbaradooriyadii Cusmaaniyiinta, wuxuu xooggoodu bilaabmay qarnigii 17aad,

waqtigaas oo ah markii ay dawladaha Yurub aad ugu muuqatay taagdarrada Cusmaaniyiinta. In kasta oo waqtigaas dawladaha Yurub ay dhul badan kala wareegeen haddana, intii qarnigii 18aad ka horreysey, danaha Yurub ee Imbaradooriyada Cusmaaniyiintu, waxay ku koobnaayeen, sidii ay dalalkii Yurub ee Cusmaaniyiintu markii hore ka qabsadeen u gala soo noqon lahaayeen. Qaringii 18aad dhammaadkiisii iyo wixii ka dambeeyey, waxay arrimi dawladdaha Yurub ka taagnayd sidii Imbaradooriyada Cusmaaniyiinta iyo dalalka ay yukunto labadaba gacanta ay ugu dhigi lahaayeen. Taasina way u meel martay, waxaana ugu dambeystii dhacday in Imbaradooriyadii weynayd ee Cusmaaniyiintu u kala qaybsanto dawlado yar yar oo ku jira gacmaha gumeystayaasha Yurub.

Fara gelinta dawladaha Yurub ee dalalka Imbaradooriyada Cusmaaniyiinta ka tirsanaa, gaar ahaanna dalalka Carabta ee frikada iyo Aasiya, waxay ka bilaabeen dagaalladii Nabaliyoon uu ku qaaday Masar 1798. Duullaankii Masar Nabaliyoon, wuxuu ku dhammaday inay ciidammada Ingiriiska ee Badda oo uu hoggaaninaayey ninka la oran jirey Nelson ay ku jebiyeen Aleksanderiya, Nabaliyoonna uu halkaa kaga noqday Masar. Hase yeeshee, weerarkii Nabaliyoon wuxuu albaabka u furay qaybsigii iyo gumeysigii dalalka Imbaradooriyada Cusmaaniyiinta ee Aasiya iyo Afrika waqooyi.

Intii dagaalkii 1aad ka horreysey, dwaladah Yurubta galbeed ee gumeysi raadiska ahaa waxaa u gacan galay dalalka Afrikada waqooyi oo dhan ee ka tirsan Imbaradooriyada Cusmaaniyiinta. 1830kii, ciidammada.Faransiisku waxay qabsadeen Aljeer. 1881kii, Tuunis ayaa iyana u gacan gashay gumeysiga Faransiiska. 1912kii ciidammada Faransiisku waxay qabsadeen dalka Marooko. Dawladda Ingiriisku, iyana tartanka gumeysiga ee dalalka Afrikada waqooyi ee ka tirsanaa Imbaradooriyada Cusmaaniyiinta waxay ka heshay Masar iyo Suudaan iyo Soomaaliya geesteeda waqooyi oo Taliska Masar ku xirnaan jirey. 1882 ayey ciidammada Ingiriisku qabsadeen dalalka Masar. Dawladda saddexaad ee Yurubta galbeed ee iyana qayb ka heshay dalalkii Imbaradooriyada Cusmaaniyiinta, waxay ahayd dawladda Talyaaniga. Dawladda Talyaayaanigu waqti dambe ayey ku baraarugtay siyaasadda gumeysiga, taas oo dawladdaha Yurub ee gumeystayaasha ahaa ay waqtiyo badan ku guuuuleysteen. Sida runta ah, dawladda Talyaanigu iyadaa gumeysi ku jirtay ilaa Toddobaatanaadkii Qarnigii 19aad. Daraasadda iyo jaangooyada siyaasadda gumeysiga ee Talyaanigu way ka horreyeen iyada madaxbanaanaanteedii, hase yeeshee, hirgelinteedu waxay u suuro gashay Qarnigii 19aad dhammaadkiisii iyo Qarnigii 20aad qaybihiisii hore. 1911kii ayey dawladda Talyaanigu qabsatay dalka Liibiya. Sida halkaa ka muuqata dalalkii Afrikada waqooyi ee ka tirsanaa Imberadooriyada Cusmaaniyiinta dhammaantood, waxay u gacan galeen gumeystayaasha Yurubta galbeed.



Sababaha ugu waaweyn ee ay Imberdooriyadii Cusmaaniyiintu ku aayo beeshay waxay ahayd iyada oo ka fakhriday xagga siyaasadda dibedda iyo tan gudahaba.

Siyaasadda gudaha ee Imberadooriyada Cusmaaniyiintu waxay ahayd mid ku dhisan kala sarrayn, musuqmaasuq, iyo caddaalad xumo. Dalalka ay haysatay dhammaantood dabaqadda ugu sarraysaa waxay ka dhisnaan jirtay dadka Turkiyiinta. Dhulku wuxuu u kala bixi jirey saddax qaybood: Qaybta koowaad waxaa lagu magacaabi jirey «Mamlakta» waxaana dhulkaa lagu tirin jiray in uu yahay dhulka suldaanka.

Dhulkaasi wuxuu ahaan jirey qaybta waddan kastaba ugu habboon beerofalashada marka xag kastaba laga eego. Dhulka, suldaanka waxaa meel kasta maamuli jirey dad Turkiyiinta ah. Qaybta labaad waxaa lagu magacaabi jiray «W - QAF», waxuunu lahaan jiray Masaajidada. Iyaan waxa maamaali jirey dadka Diinta maamula ee Turkiyiinta ahaa. Qaybta saddexaad waxa lagu magacaabi jirey (Mulk) waxaana lahaan jiray dhulgoosatada. Qayb yar oo afraad oo soo raaci jirte, waxay ahaan jirtey qayb ka dhexeysa iskaashatcoyin yar yar oo koox-koox isu raacsan Isla markaa waxaa ugu cashuur badnaan jirey qaybta iskaashatooyinka. Mamlakada iyo Waqafka iyaga cashuur lagama qaadi jirin. Qaybta Mulk ee dhulgoosatooyinku, ay lahaan jireen, cashuurta laga qaadi jirey may badnayn. Weliba waxaa loo kala saari jirey laba qaybood : Kuwo

Turkiyiintu ya leeyihiin iyo kuwo dadyowga kale ay leeyihiin. Kuwa dhulgoosatooyinka Turkigu ay lahaayeen cashuur yar baa laga qaadi jirey. Dhulka Marlakada waxaa hoos bixi jirey, dhul lagu magacaabi jirey «Khaas iyo dhulka Ciidammada» Dhulka khaaska ah waxaa loo fali jirey Suldaanka iyo qoyskiisa ama wasiirrada dawladda. Dhulka ciidammada wuxuu ahaan jirey dhul ay ciidammadu falan jireen wixii ka soo baxana ciidammada ku noolaan jirey. Dhulka ciidammadu wuxuu ahaa dhul aad wax tar ugu ahaa dhaqaalaha dawladda Turkiga waayo, ciidammo ay tiradoodu ka badnayd laba boqol oo kun ayaa cuudkooda la soo bixi jirey.

Xagga tacliinta iyofarsamada, iyagana Imbaradooriyadii usmaaniyiintu aad bay dib ugu hadhay. Qarniyo badan bay aad ugu horreysey dunida xagga xoogga iyo samaynta hubka qalabka iyo sancada ciidammada. Xagga sancada dharka iyo alaabooyinka kale ee l istimaalo iyana aad bay ugaga horreysey dunida kale oo dhan. Xagga cilmiga beerofalashada iyo abuuriddaba aad bay Imbaradooriyadii Cusmaaniyiintu hore ugu martay.

Marka laga bilaabo Qarnigii 16aad iyo wixii ka dambeeyey nidaamyadii beerofalashada cashuurtooda, sancada iyo ganacsiguba way isbeddeleen. Isbeddelkaa waxaa u sabab ahaa, iyada oo ay bulshadii Imbaradooriyada ku bilaabmeen nidaamdarro iyo caddaalad xumo. Waxaa dhacday inay dhulgoostooyinkii dhulka waaweyn lahaa oo markii horeba canshuur yar laga qaadi jirey ay diideen ama musuqmaasuq canshuurtii ay dawladda siin jireen.

Muddo ka dib waxa isku xirmay dhulgoosatooyinka iyo Ciidammada, waxaana ay bilaabeen inay beeraha ay beeralayada yaryari lahaayeen cashuurta iyagu ka qaataan. Xagga ganacsiga waxaa dhacday inay soo bexeen ururro shufto ahaa oo ka qawlaysta badaha iyo waddooyinka lagu ganacsado. Waddanka gudihiisa ha ahaato ama ka dibeddaba ha ahaatee, kuwaas ayaa curyaamiyey ganacsigii imbardooriyada. Xagga sancada, iyana waxay ku luntay in uu heerkii aqoonta iyo farsamobarashadu uu hoos u dhaco, halkaasna ay horumarintii sancadu ku cirib beeshay.



Fadqallaaladna ku dhacay nidaamkii imbiridooriyadii Cusmaaniyiinta, waxaa ugu darrayd mid ka timid xagga ciidamada qalabka sida oo lagu magacaabi jirey «Janaasiirta». janaasiirtu waxay ahaayeen niman dhalinyaradoodii ay dawladdu ka qaaday xaasaskoodii oo u badnaa caruurtii dadyowga haysta diinta Masiixiga kuna barbaarisay diinta Islaamka.

Uga dambeyntii waxay noqdeen xoog isku xiran kana awood weynaaday Taliska Imbiridooriyada. janaasiirtu si isdaba joog ah ayey u baabi'iyeen nidaamyadii ay ciidammada Turkiga ku dhisnaan jireen oo idil. Cashuurtii dawladda ee gobollada kala duwan laga soo ururin jirey, waxaa dhacday inay badnkooda iyagu iska maamusheen. Cashuurta, iyaga oo aan cidna amar uga haysan ayey markay doonaan kordhin jireen markay doonaanna way dhimi jireen. janaasiiriintu waxay mashaqooyin badan ka dhex dhigeen gobolladii imberadooriyadda, taas oo ahayd inay qabanqaabiyaan isku duul gobollada ka dhaca.

In kasta oo Suldaanno badani ay isku dayeen inay wax ka qabtaan, fadqalalada ay wadeen jaaansiirtu, haddana waxba uga mey suuro gelin, waayo janaasiirta, waxay isku xidhnaayeen Maxkamadaha, Fuliyayaasha sharciga oo dil, ganacsatada iyo dhulgoosatooyinka. Habka Imberadooriyadaas baaba' buu dhaxalsiiyey, dadka ka talin jirey imberadooriyadda Cusmaaniyiinta, waxay ahaayeen Turki. Taasi waxay keentay inay dadyowgii kale oo dhan kalsoonidii ka dhimato, sidaa awgeedna qofkii aan Turki ahyniba uu isku dayo in uu siyaasadda, maamulka iyo dhaqaalaha dalkaba lugta jiido. Dhulgoosatooyinka Turkiga oo uu Suldaanku ku jiro, ayaa awoodda dalka oo dhan gacanta ku haystay.

Dawladda, suldaanka ayaa madax u ahaa, maamulka ciidammada iyo Bulshada kaleba isaga ayaa go'aankeeda lahaa.

Marka laga bilaabo qarnigii 16aad iyo wixii ka dambeeyey suldaanku wuxuu awoodda hore ku darsaday madaxnimada diinta Islaamka. suldaanka, xagga awoodda waxa soo raacayey wuxuu ahaan jirey «Sweykhul-Islaamka». Kaasina wuxuu gacanta ku hayey sharciga, garsoorka iyo tacliinta. Dawladda dhexe waxa lagu magacaabi jirey Baab-Al-Cali waxaana guddoomiye ka ahaan jirey Ciidamada qalabka sida. Saraakii-

sha ciidammadu, waxay u qabeen in aanay la'aantood fulin karin siyaasadda Imberadooriyadu, sidaa awgeed, badanaaba waxaa iska hor imaan jirey, iyaga iyo dawladda dhexe.

Waxyaalahaas oo dhami waxay hawl yareeyeen inay imeradooriyadii Cusmaaniyiinta ee awoodda weyn lahayd ay noos u noqoto, taliskeedana fara geliyeen dawladaha Yurub.

Siyaasadda gudaha ee imberadooriyadii Cusmaaniyiinta waxaa ka foolxumayd siyaasaddeeda dibadda ee ay kula dhaqmaysay dalalka shisheeyaha ahaa, gaar ahaanna dawladaha iyo dadyowga Yurub. Dawladaha Yurub oo xagga dhaqaalaha iyo sancadaba aad uga heer sareeyay, Imberadooriyada Cusmaaniyiinta waxay suuro gelisay inay dalkeeda soo dhex galaan, halkaasna kaga faa'iidaystaan taagdarrada Imberadooriyadda.

Ilaa Qarnigii 15aad dalka Turkiga waxaa jirey xeer dhowraya dadyowga shisheeyaha ee la ganacsan jirey ama siyaabo kale u imaanayey dalalka imberadooriyada Turkiga Waxyaalaha uu xeerkaasi oggolaa waxaa ka mid ahaa in qofka shisheeyaha ah ee imaanaya dalka Turkiga aan cashuur laga qaadin. 1536kii, dawladda Turkiga iyo Dawladda Faransiiska waxaa dhexmaray heshiis ganacsi, kaas oo oggolaanaayey inay dalka Imberadooriyada Turkiga ganacsatada Faransiisku ay aad uga faa'iidaystaan. Heshiiskaa wuxuu jideeyey in ganacsatada Faransiiska alaabta ay keenayso ama ka qaadayso dhulka Imberadooriyada Cusmaaniyiinta aanay Cashuur lahayn. Taasi waxay dhalisay in waxyaalihii dalka Turkiga laga soo saari jirey badankoodii beddelaan waxyaalihii dibedda uga keenayey, sidaa awgeedna maamulka dhaqaalihii Turkigu dawladaha Yurubta galbeed gacanta u galay. Qarnigii 19aad bartamahiisii xubnaha ugu waaweyn ee dhaqaalaha Imberadooriyadii Turkiga waxaa gacanta ku hayey shirkado shisheeye ah oo u badnaa Yurubta Galbeed. Xubnaha ay sharikadahaasi maamulkooda haysteen waxaa ka mid ahaa:

Bankiyada; Tareenada, ballaarinta iyo safaynta beeraha, dhismaha, iyo qalabkooda iyo waxyaalo kale oo badan. Isla markaa ganacsiga laamahaas oo dhan waxaa gacanta ku dhigay ganacsatooyinka reer Yurub.



Markii ay dawladaha Yurub gacanta ku dhigeen dhaqaalihii Imberadooriyadii Cusmaaniyiinta waxaa u hawl yaraatay inay dhaqammaadoodii, diintooda iyo caadooyinkoodii faafiyaan. Si ay taa u hirgeliyaan, waxay halkaas ka sameysteen Kiniisado Dugsiyo iyo Cusbitaallo. Dhulalka imberadooriyadii Cusmaaniyiinta, 1875kii waxaa ka sameysnaa 240 dugsi oo ay leeyihiin kiniisado Yurub iyo Ameerikaanka ay ku jireen /8,000 oo arday. Halkaas waxaa tallaabo tallaabo uga abuurmay koox Turkiyiin ah oo leh Dhaqan, caadooyin iyo diin ay leeyihiin reer urub;

## URURKII UMMADAHA.

Dagaalkii laad ee ku dhammaaday heshiiskii Golaha Versaalis ee magaalada Baariis, indhaha ku kala qaadaan khasaaraha weyn ee dawladaha Imberyaaliis-tayaasha Yurub ay uunida u geysan karaa, haddii aan laga hor tegin. Dagaalkii laad waxaa lagala kulmay dhibaatooyin waaweyn oo ay ka soo kabashadoodii muddo dheer qaadatay. Dagaalkii laad waxaa ku geeriyooday malaayiin dad ah, waxaa ku baaba'ay magaalooyin waaweyn, waxa ku baxay adduunyo badan oo dadyowga adduunyadu ay siyaabo kale uga faa'iidaysan lahaayeen.

Sababaha dagaalkii labaad keenay waxa ugu weynayd, iska hor imaad ballaaran oo ka dhex dhacay dawladaha gumeystayaasha Yurub. Iska hor imaadkaas, wuxuu ugu muhiimsanaa, iyada oo ay tartan u galeen mid waliba ay doontay sidii ay kuwakale uga bursan Dhulka Imberadooriyadii Turkigu wuxuu ka mid ahaa dhulalka Imbariyaalistayaasha Yurub tartanka ugu jireen. Ruushku wuxuu doonayey inuu qabsado Konstantinooboli si uu qayb uga helo Badda Cad; Faransiisku wuxuu doonayey in uu qabsado Suuriya, Ingiriisku wuxuu doonayey in uu qabsado Ciraaq iyo Falastiin, Masarna aad ugu xididaysto. Jarmalkuna wuxuu hunguraynaayey Marooko iyo Tuunis in uu qayb weyn ka helo.

Imberadooriyada Turkigu waxay ka mid ahayd dalalkii dagaalkii laad lagaga adkaaday, sidaa awgeedna, aayaha dalkeeda iyo dalalkii ay gumeysanaysayba, waxaa lagu wareeji-

yey Golihii Farsaalis ee heshiis nabadeed lagu raadinayey lyada oo la isku deyaayo in la is hortaago dagaal kale oo dunida ka dhaca awgeed ayaa la isla gartay in la sameeyo urur Ummadaha ka dhexeeya. Ururkaas ulajeeddadiisu waxay ahayd in uu si nabadgelyo ah ku dhameeyo wixii dhibaatooyin ah ee dawladaha ku kala yimaada iyo in uu ilaaliyo xaqa ay leeyihiin dadyowga dunida ku nool oo dhami. Aasaaska ururka Ummadaha waxaa saldhig u ahaa afa iyo toban (14) fikradood oo uu keenay Madaxweynihii Maraykanka ee waqtigaa, Woodrow Wilson. Dawladdihii kale ee shirkaa talidiisa ka qaybgelaayeyna, way ku raaceen.

Ururka UUmmadaha xaruntiisu waxay noqotay magaala dalka Swiisarland ee Jineefa, xubnihiisa ugu waaweynina waxay ka koobnaayeen shan. Xoghaynta, Shirguud, Gole, Maxkamadda adduunka uu dhaxaysa iyo Ururka shaqaalaha adduunweynaha. Dawlad kasta oo madaxbannaani waxay ahayd inay wakiil ku yeelato Ururka Ummadaha.

## MANDAATOOYIN

Xeerka Ururka Ummaddaha qodobkiisa laba iyo labaatanaad (22) wuxuu ka hadlayey dhulalka la gumeysto ee ay lahaayeen dawladdihii dagaalka lagaga adkaaday. Qodobkaasi, wuxuu sheegay in dalaka ay awooddoodu yar tahay, sida iyaga la ahayd, ee aan xil dawladnimo waqtigaas qaadan karayn, wax la baro oo loo diyaariyo si madaxbannaantooda ay u helaan. Inta dalalkaasi ay u diyaar noqonayaan madaxbannaatooda, waxaa la isku raacay in Mandaatooyin loogu dhiibo dawladaha xoogga waaweyn, kuwaas oo wakiil uga noqonaaya Ururka Ummadaha. Mandaatooyinku ka may hadlayn dalalka ay gumeystaan dawladihii dagaalka ku adkaaday, in kasta oo dalalkaasi dhammaantood ay madaxbannaani u baahnaayeen, waxa ayku kala duwanaayeen aan la garanayn. Taasi waxay caddaynaysaa in siyaasaddii gumeysiga, aanay waxba iska bedelin ee dalalkii ay gumeysan jireen dawladihii dagaalka lagaga adkaaday, gumeysi cusub lagu wareejiyey.

Qodobka maandaatooyinka, dalalkii aay gumeysan jireen jarmalka iyo Turkiygu wuxuu kala qaybiyey B,T, iyo J. Qaybkoa waxay fikraddodii iyagu saldhig uga dhigeen, siday ugu kala horreeyeen xagga ilbaxnimada iyo awoodda maamulka.

Dalalkii uu Turkigu gumeysan jiray oo dhan, waxaa laga dhigayqaybta «B». Dalalkii uu Jarmalku gumeysanayeyyna waxaa laga dhigay «T». iyo J. Dalalkii Turkiga, iraaq iyo Falastiin waxaa lagu wareejiyey Ingnriiska. Dalalkii «J» Jarmalka, Tanganiika waxaa loo qaybiyey Ingiriiska iyo Beeljuum; Toogna iyo Kamaruunna waxaa loo qaybiyey Ingiriiska iyo Faransiiska; Afrikada koonfur gaibeed waxaa gacanta loo geliyey midab takoorka koonfruta Afrika. Dhulbadeedyada Badweynta Baasifiga ee Dhulbadhaha waqooyigiisa waxaa loo dhiibay Jabbaan; wixii Ikuwatoorka koonfurtaasa ahna waxaa loo dhiibay Ustareeliya iyo Naysiiland.

Dawladaha dalalka maandaatooyinka loogu dhiibay waxay qaadeen xil in ay dalalkaas xornimadooda gaadhsiiyaan waxayna ahayd in guddi Ururka Ummaduhu saaray warbixin si is daba joog ah ay uga keenaan, gaar ahaan dalalka qaybta «B». Dalalka qaybta »T« iyo «J» xil weyn iskamuu saarin UUrurka Ummaduhu, waxaana ka muuqatay in iyaga loo daayey dawladaha gacanta ku dhigay.

## DAWLADAHA CAR BTA EE MADAXBANNAADAY.

Markii gumeystayaasha Yurub ay golaha Farsaalis ku qaybsadeen dalal badan oo filanaayey inay gumeysiga ka xoroobaan, ayey dalalkaas badankoodu kala hor tageen dagaallo ay ku diidayaan mandaatooyinka iyo gumeysiga cusub ee ay dawladaha Yurub bilaabeen.

Markii uu dagaalkii laad soconaayey, waxay dawladaha Yurub ee gumeytayaasha ahi marar badan ku dhawaaqeen in dadyowga dunida ee la gumeysto siday doonaan loo yeelo markuu dagaal ku dhammaado Sidaa awgeedna, dalalka la gumeysan jirey aad bay dagaalkaas naftoodii ugu hureen iyaga oo taa xornimadooda ku raadinaaya. Hase yeeshee, markii uu dagaalkii dhammaaday taasi way beenowday dawladaha Yurubna gumeysi hor leh ayey bilaabeen iyaga oo isku qarinaana, waxaa ay ku magacaabeen «Mandaatooyin». Dalalka la

gumeysto oo dhammi, gaar ahaan dawladaha Carabtu dagaal xoog leh bay kala hor tageen gumeystatayaasha Yurub, iyagoo ka hor jeeda waxa lagu magacaabay «Mandaatooyin».

Dalalka Masar, oo Ingiriiska kala hor tegay dagaala aad u kuluu,w axa horseed u ahaa Ururka lagu magacaabi jirey «Wafdi». Masar waHxay gumeystihii Ingiriiska ku kicisay dagaal aad u ballaaran, khasaare weynna way u geysatay. Sida awgeed, dawladihii Ingiriiska way u suura geli weydey inay Masar sii gumeysato. 1922kii ayey Masar madaxbannaanideedii ka heshay dalka Ingiriiska. Hase yeeshee, taasi madaxbannaani buuxda may ahayn, waayo, dawladda Ingiriisku waxay caddaysay inay arrimaha dibedda iyo kuwa gudaha qaarkoodba ay iyadu gacanta ku haynayso. Sida awgeed, dagaalkii wuu soconaayey ilaa 1936kii. Dagaalkii Masar iyo dawladda Ingiriiska ka dhex taagnaa wuxuu dhammaaday in Masar madaxbannaani buuxda la siiyo Ururka Ummadahana loo oggolaado inay gasho.

Ciraaq waxay iyana markiiba raacday waadadii ay Masar martay. 1920kii ayey Ciraaqiyiintu dagaal ku qaadeen gumeystaha Ingiriiska. Dawladda Ingiriisku waxay isku dayday inay dagaallo ku joojiso dagaalladaas iyada oo ku ballan qaadaysa inay Boqorkii Sucuudiya ee waqtigaa, Xuseen, ay wiilkiisa Faysal Boqornimo ka sii doonto dalka Ciraaq, haddii ay dagaalladu ka joogsadaan. Hase yeeshee, taas waxba way uga suuro geli waayeen. 1930kii ayey Ciraaq iyo Ingiriisku heshiis gaareen, kaas oo Ciraaq ay madaxbannaanideedii ku heshay. Dawladda Ingiriisku heshiiskaa waxay ku faa'iiday saddex saldhig oo diyaaradaha militeriga ah. 1932kii, ayey iraaq gashay Ururka Ummadaha.

Suuriya iyo Lubnaan iyana waxay dagaal ku qaadeen gumeystihii Faransiiska. Dagaallada Suuriya iyo Lubnaan ay kala hor tageen Dawladda Faransiiska xooggooda waxay billaabeen 1925kii. Dawladda Faransiisku waxay isku dayday, inay cadaadiso dalalkaas iskana dhega tirto dhibaatooyinka kaga imaanaya waddaniyiinta Suuriya iyo Lubnaan, hase yeeshee, wax guul ah kumay helin. 1930kii ayey dawladdii Faraansiiska iyo waddaniyiinta dalalka Suuriya iyo Lubnaan heshiis isla gaareen, kaas oo madaxbannaanidoodii u



oggolaaday. Hase yeeshee, heshiiskaa waxa diiday inay saxiixaan Mudanayaashii Baarlamaanka Faransiiska, sidaa awgeedna, waddaniyiinta labadaa dal wey wadeen dagaalkoodii ilaa dagaalkii labaad ee Dunida. Madaxbannaanida labadaa dalna waxay si fiican u hirgeshay dagaalkii labaad dhammaadkiisii.

## SAHYUUNIYADDA IYO CARARBT

Markii Turkiga xikunkiisa uu Ataatuuk ku guuleystay laba dad ayaa Bariga Dhexe dagaal u kala safnaa. waxaa lagu dagaallamayey dhulka Falastiin loo yaqaan. Sidii dawladdii Bisantiin Turkigu u qabsaday, ayaa Boqortooyadii yaryarayd ee Falastiin ay Dawladdii Roomaanku u qabsatay. Markii taariikhdu ahayd 70 C.H. dadka loo yaqaanno Yuhuudda arliga oo dhan ayey ku kala fideen.

Waxaa jirtey in dhulkii ay u dooleen dadka Yuhuudda ihi ay dhibaato iyo dhaqan takoor ay kala kulmeen. Dawladaha qaarkood meel gooni ah ayey dejin jireen Yuhuudda Sidaa daraadeed markay taariikhdu ahayd 1890 ayaa nin waxgarad ah oo Yuhuud ah oo lagu magacaabi jirey Tiyador Heersal uu wada hadal la yeeshay Boqorkii Borashiya, Wilyam iyo Saarkii Ruushka, Nikolay oo uu ku guubuubiyey in ay Yuhuudda gacan ku saayaan hindisaha ah in Falastiin ay degaan. Tiyadoor wuxuu Yurub ku been haweesinayey dhibaatooyinka ay dadka Yuhuudda ihi ay la kulmi jireen.

Aan xusuus u lahaanno in Yurubku abuureen. Tiyadoor wuxuu kaloo cuskanayey kaalmada Yuhuudda adduunweynaha ku nool ee aad maalqabeen u ahaa. Waxa arrinta aad u sii taageeray culummadii Yuhuudda.

1897kii waxa la furya shirkii ugu horreeyey ee lagu ababulay magaca sahaynuuniyadda waxaa shirkii lagu caddeeyey in waddanka rasmiga ah ee Yuhuudda laga dhigo Falastiin iyadoo aan loo aabba deyin ciddii dhulka tiil ama aan haba yaraatee aan laga tala qaadin dadka Carabta ah ee weligood dhulka degganaa taasu waxay ku ahayd xadarro iyo meel kaga dhaca dadkii Carabta ahaa. 1900 Tiyadoor wuxuu abaabulay ururin lacageed oo saldhig looga dhigay dejinta Yuhuu-

dda qofkii yuhuudda ahi oggolaada in uu dhulka deganaa dda. qofkii yuhuudda ahi ee oggolaada in uu dhulka degana

Arrintaas waxay ahayd mid ay dawladaha waaweyn u riyaaqaan, sababtu may ahayn in ay Yuhuud jecel yihiin. iyaka ayey ahaayeen kuwii ku qasbi jirey inay Yuhuuddu gooni noolaadaan meelaha la yiraahdo Gettoes. Sababtu waxay ahayad dawladaha reer Galbeed waxay arakeen qarnigii labaatanaad bilowgiisii in gumeysiga soo dabar go'ayo siiba Bariga Dhexe iyo Adduunka seddaxaadba. sidaa awgeed, waxay ree galbeedku rabeen dawlad iyaka danahooda wadda oo ay ku qadhaataan.

## DHAQDHAQAAQA SIYOONIYADA

Waxay ku abtirsataa fikraddaasi buur ku taalla Falastiin oo la yidhaahdo sahyoon, «Zion». Halkaas oo ay ka dhisnaan jirtay Dawladihii Yuhuudda oo hore, waayihii Nabi Daa'uud iyo Nabi Suleymaan 1000 C. H.


Hase yeeshee, umado kala duwan baa isaga dambeeyey xukunkii Falasdiin. Ugu horeystii waxaa jebiyey Yuhuudda Dawladihii Baabiloon iyo Aashuur ee ka dhisnaan jirey Ciraaq. sannadkii 386 C.H. oo baabi'isay Dawladoodii juurusaleemna gubtay.

Waxaa uga danbeeyey Iiraan oo iyaduna qabsatay Ciraaq iyo dhulkey haysatay oo dhan. Iiraanna waxaa jebiyey Dawladihii Rooma oo iyaduna qabsatay Falasdiin. Maalmahaas baa waxaa iyaduna fidday Diintii Masiixiyadda oo iska hor imaad xoog leh ka dhex dhashay iyada iyo Yuhuudda, si uu u dhammeeyo iska hor imaadkaas ayaa Boqor Adriyaanos wuxuu amray in la israaciyo waxii ka hadhay darbigay ku tukadaan Yuhuuddu.

Sannadka 135kii Yuhuuddii u danbeysayna wey iskaga qaxday dhulkii, waxaana ka dhismay dawlado Carab ah, sannadkii 637 waxaa soo galay dhulka Falastiin diinta Islaamka markay 15 jirsatay, tan iyo waqtigaana Falastiin waxay ahayd dawlad Carab ah, Muslim ah ilaa ay soo ifbaxday



dhaqdhaqaaqa Sahyooniyadda Cusub dhammaadkii Qarnigii 19aad.




1947 KA HOR — Qaybtii U.Q.M. 1947. — ABUURKII YUHUUDDA

ARRINTA REER FALASTIIN

**Dhaqdhaqaaqii Sahyooniyadda.**

Ujeedada dhaqadhqaaqaas waxay ahayd sidii loo heli lahaa waddan ay degaan Yuhuudda ku firdhsan adduunka. Billowgii qarnigii 2aad waxaa degganaa falasdiini dhowr kun oo Yuhuud ah. In ka badan 15 malyanna waxay ku firidhsanaayeen Yurub, Ameerika iyo Waqooyiga Afrika.

Waxayna ku noolaayeen ciil iyo cadaadis ay ka muteen waddanidii ay ku dhex jireen. Nimankooda wax garadka ahi waxay ku talin jireen sidii loogu sameyn lahaa waddan la dejiyo Yuhuudaas iyagoo niyadda ku hayo dhulka Falastiin in uu yahay Gurigii-hooyo: sannadkii 1896 Dr. Tiyoodor Harsal baa soo saaray kitaab la magac baxay (Dawladda Yuhuudda).

sanadka bacdi 1897 dhaqdhaqaaqoodii wuxuu shir ku yeeshay maagaalada Baal (Switserland). Dawladda Ingiriisku waxay isku dayday inay dajiso dhinac ka mid ah dhulka keenya. Hase yeeshee, Yuhuuddii baa diiday, iyagoo doonaaya dhulkii loogu baallaan qaaday. Isla waqtigaas waxay si lixaad leh Yuhuuddu ugu sii dhurmasay Falastiin. Baaqi Hertzel wuxuu ahaa ma rabno sidii dad tuugo ah inaan dhuumasho ku soconno ee waa inaan sidii dad gurigoodii u socda u muuqaannaa).

U.M. & Arrintaa Falasdiin.

Arrinta Falasdiin markii la hor keenay U.M. oo ahayd Bishii Noofembar 1847. Waxaa u talinaayey Dawladaha waaweyn oo hoggaankeeda hayey. Dawladahaasuna waxay ahaayeen kuwa ka dambeeya danahooda Yuhuuddu ka talineyso. Sidaas darteed, inkastoo danjirayaashii Carabtu aad u dadaaleen haddana markii laga dooday Go'aankii ay soo saartay Guddigii loo diray Falasdiin arrinteeda, oo ahaa in la kala qaybiyo waxaa oggolaaday 3 Dawladood 13 way diideen 10 way ka aamuseen. Waxaana arrintaas door weyn ka ciyaaray Madaxweynihii Mareykanka Turuman oo ku dadaalay inay Dawladda yuhuuddu hirgasho. Dawladihii Carabtu waxay halkaa ka sheegeen inaanayan u hoggaansamaynin Go'aanndaas waxaana ku sii fiday dagaalladii iyo weerarkii ka socday Falasdiin.

## BALLANQAAKII BELFOOR.

Dawladda Ingiriisku waxay ahayd mid kula dhaqanta been iyo laba wajiile Ummadihii Carbata ahaa markuu dhacay dagaalkii koowaad. Turkigu waxay is garab taageen Jarmalka. Ingiriisku isagoo ilaashanaya danihiisa Bariga Ddexe iyo waddooyinkiisa Bariga Fog, ayuu bilaabay inuu ku hogaamiyo Ummadda Carabta siday uga eryi lahaayeen dhulkooda Turkiga .Isagoo u carrab laalaadshay Dawlado Carab ah oo xor ah inuu dhisi doono, isla markaas wuxuu heshiis la sameystay Dawladda Faransiiska 1916 siday u qayb san lahaayeen dhulka Carabta markii Turkiga al saaro. Sannad ka dib 1917 ayaa Dr. Waysman oo ahaa hoggaamiyaha dhaqdhaqaaqa siyoonisadda, kaana ahaa Macallin Jaamacadda **MANCHESTER**,aad



ugu dadaalya siday uga faa'iidaysan lahaayeen cidhiidhiga Ingiriisku ku jirey, culeys weynna saaray siduu uga heli lahaa ballan. Isla markaas Dawladda ingiriisku waxay u baahnayd kaalmada Yuhuudda ku nool Yurub & Ameerikaba. Xagga Burobagaanadaha iyo xagga dhaqaalahaba intaas baa waxay dhalisay in wasiir dibedeedkii Ingiriisku Belfoor ugu baaqo Yuhuudda 1917 ballan qaadka hoos ku qoran: (Dawladda Boqorrada Ingiriisku waxay il naxariiseed ku fiirinaysaa sidii ay uga dhigi lahayd Falasdiin waddan Ummad Yuhuuddu u hoyato, waxayna ku dadaali sidey u hirgasho arrintaas iyadoon waxba loo dhimin danaha dadka iyo Diinaha aan ahayn Yuhuud oo ku nool Falasdiin).

Ballanqaadkaas Belfoor ku dhawaaqay waa mid aan sharci ahayn, sababtoo ah wuxuu ka taliyey arrin uusan lahayn, wuxuuna siiyey dad aan lahayn, kamana baxsana tallaabadaasi gardarrooyinkii xadgudubka ahaa ee ingiriisku ka dhex abaaray Ummadahey gumeysan jireen, ee Afrika iyo Aasiya.

## CARABTA IYO ARRINTA FALASTIIN

Markay u caddaatay Carabta in ay falasdiin dhaxal waleeg ku socoto, Yuhuuduna si laxaad leh ugu soo dhumeyso dhulka; Ingiriiskuna ku taliyey in loo qaybiyo falasdiin saddax meelood oo qaybaha ugu roon la dejiyo Yuhuudda. Waxaa la gudboonaataay Ummadda Carabtu sidey uga hor tegi lahaayeen arrintaas iyagoo wada jira.

Taas baa keentay shir weyn oo lagu dhigay Baloodaar 1937 bishii Sebtembar waxaana isugu yimid abbaara 500 qof oo ka tirsan dhammaan hoggaamiyaalkii Carabta Bari & Galbeed, waxayna go'aan ku gaareen:-

1) Falasdiin waa Gobol aan ka Go'i karin Ummadda Carabta.
2) Marna in aan la oggolaanin qaybinta Falasdiin, iyo Dawladda Yuhuudda midna.
3) Marna in aan la aqoonsan Ballan qaadkii Belfoor.
4) In la joojiyo qaxitaanka Yuhuudda dhulkana laga iibinin.

Go'aannadaasi ma noqon kuwa kaalmo ka helay Ingiriiska iaba daraadle wuxuu bilaabay inuu cadaadiyo iyo cayrsi kula dhaaqmo hoggaamiyaashii Carabta, irridaha xabsiyadana u turay gobanomodoonnadii Carabta, wuxuuna casilay guddoomiyihii Guddiga Sare Carabta Falastiin Alxaaji A.X. Tallaabooyinkaas oo dhani waxay u kordhiyeen Carabta geesinnimo iyo inay ku adkeeystaan codsashadooda xaqa ah.

Dagaal weerar aan kala go' lahaynbaa ku fiday dhammaan dhulka Carabta. Ilaa uu soo curtay Dagaalkii labaad 1939; markaas oo ay diintii Falastiin yeelan doonto wajiyo hor leh.

## WADDAMMDA CARABTA.

Turkiga oo abbaara ah qarni u talinaayey dhulalka Carabta waxay ku dadaaleen sidey u baabi'in lahaayeen **«Qofnimada» Carbeed.** Hase yeeshee, muddadaas oo dhan carabnimadu waxay ahayd mid dahsoon oo ku nool maskaxda & niyadab, waxaaana ugu kaalmeynayey af Carbeedkii isku xirayey Ummadda Carabta oo laxaadsatay & Xukunkii Turkiga oo aan ahayn mid hoos u raaridan. Nuskii dambe ee qarnigii 18aad Boqortooyadii Turkiga way sii liicaysay. Gobollo badan oo Yurub ahina way ka baxeen. Guud ahaanna waxaa la yidhaahdaa waqtigaa (waqtigii Ummada). Turkigana loo bixiyey (Ninkii jirranaa ee Yurub). Dhaqdhaqaaqyo badan oo ku doodaya Ummadnimada Carabta ayaa aad u fiday siiba dhulka Suuriya, Lubnaan, Ciraaq, iyo Masar.

Waxaana ka abuurmay dhulkaas ururro siyaasi ah oo ku doodaya xuquuqda iyo Qarannimada Carabta. Bilowgii Qarnigan 20aad, dhaqdhaqaaqa waddanimada Carabtu wuxuu laxaad ku lahaa Masar oo inman badan oo Yurub wax ku soo bartay ay ka abaabuleen axsaab iyo ururro kala duwan. Sida Musdafa Kaamil oo 1807 ka furay Masar (Al-Xisbal wadani). Ujeedada ururrada ama doodihii dadkii Carabta waxa garadka ahaa waxay markii hore ku dhisnayd in Dawladda Turkigu ay wax ka baddasho habka Maamulkeeda, Carabtana laga qayb geliyo arrimaha xukunka iyo in la daryeelo danaha Carabta xagga dhaqanka, Bulshanimada, Diinta si loo hormariyo



waddanada Carabta, codsashadaas ay soo jeediyeen hoggaamiyayaashii Carabtu oo aanay wali Turkigu waxba ka qabanin ayuu soo foodsaaray adduunka dagaalkii laad.

Taas baa ku dhalisay hoggaamiyayaashii carabta markey ka quusteen dawladda Turkiga inaanayan oofineynin codsigii Carabta, horukacna ka suurto galeynin, in ay doorbidan iskaashi dhex mara iyaga iyoDawladda Ingiriiska sidey wadajir ugasaarilahaayeen Turkiga dhulka Bariga Carabta. Hoggaamiyayaashii waxay ugu baaqeen Carabtu inay la jahaadaan Turkiga oo garab siiyaan Ingiriiska.

Shariif Xuseen Taliyihii xijaas oo ahaa Nin wadaad ah oo u bisil siyaasadda iyo isku hor imaadka danaha Dawladaha kala duwan. Ayey ka dhigteen, Hoggaamiye, markii dagaalkii 1° dhammaaday oo Ingiriiska iyo jaallayaalkiis ku guuleysteen, Carabtii waxay ku baraarugeen inay ku dheceen god loo qoday. Ballannadii Ingiriiskuna been noqdeen dhulkoodiina loo tashaday. Hase yeeshee isma dhiibin Carabtu, halgankoodiina ma joojin, baaqii waxgaradyada iyo ururradii Siyaasadaha bulshada way sii xoojiyeen halgankii; waxaana bilaabatay in ummadii carabtu mid walba gobanimadeeda u raadsato qannimo buuxda. Waxay arrintaasi midho keentay dhammaadkii dagaalweynihii 1aad oo Dawladaha Suuriya, Lubnaan iyo Ciraaq ay heleen madaxbanaani iyo xornimo.

Sannadku markuu ahaa 1945 ayaa shir lagu qabtay magaalada Iskandariya oo ay ka soo qayb galeen Dawladihii Carbeed ee madaxbaannaanaa laguna heshiiyey wax la yidhaahdo (Barootakool Iskaandariya.)

Barootakoolkaas baa laga unkay Jaamacadda Ururka Carabta oo ilaa maanta laxaad weyn leh, sidii la isugu keeni lahaa tabarrada iyo talada Ummadda Carabta oo ay u xoojin lahaayeen awooddooda siyaasadeed, dhaqaale dhaqan iyo dagaalba.

## DAGAALADII CARABTA IYO YUHUUDDA

Colaadda dhex taalla Carabta iyo Yuhuudda waxay bi-

laabatay markii Dadkii reer Falastiin laga qaxiyey dhulkoodii oo Carruur iyo cirroole haween iyo rag laga wada bixiyey guryahoodii beerahoodii, dukaammadoodii iyo xoolahoodii. Carabtu intii hore waxay ku niyad samayd in Dawladda Ingiriisku wax ka qaban doonto, gardarrada Yuhuudda.

Tan iyo 1933 talaabooyinkii Yuhuudda taabba gal ma ahayn. Tiradooduna ma dhaafsanayn 12%, laakiin 1933-35-kii waxaa soo galay Falastiin in ka badan 150 kun oo ah Yuhuuddii ka soo carartay Yurub markii Hitler xisbigiisu qabsadeen xukunkii Almaaniya, waxayna sameysteen ururro dhallinyaro oo dagaalyahanno ah.

Ururradaas oo ahaan jirey qarsoodi baa ku dhex abuuray Carabtii argagax markey dileen oo gubeen oo boobeen dad iyo duunyo waxay Carabi lahayd iyadoon cidna u aabeyeelin, waxana ugu caloolxumo badnaa weerarkey habeen ku qaadeen Tuuladii (Diiryaasiin), oo ay ku dooxeen boqolaal isugu jira maati iyo shuyuukh iyo haween, si ka fog baniaadanimada. 1936kii bishii Abriil bay ka dhacday dhulka Falastiin Tawrad ay kaga ciil iyo cadho baxeen Yuhuudda iyo Ingiriiskuba. Lix bilood ka dib baa Ingiriisku ka codsaday Carabta inay joojiyaan dagaalka si uu wax uga qabto arrintaa Falastiin. Isagaa oo ku ballan qaadayay inuu ilaaliyo danaha Carabta. Hoggaamiyaalkii Carabta way oggolaadeen, Ingiriisna waxa uu soo diray guddi soo baadha, guddigaas oo ku soo taliyey in Carabta iyo uhuuddu marna ku heshiin karin Dawlad wada jir uga dhisan Falastiin, waxayna ku dhammeeyeen in loo qaybiyo Falastiin, taladaasi ma raalli gelinin Yuhuudda iyo Carabta midna.

Isla markaas Dawladda Ingiriisku waxay u tabaabusheynaysay dagaal weynihii II° markii arrintiisu soo curatay. Dawladdii Ingiriisku aad bey ugu wareersatay arrinta Falastiin wax ka qabadkey rabteyna laga qadin waayey. Ilaa ay soo hordhigtay Q. M. arrintii Falastiin iyadoo caddeynaysa inay ka baxayso dhulkaas 14 Maajo, 1948. Maalintii ku xigtay 15 Maajo ayaa Yuhuuddii ku dhawaaqday Dawladii Israa'iil, maalmo kaddibna waxaa soo weeraray, Dawladihii Carabta ahaa.



Hase yeeshee, Carabtu waxay dagaalkaas soo galeen iyagoon wax tababulsha ah u sameysan, Askar iyo hubtoona. Isla markaa oo shuftadii Yuhuuddu, sida «Argoon» hoggaana ay u ahaayeen kuwo lixaad leh xagga hubka iyo xagga layskaba. Dagaalkaas waxuu ku dhammaaday Yuhuuddii oo sii dhulballaarsatay. Foolxumadii iyo nidaamdarradii ka muuqatay Askartii Carabta baa waxey ku dhalisay koox ka tirsanayd saraakiishii Askartii Masarta inay afgambi ka dhigaan oo la wareegaan tailskii Masar. 952kii kooxdaas oo madax uu ka ahaa G. Sare Jamaal Cabdi-Naasir aad bay ugu dadaashay sidey horumar lixaad leh u gaadhsiin lahayd dhulkeeda. Jamaal waxyaalo badan ayuu sameeyey oo ay ka mid yihiin: Beerihii oo loo qaybiyey beeraleydii saboolka ahayd. Wuxuu ku gacmo sayray dawladihii reer Galbeed. intuu hub iibsaday heshiisyana la dhigtay, dawladaha Bariga ah. Waxaa kaloo u tabusheystay siduu u dhisi lahaa biyoxidheenka weyn ee Aswaan. Ugu dambeyskii wuxuu la wareegay maamulkii Biyomareenkii Suwees. Tallaabooyinkaas oo dhan baa ku riday dawladihii reer Galbeed argaagixis iyo filan-waa. Ilaa ay faransa Ingiriis iyo Yuhuuddii ay duullaan ku soo qaadeen Masar 1936kii.

Duullaankaas aad bay foolxumo uga raacday Faransa iyo Ingiriiskaba. Yuhuuddiina dibba loo celiyey. Masar intii dagaalkaas ka dambeysey aad bey laxaad u yeelatay xagga Siyaasadda dhaqaalaha iyo gaashaandhiggaba. Bishii Maajo 1967, arrintii Bariga Dhexe aad bay u xumaatay markay Masar ciidankeedii u gudbisay Siinaay. Isla markaasna ay bixisay dhaxdhaxaadiyayaalkii Askarta ahaa ee U.M. ka joogay Bariga dhexe. Iyagoo u hiilinaysa Suuriya oo Yuhuuddu weerarro ku haysey.

Hase yeeshee, Masaaridu waxaad mooddaa inay isku halleysay ballankii Danjiraha Midowga Soofiyeeti siiyey Jamaal Cabdinaasir oo ahaa inuusan billaabin dagaalka si loo raadiyo Nabad-gelyo dhab dah.

Subaxnimadii 5tii Juun.1967kii bey Dawladdii Israa'ii ku qaadday weerarro culus oo lama filaan ah dhammaan saldhigyadii ciidammadii Masar, suuriya iyo Urdun halkaas oo ay ku curyaamiyeen laxaadkoodii. Waxayna qabsatay in ka badan

3 laab dhulkey hore u degganayd. Israa'iil waxay fileysay begdiintaas ku dhacday Carabtu inaayan dib dambe u joogsan oo ay ka heli karto heshiis iyo nabad waarta.

Hase yeeshee, Carbta oo ah dad ilbaxnimada iyo qarannimadaba ku qoto dheer uma suurto gein Yulhuudda say rabtey isumana dhiibin.

Waxayna u guntadeen siday u soo ceshan lahaayeen dhulkoodii, waxaana hoggaankii Masar qabtay Anwar Al Sadaat markuu geeriyoodey Jamaal Cadinaasir Sebtambar 1970. 6 oktoobar 1973, ayaa ciidammadii Suuriya iyo Masar, duhur cad soo weerareen Israa'iil; saacado kabacdina ciidankii Masar ee cadhaysnaa wuxuu ka tallaabay biyomareenka Suwees wuxuuna gacanta ku dhigay dhufeyskii Yuhuuddu dhisatay ee ku caanbaxay Baarleef. Dhufeyskaas oo Yuhuuddu ku tilmaami jirtay inuu yahay xabaashii Askarta Masar. Waxaa kale oo dagaalkaa si laxaad leh uga qayb galay dhammaan dawladaha Carabta oo soo saarta saliidda, oo ka cunqabateysay dawladaha reer Galbeed ee kaalmeeyn jirey Yuhuudda.

## TAARIIKHDA DALALKA JAARKA .LA YAHAY DALKA SUUDAAN, SULDAANTOOYADA FUNJIDA

Suldaantooyada Funkida suudaan waxay ahayd Boqortooyo muslim ah, magaalamadaxdooduna tahay Sennar. Boqortooyadaas oo dhisantay markii ay burburtay Boqortooyada Calwa dabadeed, waxaa aasaasay «Ammara Dunkas» Dawladda Funjida oo loo yaqaan suldaantooyada madow waxay soo gaartay tan iyo 1820kii. Dadkii dhisay suldaantooyadaas waxay ahaayeen dad madow, hase yeeshee, dhalashadoodii si run ah lama hayo. Qoreyaasha qaarkoodse waxay rumeysan yihiin in ay ka mid ahaayeen dadka la yiraahdo reer «Shilluk» oo haddaba ku nool Suudaan. Markii laxaadkeedu ugu weynaa waxay u talisay dhul aad u ballaaran oo ka bilowda agagaarka Sennar, tan iyo biyodhaca Niil, hase yeeshee, soohdinteedu marna ma gaarin koonfurta Suudaan. Suldaantooyada dhulkeeda waxaa ka mid ahaa gobollo badan oo madax u gaar ah lahae iskoodna isu maamuli jirey, una hoggaansanaa guud ahaan u maamuli jirey arrimahooda gaar ahaanneed waxaa ka mid ahaa dhulka ka



xiga halka aay iskaga darmaan webiyada Niilka Cad iyo kan Bulug ah, ayna degganayd bulsho Carab ah, magaca suldaantooyada Funji ugu talin jirey nin Carab ah oo la oran jirey Cabdulla. Waxa dhanka koonfureed ee Boqortooyada ku noolaa dadyow badan oo lahaa madax ayaga u gaar ah oggolaana in ay ku hoos noolaadaan suldaantooyada. Boqortooyada habkaa ku dhisnayd, sida caadada ah, wey jilicsan tahay, middatanise waxay waartay markii ay yeelatay ciidamma aad loo tababaray oo isugu jirey Fardoolay iyo kuwa lugta ahba. Laxaadka Boqortooyada Funji wuxuu hoos u soo dhacay markii ay ku kaceen dadka la yiraahdo Shaykhiya oo deggan agagaarka Webiga Niil, kuna dhawaaqeen inay yihiin dad haysta madaxbannaani buuxda.

Kacaankaasu wuxuu dhibaato u geystey ganacsigii Funji. Si looga kabto dhibaatadaasna suldaantooyadu waxay ku dadaashey in dhulka ay u taliso ay ballaariso oo gaarsiiso tan iyo Kurdufan, dhul ballaarsigaana waxaa awood weyn lagu siiyey taliyihii ciidammada «Abu Likeyliki», oo awooddii u isticmaalay s lama filaan ah, markuu qabsaday magaalamadaxddii «Sennar» Boqorkeediina la casilay. Markaas dabadeedna waxaa isku laayey madaxtinimada Abu Likeyliki inamo uu dhalay iyo kuwa uu awoowe u ahaa.

Dagaalka dartii dad badan ayaa ka dhintay suldaantooyadiina dhul yar baa u haray awooddeediina way yaraatay. Wixii ka dambeeyey 1811kiina imaashahii qaxootidii mamlukuyiinta Masar ayaa arrintii sii qasay.

## QABSASHADII TURKIGA-MASAR EE WADDANKA SUUDAAN

Sannadku markuu ahaa 1820kii Suudaan waxaa ku soo duulay ciidan uu watay wiilkii saddaxaad ee uu dhalay Maxamed Cali, kaas oo la dhihi jirey «Kaamil Baasha». suldaantooyada Funji aad bay u tabardarrayd awoodna uma lahayn in ay dalkeedaa daafacdo. Kaamil Baasha wuxuu watey ciidammo tiradoodu tahay 4000 oo qof kuwaasoo qabsaday Suudaan. Ujeeddada Maxamed Cali uu ka lahaa qabsashadii Suudaan waxay ahayd:

a) In uu ka raadiyo dhul ay dahabka ka qotaan.

b) In uu ka raadiyo looxyo uu ku dhiso doonyo.

t) In uu dad askar u noqda ka qorto.

Maxamed Cali Ujeedooyinkaas uu lahaa waxa uga suura gaiay in uu qorto askartii uu doonaayey.

## MAAMULKA TURKIGA-MASAR 1820-1881kii;

Bilaawgii sannadkii 1820kii ilaa iyo 1881 Suudaan waxaa u talin jirey Turkiya-Masar, waxaana ka fadhiyey barasaab golbol oo guud, kaas oo la dhihi jirey «Dikimada». Dhulkii waxaaa loo qaybshey gobollo, kuwaasoo ay barasaabyadoodu ahaayeen dad u dhashay gobolka loona bixiyey «Qisim». Waxaana u talin jirey sarkaal la yiraahdo «Qisim Mudiir», ugu dambeyntii qisimkii waxa loo sii qaybshay qayb la yiraahdo khat-Hakiim. Dawladdii Turkiya iyo Masar waxay ku taagnayd ciidammadeedii laga qoray waqooyiga Suudaan. lana oran jirey «Jihaadiya» iyo 9000 oo fardoolay ah oo laga qoray waqooyiga Suudaan.

Kaddib markii Maxamed Cali u qabtay Suudaan wuxuu ku dadaalay in ganacsigii labada waddan ka dhexeeyey u xoojiyo. Taas oo danta ugu jirtey ahayd in canshuurtii waddanka Suudaan ka soo galaysey ay kororto saas daraadeed, wuxuu keensaday beeraaley Masaari ah oo bara dadka hababka cusub ee wax loo abuuro. Cudbiga oo waqtigaas adduunku u baahnaad ayuu hor mariyey, waxaanay noqotay mid ugu badan waxyaalihii waddanka laga dhoofin jirey.

Waqtigii Turkiya-Masar, si qorsheynta dhul ballaarsiga uga hirgalo, waxay ku dhaqaaqeen horumarinta isgaarsiintii. War isgaarsiinta nooca laliska waxay ka sameeyeen sannadkii 1866kii, waxaana isku xirmay «Waadi Xalfa» ilaa iyo Masarta sare. Sannadkii 1874kii waxaa loo sii fidiyey ilaa Khar tuum. Waddo war isgaarsiineed ee kale waxaa la isugu xiray Suudaan iyo badda Cas, mid kalena waxaa loo fidiyey dhinaca galbeedka, taas oo dhexmareysey «Al-Ubayd» ilaa iyo «Darfur». Saxiimadihii maraayey Niilka iyana waxay kordhiyeen war isgaarsiintii iyo taakulayntii maamulka.



Khartuum, Magaalamadaxda Suudaan in loo doorto waxay ka mid ahayd waxyaalihii ay maamulkii turkiya-Masar baahida u qabeen. Markuu sannadku ahaa 1825kii waxay ahayd tuulo yar oo u dhow isku darka labada gacan ee Webiga Niilka Cad yo kan Bluga ah, hase yeeshee, sannadkkii 1833kii waa ay sii fidday ilaa ay noqotay magaalamadaxda waddanka. Sannadkii 1837kii dadkii degganaa waxaaa lagu qiyaasay 30 000 oo ruux in ay gaareen. Dawladdii Turkiya-Masar waxay fidsatay dhulkii, taliskeedina wuxuu gaaray meel ka shishaysa soohdintii Boqortooyada hore ee Funji. Dadka madowga ahaa oo aan Muslimiinta ahayn ee deggannaa koofurta Suudaan waxay u ahayd markii ugu horreysey oo ay gacan gumeysi hoos galaan, la iskuna daro iyaga iyo Suudaanta Waqooyi ee Muslimiinta ah meel qur ahna looga wawda taliyo. Madaxtooyadii Masar waxay dhulka soo gelisey maamulyaal iyo khubaro reer galbeed ah si ay u hormariyaan ujeeddaday ka fulin rabeen dalka Suudaan. Iyagoo mankood ku haya dhul baaariska, waxay ku guubaabiyeen khubraadii in ay dhulka baadhaan. Nimanka khubarada ahaa nin ka mid ah oo la oran jirey «Baker» wuxuu ogaaday isha uu ka soo baxo webiga Niilka Bluuga ihi. Wuxuuna caddeeyey in Webiga Niilka uu ka soo baxo harada Fiktooriya. Nin kale oo reer Galbeed ah, una shaqayn jirey taliska Turkiya-Masar, dhalashadiisuna tahay Jarmal, lana oran jirey (Emin Basha) wuxuu gaaray waqooyiga Ugaandhada cusub isaga oo ay la socdaan askar Masaari ah, haddaba haddii aayan dadka reer Suudaan ku kicin taliska Turkiya-Masar, wuxuu gaari lahaa bartamaha Bariga Afrika.

## MAXAMED AXMED MAHDI

Isla sannadkii 1820kii ee qabashadii Suudaan waxaa biliwday dhaqdhaqaaqyo la isku hor taagayey cashuurta dawladda cusub ee Turkiya-Masar; dhaqdhaqaayadaas oo ka bilawday meelo ay ka mid tahay «Darfur», lidna ku ahaa taliska Turkiya-Masar, sannadku markuu ahaa 1838 iyo 1878dii, dhaqdhaqaaqii waxay kale oo ka bilawdeen Baxar Al-Qasal. Sannadku markuu ahaa 1877kii iyo 1878kii xaaladdii ay si lama filaan ah isu beddesho, waxaana soo bannaan baxay nin xagga diinta iyo xagga siyaasaddaba ku xeel dheer, lana oran jiray Maxamed Axmed. Wuxuu ku dhashay gobolka Dongola

sannadkii 1844kii, kana dhashay qoyis doonyo dhiseen ah. Dhalinayaranimadiisii wuxuu ka bartay tacliinta sharciga iyo diimaba nin caalina, magac dheer leh oo la oran jirey «Shekh Tayib». Wuxuu ahaa nin aad u jecel tacliinta ilaa uu ku soo baxay nin diinta ku xeel dheer. Wuxuu noqday nin ka tirsan ururkii walaaltooyada «Sammaniya» wuxuuna furtay degeyna meel ku taal jasiiradda «Aba» taas oo ahayd waqooyiga Khartuum. Sidii ragga kale ee diinta hirgeliyey uu ka mid ahaa «Cusmaan dan Fodio» oo ka dhasay galbeedka Afrika, Maxamed Axmed sidoo kale wuxuu ku riyoonayey in lagu laabto habkii dawladdii Muslinka ee khulafada. Waxay himiladiisu ahayd in uu arko dadweynaha Muslnka ah oo ku hoos noolaada caddaalad, sinnaan iyo midnimo, iyagoo isugu talinayey seda quraanku ina faraayo. Wuxuu kaloo rabay inuu is hortaago isyeelyeelka iyo musuqmaasuqa oo markaas jirey, isagoo ku guubaabinaaya dadweynaha in loo laabto nolosha runta ahayd ee diinta Islaamka. Wuxuu arkay in Turkigu ay yihiin dad aan Illaahood aaminaynin oo musuqmaasuq ku dhaqma, wuxuuna ku cambaareyn jrey Sheekhyadii Suudaan ee ka hoos shaqeyn jirey dawladdaas Turkiya-Masar ee musuqmaasuq ah sifahay u raalligalisay in dawladdaas oo kale ay u shaqeeyaan.

Wuxuu bilaabay in uu dhiso bulsho muslin ah iyo in uu ku soo celiyo bulshadaas kalsooni iyo niyad sami. Sannadkii 1881 wuxuu ahaa sannadkii isaga dadka raacsanaa ay ku dhawaaqeen in Maxamed Axmed uu yahay Mahdi.

**Dagaalladii Mahdiga iyo Turkiya-Masar.**

Markii Maxamed Axmed dadkii raacsanaa ay ku magacaabeen in uu yahay Mahdi, maamulkii Turkiya-Masar arrintaas way ciriirigelisay. Waxaana Mahdiga loo diray askar u soo kaxaysa Khartuum. Mahdigu wuu diiday, askartiina wuu laayey. Markii warkaasi ku fiday Suudaan, dadweynihii waa ku riyaaqay.

Maamulkii Turkiya-Masar way ku adkaatay sidey siyaasaddoodii gumeysiga ahayd u fulin lahaayeen. Dadkii Mahdiga raacsanaa way sii bateen, dhirbaaxo laxaad lehna way u geysteen gumeysatadii. Mahdigu wuxuu ka guuray meeshii uu hore u degganaa wuxuuna saldhig u noqotay Kordoofan oo ah gal-



beedka Suudaan, oo dadkii isaga raacsanaana ku badnaayeen. Qoladaa halkaa degganayd oo la oran jirey Ansaar aad bay u tira badnayd. Mahdigu intaa u joogey Kordhoofan iyo Darfuus wuxuu dhowr jeer la dagaallamay gumeysatadii Turkiya-Masar Dagalladaasna guul weyn buu ka gaaray. Sannadkii 1883 Maamulkii Mahdigu kuma ekayn Kordoofan iyo Darfur ee wuxuu gaarsiisnaa agagaarka Webiga Niilka Bluuga. Gobolkaas baa waxa magac Mahdiga ku maamulayey nin la oran jirey Cusmaan Digna.

Ingiriisku ma uusan baabiin dawladdii hore ee Masaarida. Si ay taliskii u oggolaato, wuxuu gacan gargaar ah uga fidiyey sidii ay ku soo ceshan lahayd Suudaan. Nin Ingiriis ah oo fadhiyey Masar oo la oran jirey Lord Kroman ayaa had iyo jeer ku dadaali jirey in uu Masaarida raalli geliyo, asaga ayaana ka ballan qaaday in uu gacan ku siiyo sidii Suudaan ugu soo gacan geli lahayd. Waxaase arrintaas ku diiddanaa Ra'iis al Wasaaraha Ingiriiska Gladstone, Arrintaas waxaa loo gudbiyey Baarlamaanka, oo go'aan ku gaaray in Ingiriiska askartiisu ay ka guurto waddanka Suudaan. Ingiriisku waxa uu soo diray gaashaanle Sare Gordon. Markuu Gordon Khartuum yimid ayuu diiday amarkii la soo siiyay, wuxuuna dagaal ku qaaday Mahdigii, hase yeeshee arrintaas Gordon wuu ku hoobtay markii askartii uu watay kala go'een, asaga iyo qaar kale ku go'doomeen Khartuum. Markii warkaas dawladda Ingiriiska u gaaray waxaa la soo diray nin kale oo la yiraahdo Wolsey, si uu Gordon uga soo saaro Khartuum. Markii dhibaato iyo dagaal uu maray ayuu galay Khartuum, wuxuuse la kulmay Gordon oo la dilay. Askartii u watay iyo kuwii Gordon ka harayna waddanka Suudaan buu ka dareeriyey 1885tii Mahdigu maamulkii dalka ayuu la wareegay.

Nasiib darrose waxaa noqotay maamulkii Mahdigu in uu ku ekaa muddo aad u gaaban, hase yeehsee, intii uu noolaa wuxuu ku dadaalay inuu baaqiisii fuliyo. Taas oo ahayd inuu Suudaan ku maamulo, sidii khulafadii hore ay wax u maamuli jireen Mahdigu markii uu dhintay waxaa meeshiisii qabtay ninka la yiraahdo Cabdullaahi Khaliifa.

## Taliska Khaliifka Suudaan 1885-1808kii.

Xukunkii Khaliifka waxaa hore uga hadlay qorayaal reer Yurub oo isaga ka soo horjeeday, qaarkoodna colaad u qabeen. Waxay qoreen in dawladdii Khaliifku ahayd mid dib uga dhac san horumarka dadweynaha, waxaanay dicaayaddaas uga dan lahayd in uu Ingiriisku mar kale ku soo laabto waddanka. Hase yeeshee, raad caddayn ahi waxaa ku cad in xukunkii Khaliifku uu ahaa nidaam habaysan oo guuleystey. Cabdullaahi Khaliif wuxuu dhibaato kala kulmay sidii uu uga daadhicin lahaa labadii Khaliif ee kale in uu yahay ninkii uga sarreeyey dawladda.Wuxuu kale oo dhibaato kala kulmay qoyskii Mahdiga, kuwaas oo dhaxal ahaan ugu doodayey in ay qabtaan meelaha ugu waaweyn dawladda.

Dhaqdhaqaaqa Mahdigu wuxuu ku dhisnaa hab diineed iyo isbeddel siyaasadeed. Mahdigu wuxuu ku dhaqaaqay in uu horumarsho xeerkii iyo sharcigii u yaalley adduun weynaha Muslinka, wuxuuna u suuro geliyey kan la socda oo ah horumarinta nolosha aadamiga, inkastuu ka tirsanaa isbaahaysigii walaaltooyadii «Suufiga» haddana waa ka soo horjeedey sifaalaha ay ku dhaqmayeen. Dhaqdhaqaaqyadaas oo dhan, dadka aad cilmiga u leh ee aan jeclayn isbeddelka iyo koox xoolo leh ee Suufiyaal ahiba, Mahdiga lama ayan hayn. Maamulkii Mahdigu wuxuu meel mariwaayey markii uu dhintay. Dhaqdhaqaaqii Mahdigu markuu noolaa si degdeg aah ayey u kordheen dadkii raacsanaa. Taas oo dhalisay in ay isu tagaan bulshooyin badani si ay uga horjeestaan xukunkii Turkiga-Masar.

Haddana markii dawladdii gumeysiga la eryey, Mahdigiina oo dhintay, bulshooyinkii waa kala firdheen waxaana soo cusboonaaday dagaalladii hore ee qabiillada dhex mari jirey.

Cabdullaahi Khaliifa sidaas awgeed waxaa hor yimid dhibaatooyin badan waxaana la gudboonaatay in uu la dagaallamo, kuwaas oo ay ka mid ahaayeen: a) shirqoolka ay abaabuleen qoyiskii Mahdigu sannadkii 1888 iyo 18dii; b) Qabaa'illo kale oo doonaayey in ay ka go'aan dawladda dhexe, samaystaanna dawlad iskeed u madax bannaan.

Reerkii Cabdullaahi uu ka dhashay, lana dhihi jirey Baggara, kuwaas oo lo'ley ahaa oo degganaa agagaarka Darfur waxay ahaayeen kuwii ugu darnaa qalaanqalka. Muddo saddax sana ah ayuu u dirayey ciidammo xasiliya. Sannadkii 1889kii wuxuu u dirayeyna xigtadiisa ah oo la yiraahdo Cusmaan Aadan in uu xukumo, Hase yeeshee, qalaan qalkii Qabiilka muu damin. Waxaana lama huraan ku noqotay inuu ka raro dadkii qaarkood Darfur uu dejiyana degmada Ummdurmaan.



Dhibaatooyinka gudaha waxaa weheliyey kuwo ka haystey dibedda. Sidii ay markeedii horeba Dawladda Ingiriisku go'aan ugu gaartay in ayan soo fara gelin arrimaha Suudaan, ayey ka ahbisay Maaasriduse, marnaba kama ayan damac dhigin in ay ku soo celiso gacanteeda qaybo fara gadan, saas awgeed, Ciidammo Masaari ahaa ayaa la dejiyey agagaarka Aswaan oo aan ka dheerayn soohdinta Suudaan. Ciidammadaasu waxay ku kallifeen in uu heegan ka dhigo ciidammo aan yarayn. Sannadkii 18889kii waxay Suudaan go'aan ku gaartay in duullimaad ay ku qaaddo Masaaridu. Hase yeeshee, gaashaanka loo daruuriyey.

Dhanka Bariga Suudaan waxay soohdin la wadaagtaa Imbaratooriyadda Itoobiya ee Kirishtaaika ah, taas oo cadaadis ku haysay dadka muslinka ah. Isaga oo nin halyeey u ah Diinta, khaliifka waxaa ku waajibey in uu duullaan ku qaado dawladda Kufriga ah, isdaa daraadeed wuxuu ku dhawaaqay dagaal lid ku ah Xabashada. Ciidammada Suudaan waxay duullaan ku qaadeen Itoobiya sannadkii 1889kii, weyna ku guulaysteen. Waxaana Itoobiya lagu jebshay dagaalkii Metemma halkaa oo lagu diley Boqor Joon. Hase yeeshee, dagaalku halkaa kuma uusan dhammaan ee wuu sii kordhay weliba markii uu madaxnimadii qabtay Boqar Menelik. Asaga ayaana billaabay siyaasaddii dhul ballaarasiga, taas oo ay ka kaalin jireen Ingiraaska, Faransiiska iyo Talyaaniga. Kuwaas oo uu la lahaa xiriir saaxiibtinnimo. Khaliifku wuxuu u qabey Boqor Menelik cadowtinimo gaar ahaaneed ooy u gun ahayd sheegashada uu Menelik sheeganayey in Fashooda iyo Khartuum ay qayb ka mid ah boqortooyadiisa yihiin Sannadii 1892dii iyo 1897dii dhexdoodii Menelik wuxuu u soo dejiyey Khaliifka ra'yi kaas oo ahaa in ay ka bahoobaan xagga Ciidammada si ay isu hortaagaan qorshada gumeysiga

reer Yurub, hase yeeshee, midaynta ciidammo ay leedahay dawlad Kirishtaan yo Muslin ahi waa suura geli weydey.

Markay sanadu ahayd 1892kii buu Cabdullaahi wuxuu ka gun gaaray arrimihii gudaha ee waddankiisa, magaalamadaxdii waxaa laga raray Khartuum waxaana loo raray Umdurmaan. Taas oo ku taal Webga Niil dhankiisa kale iyo magaalooyin waaweyn oo ka samaysan agagaarka Jasiiradda Aba oo ahyd xaruntii Khaliifku toos u xukumayey. Dawladda inteedii kale waxaa loo qaybshay gobollo ay xukumi jireen Amiirro, kuwaas oo ku dhaqmayey dhaqankii hore ee khulafada waxayna ahaayeen goddoomiyayaal iyo cashuur qaadayaalba.

Siyaasadda khaliifku waxay ahayd in uu magacaabo Amiirro kuwaas oo ku xirnayn inay u dhasheen gobolka ay u talinayaan. Wuxuu waday dhisidda bulsho asluub wanaagsan leh oo ku farsugan diinta Islaanka. Taas oo ujeeddooyinkii siyaasadda mahdiga ahaa. Waxaa waddanka lagu maamulay niyadsami iyo caddaalad, qofkii sharciga ku xadgudbana oo musuq-maasuq ku kaca, looma dulyeelanayn ee waxaa loo ciqaabi jirey si naxariis darro ah. Cashuurihii waa laga dhimay intay ahaan jireen waqtigii dawladdii Turkya Masar si xilkasnimo lehna waa loo uruurin jirey, dadkuna wuxuu ku bixin jirey niyyad sami. Cadowga far/ha badan ee ku hareeraysanaa waddankeeda ayaa ku kallifay dawladdu in ay lacagta ka soo gashay canshuurta badankeeda ku maamusho gaashaandhigga, in yar ayaana u hari jirtey horumarinta dhaqaalaha.

Qalaanqalkii qabaa'ilkii waa la joojiyey waxay socdaanba. Qabaa'lkii Baggara, kuwaas oo ugu qalaanqal badnaa ugu dambayntii waa beddelmeen waxayna noqdeen qaybtii ugu hanuunsanayd dadkii khaliifka raacsanaa. Qayb madaxtooyadii ka mid ahayd waxaa la geeyey Undurmaan, waxaana loo dhiibay xafiisyo aad u sarreeya ee dawladda. Khaliifku wuxuu ku guuleystey tobankii Sano ee ugu dambeeyey Qarnigii 19aad. Dhowr waddan oo ka mid ah gumeystayaasha reer Yurub ku tali jirey in ay qabsadaan halka u sarraysa WebigaNiil. Taliska Khaliifkuna waa sii waari lahaa haddii ay dawladaha reer Yurub ammaan siin lahaayeen.



## QABSASHADII INGIRIISKA EE SUUDAAN 1898kii.

Tobankii sano ee ugu dambeeyey qarnigii sagaal iyo tobnaad, qorshihii gumeystayaashii reer Yurub qaarkood wuxuu u socdey inay qabsadaan halka u sarraysa Webiga Niilka. Jarmalku waxay kaga yimaadeen dalka Tanganiika, Ingiriiska wuxuu kaga yimid dhanka Ugaadha iyo Kiiniya. Boqorkii Beljinka oo la odhan jirey Leoboldkii labaad, dalka Koongo oo uu haystay ayuu isku sii ballaarshey oo wuxuu u soo durkaydhinacaas isagoo ka socda dhanka Koongo.

Waxay ka hortageen ciidammadii Ingiriiska taasina waxay ku dhibaatesay sidii ay u heli lahaayeen taakulaynta askarta iyo hub ay ku weeraraan xeryaha Ingiriiska. Taas oo dhalisay in niyadsamidii ay hoos u dhacdo iyo tiradoodii oo yaraatey Waxay arrimahaas dhaliyeen in Ingiriisku ka taag roonaado Khaliifka, meeshii ugu dhib badnaan lahaydna ka gudbo isagoo aan khasaaro badani gaarin.

Lord Kitchener oo ahaa madaxa Ciidanka Ingiriiska wuxuu ku dhawaaqay in Ingriisku uu qabsaday Suudaan, wakiilna uu ahaa Khedifkii Masar, maamulka waxaa loogu yaqaan wada-xukunka Ingiriiska Masar, hase yeeshee, run ahaan Ingiriiska ayaa xukumi jirey ilaa iyo madaxbannaanidii buuxdey ee ay qaateen sannadkii 1956dii.

## IMBERADOORIYADDA ITOOBIYA BILOWGEEDII QARNIGII 19aad.

Itoobiya waa waddan taariikh fog leh, waxayna ahayd waddanka keliya oo aan la gumeysan jirin, markii Afrikada kale la gumeysan jirey, haddii laga reebo waqti yar oo Talyaanigu qabsaday oo ahayd 1935-1941, iyo 40 sano oo ay qabsatay Soomaalidu waqtigii Axmad Gurey iyo Amiin Nuur Maxamad Axmad Gurey wuxuu xukumayey 15 sano; Amiir Nuurna 25 sanao Inkastoo ay jirtey Boqortooyada Itoobiya.

Qarnigii 19aad billowgiisii ka hor waddankaas waxaa ku noolaa ummado badan oo ay ka md ahaayeen Eritrea, Wallo, Guraage, Soomaali iyo Siidama. Waddankaas gumeystuhu kuma degdeg jirin in uu gumeysto, sababtoo ahayd in ay haysteen diinta Kirshtaanka.

## SOO GELITAANKII IYO KU FAAFINTII DIINTA KRISTIYAANKA WADDANKA ITOOBIYA.

Waxaa xagga diinta ugu xoog badnaa Masar oo qarnigii 6d ka har lahayd Kaniisado badan oo ay ugu weynayad BATRIARKAL AL ESANDRIYA oo ahayd meeshii uu fadhiyey Shiikha diinta Masiixiga Diinta Itoobiya waxaa laga xukumi jirey Masar oo uu joogey paapaha Mahdabadda Ortodooska. Itoobiya waxay ahayd qayb ka mid ah Afrikada Bari, xagga diintana ka tirsan waddanka Masar. Madaxda diinta Itoobiya waxaa laga soo diri jirey Kaniisadda la yiraahdo PETRIARKA ALESANDRIA. Sida la ogyahay Diinta Masiixgu waxay u qaybsantaa saddex Mahdabadood kuwaasoo ah:

1) Katoolik.
2) Proteestante.
3) Ortodoox.

Middaan ugu dambaysa baana ku faaftey waddanka Itoobiya. diinta Kristiyaanku waxay soo gashay waddanka Itoobya qarnigii 6aad ee dhalashadii Nebi Ciise. Diintaasu waxay ka soo jeedday Masar, waxayna ahayd Ortodoox (Kobtik). Waxaa waddankaas soo geliyey labā wiil oo ka soo hartay doon joogsatay xeeb ku taal Badda Cas..

Doontaas oo ka qaadanaysey biyo xeebtaas ayaa waxaa soo weeraray dad meeshaas degganaa kuwaas oo laayey dadkii doonta saarnaa laba maahee, doontiina jajabyey. Wiilashaasu waxay wax ka soo barteen waddanka Masar xarunta diinta ugu weynayd oo la oran jirey PATRIARKA DI ALESANDRIA. Wiilashaas magacdooda waxaa la oran jirey Frumensio yo Adesio. Markii helay wiilashaas waxaa loo geeyey Boqorkii waddanka Itoobiya Asana, waxayna ku soo hareen gurigiisa. Markaas bay waxay noqdeen dad ka tirsan dadkii boqortooyada lahaa. Frumento markuu weynaaday wuxuu u noqday Masar isagoo ogeysiinhayey in waddankaas looga baahnaa nin aqoon dheer u leh Diinta Kristaanka siiba Mahdabadda Ortodooska (Kobtik). Masar waxaa laga soo diray Frumenzio iyo hal Baadari oo la oran jirey Atanasio



Frumenzio wuxuu ahaa sidii nin gurixigiisii yimid oo kale. Sidaas darteed bay waxay u heleen fursada in ay ku faafiyaan diinta Masiixiga dalka Itoobiya. Waxayna ka billaabeen in ay Kirstaaniyaan Boqorkii yo intii xukunka la haysey. Markaas baa waxaa dhacday in syaasaddii waddankaas lagu maamulayey sidii loo rabey diinta Masiixga, dadkii reer boqor oo dhammina waxay noqdeen Kiristiyaan.

Waagaas wixii ka dambeeyey madaxda diinta Itoobiya waxaa laga soo magacaabi jirey, lagana soo diri jirey waddanka Masar. diinta masiixiga waxay door weyn ka ciyaartay siyaasaddii waddanka Itoobiya. Soo gelitaankii diintaas wixii ka dambeeyey Itoobiya si gaar ah bay ugu xirnayd, waddammada reer Yurub. Ugu dambayntii boqorkii wuxuu noqday madaxii lama dhaafaanka ahaa ee Kaniisadda Itoobiya.

Baadari-yaashii kama caajisin inay aad ugu faafiyaan diintooda waddammada Afrikaanka teer yo gelitaankii Diinta Islaanka. Waxaa jirtey in markii diinta Islaamku ku faaftay Afrikada Bari in Soomaalidii oo dhammi noqdeen Muslin, iyo dad badan oo kale oo ay ka mid yihiin: Gaalla iyo Eritrea, markaabaa waxaa dhacday in dagaallo ka dhex dhasheen waddankii Dagaalladaasi waxay dhaawac weyn gaarsiiyeen diintii Kiristyanka waana fashalantay.

Billogii qaringii 11I aad teer iyo qarnigii 16aad Soomaalidu waxay faafisay diinta Islaanka, waxaana madax ugu ahaa Axmad Gurey iyo Amiir Nuur Maxamad, Axmad Axmaarada wuxuu ku xukumi jirey sharciga Islaanka markay taariikhdu ahayd 1528 tan iyo 1543kii. Amiir Nuurna wuxuu xukumayeye waddankaas laga billaabo 1543-1568kii Diinta Masiixyaddu mar labaad bay soo xoogawdey, markay billaabeen reer Yurub Galbeed in ay gumeystaan. Afrikada Bari, bilowgii qarnigii 19aad. Sida runta ah diinta masiixiga ahi qayb weyn bay ku leedahay siyaasadda adduunka oo dhan, sidaas daraadeed, gumeystaha reer galbeed siyaasaddoodii waxay ku billaabeen in ay ku faafiyaan diintoodii waddamada Afrikada Bari, si ay u soo dhex galaan waddamadaas. Qarnigii 19aad bilowgiisii. ayagoo gaashaan ka dhiganaaya diinta Krishtaanka ah, kana billaabay waddanka Itoobiya, oo horey u haystey diintaas.

IMBARADOORIYADDA ITOOBIYA BILOWGII QARNIGII 19AAD.

Sida aan kor ku soo sheegnay, waddanka Itoobiya bilowgii qarnigii 19aad ka hor wuxuu uqaybsanaa gobollo, kuwaas oo ay u talıyeen madax kala duwan. Siyaasad ahaan waddanka Itoobiya wuxuu isku xirmay qarnigii 19aad bilowgiisii. Itoobiyada cusub waxaa laga bilaabay waqtigii sannadkii Tiyoodor. Itoobiya waa kortay, waxayna xoogowdey bilowgii sannadkii 1840kii, wuxuuna ku dhashay beled yar oo u dhow Kuwaank 1840 dhalashadii Nabi Siise ka dib.

Tiyoodor wuxuu dhashay 1818kii, wuxuuna ku dhashay beled yar oo u dhow Kuwaana, lana yiraahdo Shaarge Tiyoodor yaraantiisii wuxuu ku koray miiskiinnimo, wuxuuna ku jiri jirey kulleejo. Asagu wuxuu ahaa nin cuqdad ka qaba xagga isirkiisii, maxaa yeelay Aabihiis lama aqoon. Tiyoodor wuxuu ahaa nin naxariis daran, geesina ah aayihiisana waxaa xumeeyey naxariis darradaas. Markuu xoogeystey wuxuu madax u noqday niman badan oo ahaa shufto muraadkiisuna wuxuu ahaa in uu heer sare ka gaaro xukunka Itoobiya, ee uu himilada u hayey. Marar badan waxaa u heshiin jiery niman madax u ahaa gobollo ka mid ahaa waddankaas, si ay u ilaashadaan nabad geliyada waddankooda, una haystaan xukunka waddankaas.

Madaxdii ka hor jeeddey waxaa ugu waaweynaa Raskii Gandoor iyo kii Shawa.

Wuxuu diriraba, markii uu noqday boqorkii dhowr gobol, wuxuu u baahday ninkii diinta Masiixiga madaxda u ahaa oo la oran jirey Saama oo aysan la'aantiis madaxnimadiisu rasmi noqoteen, maxaa yeela caadooyinka ay lahaayeen baa ahaa in boqorku ku xiran yahay Diinta. Taariikhdu markey ahayd 1855tii waxaa lagu boqray Teodooro Gondor. Halkaasna waxaa loogu bixiyey Tiyodoor. Laakiin uma suurtoobin in uu ku darsado boqortooyada Shawa oo xoog badan lahayd.

Tiyodoor xukunka intuu hayey wuxuu la kulmay gobollo badan oo ka soo horjeedey maamulkiisii kuwaas oo u keenay dhibaatooyin waaweyn horusocodnimadiisii. Ingiriiska wa-



xaa dhex maray is-afgaranwaa, taasoo ka timid in Ingiriisku ku yiri Tiyodoor qaata Diinta Brotestaniga ah, Tiyodoorana kama yeelin. Maxaa yeelay Itoobiya waxay haysatey diin ka soo jeeddey Baatriyaarko, ayaguna ay oran jireen Abuuna. Muddo yar ka dib waxaa isku xirmay iyaassaddii Tiyoodor iyo madaxdii Diinta Kristiyaanka, waxayna heshiis ku gaareen in la baab'iyo dadkii caabudi jirey Diinta Islaamka 15kii Luuliyo 1854tii beledka Gondor.

Teodooro wuxuu ahaa ninkii u furay irdaha Afrikada bari gumeystaha reer galbeed. Maamulkii siyaasaddiisa ma aysan jeclaysan dadkii ku hoos noolaa xukunkiisa. Waxaa jirtey inuu Tiyoodor xaashi u diray boqorradii la oran jirey Viktooriya 1862dii taasoo uu ku weydiisanahayey in ay yeeshaan xiriir siyaasadeed oo ay isweydaarsadaan Danjireyaal. Nasiib darro xaashidii jawaab kama helin, taasuna waxay sabab u noqotay dumiddii xukunkiisii. Jawaab la'aantii xaashidaasi waxay keentay in Tiyoodor xirxiray nimankii Ingiriiska u joogey waddanka Itoobiya oo u qaabilsanaa siyaasadda dibedda ee waddankaas, hoggaamiyana waxaa u ahaa Kamiruun, iyo niman kale oo loo soo diray ergo. Ingiriisku wuxuu weydiitsay Tiyoodor in uu xabiska ka soo saaro (daayo) nimankaas, Tiyoodarna kama yeelin.

1867dii Ingiriisku wuxuu soo diray ciidammo uu hoggaaminihayey Robeerto Naabiyeer, waxayna yimaadeen Seylac 1868dii. Ingiriisku markaas uma jeedin in uu qabsado waddanka Itoobiya ee wuxuu rabey in nimankiisa loo sii daayo. Sidaan kor ku soo sheegnay Tiyoodor wuxuu ahaa nin aad u qallafsan oo naxariis daran, taasna waxay sabab u noqotay jeediddiisii, maxaa yeelay wuxuu laayey dadkii xukunkiisa ku hoos noolaa badidoodii. Ayagoo noolna qaar buu gubi jirey.

Markaas baa waxaa dhacday in ay kala cararaan, sidaas darteed waxaa isdhimay xooggiisii. Ciidammaadiisii qaarna wuxuu u diray colkii Ingiriiska, qaarna waxay aadeen gobollo ka soo harjeedey Imberadoorka Teodooro. Ingiriiskii iyo ciidammadii Itoobiya waxay isaga hor yimaadeen beledka Makhdala bishii Abriil 1868kii, waxaana ku guuleystey ciidammadii Ingiriiska, Teodoorana intaan gacanta lagu dhigin buu isdiley.

Talyaanigana wuxuu ka eeganaayey Xeebaha Badda Cas Faransiiska oo markaa ku socda in uu qabsado bartamaha dhulka Afrika, isagoo qorshayntaas ka billaabay dhulka ku yaal meesha la yiraahdo Ekuwatooriyo!, Afrika; Senegaal tan iyo Badda Cas. Koonfurta Afrika nin la yiraahdo Cecil Rhodes oo Ingiriis ah, wuxuu ku riyoonayey in uu Ingiriisku yeesho dhul ka bilowda kayb Town oo fidsan ilaa iyo Qaahira oo ay iskuna xiraan waddooyin, Tareenooyin iyo War-isgaarsiinta laliska.

Sidii horeba loo yiri, Ingiriiska wuxuu ka wewel qaabey in dhul ka Masar ee muhiimka ah uusan ku waarin haddii Niilka sare ee la isku haysto ay qabsato dawlad xoog leh, lidna ku ah Ingiriiska. Sidaas awgeed dawladda Ingiriisku waxay ku dadaashay karaankeeda in ay ka celiso dhulkaas dawladihii kale. dawladda Ingiriisku waxay heshiis la samaystay dawladaha Beljamka, Talyaaniga iyo Jarmalka, kaasoo ay si rasmi ahaana isugu aqoonsanayeen dalalka ay hore u haysteen, Wakuna ballan qaadeen in faraha ka qaadaan Niilka sare. Wa-xaase arrintaadiidey faransiiska. Faransiisku wuxuu weligii u haystey in qabashada Ingiriisku qbsaday Masar ay ahayd fal dhagar ah wuxuuna isku dayey in uu qalaanqal geliyo arrintaas. Wuxuuna u diray dad qabsada Niilka sare, kuwaas oo uu doonayey in ay ka soo kicitimaan Koongada Faransiisku gumaysto iyo Afrikada Waqooyi. 1896kii ayaa waxaa arrintaa ku dhaqaaqay nin Faransiis ah oo la yiriihdo Gaashaanle J.B. Marchand, oo ka dhoofay koongada sare kana guul gaaray shaqadii dhibaatada lahayd ee taabidda fashooda, taas oo ku taal Niilka, ahaydna magaala ku taal soohdinta Suudaan. Arrintaasi waxay Ingiriiska gelisay dhiillo, markaas ayey dawladdu go'aan ku gaadhay in Suudaan ayan noqon rudhmo dawlad kale ay liqdo. Qorshihii dagaalka ee lagu qaban lahaa suudaan ayaa degdeg loo dejiyey. Waxaa la dhisay jidad tareeno iyo cutub lagu sido hub aad u cusub, kuwaas oo uu watey Sarreeye H.H. Kitchner ayaa galay Suudaan. sannadkii 1898kii Kitchner iyo Marchand waxay isaga horyimaadeen Fashooda, wuxuuna Kitchner ninkii faransiiska ku sandulleeyey in uu dib u gurto. taas oo dhilisay shilkii Fooshada. Arrintaa awgeed Faransiiska iyo Ingiriiska waxay ku sigteen inay dagaal iskaga hor yimaadaan. Intii taas ayan dhicin ayaa madax bannaanidii suudaan waxaa burburiyey Kitchener Ciidammaadiisii. Ciidammaadii Khaliifku wey badnaayeen geesiyiinna wey ahaayeen, hase yeeshee, waxaa ka maqnaa hubkii cusbaa ee Ingiriiska oo kale. Nasiib darrose waxay ahayd in ay meel dheer kaga hor tageen Ciidammadii Ingiriiska intay ku sugi lahaayeen dhul kayn leh oo ay ugu jilib dhigi lahaayeen weerarka Ingiriiska.



## IMBERADOOR JOON IYO SOO GELITAANKII TALYAANIGA DALKA ARITREA

Joon wuxuu dhashay 1821kii, wuxuuna ahaa reer Tigri, waxay aad isaga soo horjeedeen boqorkii Shawa oo ahaa Menelik. Joon wuxuu qabtay Imberadoornimada 1872kii. Waxaa jirey in garnigii 19aad aakhirkiisii ay reer urubka Galbeed intooda badani dano ka yeesheen Afrikada Bari, gaar ahaan waddanka Itoobiya, sababtoo ahayd in gumeystuhu u soo mari jirey weligiis Afrikada Bari. Jidkaas Itoobiya kuwaasuna waxay ahaayeen Portogaal, Ingiriis, Faranasiis iyo Talyaaniga. Ingiriisku wuxuu ka qabey ra'yi gooni ah gumeysiga Itoobiya. Taasoo ay keentay ka adkaanshihii Imberadoor Teodooro. Ingiriisku wuxuu u arkaayey in Itoobiya tahay dawlad taag daran.

Taariikhdu markay ahayd 1869kii dekedda Casab oo taal Eritrea waxaa gatay Talyaanigo, isagoo ka gatay caaqillada reer Casab oo ahaa niman hur u qaaday. Waxaa maamuli jirey waddnkaas Turkiga. Markaas Talyaanigu wuxuu rabev inuu uga soo dhawaado halkaas waddammada Afrikada Bari, si uu u ogaado meelaha faa'iidooyinka u leh oo uu saldhigga ka dhigan karo. Talyaanigu si rasmi h wuxuu u billaabey gumeysigii waddankaasi 10 Sano kaddib 1879kii.

1881kii Danaakhilladaa waxay baabi'isay talyaani badan. 1883kii wafdi talyaaniga k socda baa heshiis l dhigtey Imberadoor Joon. Heshiiskaas oo Talyaaniga looga og golaanhayey in uu rasmi ahaan u dego waddankaas. 1885kii Masaaridu waxay ka baxeen waddanka Eritrea isla markaas baa waxaa qabsaday Talyaaniga, taasoo dhilisay in ay axmaaradii ka xumaatey, maxaa yeelay, waxay rabeen in ay iyagu gumeystaan talyaaniga hortiis. Itoobiyaankii waxay weerareen talyaanigii, Talyaaniga baana laga adkaaday, sa-

babtoo ahayd in ciidanka talyaanigu yaraa (500), si uu gacantiisa xukunka waddanka Itoobiya u wada galo, Joon wuxuu heshiis la saxiixdy Ingiriiska oo uu ka rabey hub iyo raashin uu siisto askartiisa. Bishii Jannaayo 1868kii Ingiriisku wuxuu soo diray wafdi uu wadey alaabtii uu ka rabey, meeshaasna waxaa lagu kala saxiixday heshiis Ingiriiska uu oggolaaday in uu soo maro waddankaas, si uu afrika u soo galo, kana soo galo Tigri. Imbaradoorku wuxuu ka adkaaday raasaskii kale isagoo u kaashanaya hubkii iyo raashinkii la siiyey. Run ahaan Joon wuxuu ahaa cadowga koowaad ee Islaamka iyo Muslimiintaba. Wuxuuna isku dayey in uu xoog ku Kirishtaamiyo dadkaas Muslinka ahaa. Asagoo oran jirey kala doorta in aad gaala noqotaan iyo in aad dhimataan. Dhibaatooyinkaasi waxay keeneen in ay ka cararaan waddankii oo ay aadaan Suudaan, ayagoo rabey in ay la socodsiiyaan dhibaatooynkaas daraawiishtii Suudaaneed, uu madax u ahaa Maxamad Axmad Mahdi.

Waxaa aad iyo aad uga xumaaday arrintaas madaxdii daraawiishta, waxayna u soo direen xaashi ay ku lahaayeen waa n aad adiga ruuxaagu Muslintaa ama aan dagaal kala saxiiaaannaa. Imbaradoorkuna qiima uma yeelin amarkii daraawiishta.

Taariikhdu markay ahayd 1888kii waxaa soo duulay daraawiishtii oo uu haggaaminayey Abuu-Khange, waxayna soo galeen magaala madaxdii Imbaradooriyad Joon ahayd Gondor, ayagoo ka gubey Kaniisaddii, dadkii oo dhanna ka laayey Waqtigaas Joon wuxuu ku sii jeedey Menelik oo ahaa boqorkii Shawa. Menelik boqornimada laguma magacaabin ee isagaa isa siiyey, markii Aabihiis oo Shawa xukumi jiray dhintay.

Menelik wuxuu ogaa in Joonna rabay in uu ka qaato boqortooyada, si uu isagu u maleeyey joonne, asagoo u direy afartan baadari oo Kiristaan ahaa, kuwaas oo iska dhigaayey Suufiyaal huwanaana maqaar idaad. Badariyaashaas waxay Joon kula taliyeen in uu xooggiisa saaro Daraawiishta Diinta Islaanka haysatey.

Baadariyaashaas iyo Menelik waxay ogaayeen in uusan



Joon ka soo nabad noqonayn dagaalkaas. Dan gaar ah waxaa ka lahaa geerida Joonna Menelik oo rabey in uu Lmberadoor u noqdo waddanka Itoobiya. ogaana in joonne cadow u ahaa. colkii xoogga badnaa oo diyaarka u ahaa in uu laayo ciidammada Menelik, joonne wuxuu u diray Suudaan oo uu madax u ahaa khaliif Cabdullaahi.

Dagaalkii wuxuu dhacay bishii Maarso 1889kii, waxaana laga guuleystay Axmaaradii. Meeshaas waxaa madaxa looga goyey Imbaradoor Joonne. Ciidammada Daraawiishta waxaa hoggaaminayey Sayid Saki. Madaxii Joonne iyo Koofiyaddiisiiba waxaa loo diray magaala-madaxdii Suudaan.

## BOQOR MENELIK IYO DHUL BALLAARSIGII ITOOBIYA.

Menelik wuxuu dhashay 1844kii, wuxuuna ahaa ina Maylemelekood oo ahaa boqorkii Shawa. Menelik boqortooyada wuxuu la wareegay markii Aabihii dhintay oo xukumi jirey gobolka shawa. Menelik aad buu u yaraa markii Aabihii dhintaay, sidaas awgeed wuxuu si rasmi ah xukunka u qabtay 11 kow iyo toban sano kaddib dhimashdii Aabihiis.

Markuu dhintay joonkii IV, Menelik wuxuu ogeysiiyey adduunka in uu noqday Imbaradoorkii Itoobiya. Imbradoodku wuxuu magaalomadax ka dhigtay Fin-Finay (Addis-Abeba), macnihiisuna ahaa Ubixii cusbaa.

Menelik wuxuu ku billaabay siyaasaddiisii sidii ay rabeen gumeystayaasha reer Yurubka Galbeed. Kuwaas oo ah: Ingiriiska, Faransiiska, iyo Talyaaniga. Menelik kuwaas wuxuu u furay jidkii ay u soo mari lahaayeen Afrikada Bari, si ay u gumeystaan. Boqorku wuxuu u duulay Waallo (Ifaat) waana qabsaday.

Boqorkii Wallona wuxuu ku qasbay inuu Kiristaamo, boqorkaasna waxaa la oran jirey Axmad Cali, magaciina waa ka beddeley asaga oo u bixiyey magac Kiristaan oo ahaa Mikaa'iil.

Boqorkaas wuxuu siiyey gabadhiisii, taasoo dabadeed Mikaa'iil u dhashay Ligg Yasu (Ilyaasu). Mar labaadkiina wuxuu u duulay Wallaga, iyadana waa qabsaday. 1885kii fadhigii Baarliin oo lagu qabsanahayey Afrika, Menelik qayb weyn buu ka qaatay, waxaana la siiyey waddammadii u dhowaa Axmaarada, oo ay ka mid ahaayeen boqortooyada Harar (Soomaaliyada Galbeed).

Menelik wuxuu xoog ku qabsaday magaala-madaxdii Harar oo ahayd Harar, 1887kii iyo Gomma Foffa, Sidama iyo Booraama. Intaas waxaa ku caawiyey gumeystaha reer galbeed. Kuwaa oo ahaa : Ingiriiska, Faransiiska Jarmalka, Talyaaniga iyo Boortoqiiska. Menelik wuxuu billaabay in uu qasbo Muslimiinta si ay ku noqdaan Kiristaan. Waxaa laga weriyey Kardinaal masaaya in uu Menelik dadka Muslinka u ahaa dhegaha uga gelin jirey digir si aysan u maqal aadaanka.

Taariikhdu markay ahayd 1889kii waxaa Menelik magac ahaan loo siiyey qayb ka mid ah gobolka galbeed ee Soomaaliyeed magaalamadaxda u ahayd Qabri Daharre. Gobolkaas waxaa siiyey Ingiriiska asagoo u siiyey abaalgud. Abaalgudkaas oo ahaa inuu Menelik ka qyab galay baabi'intii darawiishtaa Mahdi (Suudaan).

1897dii Ingiriiska iyo Menelik waxay kala saxiixdeen heshiis qarsoodi ah. Heshiikaas oo Menelik lagu siiyey gobolka galbeed ee Soomaaliyeed, Hawd iyo intii la xiriirta. Heshiiskaasu wuxuu qarsoonaa teer iyo 1948dii.

1869kii waxaa dirirey Talyaaniga iyo Xabashida oo uu xukumahayey Menelik, dagaalkaasina wuxuu ka dhacay goobtii Addua,waxaana laga adkaaday Talyaaniga, maxaa yeelay Menelik waxaa kaalmeeyey Ingiraaska iyo Faransiiska oo siiyey hub fara badan. Dagaalkaas waxaa sababay heshiiskii dhex maray Menelik iyo Talyaaniga, oo la oran jirey heshiiskii Uccialli. 1889kii markii run ahaan loo eego (fiiriyo), sababtii keentay dagaalkaas waxay ahayd in Ingiriiska iyo Faransiisku ku direen Menelik, ayagoo ku fogeyn haya Talyaaniga oo aysan rabin soo dhex gelidda Afrika, Menelikse wuxuu sabab uga dhigay heshiiskii Uccialli.



## HESHIISKII UCCIALLI

Heshiiskaas oo xagga Menelik mar walba ku dhisnaa qayaano, Menelikii 11aad wuxuu gartay in Itoobiya jiraalkeedu ku sugnaanahayo halis ayadoo hub casri ah yeelata mooyaane, sidaas darteedna wuxuu ku fakerey in uu ka Iibsado Talyaaniga oo asagu markaas Itoobiya hunguriyeynahayey, Waxay markaas kala saxiixdeen Heshiiskii Uccialli oo talyaanigu ku oggolaaday in uu hub siiyo Itoobiya.

Sababta talyaanigu u oggolaaday in ay hub dhiibaan waxay ahayd in Itoobiya ballan qaaddo in uu talyaanigu Maamulo arrimaheeda (Siyaasaddeeda) dibedda. Talyaanigu markuu saxiixay heshiiskii sidaas buu gaarsiiyey dawladaha reer Yurub. Intaan heshiiska la kala saxiixan ayaa Menelik wuxuu weydiistay in af Axmaari lagu qoro kaas keliyana buu saxiixay. Menelik mar alla markii hubkii u soo gacan galay ayuu wareegto u diray dawladaha reer Yurub 1891kii, wareegtadaas oo uu ku caddaynahayey in uusan Talyaanigu wakiil ka ahayn Itoobiya, una sheegahayey in heshiiskii ku qornaa Af-Axmaariga keliya inuu saxiixay. Wareegtadiisiina wuxuu ku qoray caynkaas. Halkaana waxaa la caddaatay in Menelik qayaanay Talyaaniga oo heshiiska af talyaaniga ah iyo kan Axmaariga ah ay kala duwanaayeen. Markay Talyaanigii ogaadeen waxay isku dayeen in ay Menelik ka ridaan boqortooyada. Arrintaas waxba way ka qaban kari waayeen. Waxaa markaas la gudboonaatay in sida keliya oo ay Itoobiya uga aar gudan karaan ay tahay ayagoo dagaal ku soo qaada. Waxayna billaabeen in ay u tabaabusheystaan duulaankaas, ayagoo ay arrintaas ku dhiirri gelinaysey sidii fududayd ee ingiriisku uga adkaaday Itoobiya. Talyaanigu haba yaraatee ma uusan tixgelin tirada askarta Itoobiya hubka cusub ee uu siiyey iyo aqoonta ay u leeyihiin dhulkooda.

Waxyaabahaas oo dhan ayaa keenay in Talyaaniga lagu jebiyo goobtii Adduwa, 1896kii. Guushaasu waxay u soo jiiday qaddarin iyo aqoonsi weyn oo ay ka hesho dawladaha reer Yurub, waxayna u suura gelisay in ay ka cayaarto door weyn qabsigii afrikada Bari. Isla markaana 1896kii Talyaanigu wuxuu adduunweynaha u sheegay in Soomaali-

yada Koonfureed (Banaadir) ay noqotay qayb ka mid ah Taliska Talyaaniga.

Menelik wuxuu goostay in uu ka soa hor maro Talyaaniga si asagu u gumeysto, waxaase dhacday in markuu soo gaaray Balcad Qarnigii 20aad bilowgiisii, uu baabi'iyey col uu abbaanduule ka ahaa Sh-Xasan Barsane. Taariikhdu markay ahayd 1897kii wxaa jirtey in heshiis dhex maray Menelik iyo Faransiiska, heshiiskaas oo ahaa in soohdin la sameeyey qaybinaysa xeebta Soomaaliyeed oo Faransiisku gumeysto iyo Soomaaliyada galbeed oo ay gumeysato Itoobiya.

Isla sannadkaas bishii Juunyo 4dii, waxaa jirey heshiis kale oo dhex maray Menelik iyo Ingiriiska, heshiiskaas oo ahaa in soohdin loo sameeyo gobolka Soomaaliyada waqooyi oo Igiriisku gumeysto iyo gobolka Soomaaliyada galbeed oo xabashidu gumeysato.

Bishii Maajo 18dii, 1908 waxa heshiiyay Menelek iyo Talyaaniga ayagoo sameeystay soohdin qaybinaysa gobolka Soomaaliyada koofureed oo Talyaanigu gumeysto iyo gobolka Soomaaliyada galbeed oo Amxaaradu gumeysato.

1911kii waxaa dhintay Menelik wuxuuna u dhintay cudur xun oo ka galay madaxa. Imbiradooriyadiina waxaa qaatay wiilkii gabadhiisu dhashay oo ahaa Liig Yasuu (Ilyaasu), markuu xukunkii la wareegay kaddib, buu islaamay asagoo ku qoray calankii Itoobiya ashahaadada. Waqtigii ka dibna xaashi buu qoray Aabihiis oo xukumahayey gobolka Wallo, asagoo ku lahaa waa inaad u soo noqotaa diintiidii hore oo ahyad islaanka, maxaa yeelay annagu waxaan nahay dhashii Nebi Maxamed, isla markiiba aabbihii wuxuu u soo noqday diintiisii. Waxaana jirtay in Menelik markii u qabsaday woallo inuu aabihii ku qasbay inuu noqdo kiristaan magaciina ka beddelay asagoo u bixiyey Mikaaiil, markii horena la oran jirey Axmed Cali. Markaas ka hor Axmed Cali wuxuu ahaa boqorkii wallo, Menelikna wuxuu ka dhigay Raas.

Liig Yaasu wuxuu u qoray xaashi Sayid Maxamed Cabdulle Xasan taasoo uu ku lahaa waxaan nahay isku diin iyo



isku dudba, marka adiguna waa inaad laysaa gaalada cad cad, ama midda madow. Wuxuuna u diray laba nin oo u sameysa hubka qarxada Ilyaas wuxuu qoray 15.000 oo nin oo Soomaali ah kuwaas oo daafacahayey diinta Islaamka.

## DALBALLAARSIGII XABASHIDA.

Geeska Afrika wuxuu indhaha Yurubta ku dhacay qarnigaa 19aad barkiisii dambe, danaha ay ka lahaayeen waxay aad u sii kordheen markii la furay biyomareenka Sues 1869kii.

Intaa kahor xiriir siyaasadeed oo aad u weyn oo dhexmaray Yurub iyo geeska Afrika ma jirin, marka laga reebo maraakiib socdaallo oo xeebaha ku nasata ama rag sahan ah. Furitaankii biyo mareenka Sues ayaa wuxuu kordhiyey qiimiga stratejiga ee geeska Afrika uu lahaa, waxaana bilawday tartan ay dawladaha reer Yurub ku kala boobayaan. waddammada ku yaal. Tartankaa waxa aad uga faa'iidaysatay oo gumeysi ku qasabtay dad iyo dal fara badan oo ayan hore waxbaugu ku qasabtay dad iyo dal fara badan oo ayan hore waxba ugu sheeganjirin boqortooyada xabasshidu. Sahmiyayaashii, iyo baaderiyaashii reer Yurub oo u horreysey oo tegay dalka boqortooyada xabashida waxay buugaagtooda ku qoreen in ay qaybsanayd dhowr dawladood oo mid walba lahayd boqorkeed kuwaas oo ay u waaweynayeen boqortooyinka Shawa, Amxara, Tigre, awoodda Imbaradoorku leeyahay, taliskoodana arah dhaafsiinayn, waxay ahaayeen dhab ahaantii boqorro madax bannaan oo had iyo goor dhexdooda ka dagaallamaaya. Waxa boqortooyada xabashida ka dhigay dawlad rasmi ah oo taliska oo dhan gacantiisa isugu soo urursha Imbaridoor Tiyodoor.

Boqortooyada Xabashida waqtigaa waxay ku egtahay dhulka xabashidu u badan tahay, kaasoo ah Gobollada shawa, Gojaam, Amxara, iyo Tigre. Qaybsashada dalalka gaallada, Soomaalida Danaakiisha waa mid dhacday wqtigii Minilik oo qayb weyn ka qaatay kala boobkii geeska Afrika ee gumeystayaasha reer Yurub, dhulalka ay xabashidu iyo gumeystayaasha reer Yurub, kala boobeen waxaa deggan dad isirkoodu yahay reer Kuush oo iskaga mid ah xagga Afka, dhaqanka iyo diintaba, waligoodna ayagoo isku duuban ka soo

hoijeedi jiray baqartooyada xabashida oo ayadu diinta, Afka dhaqanka intaba kaga duwan.

Tartanka loo galay kala boobka waddamada ku yaal geeska Afrika waxa run ahaantii bilaabay Khadiif Ismaaciil oo ahaa taliyihii dalka Masar. Khudayf Ismaaciil andaco ayuu soo hormariyey sannadku markuu ahaa 1869kii uu ku sheeganaaayey xeebaha Soomaalida, isaga oo la kaashanaayey xukunkeeda oo ay ku wareejiyeen Dawladda Turkiga. 1879kii ciidammada Masar waxay hantiyeen Saylac, Harar iyo xeebaha geeska, sidaasna waxa u oggolaaday heshiis iyaga iyo Ingiriiska ku dhexmaray magaalada Aleskandariya. Wuxuu xukumayey muddo dhan toban sannadood. wakhtigaa tartanku jirey Ingiriisku aad ayuu ugu fara adeygayey gacanka Cadmeed una diiday in ay dawald kale u soo dhowaato isaga oo danihiisa gaar ahaaneed ku ilaalinaayey. sannadku markuu ahaa 1880kii, dawladda Talyaaniga ayaa degtay Casab oo heshiisyo la sameystay Caaqilladii Eritrea.

Faransiiskuna si u wax ula qaybsado dawladaha kale wuxuu soo nooleeyey danuhuu ku lahaa Obokh, kuwaasoo ku xirnaa heshiisyo u dadka reer Obokh hore ula sameystay. Sannadku markuu ahaa 1884kii ayaa Ingiriisku qabsaday qayb xeebta badda Cas ah, isaga oo ka faa'iideysanaaya ciidammada Mahadiga suudaan. Waxa kale oo Ingiriisku raadsaday taageerada Imbaridoorka xabashida joon, isaga oo ugu ballan qaadaya wadanka ay Masar xukumeysay ee ka shisheeyey Mosowac, Talyaanigana wuxuu Ingiriisku kula heshiiyey inuu qaato, Masawac, Talyaanigana wuxuu Ingiriisku kula heshiiyeyinuu Masawac, arrimhaa wuxuu ula dan lahaa in uu ciriiri geliyo Faransiiska danuhuu kulahaa Tojoro, uguna dheelitiro xoogga faransiiska, kaasoo ahaa dawladda keliya ee u dhiganta. Masar oo sidaynnu soo sheegnay ay laciifiyeen Mahdiga Ciidammadiisii, waxaa khasab ku noqotay inay ka baxdo harar, xeebaha Soomaalida iyo dalalkii geeska ahaaba.

Markaa dabadeed madax wareer ayaa ku dhacday Ingiriiska, dhan waxay rabeen in magaalada Beabera aan loogu imaan si ay u hubiyaan in hilibkii ay u rabeen ciidammadooda. Cadan fadhiya, aanu go'in.



Waxaa kale oo ay doonyeen xeebta Tojoro iyo Saylac in Masar sii xukunto, taasoo u fududeyneysa xukunka waddanka kana ilaalineysa Talyaaniga iyo Faransiiska in aanay faraha la soo gelin xukunka waddanka. Arrintaasi waxay keentay in dawlad kastaba siyaasadeedii xoog u yeesho, fiiro gaarna waxay siiyeen Casab iyo Tojora oo ahaa dekedaha labada Boqortooyo ee xabashida «Tigreiyo Shawa» dibadaha kala ganacsadaan. Saylac oo ganacsiga gudaha geeska badankiisa haystey, Berbera oo qudheedu safarro fara badani ay soo geli jireen, dekedahaas aynu soo tirinnay waxay ahyeen kuwa gumeystayaashu inay hantiyaan doonayeen. Dawlad walibana waxay dhinaca saartay Dawladda Xabashida hub iyo rasaasna siiyey taas oo raad xun kaga tagtay geeska Afrika. 1894kii, oo ahaa sannadkii Masaaridu ka guurtay Harar ayaa boqorkii Xabashiga ahaa ee Shawa xukumi jirey «Menelik» gacan kaalmo u taagay Farasiis si ay u qabsadaan Harar. Taasi ma dhicin, Hararna waxaa loo dhiibay inankuu dhalay Amiirkii xukumi jiery Harar oo la oran jiray Amiir Cabdullaahi. Sannadku markuu ahaa 1886kii, ayaa koox Talyaaniya oo shan ahi farrin Amiir Cadullaahi Saylac uga soo direen sheegaysay in ay Amiir Cabdullaahi hadiyad qaali ah ay u sidaan.

Arrintaas isaga oo garawsan waayey awgeed Amiirkii wuxuu amray in la laayo. Sidii baana lagu laayey, taas buu Menelikmarmarsiiyo uga dhigtay in uu qabsado Harar isagoo foodsaarro ka dhiganaya in uu daafacayo diinta Masiixiga ah, oggolaanayina in rag Masiixi ah la laayo. Runtuse waxay ahayd in uu dal ballaadhsi wadey isla markaana ka baqanaayey in Amiir Cabdullaahi waddnkiisa hantiyo, baqartooyadiisana baabi'iyo. Menelik halkaas ayuu ka sii qaaday dal ballaadhsigiisii.

Markuu qabsanaayey Harar wuxuu u soo diray Ciidan Abbaanduule uu ka yahay Raas wallo Gariel. Hase yeeshee, waa lajebshey, mar labaad ayaa ciidan uu hor kacaayo boqor Menelik oo dhan 30,000 weerar Harar ku soo qaadeen. Ciidankii Harar halkaasaa lagu jebshey bishii Febraayo 1887dii. Taasi xabashidu waxay u arkeen aargoosi dagaalladii Axmed Gurey ay kaga aargoosanayaan, labada dagaalse isumay dhigmeyn sababtoo ah Menelik dano u gaar ah ayuu watay, Axmed Gureyna danaha dadka deggan halkaa ayuu watay. Harar markii la qabsaday waxaa looga tegey hub iyo saanad fara badan ay uga tageen Maaasridu si Amiir Cabdullaahi isugu daafaco.

hubkaas xabashidii ayuu faraha u galay. Intaa ka dib Raas Makonnen, Menelik ina adeerkii ahaana Hayle Sellaas aabihii ayaa looga dhigay Barasaab gobol wakhtigaas ayaana u horreeyey xabashi xukunta dad Soomaali ah. Menelik intaa kumuu joojin dalballaadhsigiisii ee hore ayuu u sii waday. Ciidammo uu hor kacaayo Fitawariiri Mangueh ayuu u diray jigjiga, halkaas oo ahayd meesha xooluhu uga cabbaan dad badan oo Soomaaliyeed, kuna kulmi jireen safarrada ka yimaada berbera Harar iyo Soomaaliyada Galbeed. Marka laga reebo duullaan marmar ah, xabashidu Bariga jigjiga soo maanay dhaafin ilaa 1901. wakhtigaas oo ahaa markii Ingriisku la dagaallamayey Daraawiishtii Sayid Maxamed Cadulle Xasan. Meelaha kale ay xabashidu soo gaadheen ka hor 1901dii waxaa ka mid ah: biyaqaboobe ilaa 64 kiiloometir uga jirta waqooyi Bari geesa. Menelik meelaha uu qabsaday markuu dood ka bixinaayo wuxuu ka andacoon jirey qabsigiisaasi in uu la xiriiro wareegtadiisii 1891kii uu u diray dalalka Yurubta galbeed, kuna sheeganaayey dhul badan oo ku siman khartuum xagga waqooyiga, Harar, Naysa dhanka koonfureed, xagga barigana Badweynta Hindiya.

Ingiriisku dhowr jeer ayuu dacwd u jeediyey Talyaaniga oo kalsooni aay ku lahaayeen xabashidu dacwadaas oo ahayd qabsiga Biyaqaboobe, dhaca ay xabashidu sameyaan iyo fadqalalooyin fara badan oo kale. Arrintaa Talyaanigu waxba kamuu qaban, sababtoo ah xiriirkii Talyaaniga iyo xabashida oo sii xumaanayey markaas, Menelikna kalliftay 1892kii in ay siyaasaddiisu u xagliyo xagga Faransiiska heshiisna uu la sameysto in ceelal biyo looga qodo jidka u dhexeeya Jabuuti iyo Xabashida. Isla markaa Faransiisku tallaabooyin degdeg ah ayuu qaaday siduu Obokh uga beddeli lahaa ugana beddeli saldhigga taliska uguna beddeli lahaa Jibuuti. Ingiriisku arrimihiisii isaga oo daba socda ayaa Jopp oo u fadhiyey Cadan una qaabilsanaa dalka Soomaalida uu tegey magaalamadaxda Ingiriiska si uu ugala soo hadlo arrinta. Dawladdiisu waxay dabadeedna u ogolaatay in sarkaal Ingiriis ah hadiyad na socota boqorrada Ingiriiska, Viictoria u gayso Menelik isla markaana martiqaadaya Mekonnon.

Ujeedada ay kala hadlayaan waxay ahayd qabsigii Biyaqaboobe waxa kle oo ku jirey inuu kala hadlo heshiisyadii Ingiriisku la lahaa Soomaalida ee ahaa ilaalinta tixgelinteeda. Wada hadallada waxa kale oo ku jirey ciidammadii xabashida ee burcadda ahina laga joojiyo dadka Soomaalida ah ay dhacayaan.

Guddigaas dibaa loo dhigay ilaa muddo aan la ogeyn sababta oo ah Talyaaniga oo magacaabay guddi hase yeeshee aan soo dirin. Soomaaliya inta dabadeed waxay noqotay dhul lagu tartamo qaybsigiisa. Xagga waqooyiga Talyaaniga iyo Ingiriisku xad u dhexeeya ayay sameysteen taas oo aanay ogeysiin xabashida iyo Soomaalida midna, xumeyseyna xidhiidhkii xabashida iyo Ingiriiska. Si arrintaa looga hor tago wuxuu u soo diray xabashida Rennel Rold guddi madax uu ka yahay, qodobbada uu kala hadlayey Menelik wuxuu war ka soo baxay aqalka Ingiriiska ku sheegay in ay ahaayeen:

a) Hubinta saaxiibtinimada labada waddan in ay sii waarto;

b) In isweydaarsi siyaasadeed iyo dhaqaale ay yeeshaan;

t) In arrimaha maxmiyadda iyo xabashida la dejiyo.

Arrinta ka sii weyneyd waxay ahayd in Menelik aan la dhayalsan marka Ingiriiska iyo Franasiisku tartanka webiga Niil iskaga horyimaadaan iyo in uu Rodd soo hubiyo ugu yaraan in Menelik dhexdhexaad ka ahaado marka Ingiriiska iyo Faransiisku is qabtaan.

### Heshiisyadii 1897.

Heshiisyadii 1897dii intii ka horreeysay xabashidu wax badan ayey isku dayday in ay xoog ku soo gasho dalka Soomaayeed, hase yeeshee, wey u suuro geli weyday, oo Soomaalidu waxay lahayd xoog caabiyi kara inta badanna way kaba xoog roonayd. Taas tusaale waxaa u ah kaalmada xabashidu ka heli jirtey shisheeyaha si ay isaga celiso Soomaalida.

Dawladaha shesheeyaha waxay u siinaayeen kaalmada u badneyd hubka waxay ahayd in ay wadaagaan diinta, iyo dano kale oo fara badan. Danahaa kale waxaynnu ka garan karnaa in ay wadaagi jireen dalballaadhiska ay wada wadeen. Marag waxa u ahayd markii ay gumeysatadu ku wareejiyeen dal badan kana mid ah dalka Soomaaliyeed iyaga oon ogeysiin Soomaalida. Haddaba innaga oo taa og, sidey u kala bixiyeen bal aan taataabanno.

Xagga waqooyiga ee Ingiriisku xukumi jirey 1897 waxay noqotay markii la qeexay soohdin ku sheegtii Soomaalida iyo xabashida u dhexeeyey. Arrintaasi waxay ahayd mid aanay

ogeyn dadka Soomaaliyeed. Waxay ogaadeen 1934 markii loo saaray guddi calaameysa soohdinta, taasi waxay keentay, dhaqdhaqaaq dadka Soomaaliyeed sameeyeen, kuna dileen nin ka mid ah guddigii. Guddi kale oo ka socotay Faransiiska madaxna ka ahaa nin la yiraahdo «Lagarde», ayaa kala xaajooday Menelik soohdinta Jabuuti iyo Xabashida 1897kii waxaana lagu dhammeeyey in uu Faransiiskc siiyo dal badan oo ka mid ah xeebta Soomaalida dhulka beddelkiis Menelik wuxuu Faransiiska u oggolaaday dhismihii tareenka ee isku xiri lahaa Jabuuti iyo dhulka xabashida taasoo looga dan lahaa in jabuuti ay noqoto marinka ganacsiga dibedda ee xabashida. Xagga koonfureed haddeynnu eegno Talyaaniga wuxuu isku deyey in uu ku fara adeygo danahuu ku lahaa iyo dalkuu ka deyeyba. Kaddibse waxaa lagu khasbay markii lagu jebiyey Addowa, heshiis. Heshiiskaas waxaa ka qayb qaatay dhanka Talyaaniga nin la odhan jirey «Nerassin», heshiiskaa Talyaaniga waxaa la oggoleysiiyey in uu ka haro sheegashada Soomaaliyada Galbeed. Dhulkaas Talyqaanigu wuxuu ku haystay heshiisyo dhexmaray Ingiriiska labadoodii 1894kii.

Talyaanigu dhulkii uu ka harey si cad looma qeexin inkastoo soohdinta ballaarkeeda lagu qiyaasaay 288km, marka laga bilaabo xeebta, dhanka waqooyiga wuxuu ku sinnaa xadka Ingiriisku u lahaa koonfur ilaa Webiga Jubba inta waqooyi ka xigta Baardheere.

Talyaaniga iyo xabashidu heshiiska ay sameysteen isaga oo lagu wada inuu hirgalo, wuxuu muddo ka dib kiciyey is-afgaranwaa ka dhex dhacay sababna u noqotay dagaalkii walwaal. Taasi waxay keentay xad heshiis lagu yahay in aanu ka sameysmin. Dalballaariskii xabashidu wadey muddadaa faraha badan intaas ayuu ku ekaaday iyada oo ay gacan ku lahaayeen dalalka reer Yurub ee wax gumeysan jirey, gaar ahaan Talyaaniga, Ingiriiska iyo Faransiiska oo heshiis kula galay xabashida qaybsiga dalka Soomaaliyeed, iyaga oo eegaya danahooda ilaabayana danta Soomaalida. Soomaalidu markay arrimahaa ka warheshay waxaa ku abuurmay niyad cusub, halgan gobannimadoon kaasoo ay kula dagaallamaayaan gumeysiga kuna dhacsanayaan dalkooda, diintoodana ku xoojinakacaan Soomaaliyeed ayaa bilaabmay oo keenay gobannimada Ummadda Soomaaliyeed .



## XEEBTA BADWEYNTA HINDIYA IYO JASIIRADAHA 1000 - 15000

Qarniyadii 10-15aad bilaaowgoodii demooyin ganacsi way ku yaraayeen inta u dhexaysa geeska Afrika ilaa waqooyiga Moosaanbiik, iyo xeebaha qaarkoodba. Hase yeeshee, markay ganacsatooyin reer Aasiya ahi ay yidmaadeen waxaa aad isugu xidhamay ganacsigii iyo geddiskii Badweynta Hindiya, jasiiradaha iyo gudaha Afrikada Bari, waxa jirtay in tuulooyinkii isu rogeen magaalooyin yar yar, 1400kiina uga yaraan 37 magaalo ay dhulkaas ka hanaqaaday,, qaarkoodna caan bayba noqdeen.

Casharrada soo socda magaalooyinka xeebaha Badweynta Hindiya ka dhismay ayeynnu kaga faalloon doonnaa.


### SOO GELIDDII DIINTA ISLAAMKA

Laba kun oo sano ka hor ayaa tuulooyin yar yar oo beeraaley iyo kalluumeysato ahi ka sameysmeen xeebata Afrika. Hase ahaatee, culimada arkiyolooyigu qalabkii ay ka heleen wuxuu ku sinnaa ilaa 700 oo sano ka hor.

Jasiiradaha Sansibaar ayaa ka mid ah meelaha qalabka laga helay dadka xeebaha deggannaa waxay xiriir ganacsi la lahaayeen geddisleyda isaga gudubta gacanka Carabta iyo Xeebaha Bariga Afrika. Astaamaha inoo muujinaya xiriirkaa waxaa ka mid ah weel dhoobo ka sameysan oo laga helay barigaAfrika. Mase hubin karno inay dadka xeebahaa waqtigaa Islaamku uu soo gaaray; waxaa astaan ah oo la raad raaco lama helin. Marakayse taariikhdu ahayd 900 dbnta Islaamku waxay la kulantay waqti fiican aadna way u dhisantay.
Sidaa daraadeed ayaa doonyo badan iyo ganacsataba soo gudbeen Afrikada bari, iyagoo raadinaya dahab, caag qolof diin iyo waxyaabihii ay Afrikada Bari weligoodba caanka ku ahayd. Taasi waxay keentay in tuulooyinkii magaalooyin noqdaan, diinta Islaamkuna dhidibbadeedii ku aasto Bariga qaaradda Madow. Meelaha ugu horreyey Islaannimada waa Manda, Pemba, iyo Sansibaar. Wada deggii, iska-guursigii iyo dhaqan is-weydaarsigii dadka xeebaha Bariga iyo Carabta waxa ka dhex abuurmay, ilbaxnimo iyo dhaqan loo yaqaan Sawaaxili. 1000 C.D. Sansibaar, Pemba, iyo magaalooyinka ku yaal xeebta Banaadirba waxaa degganaa bulshooyin badan oo muslin ah. 1100 C.D. ayaa markii ugu horreysey Masaajiddadii

dhagax laga dhisay magaalooyinka qaarkoodna waxay isu rogeen degmooyin iyagu iskood isu xukuma. Magaalo qaran waa mid awoodda siyaasiga ahi oo dhammi gacanta magaalada iyo taliyaheeda ku jirto hase ahaatee, awooddaasi ku fiddo miyiga iyo hareeraha magaaladaba. Magaalooyinka sifaha leh waxaa ka mid ahaa kilwa oo aynnu ka faalloon doonno.

## GANACSATADII HORE EE MUSLIINKA DAAYBUULI




Dadkii ku noolaa magaalooyinka aynnu hore u soo sheegnay waxay ahaayeen awoowayaasha dadka maanta loo yaqaan Sawaaxili. Dadkaasu waxay ahaayeen beel ka mid ah dadka ku hadla afafka la yiraahdo Baantuga. Had iyo jeerse waxa soo kordhi jirey dadka Carabta ah. Qaarkood waxay yeesheen awood siyaasi ah, maamulkii dhulkana way ka qayb qaateen. Bal haddaba aan isweydiinee, goormay dadka shisheeyaha ahi Bariga Afrika yimaadeen? Laba astaamood ayaa inna kaalmayn kara:

1) Cilmiga arkiyooloojiga.
2) Sheekooyinka dhaqanka ka hadla iyo caadada dadka.

Haddaynnu xagga Arkiyooloojiga eegno waxaynu ogaanaynaa in astaamahii ugu horreyyey ee muujinaya in dadkaasu muslin ahaayeen, waxay ku siman yihiin 900 sano. Laakiin tusaalooyinka iyo sheekooyinka aynnu ka akhrinay buugagga taariikhda xeebaha :-

a) Muqdisho oo ahaa xeebta Banaadir
b) Pate
t) Laamu
j) Momhaasa, iyo
x) Pemba oo kulli ku wada yaalla dalka Keeniya.
kh) Kilwa oo ku taalla dalka Talyaaniga.

Taariikhda magaalooyinkaas waxay wada sheeganayaan in diinta Islaamku ka horreysey 900 C.D. Arrintaasu khilaaf ayey dhalisay inta badanse culammada taariikhdu waxay isxigyaan dhinaca Arkiyooloojiga, sababtoo ah taariikhda xeebta waxay si qoran oo tifaftiran loo dhigay boqolaalkii sano ee danbe. Sheekooyinka xeebta waxaa kuwa hirgalay ka mid ah dadkii soo duulay ee loo yiqiin Daaybuuli. Daaybuuli waxay ka farcameen Carab u dal doorsatay magaalada Daaybuul oo ku taal waqooyi galbeed xeebta Hindiya 74 C.D. Magaalada Daaybuulna waxay caan ku noqotay ganacsi.

Tiradoodu may badnayn, hase yeeshee, waxay daaybuliintu keeneen fikrado cusub, magaalooyinkay dhiseenna waxay yeesheen caadooyin iyo dhaqan muslin oo uu ku talaalan yahay garashada iyo dhaqan Afrikaan.


Dadka magaalooyinkaa degganaa waxay qabeen dareen muslin, waxayna ku barbaraareen inay ka mid yihiin dadweynaha muslinka ah (Umma). Aan xuusus u lahaanneese, dadka xeebta degganaa, ma ay wada ahayn Carab iyo Hindi, waxayna u badnaayeen dad Afrikaan ah, nimanka magacyada Carabiga lahaa marar badan waxay ahaayeen rag madow laakiin muslimay.

Ilbaxnimada halkaa ka dhalatay aynnu hore u sheegnay inay tahay sawaaxili waxay noqotay ilbanimo Afrikaan ah, oo marna dhalan rog ku ridin dadka ee hufnaan iyo garasho ku kordhisay. Ilbaxnimadaas xeebta Afrika waxay la dhigantaa ilbaxnimooyinka Afrikada waqooyi ee dadka barberiyiinta iyo ilbaxnimadii Soodaanta ee galbeedka Afrika.

Magaalooyinkii dhulalka ka hanaqaadayna waxay ahaayeen Magaalooyin Afrikaan ah. Adduunka in lays dhex gaɪo ama waxbarasho lays dhaafsado waa mid lagama maarmaan ah. Haddaynnu taariikhda Ingiriiska dib ugu noqonno, waxaynnu ogaanaynaa in 1066 markii xeebta Afrika Bari ay ku dhaqmaysay casrigii Daaybuli in iman caaqillo ah oo Faransiis ihi ay Iglan dagaal-weyn ku qaadeen, Anglo-Saaksonkana ay ka adkaadeen. Halkaana ay isku dhex galeen iskana dhexguursadeen Faransiiskii iyo Anglo-Saksonkii. Inglan waxaa lagu dhisay Kaniisado, boqorraduna waxay ku hadli jireen afka Faransiiska. Dadakii Anglo-Saksonka ahaaba waxay isaga fikiri jireen inay yihiin Faransiis. Ilbaxnimadii Iglan waxay noqotay Ingiriis ee Anglo-Sakson iyo Fransiis midna may noqo. Ilaa maantana Afka Ingiriiska waxaa laga nelaa erayo badan oo Fransiis ah. Taariikhdii Xeebta Afrika waa mid la barbardhigi karaa a Ingiriiska. Aadamigu in uu weligii is dhex gelayey waa in had iyo jeer haabka lagu hayaa.

## SANSIBAAR iyo PEMBA

Tusaalooyinka ugu fiican ee casrigii Daaybuli waa magaca Sansibaar. Tusaaladaasu waxay inoo muujinaysaa isbeddelka afka ku dhacay. Magacii Jasiiradda ee hore waxaa la oran jiray Yanguja. Laakiin Carabtu waxay ku magacaabeen Zanjibaar taasu oo ulajeeddadeedu tahay xeebtii dadka madow. Asal ahaan eraygu waa Faarisi. Astaama kale waxaa ka mid ah sanadkooda isbeddelka qorraxda. Maalinta u horreysa sannadana waxay yeelaan jireen dabbaaldeg lagu magacaabi jirey Nayruush.



*Zinjibaar waqtigii Sayid Saciid*

Waxaynnu ogaanay in Zansibaar Nayruushka lagu xusi jirey ilaa iyo intay xiriirka la yeelatay Faarsiiyinta iyo Carabta. Erayada Shaaha iyo Diwaani oo saamaynaaya taliyaha ayaa ka mid ah erayad soao kordhay. Erayada Faarisiga ah waxaa keenay xeebta Afrika niman Carab ah oo iyakaba afkooda ay erayadaa Faarisiga ihi dhex galeen. Carabta degganayd xeebaha loo yihiin gacanka Carabta waxay qaateen wax badan oo ay leeyihiin Faarisiyiintu. Afkii Carabiga ahaanna waxaa dhex galay erayo Beershiyan ah. Zansibar iyo Pemba waxay ahaayeen labadii meelood ee u horreeyey ee muslimiintu degaan, waxayna markii u horreysay degeen jasiirado yar yar, oo ay ka mid yihiinTumbatu, Kisimkasi oo labadaba Zansibaar ah. Mkumbu oo Pemba ku taalla degmooyinka waxaa loo dhisay si adag, cadowgana way ka gaashaanteen dadkii meeshaa degganaa. Magaalada Kisimasi waxaa laga helay gidaar ay ku qoran tahay in nin la oran jirey Sheekh Al-Sayid Amran u amar ku bixiyey in la dhiso masaajid maalintay kowsatay bishii dul-Caqada.

## JULAY 27 C.D. 1107

Magaalooyinkii way waaweynaadeen, xooggoodii siyaasiga ahaa iyo kii milateriga ahaana wuu kordhay. Nimankii xukumayeyna waxay ka dhisteen guryo qurxan. Weelkoodna waxay ka iibsa jireen Faarisiyiinta iyo dhulka Shiinaha, dhar qurxoon badanna waxay ka keensan jireen Hindiya. Heerka nolashuna aad buu u sarreeyey Boqorrada iyo nimanka kale ee wax xukumaana dad aad u badan ayaa u adeegi jirey. Xusuus aynnu u lahaanno in dadweynaha noloshoodu dhibaato ku sugnayd. Beeralayda, Kalluumaysatada iyo Adeegayaashu dhib bay ku jireen, xooggoodana waxaa ka faa'iidaysanaayeen boqorrada. Midhaha ilbaxnimadii hore may wada sameeyeen dadweynaha. Dadka reer Hadinu ee reer Sanzibaar waxay ku tawaawici jireen naxariis darridii reer Daaybuuli.

## XIRIIRKA XEEBTA IYO BARIGA FOG

Casriga aynnu ka faalloonnay ee hore, waxaa ka dambeeyey casrigaa labaad oo ka bilaabmay 1200 waxaanu dhammaaday 1500 oo ahaa markii Boortiqiisku weerarradii foosha xumaa ku qaaday Xeebta Bariga Afrika.

Muddo ku siman saddex qarni ilbaxnimadii xeebta ee Sawaaxiliga ahayd waxay ahayd mid lagu ashqaraariyo, ganacsatadu waxay noqdeen niman bad mareen ah oo adduunka muslimka iyo dalal badan oo Bariga ahba ka goosha. Kutubta taariikhdeedii horena waxay ak heleen astaamo fara badan oo ka hadlaya xeebta iyo wacdaraheedii. 1250 nin Shiine ah oo kormeer ka ahaa deked ku taal koonfurta dalka Shiinaha wuxuu qoray buug uu ku sheegay in sannad walba maraakiibta ka gooshi jiray marsada Gujuraat ee ku taal dalka Hindiya tegina jirtey xeebta Afrikada Bari, oo ay ku magacaabi jireen dalkii reer Bani (Madow). Nin la oran jirey Al-Idiris oo ku barbaaray jasiiradda Siisili ee ku taal Badda Cad, isna wuxuu qoray buug ku saabsan ilbaxnimada xeebta Afrikada Bari. Al-Idiris wuxuu caddeeyey in Afrikada Bari caan ku ahayd birta. Birtaana Hindiya aad loo geyn jirey.

Jaawa iyo Sumaatrana birta la geyn jirey. Waxa kaloo buugguu kaga faalooday Al-Idiris magaalooyinka Malindi iyo Mombaasa. Markaynnu akhrinno taariikhda Pate, waxaynnu la kulmaynaa in nin la oran jirey Suldaan Cumar oo xukumi jirey Pate 1350 u aad u jeclaa lacagta iyo ganacsigaba. Markaana ay Pate ahayd marsooyinka kuwa ugu qiimaha weyn. Niman ganacsato ahna uu u diray dalka Hindiya. Pate markaas waxay ahayd magaalo-qaran, waxayna awoodeeda siyaasiga ahi gaarsiisnayd tan iyo kilwa. Maraakiibta markaas la isticmaali jirey ka u weyni wuxuu le'ekaa kan maanta looga yaqaanno Jahaas ee caan ku ah Sinsibaar. Isis oo ahaa nin Bootoqiis ah oo degganaa magaalada Maalaak oo aan ka fogeyn Singabuur wuxuu, isna sheegay in ganacsato badan oo reer Hindiya, Carab reer kilwa, reer Muqdisho iyo reer Mombaasaba u la kulmay. Waxaa kaloo u sheegay in Shiinaha taariikhdoodu boqorradu ay caddaysay 1415 in nin danjirihii ka tegay Malindi isaga oo geri hadiyad ah u sida Boqorkii dalka Shiinaha.




Boqortooyadii Mwaanmutaaba oo ku tiil bartamaha Afrika waxay caan ku ahayd macdanta la yiraahdo dahabka. Dahabkaana waxay u dhoofin jireen xeebaha magaalooyinka Sawaaxiliga oo iyakuna u sii gudbiya Hindiya iyo dhulal kale.

**S h i r a a s i.**

1200 waxaa jirtay inay soo kordheen dad la yiraahdo Shiraasiga siiba Xeebta Tansaaniya. Taariikhda Shiiraaziga waxa aynu ognahay in 1520 niman Carab ahi waxa ka qoreen. Imaatinkoodase waa sheeko baraley. Waayo buusaa in dad ka yimaadeen dhulka Shiraasi oo ku yaal Beershiya, waxayna wateen 7 markab. Kii u horreyey wuxuu baroosinka dhigay marsada Mandhaka oo loo malaynayo in ay ahayd (J. Manda) kii labaadna Shawga. Kii sddaxaadna Tabjy, kii afraadna Mambaasa; kii shanaadna Bimba; kii lixaadna kilwa; kii toddobaadna Hasuun. Sheekadu waxay tebinaysaa in lixda markab ee hore lix wiil oo walaalo ahi ay hoggaayayaal u ahaayeen, kan toddobaadna Aabahood ahaa. Sheekooyinka la xiriira dhaqanka orahda ah in kastay xiisa gaar ah leeyihiin, haddana waxay iska hor imanaya iyaga iyo cilmiga baarista ee Arkoyooloojig.a

Dhaqanka odhaahda ah se waxaynnu filaynaa inuu salka ku hayo, in kastoo aynnu caddayn karayn waxyaabo ka badbaadin ah iyo kuwo lama dhaafaan ah. Hase yeeshee, nimanka taariikhda qora waxay isku raaceen in Shiraasiyiintu ay ka soo gudbeen xeebta Banaadir ee ku taal dalka Soomaaliyeed, Shiraasiinta xeebta Banaadirna ay ka soo farcameen Beershiya. Markaa runtu isugoo noqonayso in Shiraasiyiinta ay had iyo jeer ku faani jireen awoowayaashoodii reer Shiiraasi. Waxaan Shiraasiyiinta garab dhigi karaa nimankii normanka ahaa ee isku waday in ay ka faracmeen Faransiiska, oo ku boolaxolfteen jirey hiddaha wanaagga iyo dhalanimada ay ka dhaxleen aabbayaashoodii Faransiiska ahaa. Aynnu xusuus u lahaanno in Shiraasiyiinta inkasta oo ay ka soo faracmeen reer Beershiya ay ahaayeen dad Sawaaxili ah dhiig Afrikaanna lihi ku jiro, xididdadooda, dhaqanna ay la wadaagayeen dadkii habeeyey ilbaxnimadii xeebta.



*Xabaalaha ku yaal Masasani, Daar as Salaam agteeda. Xabaalaha udubka leh oo caynkaas ah waxay ka mid yihiin Afrikada Bari ʕastaamaheeda. Marar badan, sida midkanba ka muuqata, waxa lagu qurxin jiray saxuun laga keenay Shiina.*



## K i l w a.

Inta magaalo xeebta ka kacaantay waxa ugu magac weynayd, uguna wacdaro badnayd, una caansanyad, magaalada kilwa ee xeebta dalka Tansaaniya ku taalla. Taariikhda kilwa heerkay gaadhay waxa ka marag kacay nimankii Farshaxanka ahaa sawirada ay ku dheeheen gidaarrada guryahooda iyo weelka dhoobada ah ee jajabkiisii la helay.

Kilwa waxay awoodeeda siyaasiga ahi gaadhay in ay magaala qaran noqoto, magaalooyinka u dhowna ay maamulka u hayos. Marka taariikhda Afrikada dhexe la baarayana waa lagama maarmaan in Taariikhda kilwa la indha indheeyo, waayo xiriir ganacsi ahba way la lahayd dhulkii agagaarkeeda ahaa oo idil. Waxay Kilwa dibedda u dhoofin jirtey foolmaroodi, hargo kalluun la engeyey iyo dahab, iyada ayaana isku xidhi jirtay geddiska iyo ganacsiga xeebata, gudaha iyo Badweynta Hindiya dibedda uga yimaadaba. Maabulka baayacmushtarka ahi hore mar ayuu u keenay Kilwa iyo Boqorradoodii Boqorkii ugu horreyey ee reer Shiraas oo lagu magacaabi jirey Cali Bin Al-Xasan wuxuu bilaabay



*Masaajidka weyn ee Kilwa gudihiisa*

in uu lacag samaysto Lacagtaa waxaa laga sameyyey maar iyo qalin. Waxa kor kaga qornaa magac. Boqor waxaase na-siibdarri ah in aan wax taariikh ah lagu muujin lacagtaa kor-keeda. Lacagtu may kala waaweyneyn laakiin qiimaheedu wuu kala duwanaa. Waxa la ogaaday in lacagtaa oo kale lagu isticmaali jirey Zansibaar, iyo Muqdishoba. Lacagta kilwa waxa laga helay magaalooyinka xeebta ah oo dhan.

Jasiiradda la yiraahdo Mafia iyana waxa laga helay la-cagtaa Shiraasiga ah. Waxaa xiisa gaar ah leh in lacagtii ugu badnayad ee waqtigaa Shiraasiga la isticmaali jirey la helay iyadoo xidhmo ah oo ku aasan masaajid. Waxa lagu qiyaa-say tirada lacagta 570 caddaddii. 1331 dalmareenkii Ibin Batuuta isaga oo ku socda dalka shiinaha wuxuu soo maray kilwa waxaanu la dhacay magaalada quruxdeeda iyo sida farshaxanadeedu iyo farsamayaqaannadeedu ay habeeyeen u-na hannaaniyeen dhismaheeda. Dalmareenkaas wuxuu shee-gay, kuna nuuxnuuxsaday nadaafadda magaalada. Guriga Boqorka wuxuu Ibn Batuuta sheegay inaanay wax quruxdii-sa loo dhigi karaa jirin. Gurigaas maanta reer kilwa waxay u yaqaannin Husuuni kubwa (qalcaddii weynayd). 1964 ay-aa arkiyooloojista Igiriis ihi ka dib markuu baadhay uu sheegay in uu leeyahay daarado waaweyn iyo meelo lagu maydho, meel lagu dabaasho iyo qolal badan oo seexasho ah, darbiyadoodana lagu dheehay sawirro iyo far Carabi si fiican loo qoray.

## BARWAAQADA LAGA HELI JIRAY GANACSIAGA IYO CASHUURATA

Xusuus aynnu u lahaanno in barwaaqada iyo lacagta laga helay ganacsi ee aan wax dhulka ka soo baxa aanay ji-rin. Waxa labaad ee Miisaaniyadda kordhiyey waxay ahayd cashuurta laga qaado geddisleyda iyo ganacsatada. Reer kil-wa waxay beeran jireen xubuub, saliid qunbe iyo midho kale oo fara badan, hilibana waxay ka iibsan jireen dadka lo'leyda ah ee agagaarkooda degganaa. Kallun waxa u jillaa-bi jirey Tuulooyinka badda ku dhow. Waxyaabaha ay ka baayac-mushtari jireen iyaka may soo saari jirin, ee dillaal uun bay ahaayeen. Alaabada ay reer Aasiya keeni jireen iyo



ta dadka reer Afrika xeebta ka dhoofin jireen ayey reer kilwa kala dillaali jireen. Siyaabaha ay cashuurta u ururin jireen waxay ahayd:- In ninkii ganacsato ah ee kilwa yimaa-daba ay ka qaadaan jireen cashuur inta aanu alaabtiisa iibin. Marka ay nimanka shisheeyaha ihi alaab ka qaataan reer kil wana haddana cashuur ayey dhiibi jireen inta aanay alaabta kala bixin waddanka dahabka iyo caagu iyagu cashuur qaali ah oo gaar ah ayey lahaayeen.

## MADAGASKAR IYO KOMOORIS

Jasiirada Madagaskar waxa la filayaa inay degeen dad reer Indooniisiya ahi oo ka yimid Jaawa, Sumaatra iyo meelo kale oo ku yaal konfurta Bariga Aasiya markay taariikhdu ahayd 500 C.D. Dadka reer Indoniisiya waxay ku yimaa-deen koox-koox Waxay dhex galeen lana degeen dadkii dhul-ka lahaa oo markaa ku jirey casrigii dhagaxa.

Isdhexgalkaasu wuxuu keenay in dadkii reer Indoneesi-ya ay isu beddeleen dadka maanta loo yaqaan «Malgaashi» ha-se yeeshee dhaqankooda iyo afkooduba wuxuu la xiriiraa kuwa reer Indoneesiya. Ganacsiga Bariga Afrikana qayb bay ka qaa-teen, ilbaxnnimadii loo yiqiin Rasikaji ee ka hirgashay waqoo-yiga Madagaskarna oo daka Malaasiga ahi abaabuleen.

Ilbaxnimadaasu way hanaqaaday ilaa Boortoqiisku ay sii weerareen Jaiirada iyo meelihii kale ee xeebta ahayadba. 1500 waxa iyaguna magaalo qaranno sameystay dad afka baantuu-ga ku hadli jirey. Bartamaha Jasiiradana waxa ka samaysmay boqollaal tuulo oo mid waliba gaar ahaanteed isu maamusho, midkastana qalcad lahayd.

Komors waa koox jasiirado yaryar ah oo ay ka mid yihiin kerimbas oo xeebta Moosambiik ah iyo Baajuun oo xeebta aga-gaarka Soomaaliya ah. Hase yeeshee, jasiiradaha komoris taa-riikhdoodu waxay ku xiran tahay ta dhulalka ay ku dhow yi-hiin. Dadka xeebaha iyo jasiiradaha deggan waxay had iyo jeer dhex geli jireen dadka waddan weynaha deggan. Ganacsi-ga xeebta iyo bariga Afrikana si fiican ayey uga qayb qaateen.

## BOORTOQIISKA

Bishii Maarso kowdeedii 1498 saddax markab oo ay lahaayeen Bootoqiisku ayaa u soo ambabaxay Afrika. Saddaxda Markab waxaa hoggaamiye u ahaa Vasko De Gama. Maraakiibta shiraacyadooda waxaa ku sawirnaa xarriiqda isku tillaabta ah ee astaanta u ah diinta kiristaanka ah. Maraakiibtaasu waxay baroosinka dhigteen Marso Moo Sambiik ah, halkaasna waxay kula kulmeen ganacsato Carab ah. Kulankaas daraaddiisna waqti cusub ayaa taariikhda Afrika u bilaabmay.

Boortoqiiska waxa ganacsigooda iyo xidhiidhkooda soconayey ilaa 1730. Marka Mambaasa laga saaray imaatinkaa boortoqiiska waxa la socday dhac, boob iyo, dagaallo isdabayaal ah. Boortoqiisku waxay baadi doonayeenna marin ay u maraan Hindiya iyo Bariga fog, iyagoo damac ka galay baayac mushtarka xawaashka, xariirta iyo alaabta kale ee laga heli jirey Bariga Fog. Xusuus aan u lahaanno in reer Yurub awoodda baayac-mushtarka laga heystay.

Haddaynnu khariidadda fiirinno, waxaynnu arkaynaa in bartamaha Aasiya iyo bad weynta Hindiyaba ay niman carab ihi ka goohsi jireen. Sidaa daraaddeedna reer Yurubka laga gacan sarreeyey xagga ganacsiga. Muddo badnna reer yurub waxay iskula dhex wareegeen in dadka Muslinka ah lala dagaallamo, dhabtuna ahayd in ay rabeen in jeruslem gacanta reer Yurub ku soo noqoto. Boortoqiiskuna waxay ka mid ahaayeen dadkii fikraddaa aad ugu hanuuunsannaa.

Colaad gaar ahaaneed ah ayaa Boortoqiisku dadka Muslimka u hayeen, waayo dhulkooda waxa jirtay in muslinka xukumi jirey markii Isbeyn la qabsaday. Casrigii 15aad, Badmareenka Boortoqiiska ihi waxay tageen Galbeedka Afrika. 1486 Baartomeeyo Diyaas wuxuu gaadhay cidhifka ugu koofureeya Afrika Marinkii Hindiya wuu furmay, jidka intii hadhayna waxa dhammeeyey Vasko De Gaama. Moosambiik markuu gaadhay Vasko De Gaama wuxuu laabta ku hayey, himilooyin waaweynnaa uu u qabey inuu helo dahab iyo caag. Dadkii xeebta degganaa way garteen markiiba in boortoqiisku u socdeen dhac



iyo dil, waxaana ka argaagixiyey gubistii Boortoqiisku gubeen Magaalooyinkii xeebta. Suldaannaddii Sawaaxiliga ee yiil xeebta way ka soo wada horjeedeen Bootoqiiska.

Hase yeeshee, Suldaanka Malindi oo Mambaasa colaadi ka dhexeysey wuxuu raacsanaa dhinaca Bootoqiiska, wuxuuna siiyey Vasko sahamiye la oran jirey Ibna Maajid oo gadhwadeen u noqday Sahankii Hindiya uu u socday. Boortoqiisku wa xay ku goosteen in ay xeebaha bariga Afrika ka samaystaan saldhigyo ganacsi iyo meelo ay ku karsadaan cunno, kana qaataan biyo.1509kii Almeida wuxuu tebiye Ciidan badeed oo uu leeyahay Suldaanka Masar. Sannadkii kü xigayna Albuquerque ayaa qabsaday Goa, kana dhigay Xaruunta ganacsiga Boortoqiisaka ee Bariga.

Kilwa waxay saldhig ka dhigeen Boortoqiiskii 1507kii. Moosanbiik waxa yimid koox gumeysato ah oo Boortoqiis ahoo bilowday in ay dhulkii degaan. Haba yaraatee Boortoqiisku wax u suuroobi weydey in ay helaan saaxiibnimada iyo walaaltooyo iyaga iyo dadkaas dhexmarta. Nabad gelyo iyo xasiloonida waa la waayey, kilwa, Sofaala, Zansibaar Mambaasa iyo Liimu kulligood gaashaan ayey u daruureen qawlaysatayaashii Boortoqiiska ahayd, waanay diideen inay bixiyaan sado iyo cashuurba. Dhibaatooyinka ka unkamay duullimaadka Boortoqiiska waxay dhidibbada u saareen baabi'iyeenna baayacmushtarkii xeebta Bariga Afrika. Nin taariikhda qori jirey oo Boortoqiis ihi waxa laga hayaa in uu yiri, bad mareenka iyo Sahmiyayaasha Boortoqiiska ihi waxay ahaayeen kuwo aan Ilaahay iyo Boqorka toona aan ka cabsanyn, naxariistana ka fogaaday. Taasu waxay caddaynaysaa banu-aadannimada iyo dadnimadu halkay ka taainayd nimadkii reer yurubka ahaa ee fadqallalaynayey ilbaxnimadii iyo ganacsgii xeebta BBariga Afrika ee boqol sano kobceysey ee kaalin qaaddey.


Mambaasa waxay Boortoqiiska ku sheegeen in ay lahayd guryo quruxsan jidadkeeduna ay dhir dhaadheer ku beernaayeen, masaajidadeeduna ay dhagax ka samaysnaayeen. Cuntada iyo biyaha macaanna laga hirqan jirey; Dadka reer Mambaasana ay aad u xarragoon jireen, seefo, dahab lagu dheehayna ay ku daanshadaanshoon jireen.

## MAMBAASA IYO QALCADDII JIISES

1586kii waxa yimid Mambaasa markab ay dawladda Turkigu leedahay oo uu hoggaaminayey Mir Cali Bey, Carabtii badkeedii waxay la safteen Turkigaa. Boortoqiiskiina way is dileen, xoolihii Boortoqiiskana Carabtii way qaadeen. 1589kii ayuu Mir Cali Bey ku soo noqday Bariga Afrika. Hase yeeshee, Boortoqiiskuna waxay soo direen Maraakiib iyo hub ay Gawa ka soo direen oo dadkii magaalooyinka deggnaa aad u ciqaabay. Mir Cali Bey wuxuu dagaal ku qaaday Malindi oo had iyo jeer raacsanaan jirtey Boortoqiiska. Waxaase nasiib darri ah in Bortoqiiskii ku guuleysteen Mir Cali iyo dadkii raacsanaa isagiina ay u taxaabeen Lisban. Halkaa oo ay ku kiristaamiyeen.

Dhawr sannadood ka dib Boortoqiiska xaruuntoodii way ka rareen Malindi oo waxay u guureen Mambaasa. Mambaasa waxay ahayd magaalo aan xasiloonaan aqoon, waxayse, lahayd maarso fiican.

Sidaa daraadeed, Boortoqiisku waxay dhisteen qalcad aad u adag oo ay ku magacaabeen Qalcaddii Ciise. Qalcadu inkasta oo ay si adag u dhisnayd haddana Boortoqiiska xoog aad ah kumay kordhin sababta oo ah itaalka Boortoqiiska wuxuu ahaa mid liicaya oo aad u itaal darraynaya. Markay taariikhdu ahayd 1600 Dajka, Faransiiska iyo Ingiriiskaba Maraakiibtoo-



*Qalcadda Ciise oo ku taal Mambaasa oo Bortoqiiska dhisay 1502*



du waxay ka gooshi jireen kaybka koonfurta Afrika ku yaal. 1631kiina Boortoqiiska waxa Mambaasa ka qabsaday nin la oran jirey Yusuf Bin Xasan. Ninkaa markuu yaraa ayaa la geeyey Gawa, waxaana lagu barbaariyey Diinta kiristaanka ah. Markuu ku soo noqday Mambaasa ayuu Diinta Islaamka dib ugu noqday, Boortoqiiskana ka soo hor jeestay.. Boortoqiiska meesha qudha ee u hadhay waxay ahayd Qalcadda Ciise. Carabtii Mambaasa ka dagaallameysey waxa kaalmo u geystay Boqorka Cummaan oo isaiuna dano ka lahaa Afrikada Bari. 1698kii ayaa Boortoqiiska laga qaaday qalcaddii. Mar dambe oo dadka reer Mambaasa dhexdooda qalaanqal uu ka dhacay ayaa Boortoqiisku ku rogaal celiyey oo qabsaday qalcaddii 1728. Hase ahaatee, markiiba waa laga qaaday Boortoqiiska qalcaddii. Mar dambena farahooda kuma noqon.

Boortoqiisku gudaha Afrika aad umay gelin. Haddannu fiirinno Itobiya, Boortoqiisku waxay sheeko beeraaley ku maqHli jireen in Afrika uu jiro boqor la yiraahdo Barister Joon oo kiristaan ah oo ay ku xeeran yihiin daal Muslin ihi. Sidaa daraadeed Boortoqiisku waxay isgaadhsiiyeen inuu Boqorkaasu yahay Boqorka Itoobiya.

Markii uu Soomaalida iyo Itoobiya dagaal ka dhex dhacayna, Boortoqiisku way u hiilliyeen Itoobiya. Waxa kale oo damac ka galay Boortoqiiska dahabka iyo qalinka laga helo agagaarka webiga Zambeesi. Waxay u sii gudbeen Zimbabwe xarunta Monomutooba, waxayse Boortoqiiskii niyad jebisay markay dahab ay jawaano ku gurtaan ay waayeen siday markii hore filayeen. Markuu Boortoqiisku ay ka huleeleen xeebta borigii Afrika: Kilwa, Bansibaar Mambaasa iyo magaalooyinkii kale ee xeebta ku yiil, waxay ahaayetn meelo laga qaxay heerkii noloshana hoos ugu dhacay. Dadkii xeebta awooddoodii siyaasiga ahyad way laciiftay. Sidaa awgeed ayaa Suldaannadii reer Cummaan Afrikada Bari ugu soo duuleen oo ay ugu howl yaraatay in ay qabsadaan.

## TAARIIKHDA KIINIYA, UGAANHDA, TANSAANIYA CARABTA IYO AFRIKAKADA BARI

Qorayaashii hore ee Giriiggu waxay Afrikada Bari u yiqiinneen Asania, Carabtuna waxay u tiqiin dhulkii Sinjiga. Magaalada u weyn waxaa la oran jirey Rhapta, waxay caan ku ahayd doonyaha la tolo, halkaasoo uu ka soo jeeday magaceeduba. Rhapta iyo meelaha kale ee lagu tilmaamay buuggagta qorayaashii hore weli lama helin. Ganacsatada Carabta ahi waxay ka iman jirtay koonfurta galbeed ee Gacanka Carabta xilliga jiilaashinka ah oo ku soo beegan Noofambar ilaa Abriil, waxayna noqon jireen markay dhacayaan dabaylaha xagaagu. Carabta qaarkood waxay yiqiineen afka Asania waxayna ka guursadeen dadkii halkaa yiillay. Dadka degganaa Asania waxaa laga ogsoon yahay inay yaraayeen, waxaase la sheegay in ay ahaayeen dad dheedheer, lamase yaqaan qoladooda.

Xeebaha Asania waxay hoos yimaadeen taliska Shraibeel oo ahaa boqorka Hemiayr oo ku taal koonfurta galbeed ee gacanka Carabta. Waxaa kale oo la inoo sheegay in Asania ay hoos iman jirtey kolba boqortooyada gacanka Carabta ugu xoog roonayd.

Alaabta Carabta ay u man jireen in ay gataan waxay ahayd alaabta weligeedba Afrikada Bari lagu yiqiin oo ay ugu horreeyaan waxyaabaha xoolaha laga helo. Waxaana raacay caagga dahabka, qolofta qubada iyo geesaha qarandida.

Waxyaabaha ugu weyn ee ganacsatadu dadka xeebaha deggan wax kaga doorsan jireen waxaa ka mid ahaa gudmo, golxob iyo la mid. Qalabkaa oo badankiisu bir ka sameysnaa, wuxuu ina tusayaa in reer Asania ayan aqoon fiican u lahayn sida birta loo shubo.

Muddo afar qarni ah oo ka dambeysay pitolemi wax war ah oo lagu kalsoon yahay oo xeebaha laga hayo ma jiro. Waxaase suuragal ah in ganacisgii ka dhexeeyey Carabta iyo reer Tansaaniya sidiisii u socday, kooxo carbeedna degeen xeebahaas sida sheekooyin badani sheegayaan. Waxaa sheekooyinkaa ka mid ah in dad ka yimaadeen Cummaan ay degeen xeebaha Afrikada Bari. Sheekadu waxay tahay in laba nin oo waalaalo ah Suleymaan iyo Saciid oo wada xukumi jirey Cummaan markii ay ciidammadii Umawiyiintu ka adkaadeen iyaga iyo wixii raacsanaa ay u soo carareen Afrkada Bari.



De Paros, oo ahaa nin Boortoqiis ah oo yimid Afrikada Bari wuxuu sheegay in Muslin dad ah oo saahidiin ah oo uu ku macaabay Emusaydis, lagana yaabo inuu u jeeday dadkii la socday sayid oo ahaa horkacihii shiicada, ay yimaadeen Afrikada Bari, waxaana la sheegay in qaarkood ay degeen Banaadir qarnigii 8aad. Qarniyaashii 9aad iyo 10aad ayaa noogu horreysey war carabta ka soo jeeda, gooni ahaan Al Mascuudi oo dhintay 945kii. Al Mascuudi laba jeer ayuu yimid Afrikada Bari isagoo ka oos dhoofay meelo kala duwan. Waqtiyadaas Afrikada Bari saddax meelood ayaa loo qaybin jirey:-

B) Berbera oo ahayd dhulka Soomaalidu deggan tahay tan iyo shabeelle.
T) Dhulka Sinjiga oo fidsanaa wabiga Shabeelle marka laga billaabo tan iyo Sofaala.
J) Waxaa ugu shisheeya dhul la oran jirey waqwaaq oo aan aqoon loo lahayn. Waxaa laga yiqiin jasiiradaha qambaluu.

Qarnigii 10aad dad ku hadla afka bantuuga ayaa degganaa Afrikada Bari dhammaan tan iyo koonfurta Soomaaliya, waxaana halkaa ka soo banbaxday magaaladii Shunguwa,. Sofaala iyo dhanka waqooyiba dadku waxay lahaayeen bulshooyin nidaamsan. Dadkaasi diimo ayey lahaayeen, Al-Mascuudin wuxuu inoo sheegay in ay dibida sida fardaha u carbin jireen dagaalka yo gaadiidkabna ugu isticmaali jireen. Ilbaxanimada muslinku kama horreyn qarnigii 13aad mana ayan gaarsiisnayn miyiga, sidaana waxaa loo hayaa marag fara badan. Marka la eego xeebaha Soomaaliya, keeniya, iyo Tansaaniya waxaa degganaa bulshooyin reer magaal ah oo muslin ah kuna jira dhismaha dhagax ah.

## XIRIIRKA REER YURUB IYO AFRIKADA BARI

Reer Yurub waxaa ugu soo horreeyey Afrikada Bari Boortoqiiska oo yimid qarnigii 15aad. Meelaha ay qabsadeen waxaa ka mid ahaa Sinjibaar waxaase raad ah kuma reebin, xagga mi-

yigana haba yaraatee lagama aqoon. Boortoqiiska ujeedada uu ka lahaa Badweynta Hindiya waxay ahayd inuu Carabta kala wareego ganacsiga ay hadda ku lahaayeen. Taasoo u suura geli-neysey in uu ganacsi la yeesho Hindiya, Shiina, Afrikada aBri iyo Gacanka Carabta. Saldhigyadii uu Afrikada Bari ku yee-shayna waxaa ka mid ahaa Sofaala, Kilwa iyo Soqadara.

Markii taariikhdu ay ahayd 1532dii ayaa ciidammo Boor-toqiis ahi soo galeen Afrikada Bari iyagoo doonaya in ay Itoo-biya, oo dagaal kula jirtay dadka Soomaaliyeed ee muslimka ah, gacan siiyaan. In 100 sano ku dhow wadaaddada Diinta Masixiga ah ee Boortoqiisku waxay isku daydayeen in oggoley-siiyaan keniisadda Itoobiya madaxtinimada Rooma. Taasina waxay ahayd markii u horreysey ee Boortoyiisku guda galay Af rikada Bari wixii ka sarreeya wabiga Sambeesi. Degmooyin-kooda kale waxay ku koobnayeen dhul badeedyada Sinjibaar, Pemba, Mombaasa iyo kooxda Laama. Waxay kale oo rabeen in ay qotaan boobaanna dahabka laga helo agagaarka Sam-beesi.

Dawladaha kale ee reer Yurub ee gumeysatada ahi waxay Afrikada Bari soo galeen iyagoo ay horkacayaan Baadariyaal iyo sahmiyayaal qarnigii 19aad.

## BAADERIYADII AFRIKADA BARI

Baadariyadii ugu horreeyey ee yimid Afrikada Bari waxay ahaayeen Jarmal waxaana hoggaaminayey baadari la oran jirey Ludwig kraft. Baadariyaasha oo yimid 1884tii waxay meel ka furteen Rabaay oo u dhow Mombaasa. Nimankiisi xeebaha ayey sahmiyeen markey-se soo dhoweys fiican dadkii ka waayeen waxay u gudbeen miyiga. 1863dii qaar kale oo ka tirsanaa Ururka gabayaasha diinta ayaa waxay ka yimaadeen dhulka badeedka Riyomuuni oo waxay degeen Sinjibaar daba-deedna waxay u guureen Bagmoliye 1878dii. Waxaa kuwaa horay loo sheegay ku soo biiray baadariyaal ka tirsan urur isku magacaabay Qabayaasha 6aad. Waxayna kinisad ka aasaaseen Unyanyenbe markii taariikhdu ay ahayd 1881dii, kaddibna waxay degeen Taboora iyo Kibaandoo. Wax qabashadoodu waxay ahayd mid ku xiran sida ay hadba gacan uga helaan madaxda dadka ay u tagaan. Fidinta diinta Masiixigu wa-



xay ku dhex beertay Afrikaanka colaad sida reer Ugaandha; waxay fidisay dhaqan shisheeye; waxay horseed u noqotayna taliska gumeysiga.

## KALA QAYBSIGII AFRIKADA BARI

Baadariyaashu waxay fureen dugsiyo ujeedadoodu ahayd in ay dadka ku baraan diinta, hase yeeshee, dadka Afrikaanka ah dugsiyadaa waxtar ayey u yeesheen.

Imaantinkii baderiyaasha waxa ku xigay sahmiyayaal fa-ra badan kuwaasoo ay ka mid ahaayeen David Livingston, Sp-eke, kameroon, Stanley iyo kuwo kale oo qarnigii 19aad barta-mihiisii dambe ku wareegey Afrika oo Yurub ogeysiiyey hoda-nnimada Afrikada Bari. Ayagoo ka warramayey buurhaeeda dhaadheer, harooyinkeeda waaweyn iyo cimiladeeda wanaag-san.

Tan iyo waqtigii dawladaha reer Yurub ee Afrika soo gudagalay waxay ahaayeen, Ingiriis, Faransiisii iyo Boortoqiis-ka. Waxaa waqtigaa kor u soo kacay kana mid noqotay dawla-daha waaweyn dawladda Jarmalka oo sameysatay warshado badan, si ay ula tartanto dawladaha kale ee reer Yurub. Waxay goosatay inay ka qayb qaadato kala boobka dalalka Afrika.Nin Jarmal ah oo la yiraahdo Karal Peter ayaa yimid Afrikada Ba-

ri 1883tii. Karal Peter, oo isku dubba ridey shirkadda gumeysiga Afrikada Bari ee jarmalka, wuxuu heshiisyo dul-ka-ilaalis ah ama abansi ah la gaaray madax Afrikaan ah. Dhulkaa jarmalku ku tala jirey inuu qabsado wuxuu ahaa dhulka ka soo horjeeda Sanjibaar ee gudaha ah. Arrintaas waxa ka qaybiyey boqorka Sanjibaar oo ku doodayey inuu Afrikada Bari oo idil u taliyo waxaase boqorka Sanjibaar uu u aqoonsaday jarmalka, Taanganiika, kaddib markii maraakiib ciidammo sida la soo dul dhigay.

1888dii ayuu jarmalku damcay inuu xeebtii si dhab ahaan ah u qabsado waxaase hor istaagay dakii meesha degganaa. Dhaqdhaqaaqaas wuxuu jarmalku ku magacaabay gadood Carbeed, waxbase kama duwanayn is hortaaggii ay dadka xeebahaas degganí weligoodba shisheeyaha kala hor tegi jireen, ha ahaado Bootoqiis ama Carab, Dhaqdhaqaaqaas oo ka bilowday BANGAANI wuxuu ku fiday xeebta oo dhan.

Halgankaa waxaa horkacayey nin carab ah oo ay col ahaayeen Suldaanka Sanjibaar oo la oran jirey Abuu Shiri Bin Saalim iyo Bwaana Heri oo ahaa nin Afrikaan ah oo aan weligiiba oggolaan taliska Carabta. Dagaallada jarmalka markii hore waa looga guuleystey oo waxaa laga saaray magaalooyinka oo idil Bagamooyin iyo Daar-es-salaam mooyee. Hase yeeshee 1889kii xoog jarmal ka yimid ayaa jebiyey dhaqdhaqaaqyadii, dad uu ka mid yahay Abuu Shiirina waa la daldaley. Markii taariikhdu ay ahayd 1891dii Shirkaddii waxaa taliskii kala wareegay dawladda jarmalka.

Jarmalku wuxuu taliskiisa u fidiyey si tallaabo tallaabo ah isagoo Afrikaanka qaarkood bahaysanaya. 1898dii ayaa maamclkii jarmalkc dhismay. Dhclkc wuxuu 1914kii u qeybsanaa 22 degmo oo uu u taliyo barasaab; degmo walbana waxaa gaar ahaan u maamulayey sarkaal heystay 200 oo askari oo Afrikaan ah, cashuurtana ururiya. Dad uu isagu qortay danihiisana ka taliya ayuu Afrikaanka madax uga dhigi jirey. Maamulka oo aan shaqale badan lahayn, lacag inuu dalka gelshana aan diyaar u ahayn, waxay Jarmalka ku riddayaamin darro iyo baqdin uu ka qabay in dalka laga saaro. Hase yeeshee waxay u badnaayeen in Sanjibaar oo Ingiriisku saldhig weyn u ahayd uu helo dhul lafdhabar u noqda. Sababta labaad ee Ingiriiska u geyesy inuu qabsado dhulkaas waxay ahayd asaga oo doonaya meel uu ka ilaashado Ugaandha iyo Niilka.



Dhulkaa maxmiyada cusub noqday markii hore Taliskiis wuxuu hoos imaan jirey Sanjibaar, waxaana u talin jirey kolba ninka xagga siyaasaddae Ingiriiska u fadhiya Sanjibaar.

Ninkii ugu horreeyey ee labada xil loo wada dhiibey waxaa la oran jirey E.H. Harding waxaa labada dhul taliskooda la isku waday tan iyo 1904kii, wixiise muddadaas ka dambeeyey dhulabbaansigu wakiil gooniya ayuu yeeshay. Beryihii hore oo dhan nimankii Ingiriiska wakiilka uga ahaa waxay ka tirsanaayeen Xafiska arrimaha Debedda, muddo dabadeedse, inkastoo Sansibaar ka horreysey, waxaa labadiiba lagu wareejiyey Xafiiska Gumeysiga. Harding markii lagu magacaabay wakiilkii dhul-abbaansiga 1895kii, wuxuu kala kulmay dhibaatooyin sidii uu u dhisi lahaa talis gumeysi, sababtuna waxay ahayd iyada oo dadka Afrikaanku aanay dooneyn Harding & Taliska shisheeyaha. Afar bilood horteed intaan Harding la magacaabin ayaa waxaa geeriyooday Saalim Bin Kaamis Al Masruxi oo u taln jrey Takwagu oo ahayd magaalamadaxda dhanka waqooyi ee Boqortooyada Masruwi, oo halkaa ka dhisantay markii sayid Saaxiid Masuwi ka kiciyey Mombaasa oo ay hore ugu talin jireen. Markaas Sharikadda Ingiriiska oo dhulkaa ka ganacsan jirtay raggii ka wakiilka ahaa waxay dooneen in Rasmid oo ahaa inankiisii, meeshii qabsado, ninkii Mubaarak la oran jirey iyo ciidammadiisii-na waa diideen; taasuna waxay keentay in shirkadda taliskeedii baaba'o Markii dadkii ay maqleen in Harding doonayo inuu talis shisheeye dhulkooda ka dhiso, dagaal ayay bilaabeen, dagaalkaasi wuxuu ku fiday waddanka oo idil Ingiriiskuna wuxuu jebiyey Afrikaankii ka soo horjeeday markuu ciidammo Hindiya keenay.Dhanka waqooyina Soomaalidii degganeyd waxay diideen inay aqoonsadaan taliskii Ingiriiska inkastoo ciidommadiisa Hindiga ahayd dagaal ku qaadeen dadkii Soomaaliyeed 1898kii, haddana wax u hirgalay ma jirin tan iyo 1925kii oo ahayd gumeystihii Talyaaniga Jubba lagu wareejiyey.

Ingiriirku wuxuu doonayey inuu miyiga ka dhiso jid tareenku maro kaasoo u lahaa qiima weyn xagga xoogga iyo dhaqaalahaba. Sida darteedna arrintii yar oo dhacda ee isaga

ku lid ahba, dadka ayuu wuxuu uga aargooson jirey si aan naxariis lahayn. Si uu dhulkaa uga faa'iideysto ayuu wuxuu bilaabay inuu beero dhirta dalalka kulul ka baxda. Dadkii reer Yu'ub ahaana wuxuu siiyey dhul intii ciidda hodanka ah lahayd. Afrikaanka wuxuu ku soo rogay shaqo sandulle ah. Dadka Afrikaankaah ee aan beeraeydla ahayna waxaa lagu khasbay inay beeraan dhir gadanta oo lacag laga helo si ay u bixiyaan cashuurta lagu soo rogay.

Tirada dadka Jarmalka ahi inkasta oo ya gaaresey 1913kii 5336 qof iyaga ayaa ka talin jirey golaha barasaabka oo la sameeyey 1904kii, lana mid ahaakan dhulka Ingiriiska uu gumeysto.

Markii Dagaalkii 1aad laga adkaaday Jarmalka ayaa 1922dii waddamadii uu gumeysan jirey ee ku yiil afrikada Bari, Ruwaanda Buruundi iyo degmada Kiyonga mooye, intii kale lagu warrejiyey Ingariiska asagoo wakiil uga ah Ururka Qaramada. sidaas ayaana Afrikada Bari oo dhami u hoos timid taliska Ingariiska.

**ZANJIBAAR.**

Afrikada Bari waxaa kor ka xukumi jirey Boqorka Cummaan. 1835kii markuu dhintay ninkii u talinayey Moobaasa ayaa Boqorkii Cummaan, Sayid Saciid, oo waayahaan damba ba qalbiga ku hayey in uu u soo wareego xagga Afrikada Bari, himiladiisii ka dhabeeyey oo ka aasaasay Zanjibaar Boqortooyo taliskeedu gaarsiisan yahay xeebaha Afrikada Bari oo dhan, inkastoo uusan jirin xagga miyiga . Qarnigii 19aad dabayaaqadiisii ayaa jarmalku wuxuu hunguriyeeyey Zanjibaar. Boqorkii u talinayana asagoo ka cabsi qabo in jarmalka jasiiradda gacanta ku dhigo. ayuu heshiis la saxiixday Ingariiska. Waxay la ahayd inuu sidaa ku badbadin karo madaxbannanida dalka. Dhab ahaantiise Sanjibaar waxay noqotay maxmiyad Ingiriisku u tashado wixii ka dambeeyey 1890kii .

**KEENIYA**

ingiriisku wuxuu ku dhawaaqay bishii juuly 1dii 18950, in Mombaasa iyo dooxada Rift dhexdoodu tahay meel ay qab-



sadeen, dushana ay ku xukumi, doonaan, ujeeddaduna tahay inay dhul abbaris ay leeyihiin meeshaasi naqoto. Inkasta co ay sidaa ku dhawaaqeen, haddana markaa waxay la ahayd in aan dhulkaasi qiima istaratiiji ah iyo ku dhaqaale midnaba u lahayn, dhismihiisuna suura gelayn haddii aan dadkaa nabad iyo shaqaale midna laga helin. Markii jidkii Tareenku dhammaaday 1901dii waxaa dhulkii ku soo kordhay shisheeye badan oo ay ka mid yihiin qaar ganacsato ah, qaar doonaya in ay diintooda fidiyaan iyo kuwo doonaya inay dhulka degaan. Dadkaa kooytida ahi iskuma koobin intii taliska Ingiriisku gaarsiisnaa ee waxay galeen dhul badan oo cusub, taliskiina dabadeed waa ka daba tegey.

Wixii waqtigaa ka dambeeyey taliskii wuxuu isku beddeley gumeysi dhab ah. Jaarle Eliyot oo ahaa ninkii wakiilka u ahaa Ingiriiska 1900-1904tii wuxuu ku soo rogay Afrikada cashuur lagu magacaabay cashuurtii Mudulayaalka, dhulkii sare ee keenyana waxa la dejiyey dad reer Yurub ah. Afriaykaankuse waxay u ahysteen Ingiriiska iyo maamulkiisaba wax aan waareyn. 5tii Maarso, 1902tii ayaa Ugaandha barigceda oo ay arkeen inay dhulka sare ee kiinya la cimilo tahay ku dareen keenya si reer Yurubku u helaan dhul ballaaran oo fiican. Markii maxmiyaddii sidaa u korodhayna waxaa xaruntii loo soo raray Nayroobi halkay kolkii hore ka ahayd Daar-Es-Salaam. Si dadka Afrikaanka ah uu ugu khasbo wuxuu doonayo ayuu Ingiriisku dagaallo ku qaaday muddadii u dhexeysey 1900-1908dii, sababta ugu weyn ee Ingiriisku dagaalladaa ugu guuleystey waxaa ay ahayd isagoo dhexdooda midnimo ka ilaashay oo dabadeedna kala qaybsanaantooda ka fa'-'iideystey.

Tan iyo 1896 dadka reer Yurub way ku soo qulqulayeen keeniya, waaase dhiirrin ah xagga dawladda kama ayan heleyn intii ka horrreysey magacaabiddii jaarlis Eliot. Waqtigaas ayey kooxihii ugu horreyey ka yimaadeen Afrikada koonfureed dabadeedna dad badan baa ka yimid dhulka Ingiriiska Awistaraalia, iyo kanada. kuwaa dambana waxay ahaayeen qaar ka dhaqaala roon kuwii koonfurta Afrika ka imaanayey. Waxyaabaha is hortaagay waxay ahaayeen maamulka oo ka horreeyey imaatinkoodii. iyo iyaga oo diday in la is dhexgalo, shaqadiina la qaban waayey dadkii madoobaa. Wa-

xaa intaa raacsanaa in ay Hindidii dhulka timid aanay marna oggoleyn inay dadka reer Yurub ka hooseeyaan. Tan ugu weynse waxay ahayd inay Afrikaanku aanay la mid ahayn dadkii Awustaraalia ee ay ahyeen dad is xukuma oo bulshooyin nidaamsan leh, Wixii u dhexeeyey 1923 iyo 1952dii waxaa Ingiriisku isku deyey inuu dadyowgii kala midabka ahaa kala qoqobo isagoo foodsaaro uga dhiganayo in jinsi walba gooni ahaantiisa hore loogu mariyo. Runtuse waxay ahayd in meesha danta reer Yurub ku jirto had iyo jeer la hor marinaayo. Waxaa taana u marag kacayey in 1931 markii keenyada Galbeed laga helay dahabka, inkastoo uu dhulkaasi ahaa midka gaar u ah dadka Afrikaanka, si degdeg ah inay Ingiriisku reer Yurubka ugu fasaxeen in ay dahabka uka qotaan. Sidaas iyo si le'eg ayaa xeerarka oo dhan loogu jebin jirey reer Yurubka, hadday, yihiin kuwo siyaasadda ama kuwo cashuurta.

Labadii dagaal ee adduunka kii laad iyo kii 2aad, siyaasiyiintii Afrikaanka ahayd ee keeniya indhaha ayey u fureen. Indha furiddaasuna waxay keentay in albaabada loo xiray ururadii siyaasadda ee soo baxay 1930kii oo ay ka mid ahaayeen Ururka xubnaha Ukamba, Ururka buuraha Tayta, ururkii dhexe ee waqooyiga kavirondo iyo Ururkii dhexe ee kuukuuyada. Isla markaa intii dagaalka labaad ee dunida lagu jirey ayaa reer Yurub awooddodii kordristeen ha noqoto xagga golayaasha wax fuliya ama xeerarka sameya, Afrikaankiina waxay ku soo rogeen shaqo-sandulle. Markii taariikhdu ahayd 1943dii 16,000 oo Afrikaan ah ayaa shaqo sandulle ah lagu soo rogey lacagta ay jireenna waxay ahayd 8 ama 9 shillin bishii.

Inta reer Yurub xagga siyaasadda hore loogu marinayey, Afrikaankuna ayaanba ayaanta ka dambeysa waa ka soo foojignaanyeen ilaa intay garteen in ay gumeysiga dhab ahaan ula dagaaliamaan. Ragga Afrikaanka horkacayey waxaa ka mid ahaa rag wax bartay iyo kuwo dagaalladii waaya-aragnimo ka helay.

## U G A A N D H A

Heshiiskii Ingiriiska iyo jarmalku kala saxiideen 1890kii ayaa Ugaandha wuxuu raaciyey Ingiriiska, danaheedana shirkaddii Ingiriiska u qaabilsanayd Afrikada Bari ayey dawladdu awood u siisay inay maamulka iyo ganacsiga meeshaas laoadaba qabsato.

Waxa Ugaandha loo diray nin ka tirsanaa shirkaddaas oo la oran jirey Dhamme Lugaard. Shirkaddaas ayaa maamuleysey dhulka tan iyo intii Ugaandha ay isku dileen dadkii kala diimaha ahaa ee isu laayeye dad raacsan kaniisadda Rooma, Borotestanti iyo Muslimiin. Dagaalladaa diinaha ee Ugaan waxaa u weheliyey shirkadda dhibaatooyin kale oo kala soo gudboonaaday xagga keeniya, sidaas darteedna waxay dawladda Ingiriisku la wareegtay maamulkii Ugaandha. 1893 ayaana calankii Ingiriiska laga taagay.

Muddo yar dabadeedna heshiis ayaa lala gaarey boqorkii Bugaandha Mwaangihii 2aad. Wakiilkii ugu horreyey ee dawladda Ingiriiskuna wuxuu noqday JERAL BORAL. Heshiiskaasi wuxuu ahaa mid kabakaa iyo dadkiisuba hoos keenay Ingiriiska una oggolaaneyey inuu cashuurta urursado. Ingiriiska waxaa uu ku fidiyey oo uu oog iyo saldhigba ka dhigtay Bugaandha, halkaas ayuuna dabadeed dhan walba uga socday.

1900 ayaa heshiis ballaaran Ingiriiska iyo reer Bugaandha kala saxiixdeen, kaasoo awooddii kabaakabaha hoos u dhigay, kana dhigay Bugaandha qayb ka mid ah Ugaandha. Heshiisyo kuwaas oo kale ah ayaa lala saxiixday boqortooyadii Toorko Ankoole 1904 iyo Bumyooro 1933. Bunyooro marka laga reebo waxaa inta loo yiqiin dawladihii heshiisyada.

Heshiisyada awgoodna waxaa Ugaandha ay noqotay dhul abbaansi Ingiriis. Taliska Ingiriisku wuxuu ahaa mid ku fiday dagaallo, kuwaas oo ay ugu waaweynaayeen dagaalladii lagu qaaday kabareega oo ahaa Boqorkii Bunyooro iyo Mwaga oo ahaa boqorkii Bungaandha. wuxuu dagaallamayey 10 sano. 1899kii ayaa boqortinimadii laga dafiray. Inkastoo dadkiisu doonayneyn waa la masaafuriyey, musaafuriskaas ayuuna ku dhintay 1923.

Boqorkii Bungaandha inkastoo uu heshiis la dhigtay Ingiriiska, haddana wuxuu iska diiday maamus xumadii gumey-

siga. Isna sidaa si le'eg ayuu ku dhintay masaafuris 1901dii. Boqorkii Ankoole isaga ayaa isdilay markuu ka baqay inuu gacanta gumeysiga ku dhaco. Kii jaarkiisa ahaa ee kajaarana Tanganiika ayuu u cararay. Boqorkii Boryenu Ingiriiska ayaa gacantiisa ku dilay. Teeso, laango iyo Ajooli Giddigoodba sutida ayey u qabteen taliskii Ingiriisiia. Gebi ahaanna dagaallada waxaa u weynaa kuwii ka dhacay Degmada lamoogi 1912-kii. Ingiriisku maamulkiisa hore oo dhan wuxuu ahaa mid ay Bugaandha ku qabsadeen, waxaanu ahaa maamul aan dadka toos loogu talin jirin. 1921dii Ingiriisku wuxuu Ugaandha ka sameeyey gole xeerarka sameeya oo aanu qof Afrikaan ahi ku jirin, hase ahaatee ay reer Yurub ku wehelinayeen Hindi-gu. 1935 ayaa markii ugu horreysey saddax Afrikaan ah loo oggolaaday inay ka qayb galaan Golaha. Tirada Afrikaankaa golaha ku jiraana waxay na tusaysaa inaan Afrikaanku xagga siyaasadda iyo xagga dhaqaalaha midna qayb looga oggolayn. Reer Yugaandha waxay ahaayeen beeraaley, si aanay beerahooda dhaqaale fiican uga helinna waxaa hoos loo dhigi jirey qiimaha waxa ay soo saaraan.

## MIDAB TAKOORKII DHEX YIIL AFRIKADA BARI

Midab takoorkii dhex yiil Afrikada bari dadyowgeeda wuxuu ahaa Mid aan waxba ka yasirrayn kii dhulalka kale ee adduunka jirey. Midab takoorkaasu wuxuu ahaa mid nolosha dhan kastaba saameynaya, waxaase aan isku koobi doonaa wixii siyaasadda ku siman iyadoo taasi tahay furaha nolosha.

### K e e i n y a.

Dhulka keeniya waxaa deggnaa dad tiradoodu aad u kala yar tahay, kuwaas oo ahaa dad cad oo tiro yar, Hindi aan badnayn oo ganacsato ahayd ama loo keenay dhismihii jidka Tareenka oo fara badnaa. Waxaa taliskii waddanka gacanta ku hayey caddaanka oo isagu isku waday inuu xaq u leeyahay inuu waddanka khayraakiisa qayb libaax ka qaato, waxaa ku xigtay Hindiya oo ahayd karraaniyaal ganacsato, waxaana u dambeeyey dadka Afrikaanka ah oo labada qolaba liidi jireen una oggolaayeen midiidnnimo keliya.

Dhulka beerashada ku wacan waxa qaadan jirey caddaanka, shaqooyinka wanaagsan ugu horreyntii iyaga ayaa siin jirey wixii soo harana Hindida ayaa lahayd. Magaalooyinka la islama degi jirin ee qolaba meel ayey degganayd. Golayaasha awoodda leh oo dhan ha ahaadaan kuwa xeerarka sameeya ama kuwa fuliya waxaa iska lahaa caddaanka, haddii ay cid wax ka siinayaanna waxay ahayd Hindida, Tana waxaa inoo caddaynaysa in 1928kii Golaha Nayroobi u taliya uu ahaa 20 qof oo 13 ahaayeen caddaan 7 dindi. Sidaa ayaana Afrikaanka xaalkiisu ahaa tan iyo dagaalkii Maw-Mwda.

### U G A A N D H A.

Madabtokorrka Ugaandha wax aad ah kama duwaneyn kan keeniya. Xagga taliska haddey noqoto, dadka Afrikaanka ahi waxba kuma lahayn; Golayaasha xeerarka oo horraantoodii bilaabmay 1921dii. Afrikaankii ugu horreeyey wuxuu ka qayb galay 1945tii.

Xagga dhaqaalaha Afrikaanka looma oggolaan jirin waxaan ahayn inuu beeraha ka shaqeeyo ama uu asaguba fasho dhulka aan reer Yurub hungurinaynaynin. Waxyaabaha ay isku dayeen in laga cunaqabateeyey, waxaa ka mid ah in ay dhistaan Urur cudbiga iibsada ama ka qayb gala Ururrada cudbiga sameeya. Labadabana Ingiriiska iyo Hindida way iska hortaageen waanay ka baabi'iyeen.

### T A N G A N I I K A

Xagga midab takorrka Tanganiika waxay la mid ahayd waddamada aan horey u soo sheegnay, reer Yurubkaana had iyo jeer meeshii Afrikaanka ku arkaan inuu ka faa'iidayo aaw ka qaadi jireen. 1951kii ayaa dawladdu qabilka la yiraahdo Meru 3000 oo qof oo ka mid ah dhulkoodii ka qaadday siisayna dad caddaan ah. Xagga Sinjibaar waxaa isku hayey Carabta iyo Afrikaanka waxaana isku diri jirey caddaanka. Waxa taasi ku tusineysa intay 1890kii boqorkii xukumi jirey ka qaa deen ayey·waxay gacanta u gelsheen Carabta Afrikaankiina xukunkii ka qabsadeen. 1945tii waxaa carabtu isku dayday inay dhaqdhaqaaq siyaasadeed oo ballaaran sameyso iyaga oo damcay inay maamulka qabsadaan intaan Afrikaanku baraarugin.

1956dii waxay sameeyeen xisbi la oran jirey xisbigii waddaniga ah ee Sinjibaar. 1957dii nin dastuurka u socday wuxuu soo jeediyey in doorasho 6 kursi ah loogu tartamo golaha xeerarka lagu sameeyo. Doorashadaasina waxay keentay in Afrikaankii iyo shiraasiyiintii qolaba dhan isu raacaan dabadeedna ay dhalatay colaad ay iskaga hor yimaadeen carbtii iyo Afro-shiraasiga Dagaalkaa siyaasiga ah oo dabada ku haya dhaqaalaha sababtuna ahayd carabta oo dhaqaalihii bursatay, ma joogsan tan iyo kacaankii bishii ka dambeeysay gobannimadii, kacaankaas oo keenay sinaasho dhan kastaba ah.

## DAGAALADII DUNIDA IYO AFRIKADA BARI

Labadii dagaal ee adduunka ka dhacay waxaa lagu tiriyaa inay ahaayeen qaar dadyowga dunida saddexaad baraarujiyeen. Dagaalladaas waxaa ka qayb galay dad Afrikaan ah oo aan yarayn, kuwaas oo ogaaday in dadka cadi kala qurumo yahay, gartayna in is hortaagga urursani qiima weyn leedahay. Dadkii Afrikaanka ahaa waxay aqoonsadeen iyada oo dagaalku yahay tijaabada u weyn ee dadku galo, in aan ninka caddaanka ahi kaga sidan, waxa uu galayna ay geli karaan. Arrintaasu waxay keentay in raggii dagaalka wax ka galay qaar ka mid ah abuuraan ururo. Ragga waxaa ka mid ahaa Okuwiri oo ahaa nin reer keeniya ah oo sameeyey Ururka dhalinta kavirondo iyo Joosef Tange oo isna u noqday madax Ururka kulkuyada dhexe. Marka la eego reer Yurub intii Afrikada bari deggenayd waxay isku dayeen inay ka faa'adystaan dagaalkii oo waxay weydiisteen dawladahoodii in danaha iyo awoodda ay ku leeyihiin waddamada la gumeysto intaba loo kordhiyo. Waxyaabihii loo oggolaaday waxaa ka mid ahaa ayadoo la kordhiyo muddadii loo fasaxay inay dhulka beertaan, ayadoo loo oggolaaday inay golayaasha xeerarka qayb weyn ku yeeshaan iyo iyadoo dhowr meelood Afrikaanka lagu sod rogay shaqo sandulle ah oo ay u shaqaynayaan dadka cad iyo siyaasaddii oo laga xaaraantinimeeyey Afrikaanka. Markii dagaalkii koowaad laga soo noqday ururadii la abaabulay qaarkood waa la mamnucay madaxdiina waa la xiray. Waxyaabihii uu dagaalkii laad ka beddelay Afrikada bari waxaa ka mid ahaa in Tanganiika oo ahayd maxmiyad jarmal Ingiriiska gacantiisa u wareegto. Marka dagaalkii dunida ee 2aad uu dhammaaday, Tanganiika



waxaa laga dhigay dhul Qaruumaha Midoobey uu Ingiriiska ku amaansaday. Gacanku-yeelashada ururka Qarammada Midoobay ay gacan ku yeesheen Tanganiika arrimaheeda waxay suuragelisey in markii madaxda ingiriiska qoonsadaanba, dadka reer Tanganiika u cawdaan Qarammada Midoobay. Taasoo Nayreere ka dhigtay nin Adduunka laga yaqaan dabadeedna u hawl yareysay si ay gobannimadeeda u helaan.

## MAAJI-MAAJI IYO DHAQDHAQAAQYADII KUUKKUUYADA

Heshiisyo dhex maray 1886dii iyo 1890kii Ingiriiska iyo jarmalka ayaa waxay ku qaybsadeen Afrikada Bari. Ingiriisku wuxuu la wareegay Ugaandha, Sinjibaar iyo dhulka hadda loo yaqaan keeniya. Jarmalkuna wuxuu qaatay Tanganiika, Ruwaandha iyo Buruundi. Labadaa dawladoodna waxay maamulka uga tageen intii hore shirkado. Markii ay shirkadihii wedi kari waayeen, ayaa dawladihii kala wareegeen. Dadka Afrikaanka ahi xukunka shisheeyaha si sahlan uma oggolaan ee waa hor istaagay. Ugaandha markii taariikhdu ahayd 1897 boqorkii Bugaandha oo hor socday dadkiisii ay aadagaal ku qaaday Ingiriiska, nasiib darrose waa laga adkaaday.

Dhanka Tanganiika Afrkaanku waxay necbaayeen weligoodna hor istaagayeen taliska Jarmalka. Dadaka reer Tanganiika halgankoodii ay kaga hortageen jarmalka markii ugu horreysey ee uu damcay inuu waddanka qabsado si kastaba ha looga taag roonaadee, marnaba ma dhigin. Dhaqdhaqaaqyadaasina waxaa ugu magac weynaa k iila baxay dhaqdhaqaaqyadii Maaji-Maaji oo bilaamay 31kii Luuliyo, 1905 markii reer Matuumbi ku kaceen shisheeyaha kana saareen buurahooda.

Dagaalku wuxuu saameeyey dhulkii cudbiga oo dhan oo ahaa dhul dhexdhexaadka iyo dhulka hoose togga Rufiiji, dabadeedna aad ayuu u fiday. Dagaalladaas oo soconaayey tan iyo 1907-kii dadka dhulka deggenaa dhammaan wuu ka qayb galay, ha isbahaysteen ama gooni gooni ha u dirireene, waxaana lagu qiyaasay in dadka ku naf waayey ay gaarayaan 100,000 oo qof. Xagga keeniya sida aan hore u aragnay, caddaanka Hindida

midnaba Afrikaanka uma oggolayn dhulkooda, Hndidu waxay doonayeen in keeniya la raaciyo caddaankakuna wuxuu dooneyey in ya noqoto sida koofurta Afrika, Afrikaankuna xanaaqa iyo xanuunka arrintaa ka hayey ayaanba ayaantii ka dambeysa wuu ka soo kordhayey. Markay taariikhdu ahayd 1952dii ayaa Afrikaankii asagoo kuukuuyadu horkacayso halgan gobannimadoon ah bilaabay markay waddooyinkii kale oo dhan ka quusteen.

Kuukuuyadu waxay ahaayeen dadka u degsiima xigay magaalooyinka waaweyn, waxbarashaduna wax ka soo gaarto shaqo, la'aanta iyo sandulleyntuba labaduba ku dhacayeen. Halgankaa ay 1952dii bilaabeen ma joogsan inkastoo madaxdodii uu Joomokeeniyaata ka mid ahaa la xiriiray tan iyo intii xeer dhulka loogu maamulo sida ay doonayeen loo oggolaaday madaxdiina la soo daayey; dhaqdhaqaaqaa waxaa la oran jirey Dhaqdhaqaaqii Maaw-Maawda.

## GOBANNIMADOONKII AFRIKADA BARI

Gumeysigu wuxuu Afrikada Bari ku galay si tallaabo ah. Habka maamulka dalalka Afrikada Bari ay soo mareenna waxaa weeye mid aan tixgelineyn intii hore oo dhan danaha dadweynaha Afrikaanka ahaa isla makaana ilaalinayey danaha dadka kooytada ah, hadday caddaan yihiin iyo hadday Hindiyihiinba. Xeerarka lagu maamuleyey dhulkaas waxay isbeddeleen marar badan. Kolka ugu horreysey dhlukaas oo dhan waxaa lagu magacaabay inay is-xakumaan dushana laga ilaaliyo oo boqorradii ama madaxdii dadka meelaha deggan ayey Ingiriiskka iyo jarmalku la saxiixdeen heshiisyo ay ku magacaabeen Dulka ilaalis.

Zansibaar markii ay taariikhdu hayd 1800 ayaa lagu dhawaaqay in ay tahay dhul Ingiriisku dusha ka ilaaliyo, wuxuuna heshiiskaa ku ballan qaaday inuusan arrimaha waddanka soo fara gelin.Boqorkii Sinjibaar wuxuu Ingiriiska heshiiskaa ula saxiixay asagoo ka cabsi qabey in jarmalku qabsado. Dabadeedna, Ingiriisku ballankii wuu ka baxay intaanay heshiiskii sannad ka soo wareegin oo 1891dii ayaa wakiilkii Ingiriiska la wareegay maamulka lacagta una dhiibay dad reer yurub ah.



Dalalka kale ee Afrikada Barina, sidaa si le'eg ayuu gumeysigu ku soo galay.

Waxaa dhacday in muddo dabadeed dhulkaas oo dhan laga sameeyey golayaal xeerarka sameeya inkastoo ay ku kala horreeyeen. Golayaashaas waxaa loo oggolaa inay ka mid noqdaan dadka caddaanka ah iyo dad yar oo reer Aasiya ah. Dadka Afrikaanka ah waxa iyaga loo oggolaaday goor dambe oo ay halgan badan u soo mareen. Golaha Ugaandha saddaxdii Afrikaan ee ugu horreysey waxay ka mid noqdeen 1945kii. Tirada dadka Afrikaanka ah oo ku jira golaha waxay gaartay siddeed (8) qof 1950kii, saddex sano dabadeedna wuxuu golahaasi noqday baarlamaankii ummadda. 1953kii ayaa Xooghaayihii gumeysiga ee Ingiriiska wuxuu soo cusbooneysiiyey ra'yi ahaa in la isku xiro waddammada Afrikada Bari, waxaase arrintaa is-hortaagey Muteesihii 1aad ee Bugaandha oo doonayey dawladnimo u gaar ah, Boqorkii waa la masaafuriyey asagoo lagu eedeeynayo inuu ku xadgudbay heshiiskii ahaa inuu dawladda la shaqeeyo. 1955kii ayaa boqorkii la soo celiyey, 1962na Bugaandha waxay noqotay dhul ka mid ah Ugaandha, awoodse leh ay ku maamulato arrimaheeda gaar ahaaneed, dalka Ugaandha wuxuu gaaray madaxbannaani.

## K E E N I Y A

1945tii ayaa keeniya waxaa kaga bilaabay nidaam dawladeed saddax sano dabadeedna laba nin oo Afrikaan ah ayaa ka mid noqotay golaha xeerka sameeya. Labadaas nin waxay kala ahaayeen Mathuu iyo Odeede. Isla sannadkaa Mathuu wuxuu aasaasay urur la yiraahdo Midowgii Afrikaanka keeniya oo joomo keynyaata ka qayb galay markuu Iglan ka soo noqday. 1947kii waxaa ka mid noqday golaha afar nin oo Afrikaan ah, dadka Afrikaanka ahise arrintaa kuma qancin ee waxay bilaabeen halgankii la magac baxay dhaqdhaqaaqii Maau-Maawda.

Ingiriisku wuxuu kolkaa bilaabay cadaadis uu cadaadiyey dadka Afrikaanka ah. Wuxuu Ingiriisku isku deyey inuu ka hirgeliyo keeniya dawlad looga qayb qaadanayo midab, dadka Afrikaanka ihi se wey is hor taageen waxaan ahayn doorasro dadku u siman yahay. 1960kii ayaa waxaa lagu qabtay London

fadhi aqoonsado dadka Afrikaanka ah in ay yihiin dadka daw-ladda aqlibiyaheeda leh. 1962dii waxaa loo aqoonsaday keeni-inay yeelato dawlad, 1963dii waxay gaartay gobannimadee-dii

## TANZAANIYA

Tanganiika waxay Keeniya kaga duwanayd ayadoo caddaanka deggani yaraa sida Keenyana aanu isugu kululye-nin inuu hoggaanka dadka qabsado, waxaase caawimaayey iya-da oo kolkii hore Jarmalku xukumi jirey xukunka Ingiriiska ee dambena ahaa mid uuka ga wakiil ahaa Qarammada Midoo-bey. Arrintaas waxay u hawl yareysey madaxdii Taanganiinka siiba Julius Niyereere n markii Ingiriirku is hor istaagaba uu qabto Quruumaha Midoobey ugana warramo dhibaatadooda. Nayereere iyo madaxdii siyaasadda ee kale ayaa Oktoobar 1953kii ku dhawaaqay urur siyaasi ah oo la yiraahdo TAA-NU. Ururkaasi wuxuu noqday mid ujeeddo ka dhigtay goban-nimo, dadkii ugu sarreeyeyna waxay ku dhaqaaqeen siday isugu dubbaridaan ururradii siyaasiga ahaa ee gobollada ku koobnaa, kana dihgaan kuwo waddani ah.

Waxaa guddi ka socda Qarammada Middobey u aqoon-saday inay tahay waddani. Doorashooynkii ka dhacay Taan-ganiika 1958-1959 TAANU wey ku guuleysatay waxayna he-shay 5 xoghaye. 1960kii dawlad xilkasnimo qaaday ayaa laga dhisay Taanganiika; 1961kii Taanganiika waxay gaartey go-bannimadeedii. Sanad dabadeed Taanganiika waxay noqotay Jamhuuriyad madaxweyne wax fulin kara leh.

Sanjibaar 1949kii ilaa 1956kii ururro siyaasadeed ayaa ka furmay. Ururradaasi waxay sugu tageen ururkii la baxay Ururka Waddaniga ah ee Sansibaar. 1956kii ayaa waxaa loo oggolaaday in 6 kursi loo doorto golaha xeerarka sameeya, markaas in kasta oo Afrikaanka iyo Shiraasiyiinta midkoodna u darbaneyn doorashooyinka haddana waxay isu geeyeen laba ururoo midna ahaa mid la sameeyey 1934kii oo Afrikaan ah iyo ururkii reer Shiraasi oo la aasaasay 1938kii waxayna labadii urur heleen 6dii kursi, laba kalana waxaa helay dad madax bannaan midna waxaa helay xisbi la oran jirey ururkii Muslimka. Intii u dhexesey 1957kii iyo 1961kii saddex arrimood ayaa isbeddeley oo tan u horreysey ahayd xumaanti dhex tiil ururrada siyaasigaa oo aad u korortay oo gaartey inAfro-siyaasigii qaadaceen ganacsigii Carabta, carab-tiina Afro-shiyaasigii waxay ka saartay beerahoodii. Tallaaba-da saddexaad ee dhacday waxay ahayd in carabtii oo Cali Muxsin hor kacayey nidaamisay ururkoodii, kaasoo keenay in labadii urur isxoog le'ekaadaan doorashadii 1961kii, 22 kursi oo la dooranayey barbarro ayey noqdeen labada urur si ay carabtu u badsato kursaasyadaa ayaa Ingiriirku ka dhigay 23, meeshaa kursigaa dheeraadka lagu darayna waxaa laga dhigay meel carabtu u badan tahay, taas oo keentay in doora-shadii carabtii heshay 12 Afro-shiyaasigiintiina heleen 11, doo-rashadii ugu dambeyseyna waxay dhacday 1963kii taasoo u dhacday sidii tii hore dadka badankiisu raacay ururkii Afro-shiyaasigii, kuraasidiise ay u badnaadeen Carabta.

Bil dabadeed Diisembar 1963kii markii ay gobannimada qaadatay, ayaa Sinjibaar kacaan ka dhashay oo Afrikaankii maamulkii la wareegay,k una darsamay Taanganiika, daba-deedna labadii waddan waxay la baxeen Tansaaniya.

## DALKA SOOMAALIYA EE KEENIYA GUMEYSATO

N. F. D. waxay ka mid ahayd dhulalkii Ingiriisku qab-saday markii gumeystayaasha reer Yurub Afrikada Bari kala qoqobteen. Sarkaalkii ugu horreeyey waxaa loo magacaabay markay taariikhdu ahayd 1910 dhismaha maamulkiisa wuu ka dambeeyey oo wuxuu ka dhismay Wajeer 1912kii. Gelista N.F.D. wuxuu Ingiriisku foodsaar uga dhigay joojinta askarta Amxaarada oo dhici jirtey dadka reer miyiga iyo xallinta dhi-baatooyinka lagala kulmay maamulka dadka Soomaaliyeed.

Markii ay taariikhdu ahayd 1914kii ayaa Ingiriisku soohdin soohdin beenaan dhex dhigay dalkaas Soomaaliyeed ee u dhexeeya webiga Jubba iyo webiga Taana, qaybtan koonfurta xigtana wuxuu u bixiyey soohdnta degmada waqooyi.

Ingiriisku isaga oo dhibaatooyinkaasu xagga Jubba iyo N.F.D. ay ka haysteen ayaa xagga waqooyi waxaa ka haystey

dagaalladii sayidka sidaas awgeedna wuxuu Talyaaniga la yeeshay heshiis 1915kii. Heshiiskaasi wuxuu ahaa mid sayidka ay ugu bahoobeen Ingiriiska iyo Talyaaniga ayadoo Ingiriisku ugu ballan qaaday Talyaaniga inuu ku wareejiyo dhulka jubba. Sidaas ayadoo aan dadka Soomaaliyeed oo dhulka lahaa lagala tashan,. oo aan dhaankooda iyo dhaqaalahooba midna la tixgelin ayaa Jubba Talyaaniga lagu wareejiyey bishii Juun 1925kii. Intaa Ingiriisku kama harin ee mar keeniya soohdimaheeda gudaha lagu noqday ayaa waxaa uu gooni u jaray boqortooyadii Wito, xeebta dhulka Taana, dhanka waqooyina dhulka Turkaanada iyo Sambuuruda oo lagu daray N. F. D. Waxaana intaa lagu magacaabay qaybta waqooyi.

Iyada qaybta waqooyi taariikhdeedu horeba inoo tosinayso in ay tahay dal Soomaaliyeed, dadkuna yahay dad Soomaaliyeed, ayaa haddana keenaya waxaa ka sii jaray qaanuun soo baxay 1934kii, kaasoo kala mamnuucay gobolka waqooyi iyo keenya inteeda kale haddii aan la haysan fasax la isugu dhaafo, Gobolka waqooyi si kastoo loo eego keeniya inteeda kale way ka duwnayd Ingiriiskuna si gaar ah ayuu u maamuli jiray.

N.F.D. oo ka kooban degmooyinka Mandheera, Wajeer, Gaarisa, Siyyeelow, Marsaabid iyo Mooyaale dadka Soomaaliyeed ee deggan halgankooda gobannimadoonka waxay mar la bilaabeen Soomaalida kala. Urdrradii laga furay waxaa ka mid ahaa S.Y.L. oo Ingiriisku xiray 1948kii, inkastoo ururkaasi ka farnaa qaybaha kale ee dhulka Soomaaliyeed oo Ingiriisku u talinayey ururkaasna, muu ahayn mid doonaya inuu keeniya wax la qabsado, waxaana kaas u marag kacaysa diidmada dadka reer N.F.D. diideen inay ka qayb galaan doorashooyinkii keeniyada kala ka dhacay 1957kii iyo 1959kii.

Mar labaad markii reer N.F.D. loo fasaxay siyaasadda 1960kii oo ku beegnayd waqtigii labada waaxood ee waqooyiga iyo koofurta Soomaaliya isu tageen, oo ku dhaqaaqeen in loo oggolaado in ay aayahooda ka tashadaan oo ay ka go,aan keeniya ,raacaanna walaalahooda ku nool .jamhooriyadda Soomaaliya. Midawga labada gobol ee Soomaaliyeed iyo dhaqdhaqaaqa siyaasiga ah ee dadka N.F.D., waxay argagixiso ku ridday cadawgii dadka Soomaaliyeed oo ay horkac u



tahay Itoobiya. isla markaaba ku dhaqaaqday in ay ingiriiska waydiisato in uu caddeeyo waxa uu N.F.D. ka qabo. Sidaas awgeedna Abriil 1960kii ayaa xoghayihii guud ee la oran jirey Makmillan ee Ingiriiska ahaa, baarlamaankooda wuuu ka yiri dawladda boqorradu horena uma dhiiran umana taageerin dibna u taageeri mayso arli sheegasho oo wax u dhimaya dhulalka Faransiiska ee Soomaaliyeed ama keeniya ama Itoobiya, waxa keliya oo la fara gelin karaa haddii dawladaha iyo dadyowga ku shuqul lihi sidaa doonaan. Hadalkaas oo laba weji yeeshay ayaa cadawgii dadka Soomaaliyeed waxa ay u fasirteen in aan ingiriisku iyaga ka dhan lahayn, dadkii Soomaaliyeedna iyaga oo tixraacaya hadalkiisii ayaa waxay u qaateen in Ingiriisku ujeeddooyinkoodii albaabada u furay, mar haddii dadkii N. F. D. lah aaay ayaga yihiin, Ingiriiskuna kii xukumay yahay, hadalkuna ahaa dhul waxa la fara glein gelin karaa haddii dawladda iyo dadkiis sidaa doonaan.

Ujeeddadooda si ay u muujiyaan, waxyaabaha ay ku kaceen waxaa ka mid ahaa qaadacaaddii ay qaadaceen doorashadii 1960kii iyo iyaga oo ku adkestay in N.F.D. loo aqoonsado in ay tahay meel iskood isu xukuntay Keeniyana inteeda kalena ka gooni ah nta aan wax iska beddelin dastuurka, sidaana waxaa diiday KAANU iyo KAADU. Markii iska hor imaatinkii reer N. F. D. iyo Keenya ay wada hadalladii beddelka dastuurka is hortaageen ayaa Xoghayihii gumeysiga Ingiriisku cadeeyay in guddi loo saari doono soo baara waxa dadka reer N. F. D. aayahooda ka damacsan yihiin. Taas baana reer N. F. D. yeeleen iyaga oo filayey in laiu socon doono wixii guddigaasu run ahaan gaaraan.

Dadka Soomaaliyeed ee Jamhuriyadda joogay iyo dawladdiiba waxay caddeeyeen in ay ummad ahaan oggol yihiin in dadka reer N.F.D. loo oggolaado in ay aayahooda ka tashadaan waxaanay ku caddeeyeen sidaas bannaan baxyo ay magaalooyinka oo dhan ka dhigeen iyo magacaabidda guudi gaar ah oo wasiirro ka kooban oo loo magacaabay in ay la socdaan waxa N.F.D. ka dhacaya.

Dabbaaldeggii gobannimada ee 1962kii ayaa dawladda Soomaaliyeed waxay marti qaadday madaxdii ururrada siyaa-

sadda ee KAANU iyo KAADU, Joomo Keenyaata iyo Ronald Nagala. Labaduba waxay caddeeyeen in aanay oggolayn in dadak Soomaaliyeed ee reer N.F.D. ayaahooda u tashadaan.

Dhowr jeer markii dawladda Soomaaliyeed Ingiriisku xusuusiyey ballantoodii ahayd inay guddi u saaraan xaalka N.F.D., ayaa waxaa la magacaabay nin garsoore ah oo reer Nijeeriya ah iyo nin Janan ah oo reer Kanada ah, waxaanay shaqadoodii bilaabeen bishii Oktoobar waxayna noqotay in dadka reer N.F.D. isku raacay in Keeniya ay ka go'aan dabadeedna ku darsamaan Jamhuuriyadda Soomaaliya. Marso 1963dii ayaa xoghayihii gumeysiga ee Ingiriiska Dunkan Sandis ku dhawaaqay in N.F.D.ay raacinayaan Keeniya lana mid noqoneyso gobolllada kale ee Keeniya. Dooda Dawladdii Soomaalidu waa mid ku dhisan in dadka deggan gobolkaas loo oggolaado inay ayahooda ka tashadaan oo ay dabadeedna yeelaan waxay goostaan, arrintaas oo waaffaqsan xerarka Quruumaha Middobay Ujeeddada Ingiriisku ka lahaa marku raacinayey N.F.D. Keeniya waxa weeye inuu ayada ku dhex beero cadow si ay weligeedba u tabar darraato gacantiisana uga bixin. Ingiriisku wuxuu ka dhadhicinayaa dadka reer Keeniya in hadday iskood isu taagaan Soomaalidu kusoo duuelyso taasna waa midda ay ku dhisan siyaasadda gumeysiga cusub.